Jaamac Muuse Miicaad

# XEER-DHAQAMEED

## Xeer-Ciise



# XEER-DHAQAMEED

## (Xeer-Ciise)

Daabacaaddan waxa maalgeliyey:

Tifaftirka : Aadan Xasan Aadan
Maxamad Cabdillaahi Riiraash

Garaacidda : X. Cabdalle X. Cismaan

Sargoynta Dhigaalka: Cumar Siciid Bile.

© Dhammaan xuquuqda kitaabkani waa dhawran tahay. Lama daabici karo, lama sawiri karo, isla markaa guud ahaan iyo qaybqayb ahaan toona looma minguursan karo, haddii aan oggollaansho qoraal ah laga helin qoraha Buugga X.Cabdalle X.Cismaan. Jabuuti, 2010.

**Jaamac Muuse Miicaad**

# XEER-DHAQAMEED

## (Xeer-Ciise)

*Qalinkii*

**Cabdalla Xaaji Cusmaan Ceeleeye**

**Jabuuti, 2010**

بسم الله الرحمن الرحيم

# Hordhac

Buuggan idin horyaal wuxuu soo koobayaa qodobbada xeerka Ciisaha qaarkood oo aan dhammaantiiba ka qoray Ruug-caddaaga Jaamac Muuse Miicaad. Qodobbada qaarkood markaan leehay, waxaan u jeedaa yaan loo qaadan in qodobbadii xeerku halkan ku dhan yihiin, waayo xeerku intan wuu ka badan yahay kana ballaadhan yahay, hadda ka horna wax laga qoray ma jirin oo sida buuggan, u faahfaahsan. Waana Xeer albaabkiisu furanyahay oo kordhi kara.

Tan iyo intii xeerkan lagu heshiiyey ee lagu socday amma la isku xukumayeyna wuxuu ahaa amma yahayba wax korka laga xafidsan yahay. Qoraal la'aantuna wax xeerkan Ciisaha u gaar ah maaha ee wuxuu la wadaagaa xeerarkii kale ee Soomalida qarkeed, taariikhdii, iyo suugaantii Soomaalidii hore oo nimba nin ka xafidayey sidaana innagu soo gaadhey oon ku dhaxallay.

# Jaamac waa kuma?

Jaamac waa nin saaxiib-salaad ah oo cibaadada ku fiican, waa nin xishood badan oo af gaaban, waa nin dadka aqoonta leh xushmeeya, waa nin aan jaad cunin oo sigaarna cabbin, waa nin dhaqankiisa jecel dadkana ku dhiiriya, waa nin aan aqoontiisa ku bakhaylin oo ciddii doonaysa inay ka barato u diyaar ah ugu dambayn, odayada garaha qaada marka ay arrimuhu ka murgaan, Jaamac ayaa ka mid ah aftahannada loo yeedho ee wax furdaamiya.

Aan u soo noqdo *"Jaamac Muuse Miicaad"* oo ah ninka aan ka qoray qodobadda buuggan ku qoran dhammaantood, wuxuu ku dhashay gobolka Dikhil, da'diisuna haatan waa 80 jir. sida ka muuqata aqoontiisa, Jaamac wuxuu ku soo barbaaray miyiga kuna soo koray, haweenaydiisii u horeysayna wuxuu ku guursaday miyiga.

Jaamac dhallinyaranimadiisiiba wuxuu noqday nin abwaana, wuxuuna caan ku noqday fagaarayaasha ay ku kulmaan dhallintu, Jaamac waxa uu jeclaa meelaha amma geedaha garta lagu qaado oo aan laga waayi jirin barbaarnimadiiba, taasina waxay u suura gelisay inuu xeerka barto, waayadii dambana wuxuu noqday garyaqaan dadka u garqaada oo guddiyada lagu daro.

Aqoontiisa iyo daacadnimadiisuba waxay u suura gelisay inuu noqdo oday laga yaaqan geedaha garta lagu qaado intooda badan. Jaamac Muuse miyiga oo keliya kuma koobnayn ee wuxuu ka dhexeeyey miyi iyo magaalaba, wuxuuna u badnaa Dikhil iyo Jabuuti haatanna wuxuu deggan yahay Dikhil.

Jaamac xilligii gumaysiga wuxuu ka mid ahaa dadkii u halgamayey sidii ay Jabuuti uga hoos bixi lahayd gumaysigii Faransiiska, wuxuuna tiriyey gabayo iyo geeraarro guubaabo iyo Gobanimodoon u badnaa.



1977kii wixii ka dambeeyey wuxuu tiriyey maanso badan oo ah ammaanta calanka, gubaabo dhinaca diinta, dhaqanka, nabadda iyo qaar kale oo badan.

Jaamac wuxuu xilligan caan ku yahay barnaamij ka baxa Raadiyo Jabuuti oo magaciisa la yidhaa *"War iyo Waayo-arag"* oo lagaga hadlo, taariikhda, dhaqanka, suugaanta iyo wax yaabo la xidhiidha.

Buuggan wax badan buu Jaamac iga codsaday inaan ka qoro si uu dhaxal ugu noqdo da'yarta soo koraysa iyo kuwa ka sii dambeeya. Ugu dambayntiina way noo suura gashay oo waakan idin hor yaal.

# Gogoldhig

Sida la ogyahay dadka Soomaalida ee ku nool Geeska Afrika waa reer guuraa xoolo dhaqato ah, waxayna u qaybsan yihiin qabaa'il badan dhulkana way kala leeyihiin, xilliyada roobabku da'ayaan haddii ay dhinac u bataan waa la wada daaqaa haddii aanay colaadi jirin.

Qabaa'ilku waxay ka siman yihiin oo qolo walba leedahay madax u gooni ah, sida Ugaas, Boqor, Suldaan, Garaad iyo kuwa la mid ah, waxa kale oo qabaa'ilka Soomaalidu gooni gooni u lahaayeen xeerar u gaar ah oo ay isku xukumaayeen Islaamka ka hor iyo ka dibba. Cid sheegi karta lama hayo xeerarkii ay Soomalidu isku xukumayeen Islaamka ka hor qodobbadii uu ka koobnaa.

Xilligii Islaamku Geeska Afrika ku xoogaystay ee dawladihii kala dambeeyey ka dhismeen, xeerka Islaamka ayaa lagu socday sida taariikhdu inna barayso.

Dawladdii Islaamka Geeska Afrika ee uu hoggaminayey geesigii Axmed Gurey waxa ugu dambayn ku soo duulay oo bur buriyey isticmaarkii Boortaqiiska iyo kuwii Yurub ee kale. Sannadkii 1516[kii] ayuu Saylac soo weeraray, dad badan ayuu laayey qaar kalena wuu afduubay magaaladiina wuu gubay, waxa kale oo Boortaqiisku qabsaday jasiiradda Siqodra ee ku taalla halkay iska galaan Badweynta Hindiya iyo khooriga Cadmeed aadna ugu dhaw xeebaha bari ee Soomaaliya. Taasi waxay isticmaarkii Boortaqiiska u suurta gelisay inuu cunaqabateeyo xeebaha Soomaalida oo dhan, doonyihii ganacsiga ee xeebaha Soomaalida imanayey amma ka baxayeyna uu dhacay. Sidaana waxaa isku taagay ganacsigii Soomaalidu la lahaayeen dibadda. Magaalooyinkii xeebaha Badda Cas ee Soomaalida oo Saylac ugu da'weyntahayna waa laga guuray, oo waxaa loo guuray miyiga.



Haddaba, sida aan odayo ka soo warinnay qiyaastii, xilliga Xeerka Ciisaha loo fadhiistay waa markii miyiga dib loogu soo guuray ee ay dawladdii Islaamku burburtay. Dr. Cali Muuse Ciye, buugga uu qoray ee la yidhaa *"Le verdict de l'arbre"* isna wuxuu qorayaa, baadhis badan kadib in Xeerka Ciisaha loo fadhiistay xilligii ay burburtay dawladdii Islaamku ka dib Axmed Guray.

Hadal iyo dhammaan waxa la isku raacsan yahay Xeerka Ciisaha in lagu dhammaystiray meesha la yidhahdo Siti oo ku dhaw degmada Ayshaca, oo u dhaxaysa Jabuuti iyo Diri-dhaba. Muddadii odayadu halkaa ay fadhiyeen Xeerkana ay dhigayeen cid si buuxda u sheegi kartaa ma jirto.

*Xeerkan maxaa loogu baahday?*

Maadaama ay dawladi jirin dadkuna ay qabaa'il u qaybsan yihiin waxa kuu muuqanaya baahida loo qabo Xeer heshiis lagu wada yahay. Odayadii Xeerkan Ciisaha dhigay ee Siti u fadhiistay waxay istuseen Maahmaahdii ahayd: *"Meel aan Xeer lagu lahayn waa lagu xoolooba"*.

Waxa kale oo ay odayadu yidhaahdeen Xeer dhigashada waxa keenay si looga baxo afar dhibaato kala ah :

- *Damac*
- *Duullaan*
- *Dil*
- *Dhac*

Qodobbadan waxay duqaydu ku sharraxaan, qofka amma dadka waxaa marka hore ku dhasha damac, dabadeedna uu duulaa, dabadeedna wax buu dilaa, dabadeedna wax buu dhacaa iyo si loo dhawro lixda kabood ee kala ah :

- dhiigga
- dhaqaalaha
- dheerta
- dhaqanka
- dhiblaha
- dhulka

Guddidii Xeerka dhigaysay ee Siti fadhiday tiradoodu waxay ahayd 44 oday oo laga soo xulay 12ka Aqal (Qolo) ee qabiilka Ciisuhu ka kooban yahay. Aqalkii walba waxaa laga soo xulay 4 amma 3 oday, markii ay

Xeerka qodobbadiisii dhammeeyeen xaruntii Ciisaha waxa loo gartay isla meeshii la fadhiyey ee Siti oo malko ahayd, xilligaa wixii ka dambeeyey, odayadii 44ka ahaa waxaa lagu magacaabay *"Gandihii Ciisaha oo u dhigma kaalinta ay dawladaha ugu jiraan Maxkamadda sare iyo Golaha sare ee distooriga ah."* Guud ahaanna dantii ummadda oo dhan halkaa baa laga xukumayey.

Qarnigii 19[naad] dabayaaqadiisi markii isticmaarku ku soo duulay dhulka Soomaalida waxa ummaddii soo gaadhay dhaawac weyn, arladiina waxa qaybsaday Ingiriis, Xabashi, Faransiis iyo Talyaani.

1934[kii] markii la jeexay xuduudda beenta ah ee qaybisay Dhulka Soomaalida oo dhan. Xaruntii Siti iyo dhulkii Ciisaha intiisii badnayd waxa saami u helay gumaysigii Xabashida. Isla markii xuduud-beenaadda la xarriiqay gumaysigii Xabashidu wuxuu qalqaalay col ku duula xaruntii Siti ee Genduhu ummadda ka maamulayey, nasiib wanaag colkaa waa laga war heley, dabadeed xaruntii waa la faaruqiyey nin walba wuxuu ku toosay reerkiisii waagaa wixii ka dambeeyeyna lama sheegin Gende Ciisuhu leeyahay oo meel ku shira. Waana dhaawicii u weynaa ee soo gaadha Xeerka hase yeeshee inkastoo la waayey maamulkii guud haddana Xeerka waa lagu dhaqmaa miyi iyo magaalaba waxaana jira guddiyo la magacaabo (44 Oday) marka loo baahdo iyo odayo garyaqaanno ah oo dadka kala gura marka wax la isku qabto.

Ugu dambayn buuggan bogaggiisa dambe waxaan uga maarmi weynay inaan ku soo qaadnno raggii geesiyaasha ahaa ee ummaddaan Xeerka ku soo xukumayey qaarkood dabeecadohooda, daacadnimadoodii, iyo sidii ay u dhaqmayeen.

Geesi marka la leeyahay waxa dadka intiisa badan hor yimaadda nin dagaal yahan ah, raggan buuggan ku qoranise waxay ahaayeen rag nabadeed.

Waxa xusid mudan in Xeerkani Ciisaha ka dhigay dad is maqla, kala dambeeya oo aaminsan inay siman yihiin, waxa taa qiray oo ka marag kacay isticmaarkii dhulka Soomaalida ku soo dulay. Ninkii la odhan jirey *"Richard Berton"* oo sahamiye u ahaa gumaysigii Ingiriiska wuxuu buuggiisa la yidhaahdo *"First foot steps in East Africa. 1856"* ku qoray Ciisuhu waa dad foojigan oo madaxbannaan, *"A turbulant race of republicans"*. Qabaa'ilka kale ee Soomaaliduna Ciisaha way ku tix geliyaan



Xeerka iyo ismaqalka ay leeyihiin. waxaan tusaale u soo qaadanaynaa geeraarro iyo gabayo ay tiriyeen rag Soomaaliyeed. Ugu horrayn aan soo qaadanno geeraar uu tiriyey gabayaagii caanka ahaa ee magaciisa la odhan jirey *"Gurraase Xaaji Cali Xirsi oo Reer Qorraxay ahaa,"* wuxuuna yidhi:

Tawfiiq Ciise-Madoobiyo
Talyankii Faranjaa leh
Teendho Reer Berberaad iyo
Turkigii Xukumaa leh
Tuhun Shuunka Amxaariyo
Nin la soo tashadaa leh.

Waxa kale oon soo qaadanaynaa gabay uu tiriyey gabayaaga caanka ah ee magaciisa la yidhaa Abshir Faarax Nuur oo ku magac dheer *"Abshir-Bacdle"*. Abshir wuxu maansadan tiriyey sannadkii 2000 , waa markii shirkii dib-u-heshiisiinta Soomaaliyeed ka socday magaalada Carta wuxuuna yidhi :

Yaan la is xaqirine beenta waa, laga xishoodaaye
Ragga noo xanuunsaday dunidu, nama xasuusnayn dheh
Xeerbeegti Geeska Afrikay, xul u ahaayeen dheh
Garta xubinta lala eegto waa, ku xuddunnaayeen dheh
Gobta waa u Xeer inay go'aan, xagaf ku siiyaan dheh
Inna kama xishoodaan waxay, xaq u arkaayaan dheh
Oo waa ka xaaraan inay, u xagliyaan meel dheh
Waa ku xarragoodaan runtay, xagaf ku siiyaan dheh
Xaqii bay asiibeen cidnana, kama xishoonayn dheh
Xeer Ciise sidii lagu bartay, ugu xarriiqeen dheh.

Waxa kale oo ka mid ah ragga Ciisaha Xeerka ku ammaanay gabayaaga la yidhaa Saalax Xaashi Carab, qoraana ah, dejiyeyna Qaamuus af Soomaali ah 2004[tii] wuxuuna yidhi sidan:

Sabankii horoo tegey
Duqay uu tayada sare
Xeerku uu tibaaxoo
Tafniidoo cayima oo
Waaya-arag ku tiiriyoo
Bulshadu ay taqaanno
Kii maqan la tabo oo
Hagar iyo tuhmaadiyo

Dhaliil tabar la'aan iyo
Lagu durin turxaan iyo
Guddi laysu taagoo
Aad loo tixgeliyiyo
Kuwa tiginka joojoo
Taam, loo addeecoo
Shacbigu tooda raaciyo
Soomaalida tastuuriyo
Sida talada Ciisaha
Tiir Xeerka dhaabiyo
Rag tanaad ah baa jiray
Tol hoggaamis baa jiray



# Afeef

Buuggani waa kii u horreeyey ee si faahfaahsan u soo bandhiga Xeerka Ciisaha, sidaa daraaddeed way fahmi karaan dadka wax qora iyo inta wax ururisaaba, dhibta uu leeyahay soo qoridda dhaqankii iyo Suugaantii soo jireenka ahayd ee Soomaalida.

Qofka qoraaga ahi marka uu u qalin qaato soo ururinta dhacdooyin Taariikh ku saabsan, waa lagama maarmaan inuu helo wax yaabo uu tixraaco si uu u soo bandhigo dhacdada uu qorayo, milaygeedii iyo meesheedii oo cad. Haddaba tixraacyada loo baahan yahay waxa ka mid ah buugaag hore, jaraa'iddo hore iwm.

Aniguna kama baxsan karo dhibta ay la kulmaan dadka isku hawla soo qoridda, ururinta, diiwaan-gelinta Taariikhda iyo dhaqankii soo jireenka ahaa ee Soomaalida.

Sidaa daraadeed waxaan ka afeefanayaa qodobada Xeerkan oo aan halkan ku dhannayn, hasa yeeshee intiisii badnayd ay halkan ku qoran yihiin inaan dhammays tirana waxay iiga baahnayd inaan meelo badan u maro waxana taa ii saamixi waayey duruufo jira oo dhawr ah, xooggana waxaan saaray oo keli ah Abwaan Jaamac Muuse Miicaad wixii uu ka qaybsanaa kana xasuusnaa Xeerkan.

Guud ahaan buuggan markaad akhrido waxaad ku arki meelo badan oo dhacdadii ay taariikh lahayn iyo weliba rag laga sheekayno oo aan magacdoodii la hayn dhacdadii maahee, taana waxaa noogu wacan mashaakilka aan kor ku soo sheegnay. Sidaa daraaddeed waxaan akhristaha buuggan ka codsanayaa inuu dhankiisa ka baadi doona wixii halkan ka maqan, waayo waa hawl innoo wada taal.

Waad mahadsantihiin!

# Mahadnaq

Mahad, xamdinaq iyo ammaanba waxa mudan Ilaaheenna weyn ee adduunka abuuray ee i karansiiyey inaan hawshan qabto. Intaa dabadeed aan u mahad celiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle oo noo suurtageliyey qoridda iyo maalgelinta buuggani ku soo baxay iyo weliba dhiirri-gelintii uu i siiyey markuu ka war helay qoridda buugan,taas oo qayb ka ah dedaalka hagarla'aanta ah ee uu ugu jiro horumarinta dhaqamada iyo afafka.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti M Ismaaciil Cumar Geelle, $1982^{kii}$ Isagoo markaa ahaa guddoomiyaha guddida dhaqanka u qaabilsan Xisbiga talada dalka haya ee (R P P), wuxuu qabanqaabiyey tartankii dhaqanka ee lagu qabtay dalkan Jahuuriyadda Jabuuti. Mar labaad wuxuu Madaxweynuhu $1988^{kii}$ Bishii Diisambar qabanqaabiyey tartan kale oo dhaqanka ah oo aad iyo aad dadweynuhu u soo dhaweeyey.

Haddii aan wax ka taabto shirarkii lagaga hadlay horow marinta Af-Soomaaliga iyo afka Cafarta iyo buugaagta uu maalgeliyey Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle waxa ka mid ah:

1) Buugga la yidhaa *War la Helaa Talo la Helaa* ee uu qoray Dirir Faarax Aadan (Allaha u naxariisto) soona baxay 1991.
2) Buugga *Fan-masraxeedka Soomaaliyeed* ee uu qoray M Maxamad Daahir Afrax sannadku markuu ahaa 1986.
3) Shirkii *Erey-bixinta Af-Soomaaliga* ee lagu qabtay Jabuuti bishii Abril $2002^{dii}$ oo laga soo saaray buug.
4) Shirkii aqoonyahaanka iyo qoraaga Soomaaliyeed ee lagu qabtay Jabuuti Bishii Janawari $2003^{dii}$ xaruuntii ururka (P E N )na loo soo wareejiyey Jabuuti
5) Shirkii Erey-bixinta Af-Cafarta ee lagu qabtay Jabuuti Bishii Feberweri $2003^{dii}$ oo laga soo saaray buug.



6) Xafladdii ballaadhnayd ee lagu daah-furay buugga caanka ah ee *"Dal Dad Waayey iyo Duni Daamiir Beeshay"* ee uu qoray M Maxamad Daahir Afrax bishii Feberweri $2005^{tii}$.
7) *Qaamuuska Af-Soomaaliga* ee uu dejiyey M Saalax Xaashi Carab $2004^{tii}$.
8) Xafladdii maalinta afka hooyo ee lagu qabtay Jabuuti bishii Abril $2006^{dii}$ laguna soo bandhigay buugag badan oo af hooyo ku qoran kana soo qaybgaleen aqoonyahaanno dunida dacalladeeda ka kala yimid.
9) Daabacaaddii shan buug u qoray Aw Jaamac Cumar Ciise oo kala ah:
   a) *Taariikhdii Sayid Maxamad Cabdille Xasan iyo Daraawiidhtii.*
   b) *Diiwaanka gabayadii Sayid Maxamad Cabdille Xasan.*
   t) *Maansadii hore ee Soomaalida Geela,Fardaha iyo Haweenka.*
   j) *Hilimmada maansada Soomaalidii hore.*
   x) *Taariikhda Jabuuti* oo Carabi ah.
10) Buugga la yidhaa *Saabxidh* ee uu gabayadiisa ku ururiyey M Aaden Xasan Aaden (Belelo).

Hadal iyo dhammaan mar labaad aan uga mahadnaqo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti M Ismaaciil Cumar Geelle hawlaha dhaxa-galka ah ee uu u qabtay Xadaaradda ummadda Soomaaliyeed.

Waxa kale oo aan mahad ballaadhan u hayaa Wasiirka waxbarashada qaranka ee Jamhuuriyadda Jabuuti M. Cabdi Ibraahim Cabsiiye oo markii aan ka wargeliyey qorista buuggan isla markiiba amar ku siiyey qaar ka tirsan shaqaalaha Wasaaraddiisa inay ii dhib yareeyaan wixii aan uga baahnaa oo dhan.

Aan ku xigsiiyo mahad aan u hayo ninka horyaalka ah ee aanu la'aantii soo baxeen buuggani; waa M Xaashi Cabdillaahi Orax oo ah hala-buur iyo maansoyahan caan ah, qayb laxaad leh na ka qaatay horu-marinta dhaqnka iyo suugaanta uu hormuudka yahay Madaxwey-naha Jamhuuriyadda Jabuuti.

Mahad kale waxa iga mudan Dr Khadar Cali oo Jaamacadda Jabuuti ka tirsan barana ka ah oo isagu i siiyey talooyin iyo garab-gal aan u baahnaa. Sidoo kale waxa abaal weyn oo aanan weligey illaawi doonin iga mudan saaxiibkay M Maxamad Cabdillaahi Waaberi *(Footiis)* oo qaybaha hore ee buuggan markaan qalinka ku saxo isna Koombiyuutarka ku garaacayey.

Caasha Cali Maxamad oo aan ka wada tirsannahay (R T D) ayaan iyana xaggan ku xusayaa taageeradii ay iga siisay ku kaydinta qoraallada dhinaca Koombiyuutarka. Aan raaciyo mahadnaq iyo abaal aan u hayo labada aqoonyahaan ee kala ah M Aaden Xasan Aaden oo loo yaqaan *(Belelo)* iyo M Maxamad Cadillaahi Riiraash oo sixidda ka sokow talooyinkoodii wax-tar weyn ku kordhiyeen buugan.

Waxa isna aan mahad ballaadhan u hayaa M Cumar Macallin *(Kuul)* oo ku takhasusay Xeerka iyo ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka oo markasta ila garab taagnaa dhiirri-gelin iyo talooyin wax ku ool ah. Ugu dambayntii aan mahad u celiyo M Maxamad Cumar As-hari iyo akhyaarta kala ah:

Cabduraxmaan Maxamd Yaxye
Faarax Wacays *(Caarre)*
Ismaaciil Maxamamuud Dugsiiye
Maxamad Xasan *(Cirro)*
Burhaan Maxamad Cali
Cadirisaaq Aw-Jaamac Cumar
Cumar Cali *(Oday)*
Xuseen Xasan Bakaal
Cumar Fariid
Cusmaan Daahir Colow
Xarbi Axmad Malaw
Huda Cali Cabdi
Sacaada Cawaale
Cumar Nuur Subagle
Ismaaciil Cabdi
Cali

## Cutubka Koowaad

# Salka Ereyga "*Xeer*"

# Salka Ereyga "Xeer"

Waxa la is weydin karaa ereyga *"Xeer"* asalkiisu xagguu ka soo jeedaa? Su'aashaa jawaabteedu way ballaadhan tahay waxaanse isku dayeynaa inaan si kooban uga jawaabno.

Ereyga *"Xeer"* markaad maqasho waxa hortaada imanaya xakame ku qabanaya oonad dhaafi karin. Haddii aad jiidhana go'aya oo aad ciqaab kala kulmaysid.

Haddii aan ka jawaabno su'aashii aan kor ku soo xusnay ee ahayd ereyga *"Xeer"* xagguu ka soo jeedaa. Wuxuu ka soo jeedaa baan odhan karnaa *XERO*, oo ah meel dad xeertay oo ood amma dayr ay ka dhiseen si ay iskaga ilaaliyaan cadowga. Markaa Xero ereygii ahaa wuxuu isku baddalay *"Xeer"* oo ah wax dad meel wada degaa heshiis ku yihiin una dhigteen si ayna iskugu gefin amma iskugu xadgudbin. Waxa kale oo jirta ereyga "Xeer" inuu leeyahay macne kale oo ah, marka aqal la dhisayo ee dhigaha la taago xadhigga weyn ee isku haya dhigaha oo dhan si ayna dabayshu u kala daadin ayaa isna la yidhaa *"Xeer"*.

Macnahan dambena waxaad kala soo dhex baxaysaa inuu Xeerku yahay wax dadka isku haya. Sidaa markaynnu iskula garanno ereyga *"Xeer"* halka uu ka soo jeedo, aan sii dhex gallo Xeerka tilmaamaha laga bixiyey. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa *(Tol waa tolane)* oo ka dhigan *"Xeer"* baa isku keen tolay. Odayadii Xeerka Ciisaha salka udhigay waxa laga hayaa *(Xeer waa kab lagu socdo)*, kab marka la leeyahay waan garan karnaa wax tarka ay innoo leedahay oo waxay innaga celisaa waxyeello fara badan oo ay ka mid yihiin raranka, qodaxda, dhagaxa iyo waxyaabo kale oo ay ka mid yihiin qaniinka iyo bahalaha hoose. Haddaad kabta tuurto halis baad u tahay inay dhibaato ku soo gaadho, sidaas oo kale ayey dhibaato inna soo gaadhi haddaan Xeerka ka tagno. Odhaah kale oo odayadii Xeerka laga soo weriyey waxay tahay *(Kab way ku siddaa)* oo

ay ula jeedaan Xeerkuna wuu ku sidaa. Dhanka kale, kabta marka ay reer miyigu tolayaan ugu horreyn saantaa laga soo gooyaa waxaana lagu sarjaraa cagta, waxaa kale oo markaa la soo gooyaa suun kabta u noqda dhegaley iyo qodobkii lagu tolayey. Intaa marka loo dhammeeyo ayey kab noqotaa oo lagu socdaa. Xeerku marka uu taabbagal noqdo waa maalinta loo dhammays tiro dhagaleyda iyo qodobbada uu ka kooban yahay. Asal ahaanna ereyada dhegaley iyo qodob waxay ka soo jeedaan tolmahaa kabta.

Ereyga kab macna kale ayuu yeeshaa, oo xagga naxwaha markaan ka eegno noqda fal, tusaale haddaan soo qaadanno oon nidhaahno Cali lug buu ka jabay waana la kabay. Xeerkana waa loo isticmaalaa ereygan falka ah oo odayadu waxay yidhaahdiin Xeerku ummadduu kabaa. Waxa kale oo jira maahmaaho badan oo Soomaalidu leedahay kuna saabsan Xeerka oo aynnu ku arki doonno buuggan dhexdiisa.



# Cali Kalageeye iyo Aale Buuri

Xilligii ay jabtay dawladdii Islaamka ee uu hoggaaminayey halyeygii Axmed Gurey kadib iyadoo dadku dhib qabo waxa ku soo duulay oo arladii oo dhan qabsaday quruunta la yidhaa Gaallaha *(Oromo)*. Duulaankaa Gaalluhu wuxuu ku qabsaday qayb weyn oo ka tirsan dhulka Soomaalida. Waxa kale oo ay qabsadeen iyagoo lo' badan wata dhulka buuraleyda ah ee haatanba ay Oromadu degto, dad badani markey akhriyaan qoraalkan waxa laga yaabaa inay is weyddiiyaan.

## *Gaalluhu xaggey ka soo duuleen?*

Ugu horreyn waxay yimaaddeen jiiddeenan Gaalluhu 1551[kii] oo ay duullaan ku soo qaadeen, ka horse may joogin. Oromadu dhulka buuraleyda ee Harargena may degi jirin, ee waxay ka soo duuleen koonfurta shishe ee dhulka haatan loo yaqaan Itoobiya. Hadal iyo dhammaan waxaa la isku raacsan yahay inay Gaalluhu qabsadeen ilaa xeebaha Somaalida oo ay ku jiraan Berbera iyo Saylac.

Inta sannadood ee ay dhulka Soomaalida haysteen lama yaqaan. Intay doontaba ha ahatee xilligaa waxa la sheegaa inay dadkii dhibeen, xoolihiina ay dheceen. Gaalluhu markaas waxay ahaayeen cawaan oo diin ma haysan. Sida ay odayo wariyeen waagaa uu Gaalluhu dhulka Soomaalida ka talinayey waxa mar madax u noqday amma boqor u ahaa nin kibray oo magaciisa la odhan jirey Aale Buuri.

Aale Buuri wuxuu ahaa nin xukun qallafsan, keligii taliye ah, dabadiina aan la hadlin. Amarradii qallafsanaa ee uu bixiyey waxaa ka mid ahaa, caanaha xoolaha laga soo maalo amma laga soo liso ani ii keena xitaa carruurta waxba ha siinina, waa amar. Xukunkaana sidiisaa loo fulinayey muddo badan, waxay dhibaato badani ka soo gaadhay amarkaa dadweynihii gaar ahaan dumarkii iyo carruurtii Rag male kama dhammaadee

dhibaatadii Aale Buuri dadka ku hayey waa loo adkaysan waayey, waana la tashaday oo waxa Ciisaha si qarsoodi ah u shiriyey ninkii geesiga ahaa ee la odhan jirey Cali Kalageeye

Sida ay weriyeen odayada u dhuun daloola taariikhda Cali Kalageeye, waxay sheegeen inuu muddo badan ku hawlanaa sidii uu ummadda uga xoreyn lahaa gumaysiga Aale Buuri.

Cali Kalageeye hub iyo ciidan uu kaga hor tago cadawga ma haysto. Aale Buurina waa nin ciidan badan oo hubkoodu u dhan yahay haysta, ciddii isku soo taagtana qoortaa la gooyaa.

Cali Kalageeye wuxuu goostay kol hadduu haysan xoog uu kaga hortago cadawga inuu xeelado adeegsado. Haddaba odayadii taariikhda wariyey waxay ku kala baydheen xeeladihii uu adeegsaday iyo qaabkii uu uga hortegey Aale Buuri, waxayna sheegaan dhawr siyood, waxayse isku raacsan yihiin inuu soo saaray labada ciyaarood ee kala ah Wilwilaha iyo Gocosta, waxayna ka mid ahaayeen labadaa ciyaarood xeeladihii uu adeegsaday si uu uga takhaluso keligii taliyihii Aale Buuri iyo xukunkiisii.

Labadan ciyaarood ee Cali Kalageeye adeegsaday tan hore ee Wilwilaha ilaa xilligan aynu joogno waa caan oo waa la ciyaaraa, waxana laga ciyaaraa oo ay kaalinta koowaad kaga jirtaa gobolka Awdal ee dalka Soommaliya, Jabuuti iyo Gobolka ismaamulka Soomaalida Itoobiya. Waa ciyaar marka la ciyaarayo raggu warmo, gaashaamo iyo golxaddo qaataan. meelaha fagaarayaasha marka lagu ciyaarayo waxa kuu muuqanaya afar nin oo Warmo iyo Gaashaamo sita oo ragga ciyaaraya ka soo horreeya laba labana u socda oo tirtirfanaya, ereyada ay ku dhawaaqayaan ragga ciyaarayaa waxa ka mid ah:

Heerimaadow, hanna haaban
Nimaan hellaa, ma hambaynnee

Ciyaartan Wilwilaha markaad u fiirsato waxa kuu soo baxaya inay laba waji leedahay:

- Mid ciyaareed
- Mid dagaaleed

Abwaanaka Soomaaliyeed ee caanka ah, waa Maxamed Ibraahim Warsame *"Hadraawiye"* waa kii lahaa.



In wilwile ciyaar tahay
Is waraari badan tahay
Wiglo iyo hab leedahay
Marna walax dagaal tahay
Warmo iyo hub leedahay
Wajigeedu laba yahay
Waayeelba noo sheeg

Ciyaartan Wilwilaha marka raggu goynayo jaantay isla helaan dumarkuna xagga dambe ayey ka jiibiyaan iyagoo ragga guubaabinaya, waxayna yidhaahdiin iyagoo ku luuqaynaya.

Baarka baarkiisow
Baaruudda ololka dheerrow
Beeryarow hee

Ciyaarta labaad ee Gocosta ee Cali Kalageeye xeelad ahaanta u adeegsaday waa ciyaar ka duwan Wilwilaha, kana mid maaha ciyaaraha loo yaqaan hiddaha iyo dhaqanka.

Gocostu waa ciyaar kubbadeed lagu tartamo oo dhibco lagu kala helo, waa ciyaar qaab *"sport"* ah oo dhaqankeenna ka mid ah waxayna u gaar tahay ragga oo keli ah.

Marka la ciyaarayo waxa la isku qaybiyaa laba kooxood oo tartama, ciyaarta gocosta waxa lagu ciyaaraa kubbad yar oo ah ta lagu ciyaaro *"Teniska"* waayadii hore Gocosta waxa laga samayn jiray geedka marabi'ista midhihiisa iyo dhogorta geela ee la yidhaa Geenbaalaha oo mara lagu duubay laguna giijiyey dabada fardaha iyo xadhig la yidhaa Gucun markaasay sida kubbadda u boodi jirtay. Xeerar u gaar ahna way leedahay. Ciyaarta gocosta marka la bilaabayo ee labadii kooxood ee tartamayey isa soo hor joogsadaan. Waxa kubbadda gacanta ku qabta nin iyaga ka mid ah wuxuuna ku dhawaaqaa:

"Yaa Il iyo Oof la".

Intii markaa ka qayb galaysay ayaa u jawaabta oo tidhaa:

"Ninna".

Markaasuu ninkii kubbaddii cirka sare u laliyaa intii itaalkii ah, sidaa buu tartankii ku bilaabmaa. Gocostu waa ciyaar xiiso badan waxana laga ciyaaraa gobolka. Waqooyi Galbeed, Awdal, Jabuuti iyo Gobolka

ismaamulka Soomaalida Itoobiya, qawmiyadda Cafartuna aad bay u ciyaaraan Gocosta.

Haddaba aan u soo noqonno Cali Kalageeye sidii u uga hor tegey Aale Buuri iyo xeeladihii uu adeegsaday, xagga hore waxaan ku soo sheegnay taariikhda raggii weriyey inay ku kala baydheen meelaha qaarkood, waxaase jirta in sida ay ku bilaabatay la isku raacsan yahay. Cali Kalageeye intaanu dagaalka cadawga uu ku qaadayo bilaabin, wuxuu dhallinyaradii ka xushay qaar firfircoon oo habeenkii uu tababaro. Cali wuxuu dhallinyarada baray ciyaarta Wilwilaha iyo qaabka uu doonayo inay ugu dagaal galaan, wuxuu kaluu baray ciyaarta Gocosta sida loogu gaatamo iyo guud ahaan xeeladaha uu maaggan yahay.

Cali Kalageeye markuu is yidhi haddeed waad tabaabuushaysatay oo diyaar baad tahay ayuu Ciisihii shiriyey, wuxuu yidhi maanta wixii ka dambeeya, Aale Buuri caanoo loo geeyaa ma jiraan, markuu caanihii aaway yidhaana waxaan ku jawaabaya "*waxaan Alle iyo Aale Buuri midna aqoon baa caanihii dhamay*", ee waxaad yeeshan carruurta soo ururiyoo caanahana ka dhargiya, waxaanad bartiin Alle iyo Aale Buurii midna ma naqaanno ee waxaan naqaan caano, Aale Buuri maalintaa markuu caanihii waayey, farriin buu soo diray oo wuxu yidhi si degdeg ah caanihii ha loo keeno.

Cali Kalageeye ayaa Aale Buuri u tegey isagoo fara madhan oo ku yidhi:
- *Waxa aan adigana ku aqoon Allena aqoon baa canihii dhamay.*
Aale Buuri oo ahaa nin kibir badan baa yidhi:
- *Waxaan aniga i aqoon dunida kuma noola ee Caliyow maxaad u jeeddaa.*
Cali wuxuu yidhi:
- *Indhahaagaan kugu soo tusi ee inna mari.*
Aale Buuri oo qaadan kari la hadalkaa baa soo raacay Cali Kalageeye. Waxay soo socdaanba, Aale Buuri waxa la dul keenay carruur badan oo meel fadhida isla markiiba Aale Buuri wuxu ubadkii weyddiiyey intuu isdul taagey:
- *Ani ma i taqaaniin Aale Buuri baan ahaye?*
Caarruurtii mar keli ah bay dhawaaqday ooy tidhi:
- *Maya!*
- *Maxaa kale oo aad garanaysiin?* baa la weyddiiyey carruurtii.
- *Caano! Caano! Caano!* bay ku jawaabeen.
Aale Buuri oo madaxa lulayaa meeshii ka tegay.



Waa kelidii taliye iyo xaalkiise, Aale Buuri markuu ku noqday xaruuntiisii oo ku taallay dixdaa Maan-daaha gumburta ku taal ee magaceeda la yidhaa Dhiig-dhaba, (Gobolka Awdal) ayuu soo saaray amarro kuwii hore ka qallafsan oo ku jeeda ubadka yar yar. Amarradii uu soo saaray waxa ka mid ah, maalin kasta oo Salaasa ahba waxaan samaynayaa xaflado ii gaar ah, sidaa daraaddeed waxaan rabaa halkii aan neef adhi ah kaga sadqeyn lahaa in la ii keeno wiil yar. Taas wuxuu ula jeedey inuu ku ciqaabo carruurtii lahayd caano maahee cid kale garan mayno. Laba toddobaad markay ka soo wareegtay ee laba carruur ah uu gawracay dadkiina yaabban yahay, ayuu amar kale soo saaray oo wuxuu yidhi gabadh ha la ii dhiso wiil yar oon arooskayga aan ku sadqeeyana ha la soo raaciyo. Halkaa markay marayso, Cali Kalageeye shir buu Ciisihii u qabtay, waxa la is weyddiiyey dhibaatadan sidii laga yeeli lahaa, in muddo ah haddii la rogrogay ugu dambayn waxa male keenay Cali Kalageeye oo yidhi: Aale Buuri gabadh baan u dhisaynaa oo waa gabadha adeerka aan u ahay ee Aamina, wiilka aan raacinayaa ee lagu sadqaynayaa waa wiilkayga yar ee Wacays, wiil la gawracana isagaa ugu dambayn buu yidhi Cali Kalageeye. Subixii dambe gabadhii Aamina iyo wiilkii Wacays buu sii kaxeeyey isagoo fulinaya amarkii Aale Buuri, markuu ku soo dhawaaday xaruntii boqorka waa kii lahaa isagoo ku dhawaaqaya.

Wacays baan soo sidnaa
Waa wiil!
Badhaadhaan daba wadnaa
Waa gabadh!

Markuu ku hubsaday halkii uu fadhiyey Aale Buuri iyo raggii la talinayey ayuu dib u soo laabmay, Cali si degdeg ah buu ugu yeedhay raggii uu tababaray ee awalba uu dadka ka xushay wuxuu yidhi:
- *Fadhi dambe innooma hadhin waxa aan sugnaaba waa dagaal aan gallo, xeeladdii aan ku dagaal galaynay anaa haya ee imaqla. Reeraha oo dhan ha la raro oo bari ha loo guuro, markaa dabadeed xaruuntii Aale Buuri baan ku noqon, waxaan ku odhan Boqorow reerihii way baqdeen oo xaggaa iyo Bari bay u yaaceen waxaan kaa doonayaa inaad i siisid ciidan aan ku soo dabbaalo.*

Markuu ciidanka i soo siiyo waan soo horkici oo waxaan keeni meel hebla, idinkana waxan idinka dhigi rag ani ila jira oo reeraha ila soo dabbaalaya, dabadeed waxaan adeegsanaynaa xeeladdii Gocosta ee aan idinku tababaray.

Cali Kalageeye sidii buu yeelay wayna u meel martay ciidankiina halkii lagu ballamay buu keenay, ciidankaa tiradiisa waa lagu kala baydhay. Ragga taariikhdan weriyey qaar waxay yidhaahdeen ciidanku (100) boqol nin buu ahaa, qaar kale waxay leeyihiin (30) soddon buu ciidanku ahaa fardo wadata.

Hadal iyo dhammaan habeenkii labadii ciidan meel bay u wada hoydeen aroortii markii la wada toosay ayaa Cali wuxuu ku yidhi ciidankii Aale Buuri aniga iyo saaxiibbaday waxaan ciyaaraynaa Gocosta ee wax yar na suga raggii Cali ciyaartii bay u sarakaceen isna uu is dhex taagey intuu kubbadii yarayd gacanta ku qabsaday, markaasuu sidii ballantu ahayd ku dhawaaqay:

- *Ayaa Il iyo Oof la?*

Markaasay u jawaabeen oy yidhaahdeen:

- *Ninna.*

Calina kubbaddii buu xoog cirka ugu tuuray, ciidankii Aale Buuri indhaha ayey cirka la raaceen iyagoo sii eegaya kubbaddii, waa siday ballantu ahayde Cali iyo raggiisiina golxaddadii iyo warmihii bay ku boobeen ciidankii Aale Buuri waana la wada gawracay.

Kooxdii Cali Kalageeye oo guulaystay hubkii iyo fardihii ay furteenna wata ayaa maalintii dambe waa dhawaadkii soo dul fadhiistay xaruuntii Aale Buuri. Boqorkii iyo raggii la talinayey siday caadadu ahayd waxay soo fadhiisteen halkii ay wax ka maamulayeen iyagoo meelna balaayo ka filayn. Cali iyo kooxdiisii mar keli ah bay weerar soo qaadeen iyagoo abbaaraya Aale Buuri iyo la taliyayaashiisii. Dagaal aad u khadhaadh ka dib waxa Cali u suura gashay inuu laba u kala gooyo Aale Buuri, ciidankiisiina waa la jebiyey oo waxaa laga dhigay wax la qabtay, qaar la dilay iyo wax cagahooda wax ka deyey.

Cali Kalageeye iyo raggiisii markay guushii u soo hoyatay bay Wilwilaha gooyeen, waxayna ku dhawaaqayeen.

War wareennoo
Annagaa reebi ogeynoo
Warmaheenna
Laga waashoo
Ridda weeyee!
Hooy weykaa
Ridda weeyee



Heeri maadow
Hanna haaban
Nimaan hellaa
Ma hambaynee !

Ragga taariikhdan weriyey qaarkood waxay sheegeen sidaa si ka duwan in loo dilay Aale Buuri. Waxay yidhaahdeen markuu Cali damacsanaa inuu Boqorka xeeladeeyo toos buu ugu tegey isagoo ku leh, Boqorow maalinta Salaasada eed xafladda leedahay baan doonaynaa inaan kuu ciyaarro, Aale Buurina taa waa u guuxay, maalinta loo ciyaari doono Boqorka habeenkii ka horreeyey ayuu Cali Kalageeye raggiisii la shiray, waxayna isla meel dhigeen sidii ay gaadmo ugu dili lahayen Aale Buuri, oo waa sidee ?

Cali Kalageeye oo raggiisii la hadlaaya ayaa yidhi, berri markaynnu ciyaarta Wilwilaha bilowno warmaheennu haku beegnaadaan. Aale Buuri iyo la taliyaayshiisa waayo haddaan iyaga dillo inta kale way noo jabayaan oo ciidan mirix waayey bay noqonayaan. Haddaba si aan u ogaanno Boqorka iyo raggiisu sida ay u fadhiyaan ee ay isku xigaan, laba nin waa inay tirtirfadaan oo u dhawaadaan iyagoo rag salaamaya iska dhigaya, laba kalena sidaa si le'eg ha yeelaan oo ha weydaartaan. subaxnimadii ayaa Cali iyo raggiisii yimaaddeen, waa sidii baallanku ahaaye ciyaartii bay bilaabeen, dhawr goor hadday tirtirfadeen oo ay iswiliiliyeen oy jaanta isla heleen ciyaartina meel fiican marayso ayaa Cali Kalageeye iyo afar nin oo raggiisa ka tirsanaa isku il jabiyeen dabadeed intay tirtirfadeen bay ku dhawaadeen mar keli ah bayna warmahoodii ku hubsadeen oo ay laabta ka wada geliyeen, intaa kagamay hadhine Cali iyo ciidankiisii oodhan ayaa warmihii iyo golxaddadii mar keli ah kula dhexdhacay cadawgii iyagoo ku dhawaaqaya.

Warwareennoo
Warmaheennaa
Laga waashoo
Hidda weeyee !

Cali Kalageeye iyo raggiisii sidaa bay Aale Buuri iyo xukunkiisiiba ku jabiyeen dalkiina ku xoreeyeen.

Halkaasaana Gaallihii dhulka Soomaalida inta badan qabsaday badhtamihii qarniigii 16[aad] dhan walba laga riixay, gaar ahaan dhul-daaqsimeedka buuraleyda Harar dhan walba ka xiga.

Waxa kale oo xusid mudan in dhacdadan ragga qaarkiis siyaabo kale u weriyaan hasa yeeshee annaku waxaan tix gelinnay sida ay wariyeen odayadii aan ka soo guurinnay intoodii badnayd.

Waxa kale oo odayadu wariyeen jabkaa ku dhacay Aale Buuri iyo xukunkiisii ka dib in loo fadhiistay Xeerka Ciisaha samayntiisa waana wax runta u dhaw.



# Gogoldhigga Xeerka

Su'aasha meesha taalla waxay tahay kumaa xeer dhigta ?

a) Qofku waa inuu labo dhibo.
b) Labana waa inuu dhowro.
c) Labana waa inuu dhaqo.
d) Labana waa inuu agabaro.
e) Labana waa inuu layliyo.
f) Labana waa inuu adeegsado.

*Kolkuu qofku lixdaa ka soo baxo ayuu Xeerka raacaa.*

*a) Labada uu dhibayo:*
Labado lugood waa inuu dhibo.

- Dhib baa u dawo ah baa la yidhi.
- Hadduu dhibiwaayo waa beer u jiif.

*b) Labada uu dhowrayo:*
Labada uu dhowrayo waa afka iyo ibta, oo muxuu ka dhowri?

- Ibta xaaraan buu ka dhowri, oo waxay u soo jiidi ceeb ifka ah iyo cadaab aakhiro.
- Afkana xaaraan uu ku cuno ayuu ka dhowri.
  Been uu ku sheego ayuu ka dhawri.
  Ummad uu isku diro ayuu ka dhowri.

*c) Labada uu dhaqayo:*
Labada indhood sida xoolaha loo dhaqo buu u dhaqayaa.

- Wuxuu ka dhaqayaa inuu wax xun ku eego, dhibna wuu ka eegayaa.
- Waxyeello iney gaadhana waa uu ka dhawranayaa.

*d) Labada uu agabarayo:*
Waa labada dhagood.

- Oo wixii wanaag ah si fiican buu u dhagaysan.
- Wixii xunna wuu ka dhaga xindhan.

*e) Labada uu laylinaayo:*
Waa labada gacmood.

- Oo wax qabad baa loo layliyaa.
- Farsamo kasta si ay u qabtaan, waa inay wax bartaan. Waayo nolol maalmeedku waa iyaga.
- Wax qabad la'antooduse waa jeedallo kaa lusha.

*f) Labada uu adeegsanayo:*
Waa maskaxda iyo qalbiga.

- Wax walba ayay hoggaanka u hayaan.
- Qofka hadday labadaasi u fayoobeyn, dadna ma kala dhabo tiisana ma maamuli karo.

Qofku kolka uu leeyahay intaa aan soo sheegnay, ayuu Xeerka raaci karaa.



# Dhegaleyda Bilawgii Xeerka

Xeerka dejintiisa waxaa loo soo maray dhibaatooyin fara badan oo aan la soo koobi karin. Muddo 50 sano ah ayaa hadba meel loo fadhiisanayey sidaan buugga ku bilawnay.

Halkii u horreysay ee loo fadhiistay Xeerka waxay ahayd daabiyadda madow ee *Tokhoshi* agteeda ah loona yiqiin *Awdal*. Waayadii dambese *Seylac* baa qaadatay magacii Awdal. Waxaana la fadhiyey 4 sannadood oo ay fadhiyeen 36 odey.

Markii xigeyna waxa la fadhiistay *Selel* oo ah dixda Ceelgaal marta. 60 oday baa halkaa fadhiistay waxayna fadhiyeen 2 sannadood. Markii saddexaad waxaa la fadhiistay *Kartataan*, wuxuu ahaa ceel sagaal shub ah, imikana waa buqdho durdur ah oo waxaa loo yaqaan *"Khadar iyo Ilyaas"* amma *"Ceelka Madow"* oo ku yaal inta u dhaxaysa *Cabdulqaadir* iyo *Jidhi* waxaana la fadhiyey 6 sannadood waxaana fadhiyey 60 odey.

Markii afraad waxa la fadhiistay meesha la yidhaa *Carra-weyne* oo u dhaxaysa *Beeyo-caanood* iyo *Beeyo-gurgur* oo iminka ka tirsan ismaamulka Soomaalida Itoobiya Gobolka Shinniile. Waxa halkaa la fadhiyay 3 sannadood, waa halka waxa inta badan lagu dhigay xeerka. *Siti* waa halkii Xeerka lagu dhammaystiray, waxayna ku taal *Geel Case* amma *Sadiiqo* dixda la yidhaa, Ayshaca ayey Galbeed kaga toosan tahay ismaamulka Soomaalida Itoobiya, Gobolka Shinniile. *Sadiiqo* waa halkii warka lagu kala helayey. Kolkaa Xeerka la dhigayey xuduuddo ma jirin gumaysina ma'iman dadkuna wuu isdhex yaallay. Waxa halkaana la fadhiyey 2 sannadood, waxaana u fadhiistay 44 oday. Sidaa baa loo yidhi:

"Eebbahay Xugun buu iga abuuray,
Aabbahayna Xeer buu ii dhigay."

# Maahmaahaha Xeerka.

1. Xeer wax ma dhaafo lamana dhaafo !
2. Xeer waa geed jeerin ah !
3. Xeer la'aan waa la xooloobaa !
4. Xeer waa xakame !
5. Xeer waa hadh iyo gogol !
6. Xeer waa hilin aan dhagax lahayn !
7. Xeer waa dayr iyo dallad !

*Xeerku wuxuu yidhi :*

- Nin hantidaada doonaya hubkaaga looma dhiibto.
- Nin bakhtigaaga jecel baylahdaada looma sheegto.
- Nin dalkaaga doonaya dawyadaada lama baro.
- Rag duunyadaada uga tagoo gartaada ha uga tegin.
- Xeer wuu kaa sarreeyaaye lagama sarreeyo.
- Xeer diid waa Alla-diid, waana Qaran-diid.
- Xeer iyo xariirba waa la huwadaa.
- Xoolo wey ku gabaane xeer kuma gabo.
- Xeer waa ilaaliyaha bulshada.
- Xeer waa ciidankaaga oo aan casho kaa dooneyn.

A. Xeerku waxba ma dhaafo oo irbad caaradeed buu wax ku baadhaa, nin dhaafi karana ma jiro oo isagaa qaban. *(Ninka dheri bixiyaa idan baa la yabdhaa).* Halkaa baa laga garan inuu Xeerku waxba dhaafin.

B. Xeer waa geed jeerin ah, geedka jeerinka ah waa geed ballaadhan oo dhulka ku naban lamana huluulan karo dhulkuu ku ballaadhan yahay, lagamana boodi karo oo waad ku dhici, Xeerkuna waa sidaa.



T. Xeer la'aan waa la xooloobaa. Xoolaha amma xayawaanka ayaan xeer lahayn hadduu qofku xeer lahayn xoolo waxba kama duwana, waa in xeer jiro.

J. Xeer waa xakame. Xakamuhu waa xadhigga fardaha lagu hoggaamiyo. Afka ayuu kaga xidhan yahay kaa la'aantiina ma kaxayn karaysid faraska, sidoo kale xakamaha ragguna waa Xeerka.

X. Xeer waa hadh iyo gogol, kolka la leeyahay, waa meel xeer jiro, oo xeerkaa baa kuu gogol ah mana cabsanaysid, hadhku cadceedduu kaa daafacaa, Xeerkuna waxyeellada iyo xumaantuu kaa daafacaa.

Kh. Xeer waa dayr iyo dallad, in kastoo aad itaal xuntahay isagaa ku ilaalinaya.

D. Xeer waa hilin aan dhagax lahayn, dariiqu hadduu nadiif yahay kuma kufaysid kumana turunturroonaysid meel xeer yaallana waa sidaa oo kale.

R. Nin hantidaada doonaya hubkaaga looma dhiibto, ruux hantidaada doonaya haddaad hubkaaga siiso hantidaadii adigaa dayacay illeen hubkaagii baa lagu qaadaye.

F. Nin bakhtigaaga jecel baahidaada looma sheegto, nin geeridaada doonaya maxaad baahidaada ugu sheegi, nin noloshaada doonayase baahidaada wax buu ka qaban.

Sh. Nin dalkaaga doonaya dawyadaada lama baro, nin aad dawyadaadii bartay iskama celin kartid oo wuu kaa adag yahay, cadowgaaga waa inaad iimahaaga barin.

Dh. Rag duunyadaada uga tag, gartaadase ha uga tegin, haddaad duunyo u dayso abaal buu kuu hayaa, lakiin gar aad leedahayd ha uga tegin oo haddaad uga tagto waan helay uun buu odhan.

G. Xeer wuu kaa sarreeyaa ee lagama sarreeyo, Xeerku waa hoggaankii ummadda iyo dalka. Qofna ma odhan karo ma garanayo xeerka.

H. Xeer diid waa Alla-diid waana Qaran-diid, Xeerka nin diiday waa nin ummaddoo dhan diiday, dhan baana laga wada mari ninkaa.

C. Xeer iyo xariirba waa la huwadaa, nin xeer lihi waa nin xariir huwan sida aad hugaaga u sidato ayuu Xeerkuna kuula socdaa.

Q. Xoolo wey ku gabaane xeerse kuma gabo, xoolaha abaar baa qaadda xeerku wad iyo weyd midna malaha kolba intii hadha ayaa ku dhaqanta.

K. Xeer waa ilaaliyaha bulshada, wax alla wixii xumaan ah ayuu bulshada ka qabtaa.

L. Xeer waa ciidankaaga oo aan casho kaa doonin, ninka kuu ciidma casho iyo cuudba waad siin, Xeerku isagoo gaashaan kuu ah buuna waxba kaa doonayn.



# Dhegaleyda Maahmaahaha

1. Raggu waxay kala yihiin: Didiye iyo Dabbaale.
   - ➢ Didiye Xeerku geed buu ku xidhay.
   - ➢ Dabbaale ayey Xeerka walaalo yihiin.
   - ◆ *Didiye* : didiyuhu waa belo u joog aan wanaag shaqo ku lahayn.
   - ◆ *Dabbaale* : waa ninka wax Alla wixii kale tegi lahaa isu keena wanaagna ka sheqeeya.

2. Raggu waa Aayo-reeb iyo Eela-reeb.
   - ➢ Aayo-reeb bay Xeerka walaalo yihiin.
   - ➢ Eelo-reeb Xeerku geed buu ku xidhay.
   - ◆ *Aayo-reeb* : waa ninka wax wanaagsan oo la xasuusto ka taga sida raggii xeerka sameeyey oo kale.
   - ◆ *Eelo-reeb* : waa ninka xumaan reebka ah ee waxa xun laga dhaxlay.

3. Raggu waa Soof-eeg iyo Suul-eeg.
   - ➢ Soof-eeg, bay Xeerka walaalo yihiin.
   - ➢ Suul-eeg, Xeerku geed buu ku xidhay.
   - ◆ *Soof-eeg* : waa ninka degaanka ilaaliya kana ilaaliya ceebtaa. Dibadda uga imanaysa iyo wixii xumaan iyo colaad ah.
   - ◆ *Suul-eeg* : waa ninka hoostiisa uun xumaan ka beera ee aan indher-garad aheyen. Xumaan side.

4. Raggu waa Bogsiiye iyo Belaliye.
   - ➢ Bogsiiye ayey Xeerka walaalo yihiin.
   - ➢ Belaliye Xeerku geed buu ku xidhay.
   - ◆ *Bogsiiye* : waa ninka meel Alla meesha ay xumaani ka dhacdo bogsiiya ee kolkaaba biyo ku shuba.
   - ◆ *Baleliye* : waa isku dire oo dabkuu shidaa laguna gubtaa, waar ma hebel baa kiciyey masiibadan ayaa la yidhaa.

5. Raggu waa Hedlede iyo Hurde.
   - ➢ Hedlede ayey Xeerka walaalo yihiin.
   - ➢ Hurde Xeerku geed buu ku xidhay.
   - ♦ *Hedlade :* waa ninka bulshada wax u tara naftiisana wax u qabta.
   - ♦ *Hurde :* waa wax ma tare naftiisa waxba u qaban.

6. Raggu waa Xeer-la-joog iyo Xoolo-la-joog.
   - ➢ Labadaba Xeerka ayey walaalo yihiin.
   - ♦ *Xeer-la-joog :* waa ninka Xeerka eega gacantana ku haya.
   - ♦ *Xoolo-la-joog :* waa ninka Xeerka tiiriyey oo wixii loo baahdo diyaar u ah.

7. Rag waa Talo-keen iyo Talo-raac.
   - ➢ Labadaba Xeerkay walaalo yihiin.
   - ♦ *Talo-keen :* waa ninka ra'yi wanaagsan keena ee bulshada ku dhaqa. Waa hoggaamiye bulshed.
   - ♦ *Talo-raac :* waa ninka wanaagga raaca inta wanaagsan Xeerku wuu soo dhaweeyay, wixii xunna wuu iska xidhay.



# Dhegaleyda Asluubta Xeerka

Afar waa lagu faanaa ee lagama faano.
Dalkaaga waa lagu faanaayo lagama faano.
Dadkaaga waa lagu faanaayo lagama faano.
Dhaqankaaga waa lagu faanaayo lagama faano.
Diintaada waa lagu faanaayo lagama faano.

Afartaa aan soo sheegnay ninka xumaan ku sheega ee yidhaa, dalkeennu ma dalbaa, ma dadkeennaa dad ah, dhaqankeennu ma dhaqan baa, ma diinteennaa diin ah iyadoo xeerkuna yahay dhaqankeenna tiirashiisa, diintuna ay tahay tan rabbi weyne noo soo dejiyey, in la caayana ay meesha oollin.

Ninka lagu helo afartaa amma mid ka mid ah ee caaya ee maragna loo helo, waxaa la hor geyn golaha weyn ee guurtida, waxaana lagu xukumi 12 halaad, waxaa uu caayay guurtiduna waa ka mid oo waa tii dadka u talinaysay. Xeerkani waa xeer dad badan lagu soo xukumay.

Haddaan xeerkan lagu soo dhaqmin dal, diin iyo dadba, midna ma jireen. Sidaasaa asluubta xeerka loo sugay looguna xad gudbi karin.

# Dhegaleyda Rukummadda Xeerka

Qodobka 1aad: 100 nin oo afkeenna lagu yidhaa Gande ayaa marka hore la sameeyey oo xeer haye ah.

Qodobka 2aad: Waxaa kaloo jira 12 ulhaye, oo afka gaalaad lagu yidhaa *"Chef district"*. Waxaana loo qaybinayaa deegaannada waxayna hoos imanayaan 100ka oday ee Gandaha. Ulhaye waxa uu ka dhigan yahay, degaankaa mas'uulka uu ka yahay xagga nabadda.

Qodobka 3aad: Gudoonshaha, gudoonshuhu waxa uu yahay waa shaqsi la doortay oo mas'uuliyad la saartay, waxaa kaloo la yidhaa duceeye wuuna duceeyaa garta horteed iyo marka ay dhammaato, curadna waa la yidhaa.

Qodobka 4aad: Intaa aan soo sheegnay waxa u gole ah oo fadhigoodu yahay 44ka aqal oo bulshada laga soo xulay. Waxayna deggan yihiin meel ugaar ah oo waa xaruuntii Siti. Magacoodu waa *Gande Khayre*. Ganduhu Ciisaha wuxuu ugu jiraa kaalinta ay hadda dawladaha ugu jiraan Guddida distooriga ah iyo maxkamadda sare.

Kolguur meel ka sokeysa reer uma degi karo. Kolguur waxa la yidhaa awrka la raro aroorta ee la furo galabta, waa maalin socod. Intaabaa u seero ah oo cidina degi karin. 44 kaa aqal waxaa loo sameeyey hab lagu dhaqaaleeyo, dhaqaalahaas waxaa laga soo guraa 12 ka Gallin waxaana soo gura 12 kii ulhaye oo ay la socdaan ciidammo u gaar ah, kidin daloolaba nayl baraar ah baa laga soo qaadi. Waxaana la daajiyaa xoolahaa seerahaa ay deggan yihiin 44 kaa aqal, waxayna xoolahaasi daaqayaan seerahaas loogu tala galay oo tigaad xiddig ah.

Xoolahaasi siday u daaqayaan kolka ay seeraha ka baxaan waxaa la garan summaddooda oo waa la soo celin lamana



Qodobka 5aad: Kol Alla kolkuu sannad ka soo wareegaba kidin walba oo daloolaba galaan subag ah ayaa laga qaadi waxana lagu shubi cokosaha.

Cokosahasoo, harag xoolaad ka samaysan, waxaa lagu xafidaa aqal weyn, wax Alla wixii gar u yimaddaba halkaa ayuu dhaqaalahoodu yahay. Waxa dhici karta keydkii hore oo yaalla, inuu kii kale ee sannadku soo gaadho, raashinkaas oo ka kooban *"subag, hadhuudh iyo cad xoolaad"*.

Qodobka 6aad: Waxaa Gendahaa la isugu yimaaddaa sannadkii kol waxaana isugu imanaya 12kii ulhaye ee deegaanka amma gallin.

Waxaana war bixin laga siinayaa, wixii la qabtay iyo wixii dhibaato ah ee gobol walba ka dhacay gobolkii ay dhibaato ka dhicin, amma xalliyey dhibatadiisa, ayaa qaadanaya *"Usha nabadda"* (oo ka dhigan billad-sharaf). Dhalliilahaa laga eegayey gobollada waxaa ka mid ahaa in laga helo reer lagu dul qaday amma gabadh la kufsaday, amma geel la qaaday, intaas mid ka mid ah gobolkii laga helo dhalliil baa loo jeedin. Gobol walba waxa uu ku dadaalayey sidii uu Usha nabadda u qaadi lahaa.

# Dhegalayda Dhaqan

Dhaqan maxaa u curad ah?

Diinta ayaa u curad ah.
Xeerka ayaa ku xiga.
Asluubta iyo wada noolaanshaha.

Degaanku waa mid ummadda ka dhaxeeya. Wixii xumaana ee ku imanaya degaanka waa in laga ilaaliyo waana waajib saaran ruux kasta.

Ummaddaa dhaqanka mid ah leh ee xeerku ka wada dhexeeyo hadduu qof ku xad-gudbo mid iyaga ka mid ah, waa inuusan odhan waan aarsanayaa ee halkii isaga wax u qaban lahayd waa inuu u yimaaddo oo ah geedka ummadda u dhaxeeya.

Xeerku wuxuu aabbo u yahay wixii la miidhayo amma dhibaato loo geysanayo.

Xeerku wuxuu dhigay inuu ninna nin ka qoorweyneyn, waxa kale uu Xeerku diiday wixii dhaqan doorin la imanaya oo dhan ee fool xumo ku dhiiranaya. Xeerku waxa kaluu diiday gardarrada iyo kibirka. Waxa kaluu dhigayaa in wixii aad hesho duunyo noocay doonto ha ahaatee aad naadiso waayo waa xoolo dadweyne oo xil baa kaa saaran

Ceelasha ummadda u dhexeeya waa in la daranyo dhabo, oo haddii la arko nin wax xun ku sameynaya laga celiyo. ceelasha dadka qaar baa saamo amma hargo ku rida si marka ay saantu qoydo ay ugu qabsadaan danahooda. Ruuxii lagu helo waxaa soo xumaan ah Xeerku xukun buu ku riday.



# Dhegaleyda Tilmaamaha 8da ah ama Xeerka Guud

Siddeeddani waxay astaan u yihiin dadkii Xeerka dhigtay:

1. Marka u horreysa waa 12 aqal
2. Waa 12 gallin
3. Waa 12 geed
4. Waa 12 dixood
5. Gendaha oo ka kooban 44 aqal
6. Guurtida dixaha loo rido ee habeenno barida waa 44
7. Guddida nabadda xidha waa 44
8. Xeerkana waxaa ugu dambeyntii dhammeystiray oo 2 sannadood ahna u fadhiyay geedka Siti 44 oday oo baaho u dhan tahay.

44ka Gendaha iyo 44ka Guddi kasta ka kooban yihiin waxay labiyo tobanka aqal ee Ciisuhu u qaybsadaan sidan soo socota

- Ceeleeye : waa 8 (Muuse oo 4ah iyo Mamaasan oo 4ah)
- Wardiiq : waa 8 (Waqtishiile oo 4ah iyo Ruma-waaq oo 4 ah)
- Holle : waa 7 (Saaciib oo 4ah iyo Mahadle oo 3ah)
- Hawlaqaade : waa 7 (Iidle oo 2 ah iyo Yuusuf oo 5 ah)
- Hooroone : waa 7 (Geelwalaal oo 4ah iyo H-Walaal oo 3)
- Uur-weyne : waa 7(Fiqi oo 4ah iyo Cabdalle oo 3ah)

Arrin kasta waa inay u dhannaadaan 12ka aqal ee Ciisuhu.

# Dhegalayda Guddida u Taal

Guddida Xeerka Qabta

1. Guddidu waa inay baaho ka koobnaato.
2. Guddida waxaa laga eegi beenaale.
3. Guddida waxaa kaloo laga eegi nin buus qaata, oo waa haddii uu gubbo-cun yahay.
4. Guddida waxaa laga eegi il dab, oo waa haddii uu eexanayo.
5. Guddida waxaa laga eegi inay wax cunayso marka ay garta qaadayso.
6. Waxaa u yaalla oo kale, kol waa hurddo kolla waa hadal; kolna waa hunguri. Waxaa taa u maahmaah ah:
   "Guddi raamsanaysaa gar ma goyso".
   Murtidaa baa u markhaati ah.
7. Guddidu wixii tegey Alle bay uga hadhi, wixii soo socdana Alle bay ka sugi. Wixii joogana way ka talin.
8. Guddida waxaa laga eegi firdhiye, oo waa hadduu qaswadeen yahay.
9. Waxaa kaloo ka mamnuuc ah guddida sir bi-xiyaha oo go'aanka hortii wax sheeg sheega.
   Haddii lagu helana waa 12 halaad oo ganaax ah
10. Guddidu waxay eegi iilka oo waa godka nin waliba gali doono.
11. Guddidu waxa keliyey eegi Allaah magacii iyagoon cid kale ka baqayn. Gari Allay taqaan ee nin ma taqaan, waa tii la yidhi.

11 kaa qodob ayaa u gaar ah guddida. Xeerkaa baa qabta guddida lafteeda, sidaasaa loo yidhi : "Xeer waa xakame".

Waxa kale oo jirta geedaha Garta lagu qaado inay u qaybsan yihiin Duddo iyo Darif.
*Duddo* : waa dhulka badhtamaha Ciisaha ah .
*Darif* : waa dhulka cidhifyada u ah.



Guddi kasta waa inay fadhiisato oo ay garta ku qaaddo meel Duddo ah iyagoo Xeerinaya dhegalaydii ahayd :

"Guddi faadhyoomaysi hadal kama fiirsato."

Meel labaad baa jirta oo aan garta loo fadhiisan oo waa meel aan biyo lahayn. Waa tii la yidhi :

"Rug aan biyo lahayn reer lama furo."

Goob saddexaad baa jirta oo aan garta lagu qaadin oo waa aqal hoostii oo waa tii la yidhi :

"Wuxuu qarsaduu qabaa."

Iyadoo miyiga la joogo haddii gar loo fadhiisto guri amma aqal dhexdiisa wax ka soo qaad male oo xitaa haddii go'aanno la gaadho Ciisahu ma aqoonsado.

Guddida marka qof amma qolo ku soo dacwooto waxay odhan sidan soo socota:

| | |
|---|---|
| 1) *Aan fadhiisanno.* | Waxay ka dhigan tahay, sarajoog gar laguma qaado ee aan u fadhiisanno. |
| 2) *Aan maqallo.* | Waxay ka dhigan tahay, arrinku marka u horraysa dhagahayaga ha ku soo dhaco. |
| 3) *Aan eegno.* | Waxay ka dhigan tahay, mar haddaan maqallay aan hoos u gallo. |
| 4) *Aan dhagaysanno.* | Waxay ka dhigan tahay, aan aad dhagaha ugu raaricinno maragga. |
| 5) *Aan isweyddiinno.* | Waxay ka dhigan tahay, nin waliba malihiisa ha ka dhiibto. |
| 6) *Aan ka fiirsanno.* | Waxay ka dhigan tahay, aad iyo aad aan u lafa gurro. |
| 7) *Aan guddoonno.* | Waxay ka dhigan tahay, intaas oo dhan markaan soo indha-indhaynay aan isla aqballo. |
| 8) *Aan goynno.* | Waxay ka dhigan tahay, go'aan wada jir ah aan ka gaadhno. |

Guddi kasta oo gar qaadaysa waxaa u Xeer ah inay is xasuusiso ereyadan soo socda oo ku saabsan, dadka garta qaadaya iyo kuwa loo garqaadayo waxayna yihiin sidan :

Nin uu faraa, ninna uu fasaxaa.
Nin uu furaa, ninna uu falanqeeya.

Nin uu gooyaa, ninna uu guddoomiyaa.
Nin way u go'daa, ninna way ku go'daa.
Arrintaa waxaa gali, Alle iyo Nebi nin yaqaan.
Wuxuuna ku gali sir iyo caad la'aan.
Dhega qabaa dhageysan.
Indha qabaa eegi.
Marag iyo markhaataa la qaadi.
Marag iyo iimaan baa qaadi.
Taakiyaa taakin.
Xusliyaa xuslin.
Gudbiyaa gudbin.
Dhereriyaa dhererin.
Maaroodiyaa maaroodin.
Dhammeeyaa dhammayn.
Ma eexdaa ilaalin.
Ku degdeg iyo dib u dhac buu ka ilaalin.
Nin eexanaya iyo nin aqoon xun baa laga saari.
Beenaale iyo nin buus qaataa laga saari.
Sabab-ku-jirto iyo sanbab-ku-jirtaa laga saari.
Wixii iil ku jira Allaa looga hadhi.
Wixii ifka joogana odayaa ka talin.
Irbad caara dheer baa lagu baadhi.



# Dhegalayda Umadda u Dhaxaysa

Qodobka 1aad: Jalku ha innaga dhexeeyo oo waa jidiinkaa wixii mara, waa yaanan la isku dulqadin ee dhuunku ha innaga dhexeeyo.

Reerka ay martiyi ku dulqaddo waxaa u taalla (12 halaad) oo ganaax ah hadduu ninkaa martida ahi, reerka uu martida u yahay col ku soo duulo waa uu ku diriri oo uu daafici, haddii uu ku dhintana mag malaha, oo waayo? Waa laga marti geliyey, waa dhuunkaa waxa uu u dhimanayo, sidaa darteed ayaana loo qadin karin oo waa tii la yidhi :

"Ciise marti maahee magan malaha."

Ta oo ka dhigan Ciise uu ismartiyaaye laakiin reer qolo kale magan u ahi ma jiro.

Qodobka 2aad: Jicsin, waxaa la yidhi dadka caydhooba xadhigga ha loo qaado oo waxaa loo saarayaa guddi ummadda ka kooban, guddidaa ayaa kidinkii waraabe ka qadinba neef ka qaadaa.

Marka horeba loog iyo lis baa la siin; looggu waxa uu ka dhigan yahay, amhin, lisna waa waxay maalayeen. Ummaddaa dhulka wada leh baa mid iyo neef laga soo qaadi, kidin daloolaba. Xoolahaa baa ummaddaa caydhowday loo qaybinayaa. Sidaa baa loo yidhi :

"Jidiin iyo jiscinba ha innaga dhexeeyaan."

Waa waxay wadajir ahaan ummaddu u dhigatay, wixii diidana waa dad ka bax.

Qodobka 3aad: Waxaa la yidhi aan wada degno oo waxay ka dhigan tahay dalku uu ka wada dhexeeyaa ummaddaa Xeerka dhigatay.

Ninna ma odhan karo meeshan baan gaar u leeyahay. Sidaa baa loo yidhi:

"Ciise ceel iyo caws ma kala laha."

Qodobka 4[aad]: Waxaa la yidhi aan wada dadno oo waxay ka dhigan tahay wixii naga dhinta aan wada aasanno.

Qaylaa lagu dhifan, oo wixii maqlaa waa inuu yimaaddo aaska ninka loo sheegay ee iman waaya wuu xakuman yahay oo waa la yakayn waayo waa xaq oo danta bulshadaa ku jirta.

Qodobka 5[aad]: Waxa uu dhigayaa aan wada daaqno, biyo dad laga ceshaa iyo daaq dad loo diido midna ma jirto.

Waayo biyo cir joojiyey ninka hor joogsada ee anaa leh yidhahda, waxaan xoolahayga ahayn oo ka cabbaayi ma jirto, wada jirbaa loola dagaallami waayo qodobka aan wada daaqno ayuu jabiyay.

Qodobka 6[aad]: Aan wada daafacno, wixii dibad nagaga yimadda dalka aan ka daafacno, laakin laguma darin aan wax daandaansanno, haddaan la inna soo doonan, oo waxaa la yidhi ummadaha jaarka ah nabad aan kula noolaanno, waayo xeerkeennu wuxuu innoo diiday daandaansiga aad buuna u dhawraa jaarka iyo nabadda

Qodobka 7[aad]: Qodobkani waxa uu dhigayaa in gabadh laga oohiyo ayaa xaaraan ah ummaddu wada jir bay ugu dagaallami haddii gabadh ooyaysa la arko.

Hadday wax dhinto, mas'uul bay leedahay oo la doonan. Laakiin iyada waxba looma gaysanayo. Ninka gabadh ka oohiya Xeerka bulshada iyo sharaftaba meel buu kaga dhacay. Raggu wuxuu waranka iyo gaashaanka u sito ee uu ilaaliyo dumarkaa ka mid ah.

Qodobka 8[aad]: Geel la qaadayo ninkii arkaa inuu rido ayuu xeerku dhigayaa, waayo gar baa bannaan ee geel la qaadaayi ma bannaana.



# Dhagalayda Dhulka iyo Dadka Dhegaleyda Gallimada

Gallin walba odayaal buu leeyahay oo wixii dhibaato ah ee Gallin ka dhaca xallin kara. Gallin walba waxa uu leeyahay odayaal tirsan oo la ogyahay iyo oday u madax ah oo la yidhaahdo Ul-haye.

Ruuxii xaajadiisa amma arrintiisa la soo dhaafa odayaashaa Gallinka ee la yimaadda madasha weyn isaga oo leh 100 ka oday iyo Boqorka iyo Gandaha ayaan u geysan dacwaddeyda isagoo yareysanaya odayadaa Gallinka waxay 100 ka oday iyo Boqorkuba ku odhanayaan waad la noqon waayo waxaa noo keeni kara dacwaddii adkaata ee la kari waayo guddida Gallinkaa joogta.

Waxaa sidaa loo yeelay waxaa la maamuusayaa oo la tix gelinayaa guddida Gallinkaa joogta, wixii ay u maaro waayaan guddidaasi iyaga uun baa keeni kara madasha weyn, oo kolkay ka warramaan siday wax u dhaceen, kolkaa baa la odhan wey idinka dhan tahay halkaa baana dacwaddii lagu qaadi, madasha weyni waa geedka ugu dambeeya ee uu geedna ka dambeynin halkaa baa arrintii lagu dhammeyn iyadoon waxna la dhimin waxna laga dhaafin.

- 12 ka Gallin "*Gobol*" waxay kala yihiin :

1. Dhuu-yar
2. Dayn
3. Bayic-joog
4. Garas-joog
5. Galool-joog
6. Jiddi-gale
7. Cadaad-joog
8. Casa-joog
9. Biniin-joog
10. Jaan-ma-garadto
11. Ilka cas
12. Orrax-joog

- 12 ka Aqal waxay kala yihin :

1. Ceeleeye
   *Muuse* iyo *Mamaasan*
2. Holle
   *Mahadle* iyo *Saaciib*
3. Hooroone
   *Geel-walaal* iyo *Habar-walaal*
4. Walaaldoon
   *Yuusuf* iyo *Iidle*
5. Wardiiq
   *Waqti-shiile* iyo *Ruma-waaq*
6. Uur-weyne
   *Fiqi* iyo *Cabdalle*

- 12 ka Dixood waxay kala yihiin sidan :

1. Harawa
2. Candha-u-baydh
3. Habaqo
4. Hadhagaala
5. Gurgur
6. Geelcase
7. Dayday
8. Heensa
9. Selel
10. Cadaad
11. Baarreeye
12. O'soli

- 12 ka Geed waxay kala yihiin sidan :

1. Xumbuli
2. Hol-hol
3. Xirsi-bow
4. Salal
5. Saylac
6. Geerisa
7. Geel-casse
8. Habaqo
9. Candha-u-baydh
10. Waaruf
11. Ceel-waa
12. Meeta

Waxaa kale oo xilliyadii dambe ee dadku badtay geedaha garta lagu qaado ku soo biiray 12 geed oo kale ilaa haddana garta lagu qaado, waxayna kala yihiin sidan :

1. Xammaysa
2. Hinni
3. Dahawi
4. Garbacad
5. Hadhi-ka-roor
6. Maraddala
7. Kaaha
8. Daad
9. Badhi-weyn
10. Caddaawe-dhogor
11. Xandha sidha
12. Cali-dhiidhi



# Dhegalayda Badbaadada Deegaanka

Qodobka 1[aad]: Badbadada deegaanka waxay ku saahabsan tahay dhirta.
Waxaa kaloo la badbaadinayaa Ugaadhiisa.
Waxaa kaloo la oggolayn in la dego halka biyuhu ka soo galaan haraha amma biyo fadhiisinnada ah.
Waa dariiqa ay ka soo galaan biyaha durdurayaa.
Waxa loo diidayo waa si ayna biyuhu u uskagoobin.
Reerkii laga kari waayo waa la xukumi

Qodobka 2[aad]: Waxa bulshada laga takoori 3 nin:
a. Xuun Gube.
b. Xartuule.
c. Xoodh-Aaste.

a. *Xuun Gube* : waa kaymo gubaha doonaya inuu dhuxul shido doonayana inuu dhirta shido mid qoyan iyo mid engeganba. Waxaa loo oggol yahay geed iyo qori engegan inuu shido.

b. *Xartuule* : waa geedo qoraha geed walba gunta ku gooya una aabbo yeelin. Waxaa loo oggol yahay oo keliya qod-dhaaf, *(laan-goyn keli ah)*. Cidhib gooyaha dhirta waa laga tashan dabadeedna waa la xukumi.

c. *Xoodh-Aaste* : oo loo yaqaan qawlaystaha buuro galeenka ah, waa ka hadduu neef cidlo ku helo qasha, wuuna xadaa, waa nin waraaboobay, oo buuro gale ah, deegaankana waa ka mamnuuc, ninkaana wadajir baa looga tashan.

# Gar

Gari waa saddex :

1. Duud
2. Doc iyo
3. Duleed

1. Gari waa Duud : marka la leeyahay waa tan dixda loola dhaadhaco ee culus, waa gar aad u weyn dhiig iyo dhaqaaqal wixii la isku hayaba, midkay doonto ha ahaatee oo waatii la yidhi:
   - *Gar ayaa gali?*
   - Alle iyo Nabi nin yaqaan baa gali.
   - *Oo muxuu ku gali?*
   - Sir iyo caad la'aan buu ku gali,
   - Hoos iyo guud buu ka eegi,
   - Dusdus iyo doc ka yeedh buu ka ilaalin.
   - Eexo la'aan buu gali,
   - Waa Alle yaqaan ee xigto yaqaan ma'aha.

Oo waa ninka haddii gar la goynayo walaalkiina ha ahaatee garta ku gooya. Kolka garta la gooyo ninka hadal celinaya ee u sheegaya dadweynaha waa nin aan gibidhsan oo indho cad oo hadal yaqaan ah kolkaasuu odhan:
- Sidaa bay gartii kuugu go'day ee liq.

Qofkaasina waxa uu odhan:
- Tolkayaw waan qaatay.

Hadduu sidaa odhan waayo inan gobeed maaha, waxase u bannaan:
- Tolkayaw geed kalaan ka leeyahay.



2. Gari waa Doc : kolka la leeyahay waa xaajo gacal, gacalna dibad looma bixiyo waa sida dhaqankeenna ku dheehan oo waa tii la yidhi:
   Geeloo Geeda Daaqay Godol baa ku Biira,
   Gacal Geed is Geeyeyse Galladi kuma Biirto.

3. Gari waa Duleed : waa xaajo xigto ah oo reeraha dhexdoodaa lagu dhammeeyaa oo waxaa la yidhaa waa xaajo tole dixna ha u ridina, oo waa duleed reer waxa ay ku dhammaan oo waa sida uu dhaqanku oggol yahay.

# Dhegalayda Sargooyada

Qodobka 1[aad]: Labada qof ee arrin isku haya amma labada duul ee is haya bal baa loo qabanayaa.
Bal toddobaadle ah si ay baaho ugu dhannaato gartooda.
Bal kasta oo la qabanayo hal toddobaad kama yaraado.

Qodobka 2[aad]: Balka loo qabtay marka la gaadho iyaga oo xidhahodii wata uun bay imanayaan.

Qodobka 3[aad]: Dadkii balka u qabtay ee u dhexeeya ayaa guddida kala dhabaysa amma garta qaadaysa keeni kara. Waxaa sidaa loo yeelay waxa meesha laga saarayaa inay iyagu dad soo samaystaan, oo ay la soo heshiiyaan. Sidaa ayey balkii ku imanayaan.

Marka balkii la isugu yimaaddo ee geedkii lagu soo dhammaado ee salaadda casar dabadeed ay tahay ayaa gar-qaadkii la bilaabi, ugu horrayn sida ay caadadu tahay curadka ayaa ducayn. Ducada dabadeed, oday baa kacaya oo hadlaya :

- Balka yaa qabtay? Buu odhanayaa.

Kuwii balka qabtay baa u jawaabaya oo odhanaya :

- Annagaa qabannay balka.
- Waxaad u qabateen iyo ciddaad u qabateen na maqashiiya! Ayuu mar labaad odaygii odhanayaa.
- Ninkaa hebel hebel iyo ninkaa kale ee hebel hebel ah baa wax isu sheeganaya oonnu balka u qabannay.

Ayaa loogu jawaabayaa.

Intaa dabadeed waxa wax la weyddiiyaa ninkii mudduciga ahaa ee soo dacwoodey oo waxa lagu yidhaa :

- Garta ayaad ku doonaysaa?
- Walaalkay Hebel baan ku doonayaa. Buu odhan.
- Hebel aaway? Baa lagu yidhaa.



- Waykan. Buu isna yidhaahdaa.
- Gar bixiye ma tahay? Baa la weydiiyaa.
- Haa, gar bixiye waan ahay. Buu ku jawaabaa.

Waxaa mar kale su'aal la weyddiiyaa ninkii soo dacwoodey (*waa muduciga'e*)

- Oo xidhahaagi aaway? Baa lagu yidhaa.
- Xidhahaygii waa odayga Hebel ee xaggaa fadhiya.

Buu ku jawaabaa.

Intaa dabadeed odaygii baa saddex jeer lagu celiyaa oo la yidhaa :

- Xidhe ma u tahay?
- Haa. Buu isna saddex goor buu ku jawaabaa.

Ninka kale ee garta lagu doonayana (*waa madaacalaha e*) sidaa si la mid ah ayaa intaa in le'eg la weydiiyaa isaga iyo xidhihiisaba.

Markay halkaa joogto arrintu, oday kale ayaa sara kaca oo wuxuu si wada jir ah ula hadlaa labada nin ee gartooda loo fadhiyo. Wuxuuna ku yidhaa :

"Wixii dhammaanaya iyo wixii aan dhammaanayn kala garta,
Gartu way dhammaan, walaalnimaduse dhammaan mayso.
Nin walbowna dantaadoo kooban ka hadal,
Dhiifna ha ku darin,
Istuul tuulkana iska ilaaliya.
Waana hal waano ah !"

Markaa dabadeed waxa hadalka laga furaa oo dacwaddiisa la dhegeystaa ninkii soo dacwoodey ee mudduciga ahaa.

Intuu ninkaasi hadalka dhammaysanayo waa la dhegeystaa oo cidi kama dhex geli karto. Marka uu ka baxana waxa hadalka loo tebiyaa ninkii la soo dacweeyey, oo lagu yidhaa :

- Waxa walaalkaa Hebel kuu sheeganayo maxaad ka qabtaa?

Isna wuu ka jawaab celiyaa isagoo iska difaacaya waxa loo sheeganayo.

Markuu isna dhammaysto dabadeed waxa hadalka qaata guddoomiyihii garta oo wuxu yidhaa:

- Ragga hadalka ka qora !

Qoraalkaa odaygu sheegayaa maaha mid qalin iyo waraaq loo qaadanayo ee waa mid dib loo akhriyayo wixii ay hadallo ku hadleen labada nin ee gartooda loo fadhiyaa. Akhrinta dib loo akhriyayo waxa looga jeedaa, labada nin ee isdacweynayaa inay ogaadaan in aan hadalladoodii haba yaraatee waxba laga tegin.

Halkaa marka ay marayso waxa geedkii la fadhiyey amma madashii dibadda looga saaraa labada nin ee gartooda la qaadayey, guddida ayaa dabadeed garta guda gasha oo qaadaa dhigta oo nin walba wuxuu sheegaa siday la tahay iyo wixii qodobbo Xeerka ku jiray ee uu u cuskanayo arrimaha.

Marka ay guddidu garta goyso ee ay isla meel dhigto ayaa loo yeedhaa labadii nin ee ay gartu ka dhaxaysey. Ugu horrayn waxa lala hadlaa ninkii soo dacwoodey, waxaana lagu yidhaahdaa :

- Guddidaas oo walaalahaa ah oon kuu eexan kaana eexannin wixii ay kuu soo goyso ma oggoshahay ?
- Kabaallo *(oo ka dhigan sida awrku rarka u qaato)* ayaan u qaadan wixii la ii gooyo amma la igu gooyo. Ayuu ku jawaabaa.

Ninka kale ee la soo dacweeyeyna sidaa si le'eg ayaa lagu yidhaa.

Dabadeed guddida ayaa wixii ay goyso ku dhawaaqda oo dadka maqashiisa oo tidhaa:

- Hebelow gartii way kugu go'day oo qodobkaas baa laguu cuskaday.
- Hebelow adna gartii way kuu go'day oo waad heshay.

Waxaana loo macnayn sidii uu ku helay. Hadday labada ninba qaataan go'aankaa guddidu gaadhey waa *guntantay* baa la yidhaa oo waa lagu duceeyaa.

Haddii nin wax tawdo oo uu *"Iima buuxdo"* yidhaa waa inuu farta taago, markaabaa lagu yidhaa:

- Farta maxaad ka taagtay ?
- Gartu way iga dhiman tahay ee tolkayow ha la ii buuxiyo. Ayuu yidhaa.
- Sidee laguugu buuxiyaa ? Baa lagu yidhaa.
- Tolkayow geed kale ha la iigeeyo. Buu yidhaa.
- Waad heshaa! Baa lagu yidhaa oo waa la geeyaa geed kale iyo guddi kale. Waxa la oggol yahay illaa saddex geed.



Guddidaa kale gar dambe ma qaaddo ee waxa loo akhriyaa geedkii hore hadalladii iyo dacwaddii ka dhacday iyo go'aankii ay guddidii hore gaadhey waxay Soomaalidu tidhaa :

"Guddi guddi ma disho !"

Sidaa daraaddeed guddida dambe inta badan waxay goysaa tii hore waxay goysey, mar mar mooyee.

Gar qaadku guud ahaan waa sidaas.

*Dhiig haddii uu dhaco maragga sidee loo qaadi ?*

Maraggaa waxaa la soo taagi meel la goobaabay. Waxaa laga odhan gal waa godkaagiiye. Hadhow cidba kulama gali doontee, waxa uu Alle kugu ogyahayna sheeg adigoon ninna ka eexanayn ninna u eexanayn.

Waxaa kaloo la weydiin :

1- Ma bug baad maqlaysay ?
2- Ma balalax baad arkaysay (ma dhiig baad aragtay) ?
3- Ma bud baad arkaysay lagu jiidayo ?
4- Ma buc baad arkaysay ?
5- Mise billaawaad arkaysay ?
6- Ma bidixdaad arkaysay ?
7- Mise midigtaad ka joogtay ?
8- Miyaad ka horreysay ?
9- Mise waad ka dambeysay ?
10- Ma beersaaraad arkaysay ?
11- Goormaa la dilay ?

Guddigu iyagoo og qofkaa wixii dilay iyo wixii lagu dilayba, ayey waraystaan 11kaa su'aaloood, iyagoo ku kala ogaanaya maraggu inuu yahay mid sax ah iyo mid la samaystay. Maraggu haddii uu sideeda u sugi waayo amma usheegi waayo hawaduu ka bixi.

Maraggaasi haddii uu sideeda ugu furi waayo, illeyn marag buuxaan haystaa bay meesha keeneene, boqolkaa dhiigga ah heli maayaan.

Maraggaasi hadduu si fiican u buuxiyo garta qoladii dhiigga lagu sheeganayey ayaa iska bixin dhiigga (Boqalka).

Cutubka Labaad

# Xeerka Dhiigga

# Dhegalayda Mag iyo Maydhaan

Mag kolka la leeyahay, ruux haddii la dilo, ruux laguma magayo laakiin xoolaa lagu magi.

Awr haddii la dilo awr laguma magayo ee idaa lagu magi, waxa sidaa loo yidhi haddii awr liita amma gaasir ah loogu mago oo uu soo daaliyey ninkii magta lagu lahaa, waxaa sidaa ku dhacan ninkii magta lahaa. Waa sida keentay in awrka ido lagu mago aanse awr lagu magin.
**Waa in awrka 12 laxaad lagu mago waa hadduu karinle yahay.**

Hashana idaa lagu magi oo waa la mid, wixii xoolo lagu mago oo dhan ayaa la yidhaa *"Mag"*, dad iyo duunyaba.

Sac haddii la dilo sac laguma bixinayo magtiisa ee **lix (6) laxaad baa lagu magi.**

Waxase Xeerku oggol yahay haddii dameer la dilo in **dameer lagu mago,** haddii la doonana **ido lagu qaato.** Waayo reer baa loogu dhaamiyaa.

- *Waar dameer u keen reerka, wax loogu dhaamiyaa ma jiree!*
  Baa lagu odhan ninkii dameerka dilay.

### *Maydhaan muxuu yahay ?*

Maydhaanku waa marka wax lagaa halleeyo oo wixii lagaa lunshay uun laguu soo celiyo.
**Sheyga, sheygiisa kale lagu celiyo ayaa la yidhaa maydhaan.**

Sida hubka oo kale haddii nin kaa halleeyo waran oo Xeerka la isla yimaaddo gar gooyuhu wuxuu odhanayaa warankiisii uun keen, hub oo

dhanna waa sida warankaa, gaashaanka iyo billaawuhuna waa la mid. Weysada geedaha laga qoro ee qoriga ah iyaduna waa *Maydhaan* ee *Mag* maaha.

- *Waar weyso u soo qor.* Uunbaa la odhanayaa.

Weysada argeegta ah waa ***Mag,*** waa waysada ugu qaalisan oo waxaa laga tolaa geedka Argeegta ah xididkiisa, waayo waxaa adag sidii lagu soo heli lahaa.

Sufraarka sahayda ragga ah ee ay had iyo jeer raggu biyaha ku qaataan kolkay socotada yihiin waa ***Maydhaan*** isaguna, oo sufraarkii uun baa loo keeni.

Fidhinka qoriga ah, hadduu nin kaa jabiyo oo aad ka hadhi weydo waa ***Maydhaan*** oo fidhinkii keen baa la odhan.

Fidhinka geeska ah waa ***Mag oo waa lax.***

Rag wax walba way ka suuroobaan oo waxaan Xeer loo dhiginna ma jirto.



# Dhegeleyda Magta 100ka
# *Axan iyo Ood*

## Axanka

Hadday dhagari dhacdo, maxaa la bixiyaa, oo sidee loo bixiyaa?

Marka hore waxaa la bixiyaa **kafan**, kafankaasi waa **qaalin lo'ah oo rimman oo ugub ah.**
Waxaa kaloo la keenayaa **hal** *"Dhagax-Saar"* la yidhaa oo qabriga lagu dul cuno.
Waxaa haddana la keenayaa **15 halaad** oo *"Axan"* la yidhaahdo.

- Waxaa u horraysa **hasha** *"Samra"* la yidhaa oo **nirig wadata,** nirigtu ma tirsana oo waa maraqii hasha.
- Waxa ku xigta **hasha** *"Qootin"* la yidhaa oo **nirig wadata.**
- Waxa ku xiga **awr** *"Macabaade"* la yidhaahdo. Waa Awr hayin ah oo layli ahayn.
- Waxaa kaloo ku xigta **hal** *"Hashii aabbo"* la yidhaa oo waa **qaalin ugub ah oo rimman.**
- Waxa ku xiga **sac** *"Seexis"* la yidhaa oo **weyl wata.**

Shantaa aan soo sheegnay waxaa la horgeynayaa aqalkii ay ajashu ka dhacday si ay reerku u samraan. Waxaa la daba dhigayaa **10 halaad** oo buuxda. **Hashii** keliya waxay u dhigantaa **12 laxaad** oo waa **120 laxaad** haddii ido loo xisaabsho.

Waxaa lagu hoynayaa ninkii la dilay adeerradii iyo ilma adeerradii, **15 ka halaad** ee *"Axan"* la yidhaa waa kuwaa.

## Oodka

"Oodku" waa **62 halaad** oo *"Uurrey"* iyo *"Daandheer"* ah.

*Uurreydu* waa kolka ay hal buuxda tahay amma 12 laxaad loo xisaabsho ayay Uurreyda noqotaa.
*Daandheerna* waa marka hasha loo xisaabsho 9 laxaad amma 6 laxaad 100 halaad ayay noqonaysaa

**62 halaad** waxaa qaadanaya tolkii ninkaasi ka dhintay ee bixin lahaa hadduu isagu wax dilo.

Meesha lagu kala qaadanayo 100 ka, waxaa joogta guddi dhexeeye ah oo magta u kala qaadaysa. Lama oggola inay labadaa duul ay iyagu kala qaataan intaa ay kala bogsanayaan, labadaa duul guddidu wey dhex joogi oo Boqolkay u kala qaadi.

Kolka magta la bixinayo, qolada boqolkaa bixinaysa iyo kuwa qaadanaya midna hub looma oggola inay haystaan, qori, qolxad, ul iyo wixii la mid ah intaba looma oggola.

Kabaha ayuu bixinayaa ninka geela soo marinaya guddida horteeda, waxuu odhanayaa:
- Iga guddooma tolkayow. Waa Boqolkii hebele.
- Kaa guddoonnay. Bay guddidii odhanaysaa.

Duulkii qaadanayey hasha hadday dhalliilaan waa loo doorin, waase hadday guddidu u garato.

Boqolkaa la bixinayo waxaa u dambeysa **hasha** *"Ruuga"* la yidhaa iyo **hal** *"Aguuga"* la yidhaa oo dhex lagu cuno.

Duulkaa boqolka bixiyey nayl bay gawrici, iyadoo loo wada joogo. Neefkaa la gawracay wuxuu ka dhigan yahay, guddidaasi waxay marag ka tahay in Boqolkii hebel la bixiyey oo la sadqeystay. Sidaa baa loo yidhi :
Ciise boqol amma buullo maahee biili *(Aano)* ma leh.



Sidee loo dhaartaa, dhaarta dhiigga ?

Reerkaa dhaaranaya gego diiran oo aan geed lahayn ayaa loo tusmayn.
- Afartan aqal ayay furayaan.
- 40 naagood oo 40 wiil sidata ayaa halkaa la geyn.
- 40 hablood oo ugub ahna waa la keeni.
- 40 gadh-madoobana waa la geyn.
- 40 will oo dhallinyar ahna waa la geyn.

Intaa kolka la geeyo ayay guddidu baaho diri, soo eegta inay shuruuddii buuxiyeen iyo in kale haddey shuruudihii buuxiyeen oo ay guddidii aragto, waa la dhaarin.
"Dad iyo duunyaba waa tuu Ilaahay qoob dameeraad noogu miisaa inaannaan qabin dhiigga na laga doonayo."
Dhaha baa lagu odhan.

Intaa markay yidhaahdiin ka dib waxa laga odhan way idinka dhan tahay, qoladii dhiigga ka doonaysayna, halkaa bay ku quusan oo wax dambe ma weyddiisan karaan. Hadday dib ula hadlaan oo dhaartaa loo dhaartay ku joogsan wayaanna iyaga ayaa dib guddidu u xukumeysaa, Xeerka u yaallana waa **12 halaad.**

Qolana dhaarta sidaa ah kuma degdegto ee waa la iska bixiyaa magtaa.

## Dhagar iyo Dhible

Dhagar waa tii aan kor ku soo aragnay ee boqolka la bixiyey amma laga dhaartay.

*Dhible,* waa marka qolo lagu sheeganayo boqol amma mag ee maragna loo waayo dhaartana ay diidaan amma ay ka meermeeraan ayaa qodobka *Dhiblaha* lagu bixiyaa (waar dhaar dhiblaa noo dhaama) bay yidhaahdiin qolodii boqolka laga doonaayey sidaabaana lagu bixiyaa hasa yeeshee boqolkii xeerka ahaa in ka yar baa la bixiyaa.

# Iimaan

Haddii marag la waayo dhaar baa meesha imanaysa waayo waa qaali dhiiggu. Qoladii dhiigga lagu sheeganayay waxaa lagu odhan u dhaaro amma u dhiib, hadduu dhaartaa diido waa inuu bixiyo dhiiggaa amma magtaa. Haddii kale dhaar buu u dhaadhici, sida loo dhaartaana dhaar fudud ma aha. Waxa jira qodobbo adag oo dhaarta dhiigga u yaalla.

Maba dhaarato qolo xilkas ahi amma rag wax garad ahi u talinayo. Waayo waxay ogyihiin dhaarta qaradeedu inta ay le'egtahay. Waata murtidu tidhaa:

"Dhiig soo hooyoo dhaar ha soo hoyn."

## Maragga

Qofka maragga galaya waa qof sidee u eg ?

Qodobka 1aad: Qof waalani ma galayo maragga.
Qodobka 2aad: Qof aan baaluqinna ma galayo.
Qodobka 3aad: Naagina ma galayso, qalbi nugayl awadii ayayna u galayn maragga, waayo ninkeeda kuma furi karayso.
Qodobka 4aad: Beenaalaha caanka ah, ee la wada yaqaanna ma galayo.
Qodobka 5aad: Ninka loo yaqaanno inuu yahay gubbo qaate isna ma galayo.
Qodobka 6aad: Ninka ka baxsan xadka ragga, wax iskuma fale la yidhaa ee waxbana xaaraan ka ahayn ma galayo.
Qodobka7aad: Ninka la yidhaa labood-dhiddig isaguna magalayo.
Qodobka 8aad: Nin go'anna ma galayo (*waa ka xiniin yaha la jaray*). Intaa aan soo sheegnay oo dhan midna ma galeyo maragga.



## Inta Maragga Gasha

Qofka maragga galaya waa inuu 20 jir ilaa 90 jir u dhexeeyo, waana inuu yahay nin caafimaad qaba oo ay maskaxdiisu dhantahay. Hadduu 20 jir ka yar yahay waa maati. Haddii uu 90 jir ka weyn yahay wuu maatiyoobay.

Waxaa kaloo maragga dhiigga u dhaadhici karta naag wiil siddata hadday wiil sidan waa maya, kolka ay dhaaranayso, waxay dharanaysaa iyadoo ilmaheeda dhabarka ku sidata, beenna ma sheegayso oo ilmaheeda ayey u baqaysaa.

Maragga sidan u adag waa kan dhiigga iyo wixii la mid ah. Dacwaddu hadday tahay mid fudud cid walba oo qaan gaadh ahi wey furi kartaa maragga.

Dix kasta oo deegaanka ka mid ah amma geed kasta garta waa lagu qaadaa oo dadka gallinkaa deggan uun baa guddi garta qaada iska soo xula.

Waxaana ka guddoomiye ah ul-hayaha gobolkaa. Wixii la kari waayo baa golaha weyn ee guurtida (Gandaha) loo geeyaa, golahaas xaruuntiisu waa Siti sidaan meelo hore ku soo sheegnay.

Gartan lagu qaado gobollada guddidaa qaadaysa inta ay halkaa fadhido, maxaa baryo u ah amma dhaqaale, illayn muddo dheer bay qaadan kartaa gartuye?

Dhaqaalahoodu, waxa uu ka imanayaa oo laga qaadayaa labada qolo ee loo kala gar qaadayo. Waxa laga qaadayaa wax isku mid ah oo is le'eg, cad iyo caanaba. Halkaa garta lagu qaadayo dadka hareero deggan wey soo gargaarayaan. Labadaa qolo wax gaar ah oo aan la ogeyn haddii uu midkood guddida si qarsoodi ah ugu keeno, garta ayaa ku go'aysa.

Inta aan ka gudbin Dhegaleyda Boqolka waxaa xusid mudan marka ay dhagari dhacdo ee uu nin wax dilo, reerkii uu ka dhashay amma xigta-diisa ahaa odayo ka tirsan ayaa si dhakhsa ah waxay u kaxaynayaan hashii Aaska iyo hashii Axanka waxayna u geynayaan ninkii la dilay xigtadiisii.

Odayadaa labada Halaad dhiibaya waxay toos ugu tagayaan odayo la yaqaan oo ka soo jeeda dhinaca kale iyagoo murugo weyni wajiyadooda

ka muuqato, waxayna ku dhawaaqayaan hadallo ay murugo iyo baryootan ku jiraan .Hadalladaa waxa ka mid ah kuwan soo socda.

Tolkayow waan dhagaroobay
Hebel hebel walaalkay buu ahaa
Adna wuu kaa dhintay
Anna uu iga dhintay
Tolkayow balna kuma dilin
Biilina *(aano)* kuma dilin
Gacan garab ku taal baa iga dishay
Oo gacan gardarraa iga dishay
Tolkayow maanta anay i haystaa
Berrina waa adi
Waar walaalkay dib u helimaayee
Ilaahay ha u naxariisto
Adna Ilaahay ha kaa gargaaro
Tolkayow Aaskii baan wadaaye
Iga guddooma walaalahayow.

Intaa iyo in ka badanba markay yidhaahdiin baa la odhan ka guddooma. Dabadeedna way iska tegayaan.

Hadallaada murugada leh ee ay soo qaddimeen ninkaa wax dilay xigtadiisu waxay marag cad u yihiin in dhagartaa dhacday aanay ahayn mid heeshiis lagu ahaa ee ay tahay oo keli ah mid uu gaystay nin qudha oo dhagar qabe ahi.

Hasha Aaska iyo hasha Axankuna waa markhaati caddaynaya in ninkii la dilay Boqolkiisii aanu muran ka joogin oo la bixin doono.

Xagga magaalooyinkana sidaa si la mid ah bay odayadu yeelaan.

Hasayeeshee halkii Aaska iyo Axanka geel lagu bixinayey unn baa lacag lagu bixiyaa.



# Dhegaleyda Addimada

## Dhegalayda Gacmaha

Gacan magteedu waa maxay?

Gacanta hortaba waxaa la yidhaa Gummud iyo Gaabin.

- Gummud waa hadday wada go'do.
- Gaabinna waa haddii ay badh go'do, waa xusulka inta ka horreysa hadday badh go'odo ayaa la yidhaa Gaabin.

Gummud : Gacantu hadday Gummud tahay magteedu waa **15 halaad.** Waxa looga dhigay 15 halaad gacanta maqan faraheedu waxay ahaayeen 15 xubnood, xubin walba waxa laga soo qaaday hal, sidaa baa looga dhigay 15 halaad, haddii ido lagu qiimeeyo waa 180 laxaad.

Gaabin : hadday gacantu gaabin noqoto, guddidaa eegi oo qiimayn, waxay ku qiimayn **7 halaad** amma in ka badan.

- Farta : Fartu hadday go'do oo la gooyo waa **3 halaad.** Fartu waxa ay ka kooban tahay 3 xubnood. Hadday Xubini ku go'dona waa **hal.** Mar walba waxay guddidu ku xisaabtamaysaa xubnaha faraha. Waxa ugu qaalisan faryarta oo la'aanteed faraha kale waxba ma qaban karaan, magteeduna waa **4 halaad.** Waagii xeerka la dhigay wax geel ka qaalisan ma jirin, sidaa awgeed ayaa magta loogu xisaabiyaa. 4 taa halaad haddii ido loo xisaabsho waa 48 laxaad.

## Dhegalayda Magta Midig iyo Bidix

Gacmaha, midigta iyo bidixda midkee mag badan? Sideedaba gamcuhu waxay leeyihiin mag kala badan. Maxaa yeelay? Way kala hawl badan yihiin.

Wakhtiga xeerka la dhigay rasaas la isku laayo ma jirin, qoryaha rasaasta leh ma jireyn. Laakiin waxaa hub u ahaa, waran, gudbin, dhagax iyo hubka noocaa ah. Waxaa qofka ka badbaadinayey gacanta bidixda oo gaashaan haysata, difaaca ugu horreeya ee qofka daafaca waa bidixda.

- Waranka iyo gaashankaba waxaa lagu sitaa bidixda.
- Naadhka iyo gorofka waxaa lagu sitaa bidixda.
- Weysada iyo masallada waxaa lagu qaataa bidixda.
- Hangoolka iyo jidibka waxaa lagu qaataa waa bidixa.
- Sahayda iyo sufraarka waxa sidda bidixda.

4 reerkaa lagu waldhaamaa oo waa gorofka, naadhka, hangoolka iyo jidibka ama gudiinta. 6 naftaadaa lagu waldhaamaa, oo waa waranka, gashaanka, sahayda, sufraarka, weysada iyo masaladu na naftaaday gargaar u yihiin.

- Intaaba waxaa sidda waa bidixda, waana sababta looga dhigay magteeda **16 Halaad** ama **192 Laxaad.**

Midigtu bidixda uun bay miciin u tahay waayo wax bay cunsiisaa.

Sida kale midigtu iyadu wax bay dishaa oo qofka dhib uun bay usoo hoysaa dakhar iyo dhagarba, wixii ay gasho daaha uun baa laguu soo dhigi. Inkasta oo ay mataano aan kala maarmin yihiin, midina ay ta kale la'aanteed ayna gargaar badan yeelanayn, haddana Xeerku wuu maaroodiyay miciinkooda iyo meel markoodaba kolkaa haddii midkood la gooyo, xeerku wuxuu yidhi middee wax qabad badnayd?

- Xeerku kolkuu isla lafa guray waxaa la gartay inay bidixdu wax dheertahay sidaa darteed midigtana waxaa laga dhigay **15 Halaad** ama **180 Laxaad.**



## Dhegalayda Lugaha

Qof haddii lug la jabiyo oo la buulleeyo oo ay kabanto guddida ayaa eegi oo waa la miisi :

Waa la eegi oo nin nin baa loo eegi.
Dhereriyaa dhererin.
Gudbiyaa gudbin oo kuwa kale ayuu u gudbin.
Sir iyo caad la'aan baa lagu baadhi.
Qiimaheedaa la isla meel dhigi.
Waa jabe "Xukuma" oo keliya la odhan maayo.
Waxa la odhan "ma *maroor* baa, ma *gunaad* baa ma *saafi* baa".

- *Gunaad :* waa hadday gamuumad tahay oo ay dhulka gaadhayn.
- *Maroor :* waa hadday dhinac u maroorto.
- *Saafi :* waa hadday sideedii u kabanto.

Hadday lugtu go'do, hadba meesha ay ku go'do ayaa lagu xisaabtami, geela lagu magayaa wuu kala badan yahay oo waxaa la eegi hadba meesha ay ku go'do oo sida ay u kala sarrayso ayey u kala mag badan tahay.

- Haddii ay wada go'do waa **shan iyo toban halaad.**
- Haddii ay labo xubnood go'dana waa **toban halaad.**
- Haddii ay xubin go'dana waa **shan halaad.**

## Dhegalayda Indhaha

Haddii labada indhood nin laga rido muxuu xeerku u dhigay?

1. Marka u horreysaba buullayntiisa iyo daweyntiisa ayaa la gali oo sida xeerku dhigay ah.
2. Waa la soo dhaadhicin oo waxaa la odhan : *"Ma bogsaday!"*.
3. Marka saddexaad waxaa la eegi inay burureen iyo inay buuran yihiin.

Hadday burureen kolkaaba waa la xukumi. Hadday indhuhu buuran yihiin dib baa loo celin, oo bal inay u fiicnaadaan oo nuurkoodu wax uun soo noqdaan baa la eegi.
Mar labaadkaa la soo celiyo haddii la isku raaco indho beel, guddidu waxay is weydiin miyuu dhintay ninku hadduu indho beelay mise wuu nool yahay? Waxaa laga soo qaadayaa nin dhintay.

- *"Aar wuu dhintay qabri uunbuuna geline"*. **100 kiisii** ayaa la bixin ninkaa. Waxaa laga reebi **15 kii halaad** ee Axanka iyo **hashii Dhagaxsaar** ee lagu dul cunayay qabriga dushiisa iyo **hashii Aguuga.** 17 kaa halaad ayaa laga reebi. Waayo qabriga uuna gelin darteed ayaa intaa looga reebay. Reer wuu yeelan karaa ee wax unbuuna qabsan karin.

## Dhegalayda Ilkaha Ragga

Magta ilkaha, ragga labada fool ayaa ugu mag badan.

- Haddii foolasha hore mid lagaa rido waa **5 halaad** amma **60 laxaad.**
- Haddii labada dhoolba lagaa rido waa **10 halaad** amma **120 laxaad.**
- Labada mici iyo labada dhool ku-xige haddii lagaa rido, kiiba magtiisu waa **2 halaad iyo badh (2 ½)** amma **30 laxaad.**
- Gawsaha ragga midkiiba waa **3 halaad** amma **36 laxaad** waa sida uu xeerku u dhigay ilkaha ragga dul iyo hoosba.

## Dhegalayda Ilkaha Haweenka

Ilkaha haweenka, waxaa ugu mag badan gowsaha.

- Gaws kasta oo ay leeyihiinba waa **5 halaad** amma **60 laxaad.** Foolasha ragga iyo gawsaha dumarka ayaa isku mid ah.

Haweenka ilkahooda hore iyo gawsaha ragga waa isku mid. Hase ahaate gawsaha haweenku waa qaali. Maxaa yeeley ?

Waxaa sidaa loo yeeley haweenku hawlaha ay qabanayaan oo dhan gawsaha ayey gargaarsadaan, sida meydhaxda ayey gawsaha ku jilciyaan, kebed hadday samaynayaan gawsaha ayey xadhigga ku qaniinaan, xadhig hadday sooha-yaanna gawsaha ayey ku qaniinaan, labadooda gacmood iyo gawsuhu wey is taageersadaan, naag aan gawso lahayn aqal ma sameysan karto. Miciyaha iyo dhoolasha ragga ayay kala siman yihiin.



## Dhegalayda Madax iyo Midhiqir

Haddii nin madaxa lagu jiido oo ninkaa la buulleeyo wax badan ninkaasi marka uu bogsado guddidaa la horkeeni, qoladii naburka u geysatay waxay odhani :

- Wuu bogsadee tolkayow iga reeba.

Guddidu waxay odhan :

- Waa madax waxani kaa reebi maynno ninkan reerkoodii oo oggol mooyaane.

Ninkii reerkiisii hadday yidhaahdaan :

- Waa tolkiiye, annagaa oggol oo ka reebayna ee noo eega oo noo miisa.

Guddigu wey oggolaanayaan.

Sidoo kale nabur qaaxo hadduu jiro isagana guddidu ma reebto, nin leh uunbaa reeba. Isagoo bogsaday ayuu naburku ku soo kici karaa waa dambe, waana loo dhiman karaa.

Xeerku waxa uu dhigay inayna guddidu reebi karin madax iyo midhiqir, waa marka naburku yahay nabar weyn oo halis ah. Labadii qolo ee ay ka dhaxaysay oo isla oggol mooyaane.

Labadaa meeloodba waa nabur qarsoon, naburkaa qarsoon dembigiisa guddidu wey iska reebtay oo waa sida loo yidhi :

- Dhaawac madax iyo Nabur qaaxaba way ku dilaan.

## Dhegalayda Jabka

Waa naburka muuqda een isaga laguba goohayn, oo laf baa jabtay jidhkiisa ka mid ah.

Qodobka 1[aad]: Waxaa laga odhan ninkii wax u geystay *"Iska dulqaad"*, oo waxay ka dhigan tahay dawee ruuxan aad dhibta u gaysatay.

Qodobka 2[aad]: Kii dhibbanaha ahaa ayaa keenaya wan, isagaa gacantiisa ku gawracaya, kii wax u geystayna mijahuu qabanayaa. Kii wax geystay baa maalinta dambe keenaya wan kii la mid ah, isagaana gawracaya, kii dhibbanaana luguhuu qabanayaa.

Qodobka 3aad: Labadaa wan ninkii naburka qabay, badhida uun baa la kabbin, hilibkana waxaa cunaya guddida baahada ka kooban ee goob joogga ah.
Labadaa badhigooyo waxay marag u tahay boqolka ninkaa haddii uu naburkaa u dhinto.

Qodobka 4aad: Intaa dabadeed ninkii baa qaadanaya oo waab u samaynaya halkaa buu ku buullayn inta uu bogsanayo.

Qodobka 5aad: Hadduu waabkaa diido, guddidaa marag looga dhigi oo loo sheegi inuu amar diid yahay.

Marka uu bogsado oo uu buullada dhammaysto, waa la soo dhaadhicin, oo guddidaa loo keeni. Qoladii buullaynaysay baa odhan :
- Naga reeba.

Marka guddida la dhex keeno waa la miisi, miisiddaa oo ka dhigan, baadhitaan lagu sameynayo bogsiimadiisa.

Hadday lug tahay, kolba dhan baa loo dhaqaajin waxaana lagu odhan :
- Sara joogso,
- Dhaqaaq,
- Labada dhan u bood,
- Lugta kaligeed ku joogso.

Hadday gacan tahayna sidoo kale:
- Fidi,
- Laab gacanta,
- Wax ku tuur gacanta,
- Waxaa culus ku qaad gacanta.

Meeshii walba ee jabtaba sidaa baa loo eegi bogsiimadeeda.

Haddii ay bogsiimadeedu sax noqoto "*Iska reeb*" baa la odhan.

Buulladu inta ay qaradeedu le'egtahay ayaa mawlaxada amma reebidda loo xisaabin. Haddii la reebi waayo oo uu qofkaasi beri dambe nabarkaa u dhinto, boqolkiisii oo dhan ayaa laga qaadi qoladii uu ka dhashay ninkii nabarka u geystay.

➢ Inta wan ee lagu buulleeyey hadday shan tahay, shan hallaad baa laga qaadi, mawlaxadu waxay la socotaa hadba inta ay buulladiisu tahay.

Hadduuse iska reebi waayo oo uu wad dilo amma abeeso cunto sidaan xagga hore ku soo sheegnay boqolku uu dul yaallaa.



Sidaa darteed buu kolba dix u tegi oo uu odhan :
- Tolkeyoow waakan ninkii bogsadaye iga reeba.

Dhegeleyda jabka sidaa baa loo sugay.

## Dhegalayda Jareexo

Dhegalayda jareexo, waa naburka aan halis ahayn. Lakiin qofkaa uun baa ka hadli kara dhibaatada.
Marka uu dhibbanuhu u yimaaddo guddida ee uu yidhaahdo :
- Waxbaan qabaa.

Daweeya uun lama odhanayo, ee waxaa la odhan:
- Isa soo eeg maalmo, amma hal toddobaad.

Toddobaad dabadii marka uu yimaad waxaa la odhanayaa maxaad qabtaa? Hadduu yidhaahdo"*Waxbaan qabaa*", mar labaad, toddobaad kale ayaa loo qaban.
Haddana "*Waxbaan qabaa*", hadduu yidhaado, 14 maalmood kadib soo noqo ayaa lagu odhan.
Labadaa toddobaad marku soo dhammeysto waxaa la weydiin :
- Ma ducaad dooni mise dawo.
- Dawaan dooni, hadduu yidhaado waxay ka dhigan tahay waxbaan qabaa.

Kolkaabay guddidu ku odhani:
- Wan shan jir ah la kaalay, hadduuna wax qabin, lexjeclaa qaban oo ducaan qaatay buu odhan.

Kii wax ku jiidayna kolkaa baa lagu odhan :
- Iska dawee.

## Dhegaleyda Xiniinyo Go'ay

Waa maxay dhegaleyda loo dhigay Xiniinyo Go'ay?

Waa haddii nin xininyaha la gooyey oo uu iska nool yahay waxna dhaqdo, wuxuuse waayey dhalmadii, sidii kale wuu dhan yahay.

➢ Waxa ay magtiisu noqonaysaa badh, **50 halaad.**

Badhka kalena waxaa loo reebay noloshiisa, illeen ninkii wuu iska noolyahaye. Ninku uu buuxaa marka uu xiniinyaha qabo, oo kolkaa waa boqol.

Hadday naagtiisu xiniinyo tirto reerkoodaa laga qaadi magtaa badhka ah.

Ninkii badhka ahaa haddii la dilo oo lagu dhagaroobo, reerkaa dilay waxaa laga qaadi mag badh ah, waayo badh horay buu u qabay, sidaa buu xeerku waxba u dhaafin.

Waxaa laga fiirsaday boqolkiisa oo dhan bixiya haddii la yidhaahdo ninkaa aad xiniinyo tirteen, duulkii xiniinyo tiray waxay odhan lahaayeen kol hadduu boqolkiiyoo dhan i raacay waaban dili, sidaa baa loo badhay magtiisa.

## Dhegaleyda Naasaha Go'ay

Naaso go'ay kolka la leeyahay waa naasaha haweenka amma ha la qabo amma yaan la qabine.

Hadduu nin naagtiisa candhada gooyo amma naas ha gooyo amma labadaba ha gooyee, muxuu u dhigay xeerku oo u yaal ?

Qofka dhibtaa gaysta waxaa laga qaadi :

- Magtii haweenka badhkeed oo ah **25 halaad**, 25ka kale nolosheedaa loo deyn ileyn waata noole.

Haddii la odhan lahaa *"Magta bixiya"*, wey beegsan lahaayeen oo waan dilaynnaa bay odhan lahaayeen. Sidaa darteed baa magtii loo kala badhay, maadaama candhadii ay carruurta ku korin laheyd laga gooyey.

Waxaa kale oo lagu xukumi ninkaa dhibta geeystay :

- **Inuusan dib uga guursanayn Reer Ciise ah.**

Dhaqan xumadaa uu la yimid awgeed, taasoo looga jeedo waa la isaga dayan. Waayo ? Xeerku wuxuu la joogaa bulshada inuu ilaaliyo.



Haddii gabadh ugub ah lagu sameeyo waa la mid ruuxa sidaa yeela magaciisana waxay bulshadu ugu yeedhaa *"Hebel Candho Goo"* si ay ummaddu u garato.

Inan uu aabbihii candho gooyay waqti hore ayaa gabadh doonay, gabadhii baa loo diiday oo la yidhi waa *"Ina candha goo"*.
Inankii baa hadlay oo yidhi :
Aabbahay nin yaqaannay gabadh ima siiyo oo candha-goo buu ahaa,
Anna nin iyaqaan gabadh iima diido oo hebel baan ahay.

Sidii baa gabadhii lagu siiyey oo uu ku guursaday, illeen ninna dambiga aabbihii laguma qaadee.

## Dhegaleyda Labooddheddigga

Laboodheddiggu magtiisu maxay noqon haddii lagu dhagaroobo ?

Qodobka 1aad: Laboodheddigga hadduu xagga haweenka u badan yahay oo uu dharkooda xidho hawshana la hayo, magta haweenka ayuu leeyahay.

Qodobka 2aad: Laboodheddigga hadduu xagga ragga u badan yahay. Sida ceel shubaasha, ciyaarta, gocasada, dharka raggana xidho, waxaa laga bixin magta ragga.

Qodobka 3aad: Ka labadaba ka dhaxeeya ee rag iyo dumarba u dhexeeya una shaqeeya sida ragga iyo haweenka, layskuna raaco inuu dhanna u badnayn, kaa magtiisu waa badhka magta ragga iyo magta haweenka badhkeed oo la isku geeyay baa laga bixinayaa, kaana haddii la dilo magtiisu waa sidaa.

## Dhegaleyda Foolxumo

Foolxumo Magi Ma Bi'issaa ? - Waa Maya!
Foolxumo waa haddii dheg ama sanka caaradiisa lagu gooyo.

Qodobka 1aad: Waxaa u yaalla **"Gacal iyo gacansaar"**.

Qodobka 2aad: Ninka laga gooyay dheg, waxaa la siinayaa "**Gabadh**", waa haddii uu geyo.

Qodobka 3aad: Hadduuna geyin waa "**Gacansaar**".
Oo ka dhigan saamaxaad buuxda gacan saarna. Waa saaxiibnimo. Saaxiibtinnimaduna waa saaxiib geelle. Waa labada ooryaha uun kala leh ee adduun kala lahayn. Waa saaxiibo heer sare ah oo geel isa siiya.
Sidaa baa loo yidhi : "**Gacal iyo Gacansaar**".

Qodobka 4aad: Haddaan sidaa la yeelin, 100 halaad haddii la bixiyana foolxumadiisa ma illoobayo oo xoolo sidaa baynan foolxumo u bi'inayn.

Qodobka 5aad: Laakiin inantaa loo dhisay, hadday wiilal u dhasho halkaa buu ku illoobi foolxumadiisii, caafimaadkiisase wax uma dhimin, laakiin folxumay ku reebtey.

Qodobka 6aad: Hadduu dhego beelo oo uu waxba maqli waayo uun baa mag ah.



# Dhagarta Sokeeyaha

Dhiig dhawaasho ma leh.

Sidii aan horay u soo sheegnay hadduu qof dhagaroobo oo uu qof dilo, xeerku kolkuu marag buuxa helo, 100 ka waa laga qaadi oo saamaxaadi ma jirto.

Hadduu nin inankiisa ku dhagaroobo oo uu dhinto, xeerkaa la horkeeni. Isagaa dhalaye daaya waa inankiise la odhan maayo. Isaguna ma odhan karayo waa dhiiggaygiiye maxaa idinka galay. Wixii uu hadduu shisheeye dilo laga qaadi lahaa uun baa laga qaadi. Tolkiina waa laga ururin. Dabadeed boqolkii waa la soori oo qaybtooda ayaa la siin, wuxuu qaadan wixii uu shisheeye hadduu wiilkiisa dilo uu heli lahaa, inta kalena xigtadii baa sooran. Axankana halkiisaa la dhigi.

Dhagartu way dhacdaa oo waa ajal, haseyeeshee wey is dhaantaa.

Ruux hadduu ruux dilo oo markuu dhinto uu furto hub iyo huwisba waa waxyaabo caado iyo dhaqan midna ahayn, meeshana ku jirin waa dil fool xun oo uu xeerku aad u cambaareeyey. Qodobbo adag buu xeerku ka sameeyay, xukun adagna leh.

Haddaba ninkaa meydka furtay waxaa lagu xukumay :

- **12 halaad** oo edeb ah. Waa *"Magtii Ciisaha"* ayaa la yidhaa oo waxa soorma labiyo tobanka Aqal ee Ciisaha.
  **100kii** ninkuna waa gooni oo iyadana is baa loo qaadi, waxaa kaloo la mid ah isagoo wax dilay hadduu geeraaro, waxaa kaloo la xukun ah ninkaa uu dilay hadduu googooyo jidhkiisa.

Hadduu qofku qof gubo amma aqal ha ku gubo amma is ha u gubo e. Xeerkaa uunbaa u yaalla iyadoo marka horeba xeerku dilba oggoleyn, haddana dil caadi ahi wuu dhici karaa.

Wuxuu xeerku diiday dhagarta foosha xun, dhammaanteedba.

- Mag siyaada ah baa lagu xukumaa oo waa **12 halaad,** een soo sheegnay.

Cutubka Saddexaad

# Xeerka Dheerta

# Dheer

## Dhegalayda u taalla Baara-cad.

Qodobka 1aad: Baaracad waxa ay ka dhigan tahay gabadh yar oon baaluqin. Haddii la kufsado Xeerka u yaalli waa **16 halaad.** Waa 16 halad oo Uurrey ah. Uurrey waxa ay ka dhigan tahay hasha haddii ido lagu xisaabiyo, hashiiba waxay u dhigantaa 12 laxaad.
16 kii halaad haddii ido lagu xisaabiyo waa 192 laxaad, hadday geel tahayna waa 16 kii halaad oo cas.

Qodobka 2aad: Gabadhaa baaracad ninka xumeeyey degaankaa wuu ka takooran yahay, gabadhna kama guursan karo.

Qodobka 3aad: Ninka gabadh siiya ninkaa dambiilaha ah, waxaa lagu xukumi **12 halaad.** Sidaa awadeed ayuuna gabadh u helayn. Ninkii gabadh siin lahaana qodobkaa buu ka baqayaa.

Badbaadada haweenka ayaa sidaa ku sugan. Cidna ma jabin karto qodobkaa. Waddan kale oo uu u haajiro mooyaane degaankiisa guur kuma leh.

## Dhegalayda u taalla Billa-cad

Billa-cad waxa ay ka dhigan tahay *"Naag doonnan"*, nin xoolo ka bixiyay oonan loo hoynin. Waxay leedahay calaamad lagu garto in ay doonnan tahay, calaamaddaas oo ah qalab gacmaha iyo qoorta la gashado oo uu u keeno ninka ay u doonnan tahay, si aanan loogu khaldamin.

Qodobka 1[aad]: Naagta noocaa ah ninka u badheedha ee guur u qabto amma guursada waxaa u yaalla oo xeer u ah **15 halaad** oo haddii ido lagu xisaabiyana hashiiba ay 12 laxaad tahay, ninka la boobay wuxuu sugayaa xeerka guddida.

Qodobka 2[aad]: Gabadhaa kolkay guddidu sugto in ay doonnanayd oo ay maragyadii buuxsato ayey xukunka noocaa ah ridaysaa. Oo waa sida ay gabadh doonnani ku badbaadayso, gabadhiina kii ay u doonnanayd baa leh.

## Dhegalayda u taalla Gambo-cad

Gambo-cad, waa naagta uu ninkeedu dhintay ee gambada cad sidda 4 bilood iyo 10 cisho.

Qodobka 1[aad]: Intaa ay gambada siddo haddii la kufsado waxa uu xukunkeedu yahay **15 halaad** oo laga qaadayaa ninka kufsada. 15 kaa halaad oo haddii ido la yidhaana ay hashiiba u dhiganto 12 laxaad.
Magtaa waxaa u dheer deegaankaa hablaha jooga oo aan la sheekeysaneyn, waxayna yidhaahdiin : *Hebel-ceebaale.*

Qodobka 2[aad]: Magta dabadeed waxay guddidu xukumaysaa inuuna ka qayb gelin wadahadallada guddiyadoo dhan, mana matali karo degaanka maadama uu yahay ceebaale, oo waayo xilkas maaha.

## Dhegalayda Xayn-gogla

Naagta haddii nin damco oo la faraxumeeyo.

Doox iyo doc wax lagu helaba, hadday qaylin weydo waa Xayn-gogla oo raalli bay ahayd bay ka dhigan tahay.

- Xayn-gogla, xeerku **cidluu** dhigay oo waxba looma xukumayo.

Haddiise qayladeeda la maqlo mag bay leedahay. Kolkuuse ka tago hadday tidhaa nin baa i kufsaday, Xeerka waxba kuma laha.



Ninka faraxumeynta geystay haddii lagu helo dambigaa, Xeerkaa xukumanaya, waayo Xeerkii ummadduu lahayd buu meel kaga dhacay.

Naagta uurka qarsata ee kolkuu soo baxo sheegta ee tidhaa hebel baan u rimmanahay, taasi waa cidla oo waa Xayn-gogla.

Ninka ay gabadhi ka xumaato waxa u wanaagsan inuu aamuso, waa aabbaheede, laakiin hadduu ninkii gabadha fara xumeeyey, anigaa leh ee i siiya yidhaahdo, aabbahaa gabadhaa dhalay waa nasiibkii.

Odaygaasi hadduu golaha u soo dhaadhaco oo uu yidhaa ninkanaa i xumeeyay, waxa la weydiin : - *Miyuu xoogay ?* Jawaabtu : - *Maya !* hadday noqoto, waa Xayn-Gogla. Sidaasaa loo yidhi :

Ceebtaadoy kow taqaanno, Kun lama baro.

## Dhegeleyda Wadaajiya

*Anshi-Xumo*

Wadaajiya waa naagta iyadoo nin qabo gogol dhaaf samaysa. Naagta dambigaa ku kacda ee markhaatiyaal ku caddeeya oo madmadaaw lahayn loo helo, xukunkeeda guddi baa la hor geyn si ummadda oo dhan loo maqashiiyo. Dabadeed guddidaa ninkii ka furi waana la takoori oo waxaa la odhan nin dambe oo guursadaa ma jiro, sidaa bayna ku guurbeeli.

## Dhegaleyda Qoyska

Rukunka ugu horreeya ee qoysku ka bilaabmo waa wiil iyo gabadh is guursada. Xeerka guurka waxa u dhigan inaan la kala iibsan hablaha ee si sharaf leh loo soo doono.

## Gabbaatiga

Gabadha marka u horreysa ee la soo doonayo waxa xeer ah gabbaati. Gabbaatigaa oo ka kooban, wan iyo sameen iyo daaqad maro ah. Daaqadda marada ah waxa iska leh dhallinyarada qoyska ay gabadhu ka dhalatay.

Waxa kale oo lagu daraa haddii la hayo oo sharaf ah in la bixiyo go' qurux badan oo la yidhaa *"Tuuti"*, Tuutiga waxa xilligan aynnu joogno lagu baddalay go'magaciisa la yidhaa *"Ameete"*.

Waxa kale oo la soo raaciyaa maro soddohdu leedahay oo magaceeda la yidhaa *"Qayli"*. Dhinaca magaalooyinka waxa go'ii lagu baddalay cimaamad shaal ah iyo macawis



# Yaradka amma Dhabanka

Xeerku waxa uu dhigay in gabadha laga bixiyo **15 Jilood.** Jil waxaa la yidhaa neef ishin ah (hal) amma (sac) amma 12 adhi ah. 15 kaa Jilood 10 iyadaa lagu yabdhayaa, 5 na reerkii ay ka dhalatay ayey ku hadhi, 5taana iyada uun bay dhigo halkaa ugu joogaan.

Sida Xeerku dhigay waa wax uu siiyey iyo wuxuu u hayo aabbeheed. Sida uu Xeerku qabo ayey xor ku yihiin habluhu.

Wuxuu Xeerku ka horjeedaa in hablaha laga qaato xoolo tiro badan oo gorgortan lagu galo, sida neef lagu baayactamayo oo kale. Sidaa ayuu Xeerku sameeyey, sidaa si ka duwanna lama samayn karo. Xeerkuna ma oggola in la boobo gabadha ee waa in la is weydiisto.

Halkaa marka aan marayno waxa innoo soo baxaya su'aalahan :

- Gabdhaha marka la soo doonayo ma aabaheed uunbaa la weyddiistaa oo bixiya mise gabadhaa lala tashadaa ?
- Su'aashaa jawaabteedu way ballaadhan tahay, waxa dhaqan adag ah in gabadha aabbeheed la weydiisto, haddii ay aabbo lahayn waxa kaalintisii galaya oo bixinaya adeerradeed, amma walaaleheed ?

Inta badan waalidku markuu gabadha bixinayo wuu ka fiirsadaa oo uu u meel dayaa, waxana jira dhaqan ay Soomaalidu ka siman tahay oo ah in lala xidido oo la yeesho gacal wanaagsan, dhaqanka sidaa ahi wuxuu qasab ka dhigayaa in gabdhaha loo meeldayo oo aan cidla lagu tuurin.

Waxa kale oo xeer ah in gabadha ay soo doonaan odayo la yaqaan magac-yadooda iyo qabiil kooda labadaba la garanayo, gabadhii waxay markaa noqonaysaa gabadh ay laba qolo isa siiyeen. Taasi waxay ka dhigan tahay haddii wiilkii gabadha guursaday uu xumeeyo oo uu cidla dhigo, waxa gabadhii dammaanad qaadaya odayadii aabbaha u ahaa wiilka,

markay arrimuhu sidaa yihiin gabadha waxba lama weyddiiyo oo aabbeheed baa hooyadeed ka war geliya wiilka gabadheeda la siiyey, hooyadeedna gabadhay u sheegtaa. Waxase jirta mar mar ay gabadhu guurka caynkaas ah muran ka keento oo ay diiddo, hase yeeshe marka ay aabbeheed, hooyadeed iyo adeerradeed isku waydaartaan ee ay waano, wax u sheeg, hoga-tus iyo maahmaahyo ku waaniyaan way aqbashaa gabadhu.

Weli waxaan ku jirnaa gabdhaha iyo sida loo bixiyo e, waxaan wada ogsoonnahay in dadku kala dabeecado yihiin. Waalidiintuna sidaa oo kale ayey u kala duwan yihiin oo waxa jira qaar xoolo jecel, laguna naanayso *"Xoolo-Garad"* waa ka ay reer magaalku yidhaahdiin *"Diintiisuba waa Lacag"*.

Haddaba dhibta u weyni waxay la soo daristaa gabadha marka aabbeheed noqdo *"Xoolo-Garad"* oo oday aan isagaba ka yarayn baa u iman oo ku odhan xoolahaa oo dhan qaado gabadhaadana i sii. Isna si degdeg ah buu u aqbalaa isagoo xoolaha badan ee uu helay oo keli ah eegaya oo gabadha iyo mustaqbalkeeda midna aan dan ka lahayn.

Marka gabadhii 15 jirka ahayd ay diiddo odaygii 70 jirka ahaa ayaa la isku dayaa in loo sasabo, kolka loo taag waayana jujuub iyo xoog baa lagu dayaa. Guurkaas oo kalena wuxuu ku dambeeyaa inta badan khasaare iyo faa'iido la'aan.

Su'aal kale ayaa innoo soo baxaysa oo ah :

- Gabadhu ninka ay doonto ma la soo haasawdaa oo ma la soo heshiisaa sidaana aabbeheed ma lagaga soo doonaa ?

Jawaabtu waa *"Haa"*, waxana caddayn u ah maahmaahda odhanaysa :

"Gabadhu kunna way la haasawdaa, kowna way guursataa".

Waxa kale oon daliil u soo qaadanaynaa, xilliyada reer miyigu barwaaqada ku jiraan in dhallinyaradu habeenkii wiilal iyo hablaba ay ciyaar la kala baxaan, waxana halkaa ka bilaabma haasaawaha, waa caddayn kale oo noo tilmaamaysa in gabadhu ninkay doonto la hasawdo.

Dharaartii marka ay hablhu adhiga la joogaanna innamadu way u yimaaddiin waana la wada haasaawaa, guurka miyiga intiisa badan wuxuu ka dhashaa is doorashada, waxa kale oon soo qaadanaynaa qiso dhab ah oo dhacday.



Xilli hore oo aan sheegi karin sannadkii ay ahayd, ayaa waxa dhacday inay gabadhi nin la haasawday guurna ku heshiiyeen. Ninkaa magaciisa waxa la odhan jiray Raage-dheere. Intaan Raage soo doonin gabadhii, waxa ka soo horreeyey oo gabadhii soo doonay aabbeheedna u yimid oo xoolo badanna siiyey oday da' ah reera kalena leh. Aabbeheedna uu bixiyey, hasayeeshee gabadhii ayaa gaashaanka u qabatay oo la soo marin waayey, markuu sasabihii iyo hadalkii ku bataynа waxay gabadhii tirisay heestan Guuxa ah:

Raage-dheere intaan arkaayo
Reenka geelu intuu baxaayo
Raasey kuu noqoni maayee
Ruuxa ha iska bixinin dhaha.

Maansadaa markay tirisay aabbeheed wuu quustay, waxaase quusan waayey odaygii la siiyey, wuxuuna maalintii dambe gabadhii ugu tegey iyadoo adhi la joogta, kadib markuu saacado badan sasabo iyo sabaale ku waday ee ay u dabci wayday ayuu cadho daraaddeed intuu golxadkii la baxay tunka ka wareemay. Gabadhii nabarkii Ilaahay baa u malmaliyey oo way bogsatay, odaygiina magtedii baa laga qaaday, waxana loogu magac daray odaygii *"Cadar-Tuurwareen"* gabadhiina waxa guursaday Raage-dheere, carruur badanna way u dhashay.

Ninka iyo naagtu marka ay aqal galaan way u kala sooranyihiin hawlaha ay qabanayaan. Naagta waxaa la yidhaa kayd haya aqalka iyada ayaa maamusha agabkiisa oo dhan, wuxuu ninku keeno iyadaa loo dhiibayaa hawsha aqalka oo dhanna iyadaa ku shaqo leh. Isagana waxaa lagu og yahay hawsha, guud, sahankii, ceel-shubiddii iyo reer-oodistii. Waxaa ayna naagtu karayn oo dhan isagaa ku shaqa leh.

Mulkiga reerkana isagaa ku shaqa leh oo haddii wax laga bixinayo, isagaa bixinaya. Waxaa ay naagtu ku shaqo leedahay hadduu faraha la galo oo ay isku diidaan dambiga isagaa leh oo waxaa laga odhan waa *"Qorqode"*.

Hawshaa haweenka waxa uu faraha la gali karaa hadday bugto amma ay ummul tahay islaantu, waayo kolkaa waxa ku jirta dantii reerkiisa. Naagtuna hawl aan hawsheeda ahayn ma gali karayso, maadaama ay keyd haya tahay.

Qoyska hadday xurgufi dhex marto oo ay naagtu duddo, saddex goor buu soo celin oo uu reerkeedii ku soo celin. Isaga iyo reerkii ay u soo dudday ayaa saddexda goorba hoynaya oo arrinteeda galaya.

Haddii ay saddexdaa goor dhaafto waxaa loo tabinayaa guddida. Iyaga baa eegaysa halka uu reerku ka degi la' yahay, waayo xeerku inuu reer dhayal ku dumo wuu diidayaa.

Marka ugu horreysa mas'uulkii ayaa la waraysan. Ninkaa waxaa laga eegayaa laba arrimood oo kala ah, hadduu rixin goo yahay oo wax Alla wixii u dhawaa naagta uu firxinayo amma uu waxba siinayn, haddii taa lagu helo waa laga sii dayn naagta. Tan labaad hadduu raad-gur yahay, oo uu hinaaso badan yahay kaasina ma reeroobo oo waa laga siidayn naagta, oo ka dhigan waa laga furi. Waayo ma miyir qabo.

Maahmaah baa odhanaysa : Lama dhawro, lamana dhagaysto. Lama su'aalloo xaggeed martay maxaad qabanaysay, dumarka lama yidhaa, qofka macnahaa xun ee sidaa u hadla ma reeroobo. Haddaad islaysiin lalama tirsado oo waa la isaga tagaa.

Haddii naagtu dambiga yeelato ixtiraan la'aan iwm iyadana waa laga sii dayn. Gogol dhaaf iyo afxumo aad u ba'an wixii reerka dhibaya oo dhan hadday la timaaddo waa laga sii dayn reerka, waa laga furi.

Xeerka qoyska loo dhigay waxaa ka mid ah :

- Aqal dhisan haddii la soo weeraro oo la dumiyo waxay doonaan haku lahaadaane, 100na haku lahaadane haddii aqalkaa ay dhig dhaxadu jabto, waa mag. Magtaa oo ah **7 halaad.**

Aqalkaa kabadda ayaa ugu qaalisan, waayo awrta ayaa loo kala qaataa kabadda. Kabaddaa hadday lunto waa ta ugu mag badan amma kebaddii baa la keeni amma magteedii baa la bixin intii uu ka raali noqdo.

Alaabta aqalka dhex taalla waxna bulsho weyntaa la leh waxna qoyska ayey u gaar tahay. Waxa ay bulshadu la leedahay waxaa ka mid ah dher-yaha cuntada, illeen cuntadii lagu kariyey martidaa laga bariiyaaye.

Waxaa kale oo ka mid ah Xeedho-Ballaadha martida wax loogu geeyo, waxaa ka mid ah Saanta martida la siiyo marka ay soo hoyato, waxaa kaloo ka mid ah Naadhka iyo Gorofka oo marka ay xoolahaagu fulaan oo aad is leedahay qaado waata la isyidhaa :

*"Waar hebelow iiddaa aan xoolaha ku waraabsadee anaa kuu keeniye."*



Waxaasoo dhan mag gaar ah ayaa loo sameeyey, waayo waxay ahaayeen wax bulsho. Wixii qoyska u gaar ahna sidaabaa xeer gooni ah loogu sameeyay : Diriri waa doox ee doc maaha.

# Dhaxalka,
# Dumarka Wax ma Laga Siiyaa ?

Dhaxalka waxaa la yidhaa wixii hanti ah ee ka hadha waalidka, waxaana xeer u leh oo dhaxla carruurtooda amma qaraabada.

Haddaynnu dib ugu noqonno bilowgaba marka qoysku dhismo ee wiil iyo gabadh ay isguursadaan xoolaha qoyskaasu leeyahay hawaynaydaa maamusha oo iyada iyo ubadkeedaa leh oo ay ooddooda ku jiraan, waxse jira xoolo intaa ka baxsan oo odayga gooni u ah. Xoolahaa waxaa la yidhaa: "Gole-ku-hadh."

Odayga ayaa iskii u leh, haddii uu odaygu doono inuu haweenay labaad guursado wuxuu yaradka ka bixiyaa xoolaha *"Gole-ku-hadhka"* ah ee uu iskii u leeyahay, isla xoolahaa ayuu badh u goynayaa islaanta labaad ee uu guursaday, sidaa bay iyaduna ku heleysaa xoolo gooni u ah oo ooddeeda ugu jira.

Odaygu marna ma madhnaado oo goor kasta waxa gooni u ah xoolo *"Gola-ku-hadh"* ah.

➢ Haddii uu odaygu dhinto sidee dhaxalkaa loo qaybsan ?

Xeerku waxa uu dhigayaa labadii bahood bah walba xoolihii goonida u ahaa ee ooddooda ku jirtay iyagaa iska leh intay doonaan ha ahaadeene, waxaa la dhaxlayo waa xoolihii *"Gole-ku-hadhka"* ahaa .

- Labada bahood hablihii ka tirsanaa ee innamada la dhashay wax ma la siinayaa ?



Xeerka meel ay ku taal habluhu dhaxalka ma soo galayaan lama hayo, haseyeeshee waxaa la hubaa oo jirta in wiilashu ay dhaxalka waxba ka siin hablihii la dhashay ee ay walaalaha ahaayeen.

➢ Sababta hablaha loo qadiyaana waa maxay ?

Waxay nalatahay waxa jira dhaqan iyo fikir ku dhisan qabiil oo ah, gabadha haddii xoolo la siiyo waxay ku biirinaysaa qolada guursata oo loo arkaayo in ay yihiin qabiilo kale.

Haddii ay gabadhu aabbaheed kaligeed ka hadho ilmo adeerna uu jirin, gabadhaasi iyadaa xoolihii aabbaheed ka hadhay qaadanaysa sidaa waxaa noo sheegay Jaamac Muuse oo u joogay soona weriyey dhacdadaan inkastuu xilligaa qoofil yar uu ahaa.

Muddo haatan laga joogo 50 - 60 Sannadood ayaa waxaa dhacday inuu oday dhintay ka hadhay 23 halaad iyo gabadh. Dabadeed waxaa dhaxalkii soo doontay rag ay odayga xigto guud ahaayeen. Ragaas oo ku doodaya kol haddayna jirin innammo odaygii ka hadhay in ay iyagu xaq u leeyihiin inay dhaxalka qaataan, gabadhuna ay xoolaha reero kale gayn doonto hadday qaadato.

Dabadeed odayadii gallinkaas joogay baa arkay in ay arrintaasi tahay boob, odayadii arrintii guddi bay u saareen waxayna fadhiisteen meeshii reeruhu markaas degganaayeen oo la yidhaa *"Dufle"* oo ku taal Buurta Casa-Cali ee u dhaaysa Dayn iyo Dhuuyar, galbeedka dhulka Ciisaha, waxaana ay guddidii go'aamisay oo ay gabadhii u xukuntay 21 halaad, raggiina waxaa lagu yidhi waxba kuma lihidiine labadaa halaadna sahay u qaata, sidaa bayna gartii ku dhammaatay.

# Xigsiinta

Marka uu nin gabadh doono ee uu yarad kabixiyo ee ay u doonnan tahay amma loo dhiso oo uu la aqal galo oo ay yihiin qoys dhisan amma carruur ha lahaadaan amma yey lahaane, haddii ay islaanta tii Alla u timaaddo oo ay dhimato, waxaa xeer ah in loo xigsiimo oo loo dhiso gabadhii taa ka yarayd.

- Haddii odaygii hablaha dhalay uu diido amma gabadhii la xigsiimayay ay diiddo sidee la yeeli ?

Inta badan odayadu ma diidaan in ninkii ay gabadhiisu ka dhimatay gabadha yar loo xigsiimo, waxay sidaa u yeelaan dhawr siyood, waa ta koowaade haddii ay gabadhii hore carruur ka tagtay inay tan yari hooyo u noqoto oo ay sidaa ku daryeesho waayo cid kale oo sideeda u korinaysaa ma jirto.

Waa ta labaadee in uu halkii kasii wado xididnimadii iyo gacalnimadii uu reerkii gabadha qabay uu la lahaa, waana wax meel adag kaga jirta xidinimadu dhaqanka Soomaalida, haddii uu sidaa yeeli waayana waxaa raacaysa magac xumo, waxaana lagu naanaysaa *"Hebel Xidid-Goo"*.

Aan u soo noqonno su'aashii ahayd, sidee la yeeli haddii loo xigsiimi waayo ninkii ay gabadhu ka dhimatay ?

Waxaa suura gal ah inuu geedka u soo dhaadhiciyo odaygii gabadha dhalay oo uu ku baano in loo soo celiyo xoolihii yaradka ahaa ee uu ka bixiyey gabadhii ka dhimatay, kol haddii loo diiday xigsiintii uu xeerka u lahaa.



- Haddaba xeerku ma dhigayaa in loo celiyo xoolihii yaradka ahaa ee uu ka bixiyay gabadhii ka dhimatay ?

Waxaa xeerku dhigayaa haddii gabadhii ninkaa ka dhimatay aanay wax carruur ah u dhalin in xoolihiisii loo celiyo amma xigsiin la siiyo. Haddiise ay carruur u dhashay xoolo loo celinaayo ma jiraan, waxaana lagu odhan xoolo wax ka weyn bay kuu keentay.

- Su'aal kale ayaa innoo soo baxaysa oo ah haddii Xigsiintii la siiyo oo loo dhiso yarad ma ka bixinayaa ?

Jawaabtu waa maya oo xeer dhigayaa in xigsiinta yarad laga bixiyo majiro, hase yeeshee ninka gabadha loo xigsiimay uum baa wixii uu karo bixiya.

Xigsiinta aan halkaa ku dhaafno oo aan iminkana u gallo Dumaalidda.

# Dumaasha

Dumaaliddu waxa ay timaaddaa marka uu nin ka dhinto haweenay uu qabay, waxaana dumaala oo guursada qaraabada ka ugu dhaw ninkii dhintay, waxaana la dumaalaa inta uu dhabankeedu is hayo ee ay dhalayso, haddii ay carruur hayso iyo haddii ayna waxba dhalinba waa la dumaala, waxaa inta badan dumaala ubadka ay dhashay adeerkood ruma, xeerkuna sidaa buu dhigayaa. Sidaan meelo hore ku soo sheegnay mujtamacu waxa uu u dhisan yahay hab qabiil taas daraaddeed haweenaydu ma diidi karto ninka markaa xeerka u yeeshay inuu dumaalo, xitaa hadduu qabiilka guud noqdo.

Sababaha ugu waa weyn ee dumarka loo dumaalo waxa kamid ah, si agoonta yaryar loo daryeelo isla markaana dhibaatada iyo nolosha miyiga ee adag looga gargaaro, hawshana waxa u qaban kara oo keli ah adeerradood iyo tolkood. Haddaba ninka agoonta hooyadood dumaala wax yarad ah oo uu ka bixinaayo xeerka kuma jirto, waxaase xeer ah inuu xoolo amma duunyo ku soo darsado reerka uu dumaalay, xoolaha uu agoonta ku soo biirsaday isaga ayey *Gole-ku-hadh* u ahaanayaan, xoolaha agoontase inuu daryeelo maahee shaqo kuma laha, haddii uu damco inuu gabadh kale guursadana wuxuu ka yarad bixinayaa xoolihiisa Gole-ku-hadhka ahaa, markuu la aqal galana xoolihii uu goonida u lahaa ayuu islaanta yar, ax ka siin oo ooddeeda ugu jiri, gooni ayayna u maamulan. Islaantii uu ninku dumaalay hadday wiil dhasho, wiilkaa waxaa la yidhaa waa dumaal dhanka hooyo oo keli ah um buu walaal kala yahay carruurtii agoonta ahayd ee xoolahooda waxba kuma leh.

Dumaalka oo labaatan jir ah hadduu aabbihii gabadh guursado, wiilka ay gabadhaasu ku curato ayuu xeerku curadnimada siiyey, xagga dhaxalkana Dumaalku wuxuu wax ka heli xoolihii Gole-ku-hadhka ahaa, kuwaasu hadday jirinna cidla ayuu u soo baxayaa.



Raggii dumaalnimada ku dhashay ee ay dhibaatadu ka soo gaadhay waxaa ka mid ahaa, odaygii caanka ahaa ee la odhan jiray Calfiye Aaddane, oo waa kii lahaa :

Caadadii dumaal uu lahaa, Ciisahaa garane
Casar baan ka tegay cuud wuxuu, aabbahay dhaqaye
Cagaar yibille waa kaan ka tegey, cadhada Reer Kuule .

# Badbaadada Hooyada

Hooyada xeerku wuxuu qoray, " Hooyo waa beer". Beertana lama gubo lamana gumaado.

Muddo boqollaal sano ay innaga xigaan oo ku siman wakhtigii xeerka la dhigey, loona fadhiyo meesha la odhan jirey Kartataan oo maanta loo yaqaan *"Khadar iyo Ilyas"* amma *"Ceelka madow"*, wuxuu ku yaalla inta u dhaxaysa *Cabdulqaadir* iyo *Jidhi,* ayaa la maqley nin habaryartii kufsaday hooyadiina uleeyey.

Guddidii xeerka ayaa is weyddiisey waxaa hooyadii u tagi karaa. Waxaa la yidhi waa xoolaha. Markaasey guddidu soo saartey dhagalaydan. Marka hore waa la xoolayn oo ilkaha sare ayaa laga guri. Marka xigga waa la dhufaani si uuna u dhalin, waxaa kaloo laga goyn suulka, faryarta iyo fardhaxada, oo labada gacmoodba tiiba laba farood baa lagu reebi. Waxaa sidaa loo yeelay si uuna u aar gudan oo uu waxba u dili karin. Labada dhan ee wajigana madde ayaa lagu gubi oo dab dheer baa lagu samayn. Sidaa waxa loo yeelay inay bulshada calaamad u ahaato.

Hooyadu waa ilayska bulshada.
Hooyadu waa macallinka carruurta.
Hooyadu waa gaadh hayaha reerka.
Hooyadu waa asaaska nolosha.
Hooyadu ma duusho waxna ma disho.
Hooyadu qawleysato ma noqoto.

Wuxuu xeerku dhigay wixii hooyo la yidhi inaan dhibato loo geysan.

Hooyadu wixii ay geedka kaga camal falayso waa loo fasaxay. Waayo waxay ka diirtaa meydhaxda aqalka lagu sameeyo, dhigaha aqalka lagu dhiso, udbaha aqalka lagu dhiso iyo heensorraarada. Maadaama uu aqalku ahaa sharafta ummadda waxa ay kaga camal falayaan geedka



baarkiisa ee ma nabaad guurinayaan. Waxaa loo diiddan yahay nabaad guurka oo keliya.

Hooyada haddii gabadh laga doono xil baa fuula. Xilkaana waxay kaga bixi kartaa geed ay adeegsato oo ay aqal ka sameyso

## Makasta iyo Maatida

Makas iyo maati, waa dumarka iyo carruurta waa labada aan lahayn karti ay isku badbadiyaan.

Qodobka 1aad: Labadaa ninkii wax u dhima xeer adag baa loo dhigay oo ganaax ah.

Qodobka 2aad: Ceelka qotonka ah ayna iyagu ka cabbi karin amma dhaan ha wataan amma dhaqaaqal ha wataane, ninka ka waaya ee kaga baxa, xilkas ma aha baa la yidhi oo isna wuu xukuman yahay oo ganaax adag baa la saari. Makasta iyo maatidu waxyaabaha xeerka loo dhigay ayey safka hore kaga jiraan. Aan soo qaadanno nin beri hore dumar dhaan waday ceel ku dhaafay oo u dhaamin waayey.

Nin aan magaciisu na soo gaadhin oo *Ciise Wardiiq Reer Xasan* ahaa ayaa maalin maalmaha ka mida goor ay fiid ahayd dumar dhaan waday kaga tegey ceelkii dushiisi, dabadeed dumarkii ceelkii bay ku rafaadeen oo goor ay habeen noqotay ayey reerkii ku soo hoydeen.

Dumarkii markii la waraystayna waxay sheegeen in ninkii hebel hebel uu galabtii ceelkii kaga tegey oo ay cid u dhaamisa waayeen. Ninkii maalintii dambe ayaa geedka loo soo dhaadhiciyey waxaana lagu xukumay **12 halaad** oo laga qaaday.

Qodobka 3aad: Agoon ay xoolo badani u hadheen waan karti badanahay laguma boobi karo, ninna ma dhici karo, mid u dhow iyo mid ka dheerba.



Qodobka 4aad: Haddii uu dagaal shisheeye dhaco, dadka shisheeyaha ee aad is laynaysaan maatidooda looma dhawaan karo lamana dili karo, gaashaan qaadkiisa uun baad iska celinaysaa.

Qodobka 5aad: Haddii mid naga mid ahi uu maatidaa dilo waa maatilays, waana magacii ba' sharafna kuma laha ummadda dhexdeeda.

# Cutubka Afaraad

# Xeerka Dhaqaaqilka

# Dhegalayda Dhaqaaqal

Dhaqaaqal waa mood iyo noolba wixii la dhaqdo.

1. Xoolo in la kala dhaco xeerku wuu diiday, xitaa haddii aad deyn ku sheeganaysid waa in aad geedka u soo dhaadhacdid oo aad soo dacwootid. Haddii aad xoolo xoog ku qaadatid, xeer baa ku qaban oo waa labo iyo toban halaad oo ganaax ah iyo xoolihii aad qaadday oo aad soo celisid.

2. Haddii ay xoolo baadi ahi ku soo galaan oo aadiska qaadatid, beri danbe haddii uu ninkii lahaa yimaaddo oo uu waa baadidaydiiye i sii ku yidhaah, kuma dhegi kartid oo waa in aad u celisaa xitaa haddii ay tarantay. Xeerku sidaa buu dhigay, dhegaleyda baadida ayaa na innoo faahfaahin.

Qodobka 1aad: Haddii haweeney la qabo ay ninkeeda ka baxsato oo ay tagto gobol kale iyadoon la furin, nin kale ma mehersan karo isaga oo aan weydiin warqaddii furniinka.

Qodobka 2aad: Haddii se la iska guursado, muddo badan dabadeed oo uu ninkeedii hore iyadoo ubad leh helo, xeerkaa loo dhaad hicin. Xeerkuna wuxuu iyada iyo ubadkeedaba siinayaa ninkii hore. Ninkii dambe waxaa lagu odhan warqad miyay sidatay, xaggeed ka keentay xeerka aad ku guursatay.

Qodobka 3aad: Waa inuu faraha kaga soo rido iyada iyo ubadkeediiba ninkeedii hore, intaa waxaa u dheer isagoo guddida u xukuman **12 halaad,** waayo xeerkuu meel kaga dhacay.

Qodobka 4[aad]: Naagtu hadday ubad leedahay oo uu ninkeedii dhinto faraha lama geli karo nin kale oo aan ahayn qoyskii ay ubadku ka dhasheen, waayo ubadkaasu hadday wax dhimaan dad baa leh oo magta ka bixinaya, dadkaa baa guursan kara. Waayo waxaa la doonayaa awlaaddu inay isku diir ahaato, waxa kale oo ay awlaaddu u baahan tahay wax xoolohoodii u dhaqaaleeya.

Qodobka 5[aad]: Ninkaa guursanaya amma dumaalaya islaanta, agoontaa xoolahooda kuma gabayo ee xooluu ku darsanayaa sidaa darteed naag la iska boobo iyo xoolo agoomeed oo la boobo xeerku ma oggola.

Qodobka 6[aad]: Naagtu hadday ninkeeda kala tagaan oo ay is furaan oo ay haysato caddayn iyo marag in la furay ah, ninka ay doonto ayay guursan kartaa oo taa looma diiddana, ta loo diiddan yahay inay shisheeye guursato waa ta ninkeedu dhintay ee adduunkii iyo ubadkii haysa, xigtadoodii uun baa taa guursan karta.

## Dhegaleyda Baadida

Shanta maal ee adduunyo ee magacyadooda la yidhaahdo:

1. **Geel**.
2. **Giir** - waa lo'da.
3. **Geyrada** - waa idaha.
4. **Geesley** - waa riyaha.
5. **Gammaan** - waa fardaha, dameeraha iyo baqlaha.

Shantaa maal adduun way baadiyoobi karaan, baadidaa hadduu nin cidlo ka helo amma ay xoolihiisa raacdo xeerku waxa uu u dhigay ninka haya baadida waa inuu naadiyo oo u ka hadlo meel Alla meeshii ay ummadi isugu timaaddo, sida geedaha la isugu yimaaddo, aroosyada, ceelasha biyaha iyo ciidaha la tukanayo dhulkaas marka uu joogo wuu lalabi, oo ka dhigan yeedhis uu baadidaa ku yeedhayo.

Hadduu aamuso oo uu iska dhaqdo baadidaa oo dhowr sano dabadeed baadidaa la garto neefba ha ahaatee, hadduu neefkaasi waxba dhalin



intuu haystay, **sannadihii uu haystay hadday 3 sano tahay 3 neef baa lagu xukumi, hadduuse lalabi jiray neefkii uum baa laga qaadi.** Xeerku wuxuu odhan waa nin baadidii daranyo dhabay, waana sida loo baahan yahay waxaanan xeer loo dhiginna ma jiro.

## Dhegalayda Bandaaq

Bandaaq waxaa la yidhaa meel lama-degaan ah oo waran-dhaq ah, amma laba duul oo col ah u dhaxeysa, meeshaa waxaa jira oo ku nool xoolo ay cidiba dhaqan, oo halkaa ku ugaadhoobay, xoolahaas hadduu dad helo oo ay dadkaasi iska dhaqdaan, hadday dad kale ku maagaan oo ay yidhaahdaan annagaa leh oo halkii la isku qabsado annagaa leh iyo annagaa leh.

➢ Xeerku muxuu u dhigay ?

Xeerku waxa uu dhigay wixii summadlaawe ah ee cidladaa ku dhaqmay ninkii helay ee xoolo ka dhigtay baa iska leh, cid ku maagi kartana xeerku ma oggola oo waxaa la odhan, ninkan bankaa ka mar waxba kuma lihide oo xarraggada ka daa.

Wixii summad leh reerkii summaddaa lahaa baa la siin. Summaddaasi waa calaamad u gaar ah nin walba xoolihiisa, summad ay qolo leedahay duul kale xoolahiisa kuma dhigan karo. Summaddaana laguma xadgudbi karo, ninkii ku xadgudba xukun baa ku dhaci, calaamad aan tiisa ahayna laga yeeli maayo. Ninkii summaddaa lahaa baa la siin, anaa itaal leh Xeerka dhexdiisa ma socoto.

## Dhegaleyda Gaadiidka

Gaadiidku waa waxyowga la rarto amma la fuulo sida, Awrta, Fardaha, Baqlaha iyo Dameeraha. Afartaa buu ka kooban yahay gaadiidka miyigu. Aad ayaana loo dhaqdaa, intaa aan soo sheegnay.

Hadday qof jiidhaan oo uu qofkaasi dhinto, una dhinto naburkaa ka soo gaadhay neefkaa, waa haddii uu neefkaasi keligii ahaa oo ay cidna wadin, reerkii uu neefkaasi wax ka dilay waxaa mag ahaan loo siinayaa **neefkaa wax dilay**. Sidaa buu Xeerku dhigay, haddii neef dibi ah amma lo' ay qof geeska ku dilaan neefkaa baa lagu Axmi.

Awrku hadduu rakuub yahay oo uu qof saaran yahay, hadduu qof jiidho oo uu qofkaasi dhinto Boqolkiisii *(Magtii)* baa la bixin, waayo awrku keligii ma ahayn, ee qof baa saarnaa oo waday. Su'aasha meesha imanaysa waxaa weeye : - *Maxaad uga qaban weyday ?* Waa sida uu xeerku dhigayoo neefkii uu qof wadaba wuxuu doono ha ahaadee, hadduu wax dilo, **100 kii oo dhan** baa laga qaadayaa. Waagaa dadka waxaa baabuur amma gaadhi u ahaa muurka.

## Dhegalayda Baarqabka

Baarqabku waa awr aan la rarin oo dhoorku ku yaal oo aan karin lahayn balse qoodh looga dhigay geela xerka ah. Geelaa lagu yaqaan oo caan waxana la yidhaa waa Baarqabkii reer hebel oo guban iyo galbeedba waa laga yaqaan iyo 12ka Gallinba. Geelasha kale een Baarqabka lahayn ayaa loo keenaa oo la yidhaa *"War ugu tuur"*, kolkaa geel walba nirig buu ku leeyahay. Waxaana la yidhaa baarqabkii reer hebel baa dhalay 12ka dixoodba waa awrka keliya ee geel uu u aabbo yahay ku leh, aadna caan u ah kana duwan awrta kale. Awrka noocaas ah haddii la dilo magtiisa waxaa loo dhigay markii hore 5 halaad, kolkii dambe ee xeerka lagu gabagabeeyay Sitti halkaa ayaa xukunkii baarqabka lagu soo qaaday waxaana laga dhigay **24 laxaad,** waxaana laga soo qaadayaa 12 ka dixood oo uu dix walba nirig ku leeyahay, dix walbana waxaa laga soo qaadayaa **2 halaad** oo cas sidaa buu ku noqday 24 laxaad. Waayo baarqabku waa Biri-magaydo lama dili karo ummaddana wuu ka dhaxeeyaa.



## Dhegalayda Awr-Qaadka - *Ergisasho*

Inta shey ee loo kala Awr qaato. *"Awrka isii aan kusoo guuree, dameeraha isii aan ku soo dhaansadee, kabadda isii aan Awrka rareystee, isii gorofka aan geela ku soo waraabsadee"*. Sidaa baa loo kala Awrqaata. Awrka dharaarta aad ku guurayso iyo dharaarta loxoska la yidhaa ee aad nasanayso uun baad haysan kartaa, dharaarta saddexaadna waad iska hoynaysaa, saddexdaa cisho hadday dhaafto oo uu dhinto amma waraabe cuno, waa mag. Saddexdaa cisho dhexdooda hadduu dhinto mag ma laha.

Kabadda waxaa u xeer ah kolkuu safarka ka soo hoydaba inuu keeno. Hadduuse ku guuray awrka uun bay la xeer tahay oo waa saddex cisho.

Dameeraha kolka aad ku aroorto eed soo hoyso cishada xigtaba waa inaad iska geysid, haddaad sidaa yeeli weydo oo uu dhinto waa mag.

Gorofka isaguna waa sidoo kale, kolkaad xoolaha ku waraabisaba waa inaad celisaa, hadduu kugu lumo waa mag.

Waxaa aan soo sheegnay xeerku inuu oggolyahay in wax la kala qaato. inaadse gosha dhigato xeerku ma oggola, danta bulshada ayaa ku jirta in wax la kala qaato.

## Dhegaleyda Wayeer

Wayeer waxaa la yidhaa, ceel qoton ah oo maguuraan ah oo magudhaan ah. Ceelkaasi waa ceelashii hore ee ummadihii hore ka hadhay oo ummadda dhulka taal uu ninna odhan karin anigaa qotay amma anigaa leh.

Hebel baa horta helay waa la odhan karaa lakiin magac maahine ummadda kama sheegan karo oo bulshaduu u dhexeeyaa. Hadduu nini dadka ka xeerto oo uu anigaa leh yidhaahdo waa la soo dhaadhicin, oo waxaa loo dhaadhicin geedka amma dixda ummadda u dhaxaysa. Waana la xukumi.

- Saddex meelood oo biyo laga cabbo ayaa ummadda u dhaxaysa, oo waa saddexdee ?
  1. Waa ceelkaa aan soo sheegnay.
  2. Waa durdurrada ma gudhaanka ah.
  3. Buqdhooyinka ma gudhaanka ah.

Saddexdaasi waa isku xeer, buqdhe iyo durdur Ilaahay baa ku galladeystay ummaddiisa oo cidna ma sheegan karto, wayeerkuna waa hedel ummado hore ka hadhay isagana lama sheegan karo, ninkii intaa is lahaysiiya xeer baa u yaalla oo qabanaya

## Dhegaleyda Birimageydo

Haween oo dhan hadday yar tahay iyo hadday weyntahayba waa *Birimageydo* oo lama dili karo. Haddii ay laba duul islaayaan waxa dilana waa gun ee gob laguma sheego, waa sida uu xeerku dhigay.

Raggana wixii aan baaluqin waa Birimageydo oo waxaa la yidhaa waa makas balaayana ma alkumi karaan, in la dilana xeerku mamnuuc buu ka dhigay illeen gaashaan qaad ma aha. Xeerku wuxuu dhigay haddii colka kugu soo duula ay kaa laayaan makasta iyo maatida, xeerku ma oggola inaad adna aargoosi ku sameyso carruurta, horaa loo yidhi :

"Cunug col ma alkumo".

Wixii maatida kaa dila gaal iyo muslim kuu doono ha ahaadee, adna inaad maatidiisa dishid maha, xeerkeennana waa ka xaaraan magac-xumo. Qofkii maatida laaya waxaa lagu naanaysaa maata-lays aad baana la isaga ilaaliyaa magac xumada kaa raacaysa halkaa, ninka xeer-yaqaan ah fool xumadaa oo kale ma sameynayo, dadka kuu magan ah iyaguna waa Birimageydo oo waata maahmaahi odhaneysa :

"Meel aan magani ku bixin, magac ma yaallo"

Ninka ku xadgudba maganta xeer adag bay bulshadu ka martaa waxaana loo bixiyaa magac-dile, waxaa kaloo Birimageydo ah ugaadha wadanka. Waayo ? Waa xoolo keyd ah oo uu dalku lee yahay, dharaarta ay colaadi ku qabsato amma ay abaari ku hesho oo kaliya bay kuu bannaan tahay oo waa xoolo dadweyne, cidna gaar uma laha. Ruuxna inuu iskii ugu camal falo Xeerku ma dhigin oo wuu diiday.



Dharaarta ay qudhuudha-qadhla taagan tahay oo ay nafi kuu geyso maahine, waxaa kaloo birimageydo ah, xoolaha ugubka ah ee dheddig sida nirgaha,weylaha, sabeenaha iyo ceesaamaha. Waayo ? Sabeenta ugubka ah meesha nabad lagu xidhayo uun baa lagu gawracaa, arwka baarqabka ah isaguna waa birimageydo, hadday laba duul islaayaan oo midi reer galo waxyaabaha ay makastu ku nooshahay sida dameeraha iyo adhiga, waayeelka aan diriri karin in la dilo waa xaaraan oo waa birimageydo, makaannada ay maatidu gasho in la dumiyo waa birimageydo, sidaa buu xeerku waxba uga tagin, waxaasoo dhammi waa birimageydo.

# Cutubka Shanaad

# Xeerka Qubanaha Ah

# Dhagaleyda Midiidinka

Midiidin waxaa la yidhaa qofka shaqaalahaaga ah Beer iyo Beerrey midkuu doonaba hakuu dhaqee. Qofkaasi hadduu wax noqdo intaa uu kuu shaqeynayo magtiisii buu leeyahay, hadduu dar Alla u bukoodana mushqaayaddiisii buu leeyahay, marka u horreysa qofka aad doonaysid in aad ciidansato waxaad u yeedhi odayaal xilkas ah oo marag ah oo ninkaa eegaya waxayna eegayaan sida uu yahay laxaadkiisu, sida indhaha dhegaha, addimmada iwm. Meelkasta oo jidhkiisa ka mid ah, hoos iyo guudba.

Hadduu iska eegi waayo, oo iimahaas uu ninkaasi leeyahay ku baano uu yidhaahdo, xoolihiisaan wax ku noqday intii aan u eegayey isagoo iimahaa horay u lahaa, guddidu waxay odhan iska bixi magta adaa iska eegi waayee.

Ninka kuu shaqeynaya hawlo badan buu kuu galayaa ceel shubis, buuro uu xoolo ku raaco, geedo uu koro oo uu xoolo u garaaco wax kasta oo ay haluko ka soo gaadhi kartaba wuu qaban, sidaa darteed hedelkiisana lama diidi karo dhaawac hadduu ku yimaaddo lama diidi karo sidaa buu xeerku u dhigay midiidinka.

# Dhegaleyda Dadka Waalan.

Nin waalan ayuu ka waashay ?

a. Nin leh buu ka waashay, oo ninku waa kee ?
   Oo waa ninkuu ka dhashay.
b. Ninkaa uu ka dhashay xeerku wuxuu u dhigay inuu xidho oo siduu u xidhan ?
   Geed baa loo waabi waa lagu ilaalin dad xilkas ah oo eegaa loo yeeli, sidaa waxa loo yeelay inuusan dhagar gelin oo dad iyo duunyaba ka nabad galaan oon isagana wax la yeelayn. Lakiin haddii la sii daayo oo uu wax dilo dadkuu ka dhashay ninkaa waalan ganaax gooni ah baa laga qaadi, wixii uu dilay magtiisana waa laga qaadi waayo way xaslan waayeen.
c. Haddii isaga la dilana waa sidoo kale oo waa la taqsiiri oo waxaa lagu odhan maxaad dadka ugu sii dayseen ma ha la idiin dilaad lahaydeen, magtiisana waa la bixin.

Sidaa buu xeerku u adkeeyay dadka waalan in la ilaaliyo oo la daranyo dhabo, si dad iyo duunyaba uga nabad galaan waayo haddii kol la sii daayo waa khasaaro u joog.

Waxaa kaloo la mid ah ey dad cun ah nin haysta oo dhaqaaleynaya, hadduu waxyeello u geysto dad iyo duunyaba, ninkii eygaa lahaa marka hore waa la ganaaxi. Marka labaadna magta waa laga qaadi, waayo xeerkuba ma oggola inaad haysato ey dad cun ah.



# Dhegalayda Magangalyada

Qodobka 1aad: Doolqaad amma qax iyo barakac, waa ummad abaari keentay amma col keenay waxa u yaalla oo xeer ah in la dejiyo meel la isla gartay. Waa in halkaa lagu dhuuniyo mase oggola xeerku inuu dadkaasi meel walba uu dego

Qodobka 2aad: Dadkaa qaxootiga ah haddii qof laga dilo waa 2 magood. Waayo waddankii oo la dilay weeye, qofka fara xumeeyana wuu takooran yahay. Halkaa baa lagu dhaqaalayn inta ay ka hoyanayaan.

Qodobka 3aad: Qof aan deegaanka ahayn haddii la qabto oo dalka wax u dhimaya, lama dilayo guurtida ayaa loo gayn intoo la qabto. Guurtidaa baa ku shaqo leh. Qofkaa waa la hubin dambi hadduu galay iyo hadduu socoto yahayba.

Qodobka 4aad: Qofka maganta ah diin looma eegayo, dadnimo uun baa la eegi, qofkaa maganta ah ninkii ku dulma, dalka dhexdiisa, laba jibbaar buu xukuman yahay, waa sida ay dhagalaydu qorayso.

# Dhegaleyda Ood-Wadaagta

Ood wadaag waxaa la yidhaa : dadka xuduudaha wadaaga, amma dalalka jaarka ah ee kala dhaqanka ah.

Xeerku waxa uu dhigay inaan dadkaa lagu xadgudbin oo la maamuuso dalkooda iyo dadkoodaba diintey doonaanba ha lahaadaane, hadday abaar ku hesho oo dalka jaar kaaga ahna uu barwaaqo yahay, ergaa loo diri oo la odhan ma u soo daaqsin tagnaa dalkiinna abaar baa na waddee. Waa wax la og yahay oo xoolahaagii nabad galyo ayay ku daaqayaan oo ay ku soo noqon doonaan iyagoo nabad qaba deegaankooda kolka ay abaartu ka dhammaato. Dadkaa xeerka dhigtay qof ka tirsan inuu magac waafi ah maahine, magac xumo soo jiido xeerku ma oggola, hadduu ummadahaa ajaanibka ah ee ood wadaagta la yahay nin naga mid ahi hadduu xumaan u geysto waxaa u yaalla ganaax 12 halaad ah, waayo dadkaa uu wax u geystay maahine, dalkii iyo dadkii uu katirsana buu ceebeeyay, xeerkaba waxaa loo dhigay dadka dalku inay ka nabad galaan dibaduhuna inay kaa nabad galaan, hadday ajaanibku kugu gardarroodaan ammaba duunyo kaa dhacaan.

1. Ergaa loo diri, hadday diidaan.
2. Ergaa haddana la diri, hadday diidaan.
3. Ergo saddexaad, taa hadday diidaan xeerku wuxuu dhigayaa in la iska dhabo gef iyo gacanba ha lagaaga horreeyo ee adigu haku horreyn.



# Dhegaleyda Uur Wadaagta

Uur wadaagtu waa dad laba duul ah oo ay hooyo kulmisay waa islaanta guursatay labo nin oo mid walba awlaad u dhashay maxaa ka dhaxeeya oo dhaxal ah labadaa awlaad ?

- Maxay isugu tegi karaan ?

Waa marka u horreysee ninba duulkuu ka dhashay uun baa dhaxli kara. Mid hadduu keligii ahaa oo uu dhinto, kuwii la aabbo ahaa uun baa xoolahiisa dhaxlaya.

- Laakiin kii la hooyada ahaa ee duulka kale ka dhashay muxuu leeyahay ?

Kii la hooyada ahaa waxa uu leeyahay labadaa dhudhun wixii uu ina habartii wax ku qabtay oo dhan, hadduu beer qodo amma ceel bir qod ah ka tegay, amma aqal uu dhisay wax Alla wixii xooggiisa ahaa ee uu labada dhudhun ku taray ina habartii baa leh oo loo xukumay, kolkaa wiil ay hooyadaa dhashay ood kala aabba tihiin dhaxalkiisa amma xoolahiisa waxaa dhaxlaya carruurta ay isku aabbaha yihiin. Adigu waxa aad leedahay xooggiisa waxa uu ku dhisay, sidaa buu xeerku u dhigay.

# Dhegaleydda Quudhsiga

Quudhsi muxuu yahay ?

Waa hadduu ruux, ruuxa kale ku yidhaahdo waan kaa sarreeyaa, amma uu iska weyneysiiyo *(Qabweyni)* ammase laba duulba ha ahaatee, oo duul sheeganayo laandheeri oo uu qolada kalee wax ku sheegata waxba u oggolayn gar iyo guunyo. Waa qolada amma qofka ay isla weynidu madax martay ee sheeganaya laandheerannimo iyagoo odhanaya weliba :

"Inaan la hadlaba waan ka qoordheerahay".

➤ Xeerku muxuu u dhigay qoladaa la quudhsanayo ?

Xeerku qoladaa la quudhsanayo ayuu is garab taagay. Duulna duul waan kaa qabweynahay ma odhan karo waa sida xeerku u dhigan yahay ee uu yidhi : "nina ninka kale waxba kama sarreeyo oo ummaddu wey simantahay." Duulka lagu caddeeyo amma marag lagu helo inuu qolo kale u faanay oo uu yidhi waan kaa laandherahay, ammase shakhsiga hadalladaa oo kale lagu helo waxaa lagu xukumay **12 halaad** oo cagahooda ku socda oo ganaax ah, waxaana loo yaqaan ninkaa waa magac-dile. Xeerku sidaasuu u xakameeyey waan xoog weynahay iyo waan xayn dheerahayba. Oo waa tii la yidhi:

"Ciise waa wada Ciise oo ninna, nin caara ma dheera."

Ninkii gabyeyna waa kii lahaa :

Xeerkii awowgey hadduu, Xerada ii yaallo
Xamdi mahad Allahayow hadduu, Xoogba soconaynin.



# Dhegaleydda Gocosta amma Kubbadda

Gocostu waa ciyaar ay dhallinyaradu ku loolamaan. waa ciyaar-kubbadeed gacmaha la iskugu dhiidhiibo, laba kooxood baa la isku qaybiyaa sidaabaana lagu hardamaa.

➤ Ciyaartan gocosta haddii qof wax ku noqdo xeerku muxuu u dhigay?

Ugu horreyn intaan ciyaartu bilaabmin, labada kooxoodbaa gegaday u soo dhaadhici oo way is hor joogsanayaan, nin baa dhexdooda soo joogsan oo dhawaaqi, wuxu odhan "Yaa il iyo oofba la", oo ka dhigan ninkii caafimaad qaba ee hadhow hadduu wax noqdo mag amma mawlaxo doonayow imikaba iskaga fadhi ciyaarta, waxaa loogu jawaabi "Ninna", waan oggolnahay bay ka dhigantahay, dabadeed ciyaartii baa la bilaabi, inta ay ciyaartu socoto haddii qof wax ku noqdo mag iyo mawlaxo midna male oo waxaa loo cuskanayaa qodobkii ahaa :

"Ninba Boogtii ha Dhaydo."

➤ Su'aal kale ayaa imanaysa oo ah, haddii laba qof oo aan ciyaarta gocosta ku jirin oo iskood u durdurinaya ay isjiidhaan oo midi dhin ay midna dhaawac soo gaadho. sidee loo kala xukumi ?

1. Taa xukunkeedu waa, ninkii dhintay oo boqolkiisii la bixiyo iyo ninkii dhaawacmay oo dawadiisii iyo mawlaxadiisii la bixiyo.
2. Haddii labada nin mid ilkuhu ka daataan ka kalena dakhar soo gaadho. Taa xukunkeedu waa ilkihii oo la mago, waayo ilkuhu waa qaali iyo ninkii dhaawacmay oo la buulleeyo.

# Dhegaleyda Jiifaaga

Jiifaagu waa oday da'ah oo sagaashanka kor u dhaafay, waa nin markiisii hore ee uu xoogga qabay geedaha garta lagu qaado laga waayi jirin. Waa nin waayaarag ah oo wax badan u soo joogay, waa nin ciraabooyin badan maskaxdiisa ku laaban yihiin. Dhallinyaraduna markay firaaqo leeyihiin way soo booqdaan si ay uga biirsadaan xigmadda iyo murtida uu hayo, kol hadduu da'yahayna guddiyada garta qaada laguma daro oo hantaaqdaa loo diidayaa, haddii laga maarmi waayana reerkiisaa loogu tagaa, afar (4) qodob oo keli ah unbaa loola tagaa, kuwaas oo kala ah:

1. Way naga murugtay.
2. Waan isku mari waynay.
3. Nala maaroodi.
4. Uu kugu martay.

1. Way naga murugtay : waxay ka dhigan tahay, gartii aan qaadaynay amma arrinkii aan wadnay waxaan ku goynno iyo wax qodob ah oon ku xukunno ayaan weynay ee bal nala eeg.
2. Waan isku mari waynay : waxay ka dhigan tahay, haddii aan guddidii nahay arrinkii naloo diray waan isku diidnay oo meel adag baan isla gaadhnay ee nala eeg.
3. Nala maroodi : waxay ka dhigan tahay arrinkii iyo gartii na loo diray meel bay ka maroortaa, dhinacyo badanna waan u rognay waanse sixi waynay ee nala eeg.
4. Uu kugu martay : waxay ka dhigan tahay, ninkii hebel, hebel baa yidhi, tolkayow gartayda odaygii jiifaaga ahaa ee hebel, hebel ha la iigu geeyo, ee nala eeg.

Afartaa qodob oo keli ah un baa Jiifaaga loola tagaa.



# Dhegaleyda Xeer-ka-boodka

Xeerku waa xadhigga ummadda isku xidha ee xidhiidhiya. Waa ilaaliyaha bulshada madax iyo mijo. Ninna kama qoor dheeraan karo oo *"Aniga ima qabto"* ma odhan karo. Waa nabadda gogosheeda xeerku, oo waa waxa aad meel walba ku seexan karto meel Alla meesha aad doonto, waana dallad kuu hadheysa oo kala hagta ummadda. Haddaba ninka uu xeerku soo dhaadhiciyo oo ma aqaan yidhaa, waxaa lagu tilmaama *"Xeer-ka-bood"*. Wadajir baa loogu dhaqaaqi gacan kulul baana wax lagaga qaban.

Waxaa kaloo la mid ah ninka la yidhaa *"Jidgooye"* amma la yidhaa *"Qaaddaca-Dariiq"*. Kaana wadajir baa loogu dhaqaaqi gacan kulul baana wax lagaga qaban. Waxaa kaloo Xeer-ka-bood ah ninka wax laga bi'iyo ee wax ha laga dhaco amma wax ha laga dilee yidhaahda xoog baan ku doonan, isagana wadajir baa loogu dhaqaaqi oo gacan kulul baa wax lagaga qaban. Waayo wixiisii oo uu xeer u hayo ayuu xumaan ku doontay, kolkaa ma tixgalin xeerka. Ragga iyaguna yidhaahda *"Xeer-ma-doono"* amma iska qabweyneeya waxaa lagu qaadaa dhegaleyda, Xeer-ka-boodka. Oo waa sida loo yidhi :

> Xeerku nin walba oo sarreeyaba isagaa ka sarreeya.

# Dhegaleyda Laba-Kitaablaha

Laba kitaabluhu waa ninka diintii uu haystay maahine tu kalana qaata, oo labadaba ku dhaqma. Ninku hadduu diinta ka baxo oo uu gaaloobo cidina wax uma dhinto, hasayeeshee waxaa la ogaanayaa inuusan bulshada la diin ahayn oo keliya. Waayo wixii diinta saameeya uun buuna shaqo ku lahayn.

Laakiin wuxuu xeerku diiday ninka labada diimood ku dhaqma oo la helo isagoo labadaba ka mid ah, xeerku wuxuu saaray ciqaab weyn, oo loo dhan yahay bulshaduna weheshan mayso ninkaa oo waa laga saarayaa ummadda, waayo waa la arkay isagoo labadaba ku dhaqmaya, arrintaasi horayna way u dhacday, gacan kululbaana wax lagaga qabtay, laakiin ninka mid uun haysta midday doonto ha ahaatee xeerku waxba uma dhimo.

Waxaan tusaale u soo qaadanaynaa nin beri hore laba-kitaablenimo lagu heley oo la dilay.

Waxa la yidhi, nin Ciisa ah baa beri lagu helay inuu laba-kitaable yahay. Ninkaa markii la ogaaday inuu munaafaq yahay ayaa odayo Ciisa ahi ku dacwoodeen tolkiis, waxayna yidhaahdeen ninkaa hebel hebel waa laba-kitaable ee Ciisaha ha laga qabto. Dabadeed tolkii ba baadhis galay waxayna soo ogaadeen inuu laba-kitaable yahay. Dabadeed intoo garba-duub loo xidhay ayaa wadajir dhagax loogu dilay oo la qalweeyey. Waxay arrintaasi ka dhacday gallinka Galool-joogga. *(Ninka magaciisii wax noo sheega maannu helin.)*

Sidii oo kale, diintuu doono ha haystee xeerkaa uun buu ku dhaqmi oo lagu xukumi, waa hadduu diin keliya haysto xeerkaa uun buu hoos iman.



# Ciqaab Kulul

Wuxuu xeerku ciqaab saaray aad kulul ninka nin u taga, haddii ninkaa dambiga lagu helo waa la ciqaabi oo calaamado dab ah baa wajiga lagaga samayn. **50 halaad** oo ganaaxana waa laga qaadi oo ninkii uu u tegay baa la siin calaamadda wajiga lagaga samaynayi waa takoor ay bulshadu ku aqoonsato, degaankana kama guursan karo, ninka gabadh siiyaana waa ganaax.

# Sahan

Sahan waa afar.

1. Sahan.
2. Saqaaf.
3. Horseed.
4. Sahangaade.

## 1. Sahan

Sahan kolka la leeyahay waa sahanka dheer ee habeenno maqnaada amma kablul ku soo hoyda, oo kolkaa laga sugayo sahan jibo ah inuu keeno amma war sugan amma lagu guuri karo amma lagu nagaan karo.

Sahankaa dheer waxaa loo diraa rag lagu kalsoon yahay oo dhallinyaro ah warkooduna meel mar yahay, waa rag fahmad badan oo wax walba u fiirsada, afkoodana waxay ka ilaaliyaan erey been ahi inuu ka soo baxo, ragga sahankaa dheer loo diraa waa ragga mustaqbalka noqonaya baanaaga.

Waxaan tusaale u soo qaadanaynaa laba war oo ay keeneen rag reero u sahan tegay, midka hore waa war laga keenay meel abaar xuni ka jirto waana kan :

- Toddoba habeen baan maqnayn, oo
- Toddoba habeen baan maqnayn.
- Magan baan ahayn oo magan Ilaahay baan ahayn.
- Waan warramaynaa oo waa nabad.

- Sahan baan tagnay oo sahan wedkii galay baan tagnay.
- Wixii aan ka tagnay wax dooriya indhahayagu ma arag.
- Dhegahayaguna ma maqal.



- Dhulka siigo maahee saxar kama soo sarreeyo.
- Madheer haddii la jiido xaab kama soo qaaddo.
- Dameer laba fool lihi waxba kama soo gooyo.
- Carrab sagaaro waxba kama soo qaado.
- Mici maraar geel afka dhulka uu ka daayey.
- Geedaha saxarna ma dul yaal saxarna ma hoos yaal.
- Abaartu waa tu weyn.
- Waa oday ka wareeris.
- Garraatigay dhigaatay.
- Biyuhu waa dhiidhi, waa gimish, waa bir is-kula-guur, waa weji-dil, waa u-ab-tiris.
- Biyuhu wiyeer iyo ceel abaysin ah bay isugu tageen.
- Ceelkii beeyo la odhan jirey waa ka dhaqaaq.
- Ceelkii la odhan jirey ceeri waa ka dhaqaaq,
- Ceelkii bataax ahaa waa ka dhaqaaq.
- Gal iyo dhijaanna waa ka dhaqaaq.
- Xooluhu hadday soofayaan rukun baa hadha.
- Hadday soo hoyanayaanna rukun baa hadha.
- Hadday aroorayaan rukun baa hadha.
- Hadday fulayaan rukun baa hadha.
- Xeradana rukun baa ku hadha.
- Haadku laba neef ma wada cuno.
- Waraabe oomman iyo waraabe fullin ihiba way dhergeen.
- Gofloluhu waa sankaba ha sii deyn.
- Ido asaarixinaya iyo inan dabbaalaysa, indhahaagu ma arkaan.
- Riyo barqanaya iyo lo' barqanaysa indhahaagu ma arkaan.
- Awr dhibi leh indhahaagu ma arkaan,
- Orgi shareerada isku shaxay indhahaagu ma arkaan.
- Inan guuxaayoo waa laguu guurin gu'ugan timaha u fidhanaya indhahaagu ma arkaan.
- Inan waa lagu guursan iyo gablaa laguu tumi timaha u tidcanaysa indhahaagu ma arkaan.
- Adhi sii daa.
- Nin adhi aamminay sii daa.
- Lo'da siidaa.
- Ri'dii dudumo aan fuulayn sii daa.
- Ri'dii taws lahayd sii daa. Ri'dii geesku jabay sii daa.
- Waxartay dhashay sii daa.

- Geed dhalay iyo geed ay diirato waxay ku hadhaba, qoor-suubaan iyo shanshacaddu inay hadhay u dhoweyd.
- Dadku waa geel kulaal iyo geel quud.
- Waa nimay ka dul ololayso iyo nimay ka dul reemayso.
- Hadday geed xadhaadh daaqdo iyo hadday moroh maroor-sataba male geelbuu noqday.
- Ninkii samir xumaa welwel uu dhaafoo wajaquu ku sugnaa.
- Naagtii samir xumayd inay ceeb soo dudo iyo inay carruurta daadisay u dhaweyd.
- Abaartu taa bay ahayd.
- Waxaan aragnay waxaa buu ahaa !

- Wax jira Allaa og.
- Ilaah inaga war roon.
- Weyddiinna idinkaa iigu noqon.
- Waa nabad.
- Nabad nabadi ha dhawdo.

Warka labaadna waxaa laga keenay meel ay barwaaqo badan iyo nabadi ka jiraan waana kan :

- Saddex habeen baan maqnayn oo saddex habeen baan maqnayn.
- Magan baan ahayn oo magan Ilaahay baan ahayn.
- Marti baan ahayn oo marti Islaan baan ahayn.
- Wax na dheefiya maahee wax na dhiba Ilaah nagama hor keenin.
- Wax ay ili nacdo iyo wax ay dhegi nacdo iyo wax intiisa la dhaafshay midna ma arag.
- Roobkii rag loo sheegi jirey baan aragnay.
- Doox iyo daanba uu duufya qaaday.
- Goflale wixii yiil diga dad iyo digo duunyaba daleed iyo wax xalay la dhalay buu ka dhigay.
- Tigaaddu waa soodu-soodu.
- Biyuhu waa habac iyo habari-shubatay.
- Caanuhu waa nin iyo maalkii.
- Odaygu waa geed-u-dhac iyo gar-qaad.
- Islaantu waa daba-lul iyo dantaa-ka-sheekays.
- Inanku waa tima fidhniin iyo foodhin-afuuf.
- Inantu waa ida-dabbaal iyo agaabaysi.
- Geelu waa gooja-boob iyo gallin-ka-weer.



- Sicu waa bunnaaxis.
- Dibigu waa diifays.
- Iduhu waa isa saarixis.
- Ri'du waa dhebi-saaq iyo midhiflayn.
- Orgigu waa balooki.
- Dameertu waa farda-la-ciyaar.
- Dameerku waa danana-weyne.
- Aygu bakhti-cun maahee waa qabaal-u-buuxis.
- Dhiishu waa hogeys.
- Gorofku waa arka-eeg.
- Kodhuhu waa asal.
- Ubbadu waa siidha-ku- gur iyo saab-u-adkays.
- Gaashaan garab kuma jirin.
- Golxad laguma seexanayn.
- Waranku muskuu ku jiray.
- Barbaari ciyaar bay ahayd.
- Waxaan aragnay waxaa buu ahaa.

- Wax jira Allaa og.
- Ilaah innaga war roon.
- Wayddiin adaa iigu noqon.
- Waa nabad, nabad nabadi ha dhawdo.

Warkaa buuxa markuu ninku dhammeeyo odayadii warka ka gurayey mid ka mid ah baa u duceeyey wuxuuna yidhaa :

- Warrantaye waynow.
- Wiil jira noqo.
- Cirro maahee cadaabkii la'aw.
- Wiilkaaga wiilkiisu kuu xiir.
- Nimcaddana Alla ha noo siyaadiyo.
- Aamiin !

2. Saqaaf

Saqaaf, waa sahan gaaban oo soo indho indheeya dhulka aan sidaa u fogeyn baad iyo biyaba.

3. Horseed

Horseed, waa nin kolka reer guurayo laga sii horreysiiyo oo u sii arka guri ood leh oo reerka lagu oodo amma meel dharaarin leh amma sabad wanaag leh, meelaha reerka la furayo baa kala qormi wanaagsan amma kala dabacsan amma duleed muuqda leh.

4. Sahan-gaade

Sahan-gaade, kolka la leeyahay ninba waxa uu la joogay ammaba wixii loo diray nin ka daba taga oo gaada ninkii oon ogeyn ka dul dhaca oo ku yidhaahda war ma sidan baad wax ula joogtaa oo sidan baad hawl u waddaa, waa kormeere xogogaal ah, nin walba wuxuu garan in laga daba imanayo oo si fiican buu hawshiisa u qaban, ninkaa baa la yidhaa Sahan-gaade ee hawlaha ka daba taga.



# Dhegalayda Nabad Xidhka

Marka labo qabiil oo ay colaadi in badan u dhaxaysay la rabo in nabadi dhex marto, sidee la yeelaa ?

Marka u horreysa, labadii qolo ee islaynaysay qolo ka mid ah ayaa diraya dumar waa weyn oo dhalmo days ah. Durmarkaa marka la dirayo waxaa loo dhiibi maro cad iyo caleemo qoyan, maradaa caddi waxay calaamad u tahay nabadda waxayna ula tagayaan duulkii loo ergeeyay.

Duulkaasina wuxuu ku soo darayaa dumar aan dhalooya ahayn.

Labadii dumar ayaa loo subkayaa, subagna loo soo dhiibayaa si wada jir ah mara kale oo cadna waa loo soo dhibayaa. Waxayna ku soo hoyanayaan duulkii kolkii hore diray.

Sidaana waxaa lagu ogaanayaa in nabaddii raalli laga yahay. Rag la iskuma dirayo, waayo colaad hore baa ka dhaxeysay. Sidaa aawadeed ayaa dumar waaweyn oo guur iyo boojimo midna galayn loo diraa, sidaa baa loogu hubiyaa raalida nabadda laga yahay.

Kolkaa dabadeed waxaa la isku dirayaa odayaal ergo ah, oo nabad-doonno ah, waxayna go'aaminayaan meel labada duul u dhaxaysa. Halkaa bay labadii duul iskugu imanayaan, iyagoo sahaydoodii wata.

Kolkaa dabadeed geed qoyan oo la gamuumay ayaa meel la xaadhay oo nadiif ah lagu turqi, laguna masaxi. Waxaana la yidhaa irbi qorigaa meesha lagu turqay.

Labadii maro ee nabadda oo la isku tolay ayaa lagu dul gogli irbida halkii lagaga turqay dhulka, gogoshaa dusheeda waxaa si wada jir ah u fadhiisanaya lix nin oo labadii duul ka tirsan oo saddexba dhan ka socdaan.

Dabadeed waa la ducaystaa waxana lagu Alla baryaa sidan soo socota.

Ceel nabada Ilaahow nagu aroori
Carro nabada Ilaahow nagu noolee
Cirka iyo dhulkaba Ilaahow naga gargaar.

Marka maradii caddayd ee nabadda la goglo ee lagu dul fadhiisto, ayaa haddana mar labaad la duceeyaa. Cidda halkaa fadhida ninka curadka u ah baa goor kasta duceeya, wuxuuna ku bilaabaa :

Cirkow roob.
Dhulkoow rays.
Ilaahow biqilka iyo baraarkaba noo beer.

Ilaayhow nabad baahsan ah,
Oo sida rayska u duxda,
Oo sida roobka u da'da,
Oo badhidii idaha oon saxashadii lahayn ah,
Oo kuruskii geela oon kulaylkii lahayn ah,
Oo qurjuc malaba iyo qudhqudha caanood ah,
Ilaahow na sii.

Ilaahow dadka inta dhuuxa leh
Iyo inta dhiigga leh,
Uurka iyo oogadaba,
Ilaahow nabad gelyo u geli.

Ilaahow xoolahana sararta caddiin u geli.
Jidhkana Ilaahow caafimaad u geli.
Candhadana Ilaahow caano u geli.
Nabad degdeg ah Ilaahow na sii!
Amiin !



- Intaanan u gelin dhegaleyda nabadxidhka waxaan is weyddiinaynaa, nabadda yaa xidha, yaase laga xidhaa, nabadduse maxay tahay ?

Waxa nabadda laga xidhaa oo madasha nabadxidhka loo fadhiyo iman karin, aabbana ka noqon karin waa :

- Ninkii wax dilay,
- Kii wax boobay,
- Kii dhiirigelinayey colaadda,
- Kii dabka shidayey,
- Kii dadka isku dirayey,
- Kii maxasta laayey iyo
- Guud ahaan ninkii gacan ku dhiigle ah.

Waxa nabadda xidha aabbana ka noqda ninkii intaaba ka fayow. Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa :

Oday dhiig ka tallaabsaday dhabar ma noqdo.

Nabaddu waa go'a wada huwado, nabaddu waa saanta lagu wada seexanayo, nabaddu waa barkiga la wada barkanayo bay odayadu yidhaahdeen, murti kale oon odayo ka soo gaadhnay waxay tidhi :

"War hooy waxa jirta hal la wada maaloo,
Ninba diidin oo goor walba godol ah,
Waa nabaddaa la yidhi."

"Geed hadh weyn oo dadkoo dhan wada gaadhaa jira,
Oo waa nabadda la yidhi."

"Ceel biyihiisa la wada cabbaa jira,
Oo waa nabaddaa la yidhi."

"Waxa jirta gogol lagu wada seexdo
Oo dadka oo dhan gaadha,
Waa nabaddaa la yidhi."

Gabayaagii la odhan jiray Xaaji Gabay-Xaddi *(Isaaq Toljecle)*, Allaha u naxariistee waa kii lahaa:

Saw nabadi surinkaad martaba, sabab qarsoon maaha.
Saw nabadi sahaydaada ood, sidatid uun maaha.

Waxa kale oo la yidhi :

Nabaddu nin way waraabisaa, ninna way wareentaa.

- Ninka ay waraabisaa waa ninka ku dadaala ee xajinteeda adkeeya.
- Ninka ay wareentaana waa ninka colaadda iyo fidmada kiciya oo ugu dambaynta gacan dad buu ku dhintaa.

Waxa kale oo Soomaalidu ku maahmaahdaa :

Ninkii nabadda diidaa, durraanteena mooyaan.

Waxa kale oo nabaddu inay macaan tahay innoo tilmaamaysa heesta uu Jaamac Muuse tiriyey 1994[kii] wuxuna yidhi :

Nabad iyo naq roobaad,
Jannadii Naciimey,
Naas qudha wadaagaan,
Naartiyo colaadduna,
Waa nabarro kululoo,
Naflahay u daran tahay.

Aan u soo noqonno nabadxidhkiiye. Waxaa hortaba la siinayaa raggii gogosha ku fadhiyey gorof caano ah wayna kakabanayaan, intaa dabadeed lixdii nin baa isa saamaxaysa oo is dhaarsanaysa, wax dhaqankooda iyo diintooda ah ayey hadyad ahaan isu siinayaan : kutub, weysooyin iyo masallooyin. Dhaartana hadday kala diin yihiin ninba diintiisa uun baa lagu dhaarin.

Dhinac walba waxa uu gawracayaa sumal iyo sabeen. Intoo badhyaha laga gooyo ayaa la shiilayaa, weel ayaa lagu shubayaa waxana loo dhiibayaa 2 nin oo labadii duul ka tirsan. Waxayna ula tagayaan oo ay siinayaan 6 dii nin ee ku fadhiyey go'a nabadda. Lixdaa nin si wadajir ah ayey u qabanayaan subaggaa.

Dabadeed odayaashii nabaddoonnada, ayaa la kabinayaa dhan walba 3 nin oo dhallin yaro ah ayaa la kabinayaa. Taasi waa dhaarta **Sumal iyo Sabeen** la yidhaa. Subagga la kabanayo wuxuu ka dhigan yahay ciddii nabaddaa jebisa sun ha ku noqdo. Markaa baa la odhanayaa *"Guntatay"*. Waxay ka dhigan tahay, guddoonsannay.



Odayaashii meesha fadhiyay kolba duul baa la casuumaya iyagoo wada jira. Rag baa la dirayaa oo olole waxaynaya. Degaankii oo dhan bay gaadhsiinayaan in ay nabadi dhalatay. Waxayna odhanayaan iyagoo ku dhawaaqaya :

"Wacad jabiyow jab baa la yidhi ee ha inna jebinina."

Kolkaa dabadeed duulka nabaddaa jabiya isagaa jaba sida u calaamada ah. Kolka ay nabaddaasi dhammaato ayaa loo bixiyaa magac. Oday walba wuxuu innamadiisa ku waaniyaa inaanay irbidaa jabin.

## Tusaale

Waxaan tusaale gaaban ka soo qaadanaynnaa nabaddii ballaadhnayd ee Ciisaha iyo Gadabuursiga dhex martay, gabagabaheedii iyo sidii ay kula baxday magaca *"Baarrax"*.

Muddo badan markii loo fadhiyey nabad sidii loo xidhi lahaa ee ay odayadu dhinac walba ka rogeen ee labada qoloba is calool xaadheen oo qalbiga iyo calooshaba si daacad ah nabad loo doonay, in la is dhaarsado keli ah ay dhiman tahay ayaa waxa geeraar gaaban mariyey nin ka tirsan dhinaca Gadabuursiga oo lagu magacaabi jiray *Daa'uud*.

Daa'uud isagoo ka araaranaya Ciisaha inta ay ood wadaagta yihiin ee ay nabadda wada dhigteen maahee kuwa galbeed jira intay soo dusaan ay nabadda jabiyaan, wuxuu yidhi :

Ku qoordiidka ku coofloo
Waran caara madow baa
Caynta soo geli doono oo
Carruurtuu naga layniye
Kaana yaa celin doona ?

Intaa markuu yidhi waxa kacay oo geeraarkii ka jawaabay ninkii la odhan jiray Cumar Hadalle, wuxuuna yidhi :

Ciisihii badda hoosiyo
Baadha meel la yidhaahdiyo
Buur madow degayey
Nabad beerka ka doonyoo

Baarrax baan ka sidnaaye
Samaroonkan bu'aayow
Adna baarrax miyaa ?

Haddaynan baarrax ahaynoo
Nafta loo ballamaynin
Birtiibaa la hayaaye
Ninba beerkii ha sheegto !

Intaa markuu Cumar Hadalle yidhi ayaa dadkii shirka fadhiyey oo dhan ee labada dhinac ahaa mar keli ah wada dhawaaqeen iyagoo leh :

Baarrax,
Baarrax,
Baarrax baan leenahay.

Sidaa baana la isku dhaarsaday nabaddiina lagu xidhay, magaceeduna sidaa buu ku baxay.



# Af Baa Billaawe Baxsha

Xeerku wuxuu mamnuucay in Ciisaha dhexdiisa la isku tiriyo gabayo isku dir, cay iyo xumaan sheeg ah, waxana la aaminsan yahay in gabayaagu laba qabiil amma laba qoysba isku diri karo, sidaana colaadi ku dhalato oo nabaddii geed dheer ku laalanto waana wax in badan loo soo joogay, waxna laga arkay sidaa baa loo yidhi :

"Af baa billaawe baxsha."

- Haddaba ninka duul kale amma qolo kale gabay cay ah u tiriya xukunkiisu waa **12 halaad.**

Waxaan soo qaadanaynaa dhacdo hore oo nin qolo kale u gabyey iyo nin qabiilkii kale ka tirsan oo u soo jawaabay lagu xukumay midkiiba 12 halaad.

Nin magiciisa la odhan jiray Xasan Guray, qoladiisuna ahayd Yoonis Muuse oo Reer-Kuul ah, ayaa wuxuu arkay isagoo jooga meel dix ah oo lagu soo wada arooray geel ay horay yarad ugu bixiyeen oo ay siiyeen qolada la yidhaa Walaaldoon oo Reer Biinle ah oo summaddii geelu lahaa dhegaha laga tirtiray.

Waxa jira wax *Dacallo* la yidhaa oo geelu dhegaha ku leeyahay oo summad u ah. Geela yaradka loo bixiyana waxa xeer ah inaan summadda laga tirtirin. Xasan Guray geelaa summaddii laga bi'iyey aad buu uga cadhooday, gabay buuna u tiriyey qoladii sidaa yeeshay. Wuuuna yidhi :

Guulle e gabdhaha Biinle Cali, weyga Garanuuge,
Wayga gabooyoo ma tago, geel ay hadhiyaane,
Oo gaanaha iiga roon, gogol dhiggoodaaye,
Waxa go'a xiniinyaha ninkii, geel ka bixiyaaye,
Gablan ha iga dilo gabannaday, guri lahaayeene.

Xasan Gurey markuu intaa yidhi waxa u jawaabay nin la odhan jirey Axmed oo Walaaldoon ahaa, nasiib darro gabaygiisi waxba nagama soo gaadhin aad baanan uga xunnahay.

Gabayadaa markii la maqlay waxa kacday xiisad, waxana arrintii soo dhex galay odayadii gallinka, waxana loo saaray guddi oo fadhiistay geedka Waaruf. Labadii qoloba ku xukuntay min **12 halaad** mid walba.

Guddidaa xukunka ridday waxa laga xasuusan yahay odayadii ku jiray, odaygii caanka ahaa ee la odhan jirey Xareed Geelle.

Xilliga ay arrintani dhacday waxay ku beegan tahay 1930 meeyihii.

Xeerku sidaa buu uga hor tagey, gabayada fidnadda kicinaya.



## Dhegelayda Laba-Dublaha iyo Qalnaynta

***Laba duble xeerkiisu waa dil.***

**Lab-duble**, waa ninka u warrama una sheekeeya duul aad is bir gaydiin oo colaadi idinka dhaxayso, isagoo idinka tirsan haddana sirtaada cadawga u geeya oo loo yaqaanno Basaas amma Jaajuus.

Kaasoo halka aad haluko ku leedahay cadowga u soo tilmaama sidaana u yeelaya isagoo buus qaatay oo cadowgaagii gacan saar la leh. Ninkaa ayaa la yidhaa Laba-duble, ninkaa marka lagu helo dembigaa basaasnimada, tolkii ayaa guurtida la horkeenaa.

Qof qudha kuma dhagaroobine, dadka iyo dalka ayuu ku dhagaroobay ayaa la isla go'aamiyaa.

Buur dhagax badan leh intoo la geeyo ayaa la xidhxidhaa, waxaa lagu xukumaa iney ummaddu wada jir u disho.

Waxaa ummad ah ee meeshaa isugu yimaadda ayaa dhagax la dhaca oo dhagax ku qariya. Waxay noqotaa meeshaasi xabaal-maguur. Weyna dhacday dad sidaa loo xukumay oo ilaa iyo iminka ay xabaal maguurtadoodii jirto. Waagaasi waa waagii uu hubku ahaa, seef, waran iyo gaashaan.

Wuxuu xeerkuba u dhigay inayna sii fidin taasoo kale, cidna uma doodi jirin ninkaasoo kale waayo wuxuu ka darnaa ninkaasi cadowga aad is laynaysiin. Laakiin hortaba waxa shardi ah inay qayliyaan qoyska uu ka dhashay oo odhanaya nala qabta waa magac-dile e. Markaabay ummadda kalina la qabanayaan. **Laba-duble dil buu xeerku u dhigay.**

Waxa kale oo **xeerkiisu dil** yahay :

- Ninka ummadda oo dhan cabsida ku abuura,
- Ninka dadka laaya,
- Ninka dhagarta badan soo hooya.

Ninkaa reerkii uu ka dhashay markuu mag iyo boqol badan u soo hooyo ayey tashadaan oo waxaa la is weyddiiyaa dhibaatada uu ummadda ku hayo iyo ilaa hadda khasaaraha uu keenay.

Intaa marka la isla garto ayaa la yidhaa : "*Balaayada u soo wado aan ka hortagno*". Dabadeed waxa loo soocaa rag soo qabta amma soo dila. Ninka caynka ah marka la dilayo waxa nabarka u horreeya ku dhifta ninka xigtadiisa ugu dhaw, intaa ka dib ummadda halkaa joogta baa dhagaxaan la dhaca ilaa naftu ka baxayso, markaa baa la yidhaa :

"Ninkii hebel waa la Qalweeyey."

Raggii sidaa lagu qalweeyey inta la xasuusan yahay waa shan nin.

1. Ninka u horreeyey ee la qalweeyey inta la xasuusan yahay wuxuu ahaa Walaaldoon. Waxaana lagu dilay amma lagu qalweeyey meesha la yidhaa Qalloocad oo u dhaxaysa Biyo qaboobe iyo Hadhagaala oo ka tirsan gobolka Shinniile ee ismaamuka deegaanka Soomaalida Itoobiya
2. Ninka labaad ee laqalweeyey wuxuu ahaa Yoonis Muuse, Reer Kuul. Waxaa lagu dilay Cadaadlay oo Laas-Xadhaadh (gobolka Shinniile) dhinaca Koonfureed ka xigta.

Labadaa nin xilligii la dilay iyo taariikhdii ay ahayd iyo dhibaatadii ay geysteen wax noo sheega ma arag. Waxaase la isku wada raacsan yahay in wadajir loo Qalweeyey.

3. Ninka saddexaad ee la Qalweeyey wuxu ahaa ninka la odhan jirey Cusmaan Rooble Dharaar oo lagu naanaysi jirey "*Baladoon*". Wuxuu ahaa Fuurlabe, Reer-Geesaale. Ninkaa Baladoon wuxuu dilay sagaal qof oo aan waxba galabsan, dad kale oo badanna wuu dhaawacay. Waxaa kale oo uu halis geliyey nabad gelyadii, dhaarna wuxuu ku maray inuu wixii ka soo hor baxaba dili doono. Taariikhda ay dhacdadani ahayd waa bilawgii 1900 siddeetameeyadii.



Khasaaraha uu ninkaasi soo hooyey culays weyn bay ku noqotay reerkii uu ka dhashay waayo waa 9 sagaal qof magtoodii waxa laga rabo iyo intii uu dhaawacay mawlaxadoodii.

Reerkii magta laga doonayey waxay shiriyeen laba iyo tobankii aqal ee Ciisaha, waxayna ka codsadeen in culayska hadda wax laga la qabto. Ciisihii oo uu guddominayo Ugaas Xasan Xirsi ayaa isla gartay in magta lala bixiyo Fuurlabaha, sidaa baana magtii sagaalka qof Ciise oo dhammi uu bixiyey.

Intaa ka dib waxa la soocay rag *Baladoon* xigtadiisa ah oo soo qabta. Ugu dambayntiina waa la qabtay oo waxaa lagu qalweeyey meel u dhaw tuulada Harawa (gobolka Shinniile).

4. Ninka afaraad waxa lagu naanaysi jiray "*Baarashuud*". Wuxuu ahaa Yoonis Muuse, Reer Kuul. Ninkani wuxu dilay afar qof oo aan waxba galabsan,dhaarna wuxu ku maray rag kale oo reerkooda ah oo weliba magac leh inuu dili doono.
   *Baarashuud* wuxu ahaa nin halis ah oo socod badan oo aan daalin, maanta haddii Diri-Dhaba lagu sheego berri waa Dikhil iyo Jabuuti, waxa lagu sheegaa.
   Xilliga ay dhacdadani ahayd waa bilowgii 1900 iyo sagaashameeyadii.

Inkastoo uu ummaddii jiif iyo joogba u diiday, ugu dambayntii dabin loo dhigay buu ku dhacay, waxaana lagu qalweeyey meesha la yidhaa Tooma, gobolka Shinniile, ee Dirir-dhaba u dhaw.

5. Ninka shanaad ee la qalweeyey inta la xasuusan yahay waxa la odhan jiray Kaahiye Cali Buux, Mamaasan, Reer Cigaal.
   Ninkani wuxuu dilay nin ay walaalo ahaayeen oo ka yaraa lana odhan jiray Gorod Cali Buux.
   Xilligii uu dilkani dhacay waxa qiyaastii laga joogaa 80 sannadood. Sababta uu ku dilayna waxay ahayd baa la yidhi, Gorod oo ka magac dheera kana fariidsanaa. Waa cayn hinaase oo kale wuxuu ku dilay.

Raggii dhacdadan soo weriyey waxay sheegeen markii uu ninkaasi fool-xumadaa geystay ayaa xigtadiisii shir u fadhiisteen waxayna go'aamiyeen in wadajir loo qalweeyo.

Go'aankaa kadib rag baa la soocay oo soo qabtay waxana wadajir loogu qalweeyey meel ka tirsan Gallinka, Orrax Joogga, oo ka tirsan Gobolka Awdal.

Haddaba markaan u fiirsanno ficilladaa foosha xun ee raggaasi ku kaceen, su'aal ayaa innoo soo baxaysa ah. Waa maxay sababta ay u laayeen dad aan waxba galabsan ?

Garaadkeenna iyo fikirkeenna markaan la kaashanno waxa inno soo baxaya inay wax tabanayeen, jawaabtuse waa wax kastaba ha tawdeen qiil kastana ha u raadiyeene waxa tabashadoodii bi'iyey markay jabiyeen qodobkii ahaa :

"Waxaad geed ku helaysid geeddan ha ku doonan."

Waxa kale oo tabashadoodii hal bacaad lagu lisay ka yeelay dhiigga ay daadiyeen waxana loo cuskaday qodobka ah :

"Dhiig hadduu yimid dhabdarro hadhay."

Waxa kale oon soo qaadanaynaa nin kale oo la doonayey in la qalweeyo laakiin ka badbaaday. Xilli fog oo haatan laga joogo qiyaastii boqol iyo konton sannadood ayaa nin la odhan jiray Maygaag Samatar, Yoonis Muuse, Reer-Kuul. Wuxuu noqday budhcad qawla ah oo xoolaha ummadda booba oo qasha, waxa kale oo la sheegey inuu ninkaasi dumarna kufsaday.

Dabadeed tolkii baa tashaday waxayna isla garteen in la soo qabto isla markaana la qalweeyo. Rag baa la soocay ilaaladaa la dirtay si gaadma ah baa loo qabtay, waxana la keenay meel fagaara ah oo god weyn laga qoday waxayna tolkii isugu yeedheen Ciise badan, waxay ka codsadeen in lala qalweeyo.

Halkaa markay marayso, Ciisihii meeshaa isugu yimid baa arrin soo jeediyey oo yidhi :

- *"Ninkan aad noogu yeedheen ee aad nala qalweeya tidhaahdeen, waa ninkii Maygaag Samatar. Waa ninkii qawlaha noqday ee ummadda dhibay oo waan wada garanaynaa.*
  *Hasa yeeshee, imika ka hor wax tarkiisii waan wada ognahay iyo sidii uu gaashaanka ugu daruuri jiray marka cadawgu soo weeraro Ciisaha, berri haddii cadaw na soo daandaansadana waa nin wax inna tari doona ee tolkayoy waan niga qabsannaye maanta sidaa ha loogu naxariisto."*



Hadal iyo dhammmaan sidii baa loogu dhaafay Maygaag Samatar.

Xilligaa wixii ka dambeeyeyna budhcadnimadii uu ka baxay gabadhna waa loo dhisay. Muddo kadib ayaa cadow soo weeraray Ciisaha oo ay ka dheceen Geel. Maygaag iyo rag uu hoggaaminayo ayaa geelii kadaba duulay oo si ragannimo ku jirto u soo dhiciyey, markaasuu geeraaray Maygaag oo wuxuu yidhi :

Xabaashii qaraweynee
Hadba la i qardhigaayey
Haddii la igu qabsiiyo
Yaa qalaadi lahaayoo
Soo qaarqaarin lahaayoo
Qaalmo keeni lahaa.

## Cutubka Lixaad

# Xeerka Dhaqanka (Ugaaska)

# Hordhac

Markii aan dhammeeyey buuggan xeerka waxa ku soo beegmay arrin taariikhi ah oo aan soo marin dadka Ciisaha muddo 81 sannadood ah. Arrintaasi fursad dahabi ah bay ii noqotay oo aan si dhayal ah igu dhaafin.Arrintaas oo ah geeddi socodkii qabashada Ugaaska19aad ee Ciisaha oo loo fadhiistay Waaruf, 11kii Abril 2009kii, halkaas oo la fadhiyey muddo aan ka yarayn 7 bilood. Qabanqaabadii qabashada Ugaaska dad badan baa ka qayb qaatay. Dadkaas oo kala joogay meelo kala geddisan. Waxa jiray guddiyo laga kala sameeyey Jabuuti iyo Diridhaba. Guddiyadaa oo muddo kooban ku dejiyey qoorshihii lagu hawl geli lahaa isla markaana soo ururiyey dhaqaalihii hawsha.

Haddaba rag madax ah oo ka mid ah guddidii qabanqaabada ee Jabuuti iyo golaha radiyooga iyo telefishanka Jabuuti ee RTD oo aan ka tirsanahay ayaa ii suura geliyey inaan goobjoog u noqdo qabashada iyo caleemasaarka Ugaaska19aad ee Ciisaha waana Ilaahay mahaddii. Goobjoognimadii iyo hawshii aan halkaa ka hayey daraaddeed baan ku hantay in aan taako taako ula socdo qabashadii iyo caleemasaarkii Ugaaska19aad oo socotay muddo sannad ah.

Ka hor intii aanay odayadu u fadhiisan Waaruf qabashada Ugaaska, wax kooban baa laga hayey amma laga qoray xeerka iyo siyaabaha loo qabto Boqorka.Waxa jirtay cajalad laga qabtay Allaha u naxariistee Ugaas Xasan Xirsi oo ka warramaysa mawduucan oo markii dambana qoraal loo rogay oo aan ka helay Cabdi Jibriil Boobakir guddoomiyihii hore ee Ismaamulka Soomaalida Itoobiya.Waxa kale oo jiray qoraal ay wadajir u soo ururiyeen Dr. Cali Muuse Ciye iyo Cumar Macallin *(Cumar-Kuul)*. Macluumaadyadaa qoraalladu xambaarsanaayeen aad iyo aad bay u koobnaayeen marka loo eego waxa Waaruf ka soo baxay. Sidaa daraaddeed in badan oo aan ka mid ahaa baa welwel ka qabay in la waayo odayo wada haya xeerkii iyo caadooyinkii Ugaas-qabashada

iyo caleemasaarka. Hasayeeshee welwelkii wuu beenoobay markii ay Waaruf ku soo urureen ruugcaddaayo xeerka qabashada Ugaaska qodob-qodob u haya oo aan hal dhegaley halmaamin. Waa Ilaahay mahaddii.

Haddaba bilawgii qabanqaabada laga soo ambaqaaday magaalada Diridhaba tan iyo caleemasaarkii Saylac, geeddi-socodkii hawsha la soo maray ayaan ku soo koobi qaybtan qabashada Ugaaska19[aad].



# Xeerka Qabashada Ugaaska

Ugu horrayn sidii caadada u ahayd Ciisaha, waxa la isweydiiyey, maxay ahaan jirtay ? Sidaa daraaddeed odayadii Waaruf fadhiistay waxay raaceen xeerkii ay odayo hore dhigeen. Xeerkaa odayadu ay dhigeen berigaa guud ahaan waxay u qaybiyeen 6 cutub oo ay iyagu u bixiyeen amma ku magacaabeen 6 Kabood oo kala ah :

1. Kabta dhiigga
2. Kabta dhaqaaqasha
3. Kabta dheer
4. Kabta dhaqanka (Kab Ugaas)
5. Kabta dhiblaha
6. Kabta dhulka.

Qabashada iyo bokhridda Ugaaska cusub waxa loo eegay Kab Ugaas. Xeerka qodobbada ku jira waxa ka mid ah :

- Marka Ugaas xijaabto kaalintiisii waxa sii buuxsha 12 oday oo ka kooban 12ka aqal ee Ciise inta la qabanayo Ugaas cusub.
- 144 oday oo ka kooban 12ka aqal ee Ciise waa inay fadhiistaan goobta la yidhaa Waaruf si ay uga shiraan soo qabashada Ugaaska cusub. 144kaa oday waa in laga soo dhex xulaa 44 oday oo noqda Gande-Ugaas iyo 100 guddi ah.
- Waaruf waa in ugu yaraan la fadhiyo 4 bilood iyo 10 maalmood.
- Ugaasnimada Ciisuhu dhaxal maaha, hasayeeshee waxa dhaxal u leh Wardiiq, Reer Xasan ah.

### Shuruudaha qofka noqonaya Ugaas

1. Waa inuu ka dhasho Wardiiq reer Xasan ah.
2. Waa in hooyadiina Ciise tahay.
3. Waa in hooyadii bilcan tahay (Gabadhnimo lagu guursaday).
4. Waa inuu dhawr iyo toban jir yahay.

5. Waa inuu dhagar gelin duullaanna ka qayb qaadan.
6. Waa inuu dumaal ahayn.
7. Waa inuu wax iin ah lahayn, iin marka la leeyahay waxa laga eegayaa :
   a. Inuu il la'yahay;
   b. Inuu dhego la'yahay;
   c. Inuu gacan la'yahay;
   d. Inuu lug la'yahay;
   e. Inuu carrab la'yahay;
   f. Inuu ilig la'yahay;
   g. Inuu dakhar leeyahay, intaa oo dhan waa inuu ka fayaw yahay;
   h. Waa inuu qof qurux u dhashay ahaado.

**Dhaqaalaha Ugaas**

- Dhaqaalaha ku baxaya Ugaas-qabashada waa in Ciise oo dhan laga soo ururuyaa.
- Ugaas marka la bokhro xoolaha u gaarka ah ee uu yeelanayo waa in Ciise oo dhan laga soo ururiyo Nayshii Ugaaska, qodobbadaas iyo qaar kale ayaa ka mid ah Kab-Ugaas.

Kor waxaan ku soo sheegay qodob sheegaya in Ugaaska laga soo qabto Reer Xasan. Reer Xasan waxay degaan Mille iyo hareereheeda oo ka mid ah dhulka lagu tilmaamo caloosha Ciisaha. Waa dhul geelu ku tarmo oo inta badan uu ka baxo geedka Cadaygu. 18 kii Ugaas ee hore dhammaantood deegaankaa baa laga soo qabtay. Geela Reer Xasanka iyo guud ahaan xoolaha ay dhaqdaan si gaar ah baa indhaha loogu hayaa,waxa laga ilaaliyaa inay soo galaan xoolo boojima ah (xoolo la soo dhacay). Wax kale daayoo geela Reer Xasan laguma daro baarqab boojimo ah amma aan dirkiisa la aqoon. Xoolaha Reer Xasan sababta xaaraanta looga ilaalinayo ujeeddadeedu waa in qofka Ugaas noqon doonaa ahaado qof xalaal ku soo koray.



# Awoodda Ugaaska

Awoodda Ugaasku leeyahay xeerka ayaa xaddiday oo qodob odhanayaa jira : "Ugaasku uu guddoomiyaa ee ma gooyo". Waxa kale oo ay odayadu yidhaahdiin : "Ugaasku waa duceeye" iyo qodobbo kale.

Dhinaca go'aan qaadashada waxa xeerku siiyey guddiyada iyo Gandaha Ciisaha u taliya. Go'aammada ay kuwaasi gaadhaan ayuu Ugaasku ku duceeyaa,waxase Ugaaska loo oggol yahay inuu malihiisa ku darsado. Ugaas Xasan Xirsi, ugaaskii kan ka horreeyey, marka ay dawladi arrin Ciisaha ku saabsan uga baahato, odayo guddi ah buu kaxaysan jirey amma uu ka war gelin jirey si ay uga tashadaan arrimaha soo kordhay, go'aanka ay gaadhaan buuna ku dhaqmi jirey. Intaas aan soo sheegay oo dhan baan filayaa inay wax innooga ifiyeen sababta Ciisuhu u doortaan Ugaas da' yar. Haddaan sii caddeeyno, Ciisuhu waxay rabaan :

1. Ugaas aan dembi gelin oo xalaal ku soo koray oo ducadiisa Ilaahay ajiibo.
2. Ugaas da'yar, cid dayn u sheeganaysaa ma jirto.
3. Ugaas da'yar, cid uu godob ka galay oo caloolxumo u haysaa ma jirto, sidaa daraaddeed waa qof raalli laga wada yahay.

Si aynnu u ogaanno halka uu ugaasku kaga jiro dhaqaanka Ciisaha, waxaan soo qaadanaynaa dhegeley ku jirta xeerka Ciisaha oo odhanaysa sidan.

Ciise saddex baa dhex u ah
1- Xeerka
2- Dhulka
3- Ugaaska

Waxa kale oo jirta xigmad iyo murti ay odayadii xeerka dhigay u adeegsadeen kaalinta dhabareeda ee Ugaasku kaga jiro wadajirka iyo midnimada Ciisaha. Xigmadahaa waxa ka mid ah.

1- Ugaasku waa udub dhexaad, Ciisuhuna waa aqalkii.
2- Ugaasku waa lafdhabar.
3- Ugaasku waa duceeye.
4- Ugaasku waa aabbo.
5- Ugaasku waa geed hadh weyn.
6- Ugaasku waa duddeeye.

Xigmadahaasi waxay inna barayaan in Ugaasku yahay ka isku haya ee mideeya Ciisaha.

Waxa kale oo jira sheekooyin odayadu si murtiyeysan ugu adeegsadaan kaalinta uu boqorku kaga jiro midnimada iyo wada jirka bulshada. Waxa ka mid ah middan soo socota.
Bahalka digirinka la yidhaa ayaa beri lagu yidhi :
- *Ma boqorkaa lagaa dilaa mise boqol xubnood ?*
Wuxuu yidhi :
- *Boqorka ha iga dilinee, boqol xubnood iga dila.*
Markaasaa boqol laga dilay.

Bakaylaha ayaa isagana lagu yidhi :
- *Bakaylow ma boqorkaa lagaa dilaa mise boqol xubnood ?*
Wuxuu yidhi :
- *Boqol ha iga dilinee boqorka iga dila.*
Markaasaa boqorkii laga dilay.

Digirinku, waa boqorkaa u badbaaday waxa uu koox koox iyo wada jir ugu wada socdo.

Bakayluhuna waxa uu keli keli ugu socdo waa boqorka laga dilay.

Ugu dambayn aan soo qaadanno sidii loo doortay ugaaskii koowaad ee Ciisuhu qabsadaan oo magaciisu ahaa Ugaas Ibraahim Makaahiil Xasan oo ku magac dheeraa Ugaadh-maal iyo magacyadii 18kii Ugaas ee hore.



# Qabashada Ugaaskii Kowaad

Waxa jira dad ku dooda in Ugaas la doortay intii aan xeerba loo fadhiisan. Dooddaasi waa mid runta ka fog, waayo iyadoo anu jirin xeer heeshiis lagu yahay oo wax lagu doorto amma xeer kaa qabta qofka aad jago sare u dhiibanaysid, ma dhici karto in qof la bokhro amma madax laga dhigto. Waxa xaqiiqo ah in markii xeerka la dhammaystiray la qabtay Ugaaskii koowaad. Taa waxa marag cad u ah sida uu u buuxo qodobka Kab-Ugaas.

➢ Haddaba sidee loo qabtay Ugaaskii koowaad ?

Markii xeerka la dhammaystiray ka dib ayaa lagu tashaday in la qabsado Ugaas. Berigaa sida ay weriyaan odayadu tirada dadku aad bay u yarayd. Odayadii bilawgii u fadhiistay Ugaas qabashadii u horaysay tiradooda waxa lagu sheegay 99 oday, waxay u baahdeen inay buuxiyaan xeerka oo dhigaya boqol oday. Nin Ciisa ah oo buuxiyana way waayeen, iyagoo halkii fadhiya waxa goobtii soo maray oday u dhashay qabiilka Qaansaleyda amma Gabooya ninba siduu u yaqaan. Dabadeed odaygii bay ku soo darsadeen, shirkiina sidii buu ku bilawday.

Wiil yar oo uu dhalay Makaahiil Xasan ayaa markuu yaraa ka hallaabay amma ka ambaday qoyskoodii. Dadka qaar waxay sheegaan in wiilku iyadoo xayskii Guban ka da'ay lagu qululayo geed hoostii seexday oo lagaga tegay. Siday doontaba ha noqotee wiilkii ugaadh-la-galeen buu noqday oo muddo aan cidi sheegi karin buu la noolaa ugaadhii. Beri dambe ayaa gabadh adhi la jootaa aragtay wiil aad u da'yar oo ugaadh maalaya isla markaana caanaheeda cabbaya. Gabadhii, wiilkii ugaadha la noolaa ee ay la yaabtay ayey aabbeheed uga warrantay. Odaygii baa maalintii dambe dhallinyaro u diray si ay u soo arkaan amma u soo qabtaan markay indhaha saaraan.

Dhalliyaradii markay arkeen wiilkii ugaadha la noolaa ayey isku dayeen inay gacanta ku dhigaan hasayeeshee uu ka baxsaday oo way gaadhi waayeen. Dhawr maalmood oo kalena sidaa oo kale ayaa dhacday oo orod waa lagu gaadhi waayey. Maalintii dambe ayaa dhallinyaro fardo wadata loo diray si ay uga lib keenaan, maalintaa waa lagu guulaystay waana la qabtay. Dabadeed odayo badan baa ku soo xoomay iyagoo u fiirsanaya wiilkan ugaadha la noolaa. Ugu dambayntii waa la aqoonsaday in wiilku yahay inankii ka hallaabay Makaahiil Xasan ee Ibraahim, qoyskoodii baana lagu wareejiyey. Maalintaa dabadeed Ugaaadh-maal baa lagu naanaysay. Wiilkii oo haddeed qoyskoodii ka mida ayaa maalin maalmaha ka mida fuulay amma koray geedkii ay maalin walba ku shiri jireen odayadii u fadhiyey Ugaas-qabashada. Geedkaasi waxa uu ahaa baa la yidhi, geedka weyn ee gobka ah kuna yaal dixda caanka ah ee Habaqo. Wiilkii oo saaran geedkii ayey odayadii yimaaddeen oo ay shirkii u fadhiisteen. Intii aanay furin shirkoodii ayey odayadu ogaadeen in geedkan daruuri duljoogto. Daruurtaasi waxa ay ahayd mid dhulka kale aan jirin oo ku koobnayd geedkan oo qudha.

Odayadii yaab baa Ilaahay u keenay, hasayeeshee markay arrinkii dhinacyo badan ka eegeen u dambayn waxay isla garteen in labiyo tobanka aqal ee Ciise ee halkan fadhiyaa aqal walba mar kaco oo uu waddadaa muuqata maro si ay u tijaabiyaan qofka ay raacdo daruurtaasi. Intii goobtaa fadhiday markay dareereen qofna may raacin daruurtii oo geedkii bay iska dul joogtay. Odayadii geedkii bay ku soo noqdeen iyagoo kor eegaya,waxay ogaadeen in wiil da'yari geedka saaran yahay, dabadeed wiilkii bay ka baryeen inuu geedka ka soo dhaadhaco. Markuu soo degay bay ku yidhaahdeen adeer hilinkaa mar. Wiilkii markuu geedkii hoostiisa ka dhaqaaqayba daruurtii baa raacday oo u hadhaysay. Odayadii muddada badan shirka u fadhiyey maalintaa bay go'aan ku gaadheen in Ugaaskii ay raadinayeen yahay wiilkan yar ee mucjisadu ka muuqato ee Ibraahim Makaahiil Xasan oo lagu naanayso Ugaadh-maal. Ugaaskii koowaad ee Ciisaha sidaa baa lagu qabtay.
*(Qisadaa waxaan ka weriyey Aare Jaamac Geelle oo 78 jir ah).*

Waxa xusid mudan, Makaahiil Xasan waxa kale oo ubadkiisa ka mid ahaa labada wiil ee la kala odhan jirey Axmad iyo Yuusuf, hasayeeshee Ugaasyada oo dhan waxa laga soo qabtaa tafiirtii Ibraahim Makaahiil Xasan oo loo yaqaan Ugaadh-maal, Ugaasyadii ka dambeeyeyna waxay kala ahaayeen sidan :



1. Ibraahim Makaahiil Xasan (Ugaadh-maal)
2. Ugaas Makaahiil
3. Guuleed Ugaas
4. Caafi Guuleed
5. Cabdillaahi Caafi
6. Cali Xuseen
7. Cumar Cali
8. Guuleed Bookh
9. Geelle Xoosh
10. Rooble Guuleed
11. Xuseen Rooble
12. Faarax Guntiweyne
13. Rooble Cali
14. Rooble Faarax
15. Cabdi Rooble
16. Guuleed Rooble
17. Wacays Rooble
18. Xasan Xirsi Ciise

# Taariikh-nololeedkii Ugaas Xasan

Ugaas Xasan Xirsi Ciise, Allaha u naxariistee wuxuu geeriyooday 29$^{kii}$ Ogost 1994$^{kii}$, isagoo 66 sannadood ah boqor u ahaa qabiilka Ciisaha.

Allaha u naxariistee Ugaas Xasan Xirsi, Ugaaskii 18$^{aad}$, waxa uu ahaa boqor dadkiisa la qaybsada dhib iyo dheefba. Goor kasta oo ay dadkiisa dhibaato soo food saarto uu dhex joogayey oo meelna kamuu tegi jirin. Waxaan tusaale u soo qaadan dhacdooyin dhib badnaa oo Ciisaha soo maray intii uu boqorka ahaa. 1935$^{kii}$ isagoo markaa ku cusbaa Ugaasnimada, ayaa dawladdii Talyaanigu ku soo duushay oo ay qabsatay dalka Itoobiya. Boqorkii Itoobiya ee xilligaa, Xayla Salaase dalka uu ka baxsaday oo cagaha ayuu wax ka dayey. Waxa kale oo la sheegay in boqorradii iyo Ugaasyadii qawmiyadaha kale ee Itoobiya qaar carareen kuwo kalina duudda galeen. Hasayeeshee Ugaas Xasan dadkiisii ayuu la joogay oo geesna umuu kicin. Ugaasku Dawladdii Talyaaniga si dibloomaasiyadeed buu ula dhaqmay isagoo xeeladdiisu ahayd in sharka Faashistada laga nabad galo. Taas uu ku guulaystay oo wax dhib ahi kama soo gaadhin Ciisaha.

1939$^{kii}$ Ingiriiska ayaa ku soo duulay Talyaanigii oo Itoobiya ka saaray. Ingiriisku berigaa dhulka Soomaalidu degto oo dhan buu gacanta ku dhigay marka laga reebo Jabuuti. Sannadkaana Ugaas Xasan isagoo meelna uga bixin dalkiisa ayuu u halgamay sidii loo midayn lahaa dhulka Soomaalida oo dhan. Waxa xusid mudan shirkii taariikhda galay ee Ugaas Xasan guddoomiyey laguna qabtay magaalada Ayshaca dagaalkii labaad ee dunida kadib Shirkaa qodobbadii ka soo baxay nuxurkoodu waxay ahaayeen in aan mar kale lagu soo celin dawladdii Amxaarada iyo in dhulkooda lala mideeyo walaalahood Somaliland.



Waxa kale oo ka mid ah arrimaha lagu xasuusan doonoo Ugaas Xasan, sidii uu iskaga ilaaliyey dabinnadii uu Ugaasyada u dhigi jirey Hayle Salaase. Dabinnadaa waxa ka mid ahaa, xoolo iyo adduun uu ku bantookhin jirey dadka madaxda u ahaa qawmiyadaha Itoobiya oo dhan. Waxa kale oo uu Hayle bixin jirey darajooyin loogu deeqo dadka daacadda u ah boqortooyadiisa. Darajooyinkaa waxa ka mid ahaa min hoos ilaa sare kuwan, Baala-abbaat, Baranbaraas, Dhijaasmaaj, Qayaasmaaj, Lij, Raas, Bitiwadhadh iyo qaar kale.Waa marka horee, Ugaas Xasan wax hanti ah aqalkii uu degganaa oo keli ah buu lahaa. Waa marka xige e darajooyinkii uu Hayle bixin jirey mid hoose ayaa la siiyey oo ah Dhijaasmaaj, halka uu suldaankii Cafarta Cali Mirix uu lahaa hanti fara badan. Hantidaa waxa ka mid ahayd beeraha cutubka laga beero ee ku yaallay Hawaas iyo shirkad gaadiidka dhulka ah. Dhinaca derajedana Cali Mirix waxa uu gaadhay mid ka mid ah kuwa ugu sarreeya oo ah Bitiwadhadh.

1974$^{kii}$ markii xukunka Itoobiya uu la wareegay taliskii Shiyuuciga ahaa, wuxu cagta mariyey oo wax la dilo, wax la xidho iyo wax nafahoodii la cararay ka dhigay dadkii daacadda u ahaa boqortootadii Xayle iyo Ugaasyadii ku xidhnaa. Waxa kale oo uu la wareegay dhammaan hantidii ay lahaayeen. Milatarigii waagaa Itoobiya qabsaday niman manaxayaal ah bay ahaayeen oo intii ay dhidibbada aasanayeen waxay dhegta dhiigga u dareen kumanyaal dad ah, iyadoo dilkaasi socdo ayuu dagaalkii Somali galbeedna bilaabmay sannadkii 1976$^{kii}$. Dagaalkaasi burbur badan iyo qax ballaadhan buu u soo kordhiyey Soomaalida Itoobiya. Ugaas Xasan intii ay waxaas oo dhan dhacayeen shacabkiisa ayuu dhex joogay oo uu wax la qabay. Dagaalkii Soomaaliya soo qaaddayna waxa uu u arkayey mid aan lagala tashan dadkii Soomaaliyeed ee dhulka degganaa. Maalintii Jabuuti xornimadeeda qaadanaysay ee 27 juun 1977$^{kii}$ ayaa Ugaas Xasan la marti qaaday si uu goobjoog u ahaado maalintaa farxadda leh ee la wada sugayo.

Haddaba waxa dhacday in ay saraakiishii nabad sugidda ee Itoobiya diidaan in Ugaasku dalka ka baxo iyagoo ka cabsi qabay inuu soo noqon waayo, hasayeeshee madaxweynihii Mangistu Hayle Maaram ayaa oggolaaday in Ugaas Xasan ka qayb qaato maalinta xornimada ee Jabuuti. Kadib ka-qayb-qaadashadii calan-saarka Jabuuti ayey rag kula taliyeen in aanu dib ugu noqon magaalada Diridhaba oo xaruntiisa ahayd. Haddaba jawaabtii uu maalintaa bixiyey waxay ahayd sidan. Ummad

dhan oo aan aabbo u ahay baa i tabaysa, anoo noolna kama maqnaan karo, dhib iyo dheef wixii ay qabaanna waan la wadaagi. Sidii buu dalkii iyo ummaddii ugu noqday.

Waxa kale oo Ugaas Xasan lagu xasuusan doonaa berigii ay dhacday dawladdii milatariga ee madaxa uu ka ahaa Mangistu. Bishii May ee sannadkii 1991[kii], waxa dhacay arrin aan la filay. Haddaba berigaa siday wax u dhaceen ?

Markii furinta hore dagaalkii ka socday lagu jebiyey ciidammadii dawladda Itoobiya ee ay guulaysteen jabhaddii (I.P.R.D.F.) ayaa madaxweynihii dalka Mangistu Hayle Maariam u baxsaday, ciidammadii dawladda oo dhanna intii aan Addis Ababa la soo gelinba way kala yaacaan. Magaalada Diridhaba oo ah xarunta Ugaaska Ciisuhu waxay magaalooyinka kale ee Itoobiya la qabtay maamul la'aantii dhacday berigaa. Gobollada kale ee dalka waxa ka dhacay boob iyo dagaallo dhex maray qawmiyadaha. Hasayeeshee Ugaas Xasan oo waaya-arag ahaa ummadaha oo dhanna abboo u ahaa ayaa ku dadaalay oo u hawl galay sidii loo nabad gelin lahaa hantidii dawladda isla markaana aan wax dagaallo ahi u dhex marin qawmiyadaha wada deggan magaalada Diridhaba iyo agagaarkeeda, taas oo uu ku guulaystay magac iyo qaddarin siyaado ahna uu ku helay.

Aan intaa ku dhaafo Ugaas Xasan Xirsi iyo mahadhooyinkii uu ka tegey oo aan tusaale kooban ka soo qaadannay.



# Guyaashii Ugaas La'aanta

Sida xeerka Ciisuhu dhigayo ugaasnimadu dhaxal ma aha, hasayeeshee dhaxalka waxa leh qolo ka mid ah qabiilka Ciisaha oo la yidhaa Wardiiq gaar ahaan jilibka la yidhaa Reer-Xasan. Si loo soo qabto Ugaas cusub waxa xeer ah inay kulmaan oo ay shir u fadhiistaan odayo xeer yaqaan ah oo ka kooban 144 oday oo u qaybsama 100 guddi ah iyo 44 Gande ah. Inta la soo ururayo, inta la shirayo iyo inta Ugaas cusub la soo xulayo waxay qaadataa muddo badan.

- Haddaba isweydiintu waxay tahay, muddadaa Ugaas la'aanta lagu jiro yaa sii wada hawlihii Ugaasku qaban lahaa ?

Waxa xeer ah in kaalintii Ugaaska sii buuxiyaan 12 oday oo ka kala socda 12 aqal ee Ciisuhu ka kooban yahay. Iyadoo la buuxinayo dhegeleydaa waxa la soo magacaabay labiyo toban oday oo hawlihii Ugaaska sii wada. Odayadaa magacyadoodu waxay kala ahaayeen sidan :

1. Dubbad Muuse Habbane,
2. Cali Maxamuud Buux,
3. Daahir Bucul,
4. Cumar Khayrre Faarax,
5. Cumar Buux,
6. Cabdillaahi Axmad Xuseen,
7. Cali Aare Xareed,
8. Xasan Faarax Aadan,
9. Aadan Aare Dhabbar,
10. Bile Dharaar,
11. Casoowe Shirdoon,
12. Cabdiraxmaan Migil iyo
13. Maxamad Ugaas Xasan oo guddoomiye looga dhigay.

Guddidaa xagga dawladda waa laga sharciyeeyay xarun na waxa u ahayd aqalkii Ugaas Xasan ka hadhay.

Geeridii Ugaas Xasan ka dib si loo shiro loona soo xulo Ugaas cusub waxay Ciisaha ku qaadatay 15 sannadood. Waa muddadii ugu dheerayd ee lagu dhaco Ugaas la'aan sooyaalka Ciisaha.

- Maxaa ugu wacnaa amma keenay sannadahaa badan ee boqor la'aanta lagu jiray ?

Sababo dhawr ah oo isbarkaday oo qaarkood culus yihiin baa keenay.

1- Waa marka horee Ugaasnimada Ciisuhu dhaxal ma aha.
2- Ugaas Xasan waagii la bokhray waxa laga joogaa 81sannadood, muddada intaa le'eg waa la wada garan karaa waxa adduun is beddelay iyo dhibta waayadan dambe taalla Geeska Afrika oo saamayn ku yeelatay Ciisaha.
3- Waxa dhacay abaaro iyo dagaallo ku soo noqnoqday mandiqadda.
4- Waxa soo kordhay dad badan oo reer magaaloobay, taas oo keentay in reer miyiga iyo reer magaalku midba midka kale ka sugo inuu hawsha bilaabo.
5- Waxa soo kordhay xuduuddo uu gumaysigu ku kala qoqobay dhulkii iyo dawlado kala shakisan oo Ciisaha saamayn ku yeeshay.
6- Waxa meesha ka baxay Gandihii Ciisaha talada u hayn jiray ee fadhigiisu ahaa xaruntii xeerka ee Siti.
7- Ta u dambaysi waxay ahayd 12kii oday iyo guddoomiyihii loo cayimay inay sii buuxiyaan kaalintii ugaaska isla markaana ay ahayd inay Ciisaha u hor kacaan sidii loo soo qaban lahaa ugaas cusub, oo kaalintoodii gabay.

Intaa iyo in ka badan baa keentay dib u dhaca ku yimid baahida loo qabay Ugaas gala kaalintii uu ka baxay Allaha u naxariistee Ugaas Xasan Xirsi.

Muddadaa dheer ee Ugaas la'aanta waxaa Ciisaha soo maray dhib badan. Aan is dul taagno oo wax yar aan ka tibaaxo dhibaatooyinkaa ummadda soo maray.

Marka hore ummaddii aabbo la'aan bay noqotay oo way agoonowday. Waxa dhacay jaahwareer la garan waayey meel loo socdo iyo dhinac loo jeedo intaba. Xidhiidhkii ka dhexeeyey Ciisaha iyo dadwayga ay oodwadaagta yihiin qaarkood ayaa kala go' ku yimid. Wadajirkii iyo wadatashigii Ciisaha u dhexeeyey baa hoos u dhacay, waayo aabbihii lagu soo wada hiran jirey baa meesha ka baxay.



Bulshada qaybta ay xoog u saamaysay ugaas la'aantu waa reer guuraaga, waayo ugaasku waxa uu u ahaa ilays iyo dayax ay iftiinsadaan, cidhiidhi dhinacyo badan kaga imanayeyna way tirsanayeen. Baahida weyn ee reer guuraagu u qabay Ugaaska waxa laga dheehanayey maalintii Ugaas Mustafa la caleema saarayey, in badan oo iyaga ka mid ahaa baa farxad la ilmaynayey.

Rag dhawr ah oo aqoonley ah oo aan wax ka weydiiyey xilligii Ugaas la'aanta ayaa ku tilmaamay tiih soo maray Ciisaha. Ugu dambayn qaybta u weyn ee la wada tebay waa ducadii uu Ugaasku ducayn jiray habeen iyo maalin, waayo Ugaasku waa duca yeel. Intaa iyo in ka badan baa ummadda soo martay.

# Cutubka Toddobaad

# Qabashada Ugaaska 19$^{aad}$

# Hordhac

Iyada oo Ugaas la'aantaa lagu jiro ayaa bishii 21[kii] Nofanber 2006[kii] waxa Jabuuti ku geeryooday, Allaha u naxariistee, Madaxweynihii hore ee Jamurriyada Jabuuti, Al Xaaji Xasan Guuleed Abtidoon. Dadkii ka soo qayb galay tacsidii, waxa ka mid ahaa guddigii 12 ka oday ee sii waday hawshii Ugaaska inta boqor cusub la soo qabanayo.

Tacsidii kadib, dad badan oo reer Jabuuti ah oo madax iyo waxgaradba leh ayaa la kulmay odayadii Diridhaba ka yimid. Waxa lagu canaantay in iyagu aabbo ka yihiin Ugaas la'aanta muddada dheer soo jirtay. Kadibna waxa laga codsaday inay si dhakhso ah ugu hawl galaan sidii loo soo qaban lahaa Ugaas cusub oo ummadda hoggaamiya, hasayeeshee uma ay dhaqaaqin waxayna iska sii wateen danahooda gaarka ah.

Markaa dabadeed waxa bilodey dhaqdhaqaaqyo dhinacyo badan ka socda oo lagu doonayo sidii loo qaban lahaa shir ballaadhan oo lagaga tashanayo sidii Ugaas loo soo qabsan lahaa. Dhinacyada hawsha bilaabay waxa ka mid ahaa dhallinyaro reer Diridhaba ah iyo madax ka tirsan ismaamulka Soomaalida Itoobiya iyo maamulka Diridhaba. Qaar ka tirsan lada maamul, gaar ahaan kuwa ka soojeeda besha Ciisaha ayaa iyaga oo cuskanaya qodobka 91[aad] oo ku jira Distoorka Itoobiya oo oggolaanaya in qawmiyaduhu u madax bannaanaadaan dhaqankooda, ayaa ka war geliyey Dawladda Feederaalka in Ciisuhu rabaan inay soo qabsadaan Ugaaskii ay xeerka u lahaayeen, taas oo Dawladda Itoobiya si buuxda u oggolaaatay. Waxaa kale oo dawladda laga war geliyey, oo ay aqbashay, in qof kasta oo ku abtirsada qabiilka Ciisuhu meel uu joogaba xaq u leeyahay in uu ka soo qayb galo, Jabuuti, Somalia, Itoobiya iyo debadaha meeshuu doono ha joogee.

# Qabanqaabadii Qabashada Ugaaska 19aad

1dii Febrweri 2009kii ayaa markii ugu horreysay shir loo dhan yahay lagu qabtay magaalada Diridhaba,shirkaas oo loo fadhiistay qol weyn oo ku yaal rugta shirarka ee loo yaqaan Ugaas Xasan Xirsi. Shirkaas waxa ka soo qayb galay dadweyne fara badan iyo 12kii oday ee kaalinta Ugaaska sii hayey iyo guddoomiyahoodii, Maxamad Ugaas Xasan, kuwaas oo cadaadis dhinacyo badan kaga yimid lagu saaray in aanay marnaba ka baaqan shirkaas. Shirkaas markii doodo badan la isweydaarsaday waxa la isku raacay lana go'aamiyey in loo hawl galo sidii loo soo qaban lahaa Ugaaskii 19aad. Shirkaas waxa laga soo saaray go'aamo dhawr ah oo ay ka mid yihiin :

1. In la is calool xaadho oo la isa saamaxo;
2. In Ciisuhu Ugaas qabsado;
3. In la sameeyo guddiyo qabanqaabo iyo farsamo.

Intaa ka dib waxa la qabtay shirar dhawr ah oo lagu soo dhisay guddi dhallinyaro oo qaabilsan adeegga iyo dhaqaale ururinta iyo weliba guddi odayo xeerka ilaaliya.

Guddida dhallinyaradu waxay kala ahaayeen :

1. Maxamad Macallin Cusmaan (Guddoomiye)
2. Muuse Warsame Buraale
3. Sugaal Maxamad Rooble
4. Ibraahim Xasan Warsame
5. Maxamad Aadan Geeddi
6. Maxamad Xasan Abtidoon
7. Idiris Aadan Shirwac
8. Ciiltire Cali
9. Cabiraxmaan Maxamad Dakharre
10. Cusmaan Gadiid Dharaar



11. Aadan Allaale Cali
12. Maxamuud Jibriil

22kii Feb. 2009kii ayaa go'aan lagu gaadhay in wufuud loo kala diro degmooyinka uu ka kooban yahay gobolka Shinniile. Dabadeed wufuud wargelin ah baa loo diray lixda degmo. 24kii Feb. 2009kii ayuu wafdigii u horreeyey u baxay Shinniile iyo Erer. 25kii Feb. 2009kii wafdi kale ayaa u ambabaxay Afdam iyo Ma'ayso. Dambalna 26kii Feb.2009kii ayuu wafdi u baxay.

Odayadii dhulkaa ay soo mareen oo dhan waxay ku war geliyey in muddo 45 maalmood gudohooda, la iskugu yimaaddo meesha la yidhaa Waaruf oo ah goobta lagu shiro mar kasta oo Ugaas la soo qabanayo.

## Waaruf

11[kii] bishii Abril 2009 ayaa markii u horreysay 24 oday ku kulmeen Waaruf oo ay degeen. Waaruf magaalada Diridhaba waxay kaga toosan tahay woqooyi-galbeed, 90 km bayna u jirtaa.

Sida xeerka Ciisuhu dhigayo odayada arrinka Ugaaska u fadhiisanayaa waa inay tiradoodu noqoto 144 oday oo labiyo tobanka aqal (qolo) ee Ciise u dhan yihiin. 144 ku waxay u qaybsamaan 44 Gande ah iyo 100 guddi ah. Ugu yaraan Waaruf waa inay fadhiyaan afar bilood iyo toban maalmood. Hawsha ugu weyn ee ay qabtaan odayadu inta ay Waaruf fadhiyaan waxa ka mid ah ducooyin ay Ilaahay ka baryayaan in Ciisaha uu siiyo Ugaas wanaagsan.

### Ducada Guddida Ciisaha

Guddida fadhiyadooda waxaa lagu furaa laguna soo xidhaa duco erayadeeda la wada xafidsan yahay. Guddidu waxay Alle ka baryaan garta ay qaadayaan ama muraadka ay markaa meesha u fadhiyaan inuu waddada toosan u mariyo. Curadka Ciise ayuun baa duceeya haddii guddidu baaho ama tolal u dhan tahay. Haddii kale kolba guddida halkaa fadhida ninka u curadsan baa duceeya. Ducooyinka soojireenka ah waxaa ka mid ah Rabbi-bariga hoos qoran :

Bismillaahi Raxmaani Raxiim.
Allaahumma salli calaa Sayidinaa Muxamad.

Ururkayaga ururkii malaa'igta Ilaahow ka yeel.
Dad aan is hurayn oo heshiis ah Ilaahow naga yeel.
Wada-jire wada tashada Ilaahow naga yeel.
Taladayada tiir bira Ilaahow ka yeel.
Taan u fadhina na talo lagu heshiiyo Ilaahow ka yeel.
Toobadayada toobad la aqbalo Ilaahow ka yeel.
Wixii tegey na Ilaahow noo toobi.
Maradayadu way is dhaafiye, maankayaga Ilaahow ha is dhaafin.
Dambigayaga Ilaahow noo dhaaf.
Dambigii waalidiintayadana Ilaahow dhaaf.
Camalkayaga Ilaahow wanaag ka yeel.
Ceebahayaga Ilaahow astur.



Ceeshka iyo caafimaadkaba Ilaahow cidhiidi ha naga gelin.
Cadaabul qabri iyo cadaabul naar ba
Ilaahow naga nabad geli.
Dhibta adduunyada iyo dhibta aakhiraba
Ilaahow naga nabad geli.
Dhibta khaas ahaaneed iyo dhibta caam ahaaneed ba
Ilaahow naga nabad geli.
Cirka Ilaahow noo irmaanee, carrada na
Ilaahow noo fayoobee.
Mudanahayaga, maatiyadayada iyo martidayadaba
Ilaahow midna ha qadin.

Ummadda Nebi Maxamad wixii dhintay
Ilaahow u naxariiso.
Wixii nasab iyo nikaax nagu lahaa dhammaan
Ilaahow u naxariiso.
Sabadka iyo soofkaba Ilaahow nagu ilaali.
Suusta cudur, saraayaha col iyo sabanka abaareed
Ilaahow naga nabad geli.
Baadka iyo biyahaba Ilaahow noo shifee.
Diintaada Ilaahow u gargaar, dadkeeda na Ilaahow u gargaar.
Ilaahow adaa Qaadiree waxan qaadi karayn hana saarin.
Islaannimo Ilaahow nagu noolee,
udub dhexaadkayaga na Ilaahow ha jebin.
Hoggaanka Ilaahow Ina habar-doobireed noogu dhiib
Halka ninkaya ku maqan yahay iyo neefkaya ku maqan yahayba
ammaanadaada Ilaahow ka yeel.
Cadawgayagu hadduu bog ku socdo,
hadduu baabaco ku socdo iyo
hadduu baalal leeyahayba
Ilaahow naga nabad geli.

Ilaahow naga aqbal oo naga ajiib.
Taladayada na Ilaahow isbax ka yeel.
Aamiintayada iyo aamiinta Malaa'igta Ilaahow is waafaji.
Intaas oo Alla idmo oo Alla aqbalo oo Malaa'igtu aamiin tidhaa.
Subxaana Rabbika, Al-Faatixa !

### ➢ Ducada Gendaha

Genduhu waa xeer-ilaaliye, wuxuu dhawraa jiritaanka xeerka si uunan u dhaqan guurin ama aan dhagalayda (qodobbada) xeerka iyo xubnaha uu xeerku ka kooban yahay loo dhalan rogin, kuwo horay aan loo ansixinna xeer ahaan aan loo adeegsan. Waxay kaloo xeerka ka dhawraan in aan si eex ah, qolannimo ama saaxiibtinimo ah aan qodobada xeerka loogu janjeedhin. Cutubka hoos ku qoran waa dheeg ka mid ah ducada Genduhu ku ducaystaan marka la doonayo in la qabto ama la doorto Ugaas cusub :

Ilaahow muraadkaan u soo ururnay ee boqor ahaa na sii.
Bil dhalatay oo la wada arko Ilaahow nooga yeel.
Ilaahow hoggaankaan doonayno ku khayr qaba na sii.
Ilaahow boqorkaan kaa barinay noo soo dhaadhici.
Ilaahow geel badane kuma waydiisan.
Ilaahow adhi badane kuma weydiisan.
Ilaahow lo' badane kuma weydiisan.
Ilaahow riyo badane kuma weydiisan.
Ilaahow ido badane kuma weydiisan.
Ilaahow ku baana badan kuma weydiisan.
Ilaahow ku gaashaan-dhigga yaqaan kuma weydiisan.
Ilaahow ku walaalo badan kuma weydiisan.
Ilaahow ku wiilal badan kuma weydiisan.
Ilaahow ku Alle yaqaan oo Iimaan leh na sii.
Ilaahow ku aan eexa lahayn oo uur fayow na sii.
Ilaahow ku dulqaad leh oo dadka sida na sii.
Ilaahow kii ayaanka lahaa ee udubka ahaa na sii.
Ilaahow noo binniixi *(Iftiimi ama nagu hanuuni)*.
Garani maynee Ilaahow noo garo.
Doorani maynee Ilaahow noo door.
Ku eex iyo inkaarba ka fayow.
Ku hibo leh oo habeen dhalad ah.
Ku aad adigu noo boqortay.
Afar iyo afartankaa oday ayaankooga Ilaahow nagu sii.
Ilaahow waad na dishaaye nama diiddide.
Ducadayada noo aqbal oo noo ajiib!
Aamiin ! Aamiin !
Allaahuma salli calaa Muxamad, Al-faatixa.



Inta Waaruf, ducooyinkas waxaa guudidu barbarwada hawlo u ku kala guraayo, hadday jiraan, qolooyin waxa isku sheeganaya oo la is calool xaadho oo la isa saamaxo. Waayo, dad aan isku calool fayoobayni arrin kuma heshiin karaan.

Guddidii dhallinyaraduna waxay u hawl galeen sidii odayada loo soo ururin lahaa isla markaana loo keeni lahaa Waaruf. Muddo aan ka yarayn laba bilood bay qaadatay in 144 ka oday oo uu dhan baahadii Ciise isla markaana ay ku jiraan wixii garaad iyo xeer-yaqaan lagu tuhmayo.

144 kii oday magacdoodu waxay kala ahaayeen sidan :

1) Abiib Geeddi Xasan
2) Aadan Aare Dhabbar
3) Aadan Cabdi
4) Aadan Cabdi Cawaale
5) Aadan Cilmi Aareyte
6) Aadan Wacays Cabdalla
7) Aadan Xasan Ibraahim
8) Aare Jaamac Geelle
9) Abiib Ibraaim Buraale
10) Axmad Buux Aabba-diid
11) Axmad Cabdalla Gadiid
12) Axmad Cabdi Cabsiiye
13) Axmad Cusmaan Bulxan
14) Axmad Rooble Geelle
15) Aye Cumar Cabsiiye
16) Bashiir Samirre Ibraahim
17) Buraale Buux Aadan
18) Buux Buraale Geeddi
19) Buux Cawaale Guhaad
20) Buux Cumar Cabdalla
21) Buux Jaamac Geelle
22) Buux Maydhane Suge
23) Cabdi Cali Gadiid
24) Cabdi Cumar
25) Cabdi Daahir Cokiye
26) Cabdi Maydhane Faarax
27) Cabdillaahi Dinneyte shirdoon
28) Cabdillaahi Faarax Giirre
29) Cabdiraxmaan Maxamad Dakharre
30) Caddaawe Faarax Rooble
31) Cali Aare Xareed
32) Cali Bahdoon Cawaale
33) Cali Caddaawe Khayrre
34) Cali Caruush Rooble
35) Cali Dugsiiye Khayrre
36) Cali Geeddi Barre
37) Cali Giirre Faarax
38) Cali Libaax Rooble
39) Cali Maxamuud Buux (Nuunaawi)
40) Cali Sigad Good
41) Carab Caddoosh
42) Carraale Hufane Cabaade
43) Ceeleeye Bookh
44) Cige Aare Cige
45) Cige Faatax Xareed
46) Ciiltire Cali
47) Cilmi Xasan Oolis
48) Cilmi Xasan Oolis
49) Cosoble Shirdoon Buux
50) Cumar Aadan Ducaale
51) Cumar Ardeeye Buux
52) Cumar Buux Aadan

53) Cumar Buux Axmad
54) Cumar Fariid Buux
55) Cumar Khayrre Faarax
56) Cumar Khayrre Rooble
57) Cumar Xaaji Xasan
58) Cusmaan Cabdi Rooble
59) Cusmaan Gadiid Dharaar
60) Cusmaan Geelle Obsiiye
61) Cusmaan Xasan Jiidhe
62) Cutte Riiraash Wacays
63) Daahir Cige Waaberi
64) Dubbad Muuse Habbane
65) Faarax Axmad
66) Faarax Cabdi Cabdalla
67) Faarax Ciiltire Diirrane
68) Faarax Daahir
69) Faarax Dharaar Shiile
70) Faarax Faatax Xaashi
71) Faarax Wacays Cali
72) Fariid Aadan Gadiid
73) Fariid Geelle Buraale
74) Furre Faarax Xasan
75) Gadiid Buraale Geelle
76) Gamiye Diirrane Geelle
77) Geeddi Cige Abtidoon
78) Geelle Aareeye Abokor
79) Geelle Bulxan Siciid
80) Giirre Muuse Xasan
81) Guhaad Aadan Faarax
82) Haayir Aadan Cige
83) Ibraahim Cabdi Bookh
84) Ibraahim Cali
85) Ibraahim Xasan Cali
86) Ibraahim ... (Laangadhe)
87) Idiris Aadan Geeddi
88) Idiris Aadan Shirwac
89) Idiris Kharre Aabaar
90) Ismaaciil Giirre Geeddi
91) Ismaaciil Muuse Cumar
92) Jaamac Cabdillaahi
93) Jaamac Geelle Cumar
94) Mahdi Cumar Xoosh-yare
95) Maxamad Cabdalla Khayrre
96) Maxamad Cabdi
97) Maxamad Cumar Xasan
98) Maxamad Faarax
99) Maxamad Faarax Suubbane
100) Maxamad Ibraahim Raage
101) Maxamad Macallin Cusmaan
102) Maxamad Xaashi Miiggane
103) Maxamad Xasan Abtidoon
104) Maxamuud ... Aare
105) Maxamuud Ibraahim Raage
106) Miisaan Miiggane Aadan
107) Muuse Cabdi
108) Muuse Cali Bahdoon
109) Muuse Daahir Cokiye
110) Muuse Ibraahim Xirsi
111) Muuse Maygaag Barre
112) Muuse Rooble Maxamad
113) Muuse Warsame Buraale
114) Roble Siciid Rooble
115) Rooble Axmad Rooble
116) Rooble Geelle Caateeye
117) Rooble Geelle Xasan
118) Rooble Ibraahim Rooble
119) Rooble Xasan Geelle
120) Samirre Faarax Odacali
121) Sh. Maxamad Yuusuf Waaberi
122) Siciid Waaberi Buux
123) Sugaal Maxamuud Rooble
124) Suge Bile Rooble
125) Suge Hufane
126) Waaberi Aadan Muuse
127) Waaliye Waabeeri
128) Wacays Buraale Guuleed
129) Xaaji Barkhad Cali
130) Xaaji Cali Cabaade



131) Xaaji Cali Muuse
132) Xaaji Muuse Abbokor
133) Xaaji Rooble Wacays Xasan
134) Xasan ... Samatar
135) Xasan Aadan Cabdi
136) Xasan Aadan Ceeleeye
137) Xasan Aadan Muuse
138) Xasan Buux Guuleed
139) Xasan Cabdillaahi Rayaale
140) Xasan Faarax Aadan
141) Xasan Rooble Ducaale
142) Xasan Xaaji Cabdalla Aadan
143) Xoosh Caateeye Aadan
144) Xuseen Aadan Guuleed
145) Xuseen Bullaale Geeddi
146) Xuseen Khayrre Aabaar
147) Yuusuf Cali Rooble
148) Yuusuf Cusleeye Cabdille

Halkaa markay arrimuhu marayeen, Wardiiq oo baahadiisii u dhan tahay isla markaana wada odaygii guddoomin lahaa shirka lagu soo qabanayo Ugaaska cusub ayaa si rasmii ah ugu soo biiray Ciisihii fadhiyey Waaruf.

Ka dib, waxa la iska dheex xulay 44 oday oo noqonaaya Gande-Ugaas ee ka talin doona soo qabashada Ugaaska 19[aad]. Boqol odayna waxay noqdeen Guddi. Gandaha waxa loo dhisay sida xeerka Ciisee dhigayo, qaabkii uu u dhisnaa Gandihii hore ee xaruntii ahaan jirtay Sitti gumaystayaashii ka hor. Waxa loo qaybiyeey lixdii aqal ee Ciisiha oo kala ah :

- 8 Ceeleeye ah;
- 8 Wardiiq ah;
- 7 Holle ah;
- 7 Hawlaqaade ah;
- 7 Hoorroone ah;
- 7 Uurweyne ah.

Magacdii Gande-Ugaas :

**Wardiiq**

1) Xaaji Rooble Wacays
2) Rooble Xasan Geelle
3) Xasan Xaaji Cabdalla Aadan
4) Wacays Buraale Guuleed
5) Fariid Aadan Gadiid
6) Cali Aare Xareed
7) Axmad Buux Aabbadiid
8) Cige Faatax Xareed

**Ceeleeye**

1) Dubbad Muuse Habbane
2) Muuse Maygaag Barre
3) Cumar Buux Aadan
4) Cali Maxamuud Buux
5) Guhaad Aadan Faarax
6) Xasan Aadan Cabdi
7) Cabdillaahi Caynaan Rooble
8) Maxamuud Yuusuf Waaberi

| Hawlaqaade (*Walaaldoon*) | Holle (*Fuurlabe*) |
|---|---|
| 1) Faarax Dhabbar Shiile | 1) Xuseen Bullaale Geeddi |
| 2) Buux Maydhane Suge | 2) Xasan Faatax Aadan |
| 3) Cumar Khayrre Faarax | 3) Cumar Khayrre Rooble |
| 4) Cali Caruush Rooble | 4) Cumar Ardeeye Buux |
| 5) Gamiye Diirrrane Geelle | 5) Axmad Xasan Bulxan |
| 6) Caddaawe Faarax Rooble | 6) Cabdi Cali Gadiid |
| 7) Cusmaan Rooble Obsiiye | 7) Aadan Aare Dhabbar |

| Uurweyne | Hoorroone |
|---|---|
| 1) Siciid Waaberi Buux | 1) Buux Cumar Caddaawe |
| 2) Xaaji Cusmaan Giirre | 2) Cilmi Xasan Oolis |
| 3) Cutte Riiraash Wacays | 3) Rooble Geelle Ciiltire |
| 4) Aadan Wacays Cabdalla | 4) Cige Aare Cige |
| 5) Suge Bile Rooble | 5) Haayir Aadan Cige |
| 6) Maxamad Faarax Suubbane | 6) Cali Libaax Rooble |
| 7) Faarax Ciiltire Diirrane | 7) Casoowe Shirdoon Buux |

Waxa loo doortay Xaaji Rooble Wacays Xasan oo ah Wardiiq Reer Xasan ah, in u noqdo Guddoomiye guddigga ka koban 44 kii Gandiha iyo 100 kii odey iyaado la waafajiinayo sida xeerka Ciise uu qorayo.

- Xeerkaa dhigaya in Wardiiqu keenaan guddoomiyaha oo inuu noqdo ah Wardiiq Reer Xasan.

Markii la joogo ayaa hawshii loo fadhiyey la guda galay. Yeesif oo xiidhe u ah Wardiiq isla markaana ah xidhaha Reer Xasan ayaa Ciisuhu si rasmi ah u weydiistay inay u soo guuraan goobta la yidhaa Geelle Cabsiiye oo ku taal deegaanka inta badan Ugaasyada laga soo qabto.

Yeesif waxa uu Ciisaha u diray farriin ah inay laba bilood ka dib oo ku beegan kawda bisha Ramaadaan ee 1430ka oo maalin Jimce ah u soo guuraan Geelle Cabsiiye (miilaadigu waxay ku beegnayd 21kii Ogost 2009kii).



## Geelle Cabsiiye amma Gugumacad

Markii Geelle Cabsiiye la soo guurayba, Ciisihii wuxuu weydiistay Yeesif inay soo qabsadaan Ugaaskii xeerka u lahaa. Yeesif baa Ciisihii ka codsaday inay toddobaad sugaan.

Sida xeerku dhigayo Yeesif baa markaa sahan tagey si ay u soo eegaan dhallinyaro marka horeba ilaalada ay ka meeriyeen si Ciisuhu hadhaw uga xushaan midkii Ugaas noqon lahaa. Odayadii Yeesif waxay direen, laba wafdi oo midkiiba ka kooban yahay saddex qof.

Waxay soo sahamiyeen afar dhallinyaro ah oo laba Mille iyo agagaarkeeda joogaan, labana ay ku nool yihiin magaalada Diridhaba.

Dabadeed, Yeesif sidii ballanku ahaa Ciisihii Geelle Cabsiiye fadhiyey buu u geeyey war dhan oo sidan ah :

- *"Ciisaw waxaan idiin hayaa afar dhalliyaro ah,*
  *mid waan niga reebay oo jaadkuu (qaadka) cunaa,*
  *saddex baan idiin hayaa."*

Saddexdii magacyadoodii oo dhan, reer abtigood iyo reer mocoydood buu Ciisaha u sheegay.

- *"Magan Allaa ! "* Ba la wada yidhi.

Qofka Ugaas lo qabsaanayo waa inuu buuxiiya shuruudaha xeerku dhigaayo ee ku qoraan bogga 143 ee buggan.

- Haddaba, hadday dhallinyarada la so sahamiyeey wada buuxiyaan shuruudahaa sidee ba lagu kala saara ?
- Nin walba reer abtigii iyo reer mocoydii baa la eegi, magacyadoodaa kitaabka laga baadhi, cilmiga xiddigahaa qaar loo eegi. Intaas oo dhan hadday ku kala bixi waayaan, qorituur baa lagu kala saari.

Waxa jiray astaamo dadku sheegi jireen oo lagu garto qofka Ugaas noqon doona. Waxa ka mid ahaa, in ay jirtay daruur isdul taagta qofka Ugaas noqonaya. Hasa yeeshee taasi way beenowday. Ugaas Xasan Xirsi, Allah ha u naxariistee, oo intii uu noolaa arrintaa ka warramay waxa uu yidhi : *"Wax daruur ah oo aniga berigaa iskay dul taagtay haba yaraatee ma jirin."*

Mid baase jirtay oo aan odayo ka soo gaadhay oo ahayd. Ugaaskii ugu horreeyey ee magaciisu ahaa Ibraahim Makaahiil *(Ugaadh-maal)* ayey daruuri isdul taagtay oo sidaa lagu bokhray, mid kalese lama sheegin. Taas Ugaas Xasan baa caddeeyey, odayo kalena waan ka xaqiijinnay.

Bishii May, mar aan booqday odayadii Waaruf fadhiyeey, waxaan halkaa kula kulmay oday magaciisa la yidhaa Faarax Faatax oo da'diisu boqolka kor u dhaaftay ahaana odaygii ugu da' weynaa ummaddii Waaruf ku suugnayeed. Odaygaasi wuxu noo sheegay inuu riyooday, riyadiisana uu sheegi doono marka Ciisuhu wada yimaaddo.

3[dii] Bishii Sebtanber, oo ahayd maalintii Ugaaska la qabanayey annagoo joogna Geelle Cabsiiye amma Gugumacad ayaan odaygii Faarax Faatax weydiiyey su'aal. *"Riyadii aad riyootay Ciisihii halkan ku kulmay ma u sheegtay oo ma lagaa yeelay mise waa lagaa diiday ?"*. Si buuxda ayuu iigu sheegay in lagu diiday riyadiisii. Taasi marag cad bay u tahay in aan riyona wax lagu dooran jirin.

Arrimo kale oo badan ay ka mid ah in farre iyo faal ay dadku sheegi jireen in si garto qofka Ugaas noqonaya iyaguuna way beenoobayn.

Intaa wixii ka dambeeyey Ciisihii buu arrinku ku soo wareegey. Ciisihii Geelle Cabsiiye fadhiyey ee ka koobnaa Gande iyo boqolkii oday waxay iska soo dheex xuleen guddi ka kooban afar iyo toban (14) oday oo labiyo tobanka aqal ee Ciise ku wada jiraan, guddoomiye uga dhiigeen Muuse Maygaag Barre. Guddidani waa kuwii ugu dambeeyn soo sahaminayey dhallinyaradii la soo xulaay isla markaana soo qabanayey Ugaaska.

31[kii] bishii Ogost 2009[kii] oo ku beegnayd 11[kii] bishii Ramadaan 1430[kii] ayey ka soo baxeen goobtii Geelle Cabsiiye, ballankuna waa inay ugu dambayn Ugaaska soo qabtaan badhtamaha bisha Ramadaan 14keeda, 15keeda amma 16keeda.

- Waa xeer in Ugaaska la qabto habeen cadda ah.

Si ay u soo sahamiyaan saddexdii dhallinyaro ee laga xulanayey Ugaaska oo midi joogo miyi labana ay joogaan magaalada Diridhaba, waxay guddidu ku horraysay midkii miyiga ee deggenaa Mille agagaarkeeda. Isla maalintaa guddidu waxay soo gaadhay magaalada Diridhaba.



## Diridhaba

Diridhaba, guddida waxa lagu marti geliyey aqal uu lahaa odayga la yidhaa Cali Maxamuud Nuunnaawi, toddoba wax soo sahamisa ayey guddidu iska soo xuleen wax soo sahamisa. 1[dii] bishii Seb. 2009[kii] oo ku beegnayd habeenkii 12[kii] bishii Ramadaan ayey soo sahamiyeen Mustafa Maxamad Ibraahim Ugaas Wacays oo ka mid ahaa labada Diridhaba joogtay.

Haddaba habeenkaa ay guddidu soo sahaminaysay Mustafa ayaan nasiib u helay inaan guddida raaco oo aan goobjoog u noqdo sidii ay wax u dhacayeen. Ragga habeenkaa nasiibka aan wada yeelannay waxa ka mid ahaa weriyaha caanka ah ee Maxamad Daahir, Cumar Fariid oo ah wiil dhallinyar oo macallin ah isla markaana cilmi baadhis u socday iyo ugu dambayn Ibraahim Axmad Cali oo isna ka mid ah dadka wax ururiya. *(Xeer maahayn inaan raacno hasa yeeshee dirqi iyo si xil leh bay nagu oggolaadeen markay ogaadeen inaan ka soconno R.T.D., ballantuna waxay ahayd inaan wax sawir ah ka qaadin).*

Habeenkaa markii laga soo baxay salaaddii cishaaci saacadduna tahay siddeeddii iyo badhkii ayaan ka soo baxnay aqalkii ay gurigii degganayd annaga iyo (7) toddoba ka mid ah (14) afar iyo tobankii oday. Odayadii kale gurigii bay ku hadheen oo ay warka ku sugayeen. Saddex gaadhi amma baabuur oo mid ka mid uu lahaa Sugaal Maxamad Rooble baan raacnay annagoo ku sii jeedna aqalkii Maxamad Ibraahim Ugaas Wacays oo ku yaal xaafadda la yidhaa Kooneel ee Dergiga ka hor la odhan jirey Xaafad Cisse.

Aqalkii irriddiisa haddan joogno ayuu roob aan sidaa u badnayn darrooray. Irriddi baan dhaafnay oo aqalkii baan gallay, salaan dabadeed meel ardaaga aqalka ah oo barande leh baa gogol na loo dhigay, waan wada fadhiisannay. Abbihii qoyska oo ah Maxamad Ibraahim hawl ayuu ku maqnaa. Waxa joogay carruurtii iyo hooyadood oo uu weheliyo nin oday ah oo carruurta aabbohood adeer u ah. Cabbaar markaan fadhinay ayuu odaygii reerka joogay na soo hor istaagey, su'aal keli ah buu odayadii weydiiyey isagoo aad mooddid inuu goodiyayo :

- *"Maxaad doonaysiin Ciisaw ?"*

Sidaa si le'eg waxa ugu warceliyey, isagoo aad mooddid isna inuu gooddiyayo, Xaaji Muuse Abbokor oo dhexda fadhiya, laba jeer isago ku dhawaaqaya :
- *"Boqorkii baan doonaynaa ! Boqorkii baan doonaynaa !"*

Odaygii dib intuu u dhaqaaqay buu galay qol kale oo naga soo hor jeeday. Daqiiqado yar dabadeed, isago gacanta haya Mustafe Maxamad Ibraahim buu ka soo baxay. Siduu u soo waday buu odayadii soo hor joojiyey. Toddobadii oday ayaa hoos iyo saray u eegay Mustafe.

Mustafe isagu sidii qof salaad tukanaya ayuu hortiisa eegayey. Inta ay iyagu Mustafe eegayeen waa odayada e, qudhaydu waxaan aad u fiiri-nayey odayada laftooda si aan runtii u ogaado waxa ay ka eegayaan. (Waxaan ogaaday oo keli ah inay eegayeen amma u fiirsanayeen inuu wax iin ah leeyahay iyo in kale).

Cabbaar markay aad iyo aad u eegeen ayuu Xaaji Muuse su'aal weydiiyey odaygii Mustafe awowga u ahaa :
- *"Ninkani wax iin ah ma leeyahay ?"*
- *"Maya !"* oo buuxda ayuu ku jawaabay odaygii.

Mar labaad ayuu Xaaji Muuse su'aashii oo kale weydiiyey odayadii la socday :
- *"Ninkan haba yaraatee wax iin ah ma ku arkaysiin ?"*
- *"Maya !"* baa la wada yidhi.
- *"Waa magan Alla oo way niga dhan tahay !"* baa la wada yidhi.

Saray baan u wada kacnay oo Mustafe iyo awowgii baan wada gacan qaadnay oo aan salaannay, dabadeed waan baxnay. Intaan aqalka joognay oo dhan iyo markaan si soconnay ba roobkii markii bilaabay baa da'aya. Baabuurtii oo noo joogtay baan raacnay, xaggaa iyo aqalkii aan marka hore ka soo ambabaxnay oo ay nagu sugayaan odayadii kale ee guddida ka tirsanaa baan ku noqonnay, waan salaannay dabadeedna gogoshii baan salka dhiganay. Weli roobkii si fiican buu u darroorayaa.

Soomaalidu waxay tidhaa : *"War baa u gaajo kulul"*, sidaa awgeed si dhakhso ah baa arrinkii loo guda galay, ugu horrayn Xaaji Muuse oo ka tirsanaa toddobadii sahanka loo dirtay ayaa hadalka qaatay si uu war buuxa u siiyo toddobadii sii fadhiday. Xaajigu war dhan oo tifaftiran buu bixiyey, wuxu yidhi, ninkaan soo aragnay nin iin leh maaha, waa nin buuxa, waa Ugaaskii aan rabnay oo loo noqon maayo. Xaaji Muuse intaa waxa uu raaciyey oo uu hadalkii ku soo gabagabeeyey, roobkiina wakaa darrooraya.



Raggii kale ee Xaajiga wax la soo sahamiyey mid mid bay iyaguna u warrameen iyagoon haba yaraatee waxba ku khilaafin Xaaji Muuse. Dabadeed raggii aqalka sii fadhiyey ee toddobada ahaa ayaa iyaguna mid mid hadalka u qaatay, wax diidmo ah iyo wax su'aal ah kamay hor keenin oo si buuxda ayey iyaguna ugu raaceen. Mid ka tirsan odayadii aqalka sii joogey baa su'aal maangal ah soo jeediyey oo yidhi :
- *"Ninkii saddexaad maxaan u soo sahamin weynay ?"*

Xaaji Muuse Abbokor ayaa arrintaa ka shaafiyey oo yidhi :
- *"Kol haddaynu kan hore isku raacnay oo aan wada oggolaanay inuu Ugaaskii yahay, ka kale inaan hantaaqno ma wanaagsana."*

Intii kalena way ku raacday.

Hadal iyo dhammaan habeenkaa baa la qaatay go'aankii kama dambaysta ahaa ee Mustafa Maxamad Ibraahim Ugaas Wacays ku noqday Ugaaskii 19[aad] ee Ciisaha.

Dabadeed waan iswada dhaarsannay oo ballan adag baan gallay intayadii aqalka wada joogtay oo dhan. Ballantaasi waxay ahayd, walaalayaal go'aankaa aan caawa gaadhnay warkiisu yaanu dibadda innooga bixin, qofna yaanu cid uga warramin go'aanka aan halkan ku gaadhnay caawa. Ku dhawaaqidda Ugaaska annaga oo guddida ah baa ku dhawaaqi doonna oo si rasmi ah u soo bandhigi. Intaa ka hor carrabkeenna aan ka adkaanno, waa ballan Islannimo.

# Qabashada Ugaaska 19aad

## Diridhaba

Aroornimadii Bishii 2^dii^ Seb. saacadduna ahayd 10^kii^ barqannimo, ayey odayadii guddidu shir jaraa'id ku qabteen xarunta Raadiyooga iyo TV. ee magaalada Diridhaba. Guddidu waxay halkaa ka caddeeyeen in ay heleen oo ay isku raaceen Ugaaskii beryahan oo dhan hawshiisa lagu jirey. Intaa waxay raaciyeen, inay habeen dambe qaban doonaan, hasayeeshee goobtaa kama ay caddayn magaciisa.

Habeennimadii Bisha ramadaan ahayd 13, waxay guddidu shir la qaateen Mustafa aabbihii Maxamad Ibraahim Ugaas Wacays iyo qoyskooda. Odayadu habeenkaa bay si buuxda uga war geliyeen qoyskaa in Mustafa yahay Ugaaskii 19^aad^ ee Ciise isku raacay. Waxa kale oo ay qoyska u sheegeen in habeen dambe oo Bisha ramadaan tahay 14, ay Ugaaska qaban doonaan sidaa daraaddeed waa in loo diyaargaroobaa.

14^kii^ Bishii Ramadaan oo ahayd habeen khamiis ah baan tagnay aqalkii reer Ugaas si aan ula soconno hawlaha Ugaas-qabashada. Habeenkaa waxa ka soo qayb galay dadweyne fara badan oo aan la qiyaasi karin. Gudaha ayaan gallay oo qol daafaha la marayo ayaan meel yar oo bannaan salka dhigannay. Guddidii Ugaaska qabanaysay iyo qoyskii reer boqor baan halkaa ugu tagnay. Goorsheegtu markay ahayd 10^kii^ iyo 17 ilbidhiqsi ayey xafladdii si rasmi ah u bilaabantay.

Ugu horreyn odayo Reer Xasan ah baa ka baxay qolkii aan fadhinay, wax yar kadib waxa nagu soo noqday odayga la yidhaa Axmad Cabdalla Gadiid oo Yeesif, Geeddi-Cali ah *(Odaygan Axmad Cabdalla Gadiid aabbihii baa Ugaas Xasan cimaamadda saaray berigii la bokhray)* oo gacanta



haya Mustafa Maxamad Ibraahim oo khamiis iyo koofiyad cad ku labisan. Hareeraha waxa ka socday odayo Yeesif iyo Reer Xasan ah.

Axmad Cabdalle sida xeerku dhigayo wuxuu Mustafe gacanta ka saaray odayga la yidhaa Aadan-Lacag oo Sacad Muuse, Reer Guulane ah, markaasuu odaygii dhawaaqay oo uu yidhi :

- *"Lagu reeyow Ugaas khayrre !"*

Markaasaa *"Ugaas khayrre !"* la wada yidhi.
Waxa gundhataha u goglay oday Xasan Gadiidshe, Reer Aadan Xasan ah oo magaciisu ahaa Guhaad Aadan Faarax, markuu Mustafe ku fadhiistay gundhatihii.

Waxa cimaamadda saaray odaygii Yeesif, Geeddi-Cali ee magaciisu ahaa Axmad Cabdalle Gadiid, dabadeed duco badan buu akhriyey odaygii.

Intaa ka dib Ciisihii goobtaa joogay oo dhan baa gacanta madaxa ka wada saaray Ugaaska cusub ee Ugaas Mustafa Maxamad Ibraahim Ugaas Wacays, iyadoo lagu dhawaaqayo :

- *"Lagu reeyow Ugaas Khayrre !"*

Habeenkaa xafladdii qabashada Ugaasku farxad iyo raynrayn bay ku dhammaatay.

Aroornimadii bishii Ramadaan 14 ahayd (3^dii^ Seb. 2009) salaaddii kadib, sidii ballanku ahaa waa lagu soo xoomay aqalkii reer boqor, si loo galbiyo loona geyn lahaa goobtii Gugumacad amma Geelle Cabsiiye ee ay fadhiyeen guddidii iyo Gandihii. Goorsheegtu markay ahayd 6^dii^ aroornimo ayaa Ugaas Mustafa oo ay galbinayaan raxan baabuurro ah ka ambabaxeen Diridhaba.

## Mille

8^dii^ iyo badhkii ayey baabuurkii Ugaaska siday iyo kuwii galbinayeyba gaadheen Mille. Dadweynihii Mille iyo hareereheeda degganaa iyagoon u kala hadhin cirroole, carruur, dhallinyaro iyo haween dhammaantood bannaanka ayey u soo baxeen si ay u soo dhaweeyaan una arkaan Ugaaska cusub. Dadweynihii oo caleemo qoyan lulaya ayaa markuu ku

soo dhawaaday gaadhigii Ugaaka siday, ku soo xoomay iyagoo isku daray sacab, durbaan, heeso iyo ereyo soo dhawayn ah.

Sidaan kor ku soo sheegay Ugaaska waxa lagu wadaa Geelle Cabsiiye oo Mille kaga toosan woqooyi una jirta 5km. Intii baabuurtu sii dhex socotay banka u dhexeeya Mille iyo Geelle Cabsiiye, waxay indhahaygu qabanayeen dadweynihii deegaanka oo fara badan una soo yaacaya dhinaca gawaadhida galbinaysa Ugaaska, dadkaas oo wajiyadooda ay ka muuqato farxad aan la qiyaasi karin.

## Gugumacad amma Geelle Cabsiiye

Markaan soo gaadhnay Gugumacad, waxa Ugaaska soo dhaweeyey odayadii guddida iyo gandaha ka koobnaa iyo culimo shallaadka qaadaysa iyo dhallinyaro wiilal iyo hablaba leh oo dhammaantood ku labisnaa dharkii dhaqanka isla markaana ciyaarayey ciyaarihii dhaqanka.

Ugu horreyn furitaankii xafladda guddoomiyihii guddida qabanqaabada qabashada Ugaaska, Maxamad Macallin Cusmaan ayaa aayado Qur'aan ah ku furay, xadiis iyo waano koobanna uu raaciyey. Dabadeed hawshii baa si rasmi ah u bilaabatay.

Maxamuud Axmad Buux oo Wardiiq, Yeesif, Geeddii-Cali ah ayaa Ugaaska dhallintayar ee la bokhrayo gacanta soo qabtay, islamarkiibana waxa uu gacanta ka saaray Xaaji Muuse Abbokor oo Sacad Muuse Reer Guulane ah (waa sida xeerku dhigayo). Xaaji Muuse gacanta midig oo dhudhunka ah ayuu qabtay Ugaas Mustafa isagoo ku dhawaaqaya :

- *"Lagu reeyow Ugaas Rooble !"*

Intaa kadib, odayga la yidhaa Guhaad Aadan Faarax oo Sacad Muuse, Xasan Gadiidshe ah yaa gundhate cusub oo midabkiisu caddaan yahay dhulka u goglay Ugaaska, dabadeed Ugaaskii baa lagu fadhiisiyey, odaygii Guhaadna Ugaaskuu daba fadhiistay. Waa sida xeerku qorayo e, Maxamuud Sheekh Axmad Buux Aare oo Wardiiq, Yeesif, Geeddi-Cali ah ayaa Ugaaska isa soo dul taagey oo Cimaamaddii saaray. Oday kale oo Sacad Muuse ah baa duco badan akhriyey iyadoo dadweynihiina gacmaha kor u taagayaan oo ay aamiinta gureen.



Ducadii markii la dhammaystay ayaa Ciisihii goobta joogay oo dhan ku soo qamaameen halkii Ugaasku fadhiyey iyadoo qof walba gacanta midig ku taabanayo isla markaana ku dhawaaqayo :

Lagu reeyow, Ugaas Rooble,
Rayadaada lagu reeyey !

Lagu reeyow, Ugaas Rooble,
Rayadaada lagu reeyey !

Lagu reeyow, Ugaas Rooble,
Rayadaada lagu reeyey !

Xafladdii qabashada Ugaaska qaybtii dhaqanku halkaa baa lagu soo gebagabeeyey, waxse halkaa ka sii socday dalbaadeggii, ciyaarihii iyo farxaddii dadweynaha.

Geed weyn oo goobtaa ku yaal baa Ugaaska loo dhigay gogol uu ku fadhiisto, halkaas oo si aan kala go'lahayn hortiisa ugu tirtirfanaayeen dhallinyaro ku labbisnayd dharkii dhaqanka iyagoo wajiyadooda ay ka muuqatay farxad aan la malayn karayn. Ciyaaraha waxa barbar socday salaan iyo gacanqaad ay dadweynihii fagaaraha joogay isu daba joogeen iyagoo weliba dhunkanaya.Sida xeerku dhigayo Ugaasku muddo (7) toddoba maalmood ah buu goobtaa Gugumacad fadhiyey.

Maalmihii uu halkaa joogay, Ciisihii deegaankaa ka dhawaa iyo qaar kale oo meelo fog ka imanayey ayaa Ugaaska soo booqday iyagoo faraxsan si ay Ugaaska cusub indhohooda ugu arkaan una dhunkadaan.

## Mille

Maalintii siddeedaad ee bisha Ramadaan 24 ahayd, goorsheegtuna ahayd 5$^{tii}$ iyo 30 daqiiqo ayaa Ugaaska laga soo kexeeyey Gugumacad isagoo ay galbinayaan Gandihii, daqiiqado yar kadib magaalada Mille ayaan soo galnay oo si diirran ugu soo dhaweeyeen dadweyne boqol-laal ah. Ugaaska waxa la dejiyey aqal laba qol oo waweyn ka kooban, dhinaca galbeedna kaga toosan masjidka weyn ee magaalada Mille.

Markii la afuray kadib ayaa golihii la wada fadhiistay, dhinac waxa ka soo jeeda qaar ka mid ah Gandihii oo baaho u dhan, dhinaca kalena odayo Reer Xasan. Hadalka sidii caadadu ahayd duco ayaa lagu furay, dabadeed oday ka mid ah Gandihii baa hadalka qaatay isagoo si kookan u hadlay, wuxuu yidhi isagoo Reer Xasan la hadlaya :

- *"Boqorkii Ciise ayaan wadaa, uu soo toddoba baxay. Ciise-weyne imika wixii ka dambeeya Reer Xasanow adun kugu soo wareejiyey Ugaaska. (40) afartan maalmood kadib haddii Alla yidhaa baan u iman, walaalahayow isagoo bad qaba aan u imaaddo."*

(Waa sida xeerka Ciisuhu dhigayo).

Dabadeed waxa hadalka qaatay oday Reer Xasan ah, wuxuu yidhi :

- *"Waan guddoomay tolkayow daranyada na waan ka dhabi haddii Alla yidhaa."*

Duco dabadeed waa la kala dareeray.

Habeenkaa wixii ka dambeeyey guddidii iyo Gandihii ka koobnaa (144ka) boqol iyo afar iyo afartankii oday dhammaantood nin walba degmadii uu ka yimid buu ku toosay ballantuna waa (40) afartan maalmood ka dib.

Ugaaska waxa goor kasta Mille la jooga af-hayeenna u ah guddoomiyihii Gandaha Xaaji Rooble Wacays iyo Ugaaska aabbihii Maxamad Ibraahim Ugaas Wacays.

## ↯ Abaalmaarin

Reerka Yeesif, Geeddi-Cali, oo ah reerkii Ugaaska Cimaamadda saaray waxa xeer ah in la siiyo boqol sameenood mar kasta oo ay Ugaas cimaamadda saaraan. Markan waa la siiyey, hasayeeshee duruufo jira awgood sameenihii lacag baa lagu siiyey. Sameentii keliya 100 birr oo Itoobiyaan ah baa loo xisaabiyey. Sidaa daraaddeed 10.000 birr baa la siiyey. Lacagtaa guddidii qabanqaabada ayaa bixisay.



Reer Xasan, Yoonis-Gurrane iyagana waxa xeer ah in la siiyo Hal. Iyagana markan hashii lacag baa lagu siiyey oo 4.600 birr baa gacanta laga saaray.

## ↯ Samirsiis

Wiilkii reer Mille ahaa ee tartanka Ugaasnimada laga guulaystay isagana xeer baa siiyey Qaalin geel ah. Qaalintii isagana lacag baa lagu siiyey oo 1.200 bir baa gacanta laga saatay. Dhaqaalahaa oo dhan guddidii qabanqaabada ayaa bixisay.

# Bareentu
# Soo Dhaweyntii iyo Ducada Yeesifka

Sidii ballanku ahaa qaar ka tirsan Gandihii oo baaho u dhan ayaa Mille tegey. 18[kii] bishii Okt. 2009, ayaa Ugaas Mustafa iyo Gandihii ka soo ambabaxeen Mille iyaga oo ku sii jeeda goobta la yidhaa Bareentu oo dhinaca galbeed kaga toosan magaalada Erer.

Ugaaska goobtaa boqollaal dad ah baa ku soo dhaweeyey oo halkaa kaga hor yimid. Markii la maqlay in Ugaaskii uu joogo Bareentu waxa ku soo xoomay Ciise fara badan oo gees walba ka yimid. Ummaddaas oo dhallinyaro, waayeel, dumar iyo carruurba lahaa waxa uu qof walba u soo orday in uu arko oo uu salaamo Ugaaska. Intii uu Ugaas Mustafe halkaa joogay waxa lagu qaabilay ciyaaro dhaqan ah, gabayo duco ah, farxad iyo raynrayn aan la soo koobi karin. Ciisihii goobtaa ku soo ururaay, markaad si dhab ah ugu fiirsato badhbadhaadhkii wajiyadooda ka muuqday, waxaad ka dheehanaysay baahida loo qabay in mar uun la qabto oo la helo Ugaaskii ahaa qabay hoggaan ummadda mideeya.

Reerka Yeesif waxay halkaa soo tubeen 46 halaad iyo laba sac. 18 halaad iyo laba sac Ciisihii bay u qaleen labadii maalmood ee martida loo ahaa. 10 halaad Ugaaskay ugu deeqeen, 6 halaad Ciisahay siiyeen, 12 halaadna Yeesif baa loo celiyey. Hasayeeshee 6dii halaad ee dib logu celiyey, Yeesifku wuxuu Ciisihii bu ugu daraay.

Haddaba Yeesifku hawl kale uma qabtaan Ugaaska ee way u duceeyaan, sidii bayna yeeleen oo way u duceeyeen. Maalintii labaad markii salaaddii duhur la tukaday ee hadhimadii la cunay baahadii Ciise iyo Ugaaskii fadhisteen ayaa sidii caadadu ahayd la ducaystay.



Intaa kadib waxa hadalka qaatay odayo Yeesif ah oo baahadii Ciise ee halkaa ku dhannayd iyo Ugaaska ka codsaday in loo duceeyo Yeesifka.

- Haddaba ducadan gaarka ah ee Yeesifku Ciisaha ka codsaday maxay tahay ?

1900 iyo siddeetameeyadii waxa dhacday dirir foolxun oo dhex martay labada reer ee kala ah Yeesif iyo Ashkir oo Ciisuhu jeclaysan. Dirirtaas waxa labada dhinac kaga dhintay rag door ah oo qaarkood si foolxun loo dilay. Intii ay dirirtu socotay geedo badan oo garta lagu qaado baa la iskugu keenay labada qoloba si loo dhammeeyo colaadda waase loo maara waayey. Dirirtaa labada qolo, Ciisaha laf dhuun gashay bay ku noqotay.

U dambayntii waxa la soo xulay guddi ka kooban boqol oday iyo boqorka, "Boqorka iyo Boqolka Nin", si loo soo dabayaaqeeyo dirirtan. Waxa lagu kulmay oo la fadhiistay Geedka Meeta. Guddida iyo garta waxa guddoominayey Allaha u naxariistee Ugaas Xasan Xirsi. Ka dib guddidii markay dhan walba ka rogtay arrinkii, go'aammo raalli laga wada noqday bay soo saartay. Go'aammada waxa ka mid ahaa :

- **in colaadda la joojiyo,**
- **in raggii dhintay iyo kuwii dhaawacmayba magtooda iyo mawlaxadooda la bixiyo.**

Ugu dambayna waa lagu wada duceeyey.

Haddaba iyadoo aan weli go'aammadii la fulin ayaa waxa dhacday arrin aan haabkaba lagu hayn oo Ciise oo dhan af-kala-qaad ku noqotay, oo waa maxay ?

Labaatan jirku intuu ood ka booduu arrin ka boodaaye, Wiil dhallinyar oo Yeesif ah baa si kas iyo ula kac ah u toogtay wiil reer Ashkir ah oo aan waxba galabsan. Halkaa waxa ka cad in Yeesifku ku ballan furay. Xilligaa wixii ka dambeeyey Yeesif uu ka qoomameeyey ballan furkii. Tan iyo waagaa dhibaatooyin badan baa soo foodsaartay Yeesifka. Guuldarrooyinkii soo gaadhay oo dhan waxay u aaneeyeen ballantii ay ka baxeen. Ducada uu Yeesif weydiistay Ciisaha halkaa bay ka soo jeeddaa. Lixda aqal ee baahada Ciise ka soo jeedo odayadii matilayey ee goobta joogay ayaa mid mid ugu duceeyey Yeesif, iyagoo weliba si niyad iyo laab furan ah ugu dheeraaday ducada.

# Hawshii Caano iyo Caddiin

Waxa dhaqan ah in Ugaaska la mariyo dalka iyo dadka ba. Waxa kale oo la sameeyaa dhaqdhaqaaqyo kale oo soo jireen ah, sida caanaha looga liso xoolo magacaaban oo ka soo jeeda qoysas magacaaban. Ujeeddooyinka iyo falsafadda ka danbaysa arrimahan qoraalkan laguma soo koobi karo, laakiin waxa hubaal ah in salka loo dhigayo dhaqanka ah in uu Ugaasku ka soo jeedo dhaqan da' weyn oo xoolihii Aabbihii Ciise cad iyo caddiin ba laga siiyo. Waxa kale oo ka mid ah falsafaddaa in ay bulshadu wada leedahay Ugaaska iyo in da'da soo kacaysa la dareensiiyo dhaqankaasi oo in ay la noolaadaan si ay u sii tebiyaan.

## Hashii Goda - Bareentu

Ducadii Yeesifku markii la soo qatimey buu Reer Xasankii dib ugu celiyeey Ugaas Mustafe baahadii Ciise oo dhan. Intaa markii ay dhacday waxa Ugaaska loo dhiibay oo lagu wareejiyey Sacad Muuse; Reer Guulane.

Habeennimadii 20[ka] Okt. 2009, Reer Guulane ayaa sidii caadadu ahayd Ugaaska u soo lisay "Hashii Goda". Caanihii oo gorof ka buuxa waxa soo qaaday odayga caanka ah ee Geelle Suge Dharaar. Geelle si tartiib ah buu ula hor fadhiistay Ugaaska caanihii, waxaanu yidhi :

- *"Boqorow caanahan waxaan ka soo lisnay hasha la yidhaa Goda. Waa hal tafiirteedu ka soo jeeddo geelii aan aabbeheen Sheekh Ciise ka dhaxallay, 18kii Ugaas ee horena waa loo lisay ee adiguna Boqorow naga guddoon."*

Ugaaskii baa labada gacmood gorofkii ku qabsaday oo intuu Bismillah yidhi saddex goor kabaday caanihii.



Maalintii xigtay ee 21[kii] okt. Markii waagu dillaacay duco dabadeed, Xaaji Muuse oo ku hadlaya magaca Reer Guulane ayaa hadalka qaatay. Xaajigu waxa uu sheegay ` in Ugaaska lagu soo wareejiyey baahadii Ciise si ay u soo mariyaan Reerihii iyo Dixihii caadada ahaa in la geeyo Boqorka caleemasaarka Saylac kaa hor. Haseyeeshee, buu raciiyey Xaajigu, maanta duruufaha, wacdi iyo abaaro xilligan jira daraaddood hawshaasi si wanaagsan nooguma suuragalin.`

Intaa ka dib waxa taladii la wareegey Ciisihii si ay u go'aamiyaan geeddi socodka hawlaha Ugaaska. Markii la qaadaa dhigay waxa la isla gartay in xeerku oggol yahay in Ugaasku ugu yaraan 6 bilood fadhiyo ama uu joogi karo deegaanka Mille. Magaalo weyn Ugaaska lama geeyo tan iyo inta Saylac lagu soo bokhrayo. Marka caadada iyo xeerka uu leeyahay loo dhammeeyo ee dixaha iyo reeraha la soo wada mariyo ayaa magaalo sida Diridhaba la geyni karaa. Intaa horteed, wuu ku shaashoobi bay yidhaahdeen odayadu. Sidaa daraaddeed Ugaaskii ayaa lagu celiyey Mille.

## Laxdii Dharo - Nirgaale

Bishii Nov 19[kii]. 2009 ayaa mar labaad la bilaabay socdaalkii lagu marinaayey Ugaaska reerihii iyo dixihii caadada ahaayd iyo hawlihii Caano iyo Caddiinta.

Ugu horayn, Xaaji Rooble Wacays, guddoomiyihii Gandaha oo uu wehelinayo Cumar Fariid oo ah nin macallin ah isla markaana cilmi baadhe ah ayaa sahan u baxay si ay u wargeliyaan isla markaana ay ula soo ballamaan reeraha Ugaaska la geyn doono.

Xaaji Rooble Wacays iyo Cumar Fariid ballan ku beegan 22[ka] Nof. bay la soo xidhiidheen Reer Xasan Gadiidshe ah, waa reerka Ugaaska u lisa "Laxdii Dharo", maalintii xigtayna Diridhaba ayey ku soo noqdeen.

21[kii] Nof. Xaaji Rooble oo ahaa Guddoomiyihii Gandaha isla markaana ah af-hayeenka Ugaaska ayaa Diridhaba kula shiray qaar ka mid ah Gandihii iyo guddidii Ugaaska soo qabatay, kuwaas oo u badnaa 12[kii] oday ee hawlaha sii waday intii Ugaas la'aanta lagu jirey,

si ay isula meel dhigaan hawlaha soo socda. Fadhigaa Xaaji Rooble iyo odayadii wey is af garanwaayeen. Markaan u kuur galay baan ogaaday in uu jiro cagajiid ka yimid dhinaca odayada.

Intaa ka dib, Xaaji Rooble Wacays, isagoo buuxinaya xeerka ayuu dedaal u galay sidii uu u dhisi lahaa guddi ay u dhanyihiin dhamaan baahadii Ciisuhu oo Ugaaska socdalkiisa ku gelbisa isla markana u raacda reeraha la geynayo.

Barqadii 22[kii] Nof., ayay guddidii oo galbinaysa Ugaaskii ka ambabaxday Mille iyaga oo ku sii jeeda goobta la yidhaahdo Nirgaale oo uu markaa degganaa reerka aan ku soconnay, waa Reer Xasan Gadiidshe oo Ugaaska u lisa "Laxdii Dharo". Ugaaska abbihii Maxamad Ibraahim iyo odayo kale oo ku sugnaa Mille ayaa iyaguna ku biiray wefdigii.

Lixdii oo gaw ah baan soo gaadhnay halkii reerku yaallay ee Nirgaale. Dadkii oo dhan baa si heer sare ah noo soo dhoweeyey. Aqal-Soomaali cusub oo qurux badan baa Ugaaska loo dhisay laguna soo dhoweeyay.

Salaaddii maqrib markaan tukanay ayaa odayadii Reer Xasan Gadiidshe Ugaaska u duceeyeen. Ciisihii iyaguna reerkii bay u duceeyeen. Ducooyinku waxay u badnaayeen roobdoon Ilaahay lagaga baryayay inuu abaarta ku raagtay dadka ka dulqaado

Intii aan la gaadhin salaaddii cishe ayaa odaygii reerka aabbaha u ahaa Xaaji Cali Gasle Xaaji Obsiiye Waaberi, si deggan Ugaaska hortiisa u soo fadhiistay isaga oo labada gacmood ku sida gorof caano ah. Intii aanu Ugaaska u dhiibin gorofka ayuu Xaajigu yidhi :

- *"Boqorow caanahan waxaan ka soo lisnay laxda magaceeda la yidhaa* ***Dharo****, waa lax tafiirteedu ka soo jeeddo xoolihii an ka dhaxallay Aabbeheen Sheekh Ciise, 18kii Ugaas ee kaa horreeyeyna waa loo lisay, adigana waan kuu soo lisnay ee Boqorow naga guddoon."*

Ugaaskii baa markaa labada gacmood ku guddoomay caanihii, intuu Bisinka qabsaday ayuu saddex goor kabaday, intii hadhayna goor dambe ayuu dhamay. Habeenkaa adhi badan baa loo qalay Ugaaska iyo dadkii la socotay.



Waagii markuu baryey salaaddii ka dib ayaa mar kale duco loo fadhiistay. Ugu horreyn odayadu Ugaaskay u duceeyeen iyaga oo Ilaahay ka baryaya inuu ka dhigo Ugaaska; Ugaas nabadeed, Ugaas Rooble, Ugaas Khayre. Ducadu waa mid odayada goobta jooga oo dhan ay ducaynayeen oo la meerinayey, abaarahana si weyn baa looga ducaystay.

Goorsheegtu markay ahayd 8[dii] aroornimo ayay Ugaaskii iyo odayadii la socday ka ambabaxeen Nirgaale, wax yar dabadeedna Mille ayay gadheen.

## Sacii Leefa - Caadda

Bisha Nof. 23kii, 2009 waxa ay ballantu ahayd inuu Ugaasku ku hoydo goobta la yidhaa Caadda amma Ceel-caadeed. Waddada tegta Caaddu waxay sii martaa tuulada la yidha Jaleelo.

Dadweynihii degganaa Jaleelo waxay ku tashadeen, kol haddii uu Ugaaska cusubi soo marayo tuuladooda in ay tahay nasiib iyo ayaan ay dad badan dheer yihiin. Sidaa daraaddeed waxaay goosteen inuu maalintaa Ugaasku dhaafin oo ay marti gelinyaan. Go'aankoodana guddoomiyihii Gandaha oo weli Mille jooga ayey ka soo war geliyeen.

Intaan laba tuke isdayin bay odayadii alaabadii rarteen oo Mille ka baxeen iyaga oo Ugaaskii gelbinaya. Goorsheegtu markay ahayd 10[kii] iyo 30 midhid baa la galay Jaleelo.

Jaleelo soo dhaweyntii ugu ballaadhnayd baa Ugaaska lagu soo galbiyey. Waxa ka hor yimid dhallinyaro rag iyo dumarba leh, odayaal iyo carruur ku labisan dhar wada cad oo kuwii dhaqanka ah. Dadku si habaysan bay u joogeen iyagoo ubaxyo iyo caleemo qoyan lulaya, qaar kale wilwileh ayey ciyaarayeen. Hablo bilic leh ayaa iyaguna ragga gadaashooda ciyaarihii hiddaha iyo dhaqanka oo kala geddisan la kala baxay. Farxadda maalintaa goobtaa ka muuqatay wax la malayn karayo ma ahayn.

Odayadii Jaleelo Ugaaska ayaa wada gacan qaaday iyaga oo soo dhaweynayaa. Dabadeed Ugaaskii iyo intii la socotayba waxa nala dejiyey dugsi cusub oo tuulada loo disayey oo aad iyo aad loo qurxiyey maalintaa.

Qolkii Ugaaska loogu tala galay markaan galnay waan la ashqaraarnay, waayo sida loo goglay ee loo qurxiyey. Markaad aragto marnaba ismaad odhanayn meel tuula ah baad joogtaa.

Maalintaa reer Jaleelo adhi badan bay qaleen oo hadhimadii wada gaadhay waftigii Ugaaska iyo dadkii tuulada badankood. Intaa oo dhan waxa ka darnaa boqollaal carruurtii xoolaha raacaysay ah oo tuulada ku soo xoomay si ay u arkaan Ugaaska. Hadhimadii kadib dadweynihii Jaleelo iyo hareereheeda degganaa ayaa iyagoo faraxsan isa soo daba joogsaday qolkii Ugaasku degganaa si ay u gacan qaadaan una dhunkadaan Ugaaska, salaantaa oo socotay ilaa casarkii. Kadib, Ugaaski qolkiisii baa la geliyey si uu u nasto.

Galabnimadii odayadii Ugaaska la socday iyo kuwii reer Jaleelo ayaa bilaabay inay u duceeyaan Ugaaska isla markaana ka ducaystaan abaaraha beryahan dambe dhulka ku batay.

Ducadaa kadib ayaa la bilaabey diyaargaraw lagu tagayay halkii loo socoday oo ah Caadda amma Ceel-caadeed. Shantii iyo 45 midhidh ayay Ugaaskii iyo odayadii la socday ka baxeen Jaleelo. Salaaddii maqrib oo dhexda lagu soo tukaday kadib buu waftigii galay goobtii loo socday ee Caadda. Halkaa waxaa Ugaaska loo keenay goobta ay mileyga degganaayeen reerka la yidhaa Sacad Muuse oo Reer Guulane ah, waa reerka Ugaaska u lisa saca Leefa caanihiisa.

Milaygii la galay Caadda waxay ahayd goor dhulku madow yahay, dabayl siigo wadata oo aad u qabaw na socotay. Odayadii reerka iyo dhallinyaro aad u faraxsan baa soo dhaweysay Ugaaskii iyo waftigii la socday ba. Aqal Soomaali weyn oo aad u qurux badan baa Ugaaska la dejiyey.

Durba waa la hawl galay oo dadkii reerka joogey oo dhan baa mashquulay, qaar xoolay qalayeen, qaar shaah bay karinayeen, qaar kalena martida iyo Ugaaska soo dhaweyntooda ayay ku hawllanaayeen, carruurtuna Ugaaskay indho farxadeed ku eegayeen iyada oo kuwa kalena gacanta ka dhunkanayeen.

Salaaddii cishe dabadeed aqalkii waxa Ugaaska la fadhiistay, waftigii iyo odayadii martida loo ahaa. Waa la duceeyey sidii caadada ahayd.



In yar ka dib waxa soo galay aqalkii, odayga reerka u weyn oo magaciisa la yidhaa Giirre Wacays Faatax. Odaygu gorof caano ka buuxaan buu labada gacmood ku sidaa, si deggan oo asluubi ka muuqato Ugaaska hortiisa u fadhiistay isagoo aad mooddo inuu ataxiyaadsanayo. Giirre intii aanu Ugaaska u dhiibin gorofka caanaha waxa uu yidhi :

- *"Boqorow Caanahan waxaan ka soo lisnay saca la yidhaa* **Leefa**.. *Sacan tafiirtiisu waxay ka soo jeeddaa xoolihii aan ka dhaxalnay Aabbeheen Sheekh Ciise, 18kii Ugaas ee kaa horreeyeyna waa loo lisay ee Boqorow adiguna naga guddoon."*

Ugaaskii baa markaa intuu labada gacmood ku guddoomay gorofkii Bisinka na qabsaday buu 3 jeer kabdaday caanihii. Goor walba oo Ugaaska caano loo lisay, Xaaji Rooble Wacays oo guddoomiyihii Gandaha ahaa baa garab fadhiyey. Intaa kadib, duco badan baa la duceeyey.

Dhawr saacadood dabadeed waa nala xeraadiyey oo adhigii la qalay hilibkiisii baa nala soo hordhigay. Ugaaska marka hilibka la siinayo, goor walba waxa la soo hordhigaa neefka dhabarkiisii oo aan meelna laga jebin (Waa xeer in Ugaaska la siiyo dhabarka, waayo horaa loo yidhi Ugaasku waa lafdhar, sidaa daraaddeed Ugaaskuna laf dhabar oo dhan gacantiisa kuma jebiyo).

Markii loo toosay salaadkii subax ee la tukaday dabadeed, aqalkii Ugaaska la dejiyey hortiisa ayaa la wada fadhiistay. Odayada reerku horey ayey uga war hayeen in Ugaasku habeenkaa uun uu u hoyan doono Caadda, sidaa daraaddeed waxay subaxaa dalbadeen in Ugaasku maalintaa na la joogoo oo uu ka tegin. Xaaji Rooble ayaa markaa hadalka qaatay oo ka cudurrdaartay oo sheegay duruufo jira awgood in aan la joogi karin. Dhawr goor haddii doodda la isdhaafsaday odayada reerku way noo garaabeen. Dabadeed waxa loo galay duco dadkii meesha joogay oo dhan mid walba mar duceeyo.

Ugu horeyn Ugaaska ayaa loo ducaynayey in Ilaahay ka dhigo Ugaas nabadeed, Ugaas khayrre iyo Ugaas cadaaladeed, waxa kale oo odayadu Ilaahay ka baryeen in uu abaarta raagtay ka dul qaado ummadda. Todobadii aroornimo bishu markay ahayd 24$^{tan}$ 2009 ayaa laga soo ambabaxnay goobtii Caadda annagoo soo marnayna Jaleelo.

Reer Jaleelo subaxaana Ugaaskii iyo annagii la soconnayba si heer sare ah bay noo soo dhaweeyeen. Ugaasku na dhaafi maayo annagoo qureecsiinna mooyee bay yidhaahdeen reer Jaleelo, sidaa daraaddeed saacado kooban oo ah intii aan qureecanaynay baan ku hakanay Jaleelo.



# Geeddi Socodkii
# Caleema Saarka Ugaaska 19aad

Kadib markuu Ugaasku Mille fadhiyey muddo lix bilood ah, waxa la bilaabay socdaal loogu baxayo magaalada taariikhiga ah ee Saylac kuna taal xeebta galbeed ee Waqooyiga Somaliya si loo caleemosaaro Ugaaska 19aad ee Ciisaha. Saylac intaan la gaadhin waxa xeer ah in la sii mariyo Ugaaska dhawr dixood oo caan ah kana mida dhulka Ciisaha. Haddaba, 23kii bishii Feb. 2010, waxa magaalada Mille ku ballamay ugu yaraan sagaashan oday oo ka mid ah odayadii Gandaha iyo Guddida ahaa ee hore u qabtay Ugaaska.

## Magaalada Mille

Sidaan xagga hore ku soo aragnay maalintii la qabtay Ugaaska maalintii ku siddeed ahayd ayuu Ganduha ku wareejiyey Reer Xasan oo ah reerka uu Ugaasku ka dhashay. Haddaba maalintii loo yimid waxay noqotay bishii Feb. 23dii 2010kii. Maalintaa bannaan ka dambeeyay aqalkii Ugaasku degganaa ayay ku kulmeen odayadii Ciisaha ka socday oo dhinac ka soo jeeda iyo odayadii Reer Xasan ka socday oo geesta kale ka soo jeeda.

Odayada Reer Xasan dhexdooda waxa joogay Ugaas Mustafe oo ku labisnaa shaadh midabkiisu ka koobnaa caddaan iyo buluug, gundhate cad iyo golxad iyo kabo-soomaali na xidhan. Ugu horrayn waa la wada ducaystay. Duco dabadeed saddex oday oo reer Xasan ah baa goobtaa ka hadlay; Xaaji Carab, Xaaji Rooble iyo oday kale, dhammaantood waxay halkaa ka sheegeen in Ugaas Mustafe sidii Ciise ugu dhiibay u hayaan isla markaana uu aad iyo aad u wanaagsan yahay wax dhibaato ahina haba yaraatee aanay soo gaadhin. *"Waa Ilaahay mahaddii ee Ciisaw haddaad u timaaddeen maanta waad dhan tibiine naga guddooma."* Reer Xasan markay intaa

yidhaahdeen waxa hadalka qaatay isagoo ku hadlaya magaca Ciisaha odayga la yidhaa Dubbad Muuse Habbane oo hadalka ku soo koobay : "*Waa magan Alla oo waa niga guddoonnay.*"

Intaa dabadeed waxa duceeyey lix oday oo matalayay lixda aqal ee Ciisuhu ka kooban yahay, markii ducadii la dhammeeyey waxa halkaa lagu gooyey ciyaarta guusha tilmaamaysa ee la yidhaa wilwilaha oo laba jeer lagu celiyey.

Intaa ka dib waxa loo qalqaalay socodkii. Tobankii iyo 30 daqiiqo ayaa laga ambabaxay Mille iyada oo lagu sii jeedo magaalada Hadhagaala oo Mille kaga toosan woqooyi-galbeed una jirta 47km. Hadhagaala waxay ka mid tahay magaalooyinka uu maro khadka tareenka ee isku xidha Jabuuti iyo Diridhaba. Maalintaa Ugaasku ka soo baxay Mille waxa weheliyey 90 oday oo ka mid ahaa Guddidii iyo Gandihii iyo qaar ka mid ah qaraabada Ugaaska.

Intaa waxa dheeraa Golaha telefishanka iyo raadiyaha ee Jabuuti ee (RTD) oo ay ka socdeen Maxamad Daahir Xasan, Cabdalla Xaaji Cusmaan, Maxamad Deheeye Guuleed iyo Maxamad Aaden Tallan Dhinaca Jabuuti waxa kale oo ka socday Saalax Sakariye Sheekh iyo Aadan Cusmaan Dharaar oo ka tirsan laanta cilmi baadhista u qaabilsan Jam. Jabuuti ee loo yaqaan marka la soo gaabiyo (CERD). Jaamacadda Jabuuti waxa ka socotay Sagal Maxamad Jaamac oo diyaarinasay pHD, waxa kale oo wehelinayey koox ka tirsan Tvga Diridhaba, laanta af Soomaaliga ee radiyo Fana iyo Tvga Itoobiya ee ku yaal Addis Ababa. Dhinaca nabadgelyada waxa dawladda deegaanka Soomaalida Itoobiya u xil saartay in ku dhaw labaatan askarta booliska ka tirsan oo watay saddex gawaadhida loo yaqaan Landcruiser.

## Dixda Habaqo

Intaan la gaadhin Hadhagaala waxaa lagu horreeyay dixda caanka ah ee la yidhaa Habaqo oo 15km oo qudha u jirta Hadhagaala. Habaqo waa mid ka mid ah dixaha la soo mariyey 18kii Ugaas ee kan ka horreeyey. Habaqo waxa kale oo ay caan ku tahay oo lagu qabtaa shirarka Ciisuhu u dhan yahay. Berigii hore intaan magaalooyinku jirin,



marka Habaqo la soo mariyo Ugaasyada, Ciisaha hareeraha yaal oo dhan baa ku soo shiri jirey oo geel iyo adhi ku qali jiray kuna ducaysanayey Ugaaskana halkaa bay kula kulmaayeen. Haddaba markii la gaadhnay Habaqo iyada oo la gelbinayo Ugaas Mustafe lama kulmin dad halkaa ku soo shiray waayo ballantu waa Hadhagaala, hasayeeshee markii la soo hoos joogsaday geedkii Habaqo ayaa duco iyo Allabari la bilaabay, waxa duceeyey lix oday oo ka kala socday reeraha uu Ciisuhu ka kooban yahay. Duco dabadeed waxa geedka sooyaalkiisa wax yar ka taabtay oday waayeel ah oo yidhi: "*geedkan aan maanta hoos joognaa waa geedkii uu fuulay Maxamuud Yoonis Muuse ee adeerkii oo ahaa Sacad Muuse ku lahaa, 'ka soo deg aabbo'.*" Waa goob ka mid meelaha tariikhiga ah ee aan qornayn haddana odayadu inna soo gaadhsiiyeen.

## Hadhagaala

Habaqo waa laga sii gudbay illaa Hadhagaala, inta aan la gaadhin magaaladii waxa Ugaaska ka hor yimid dad fara badan oo ka mid ah dadweynihii Hadhagaala oo ku labisan dharkii hiddaha iyo dhaqanka isla markaana wilwilaha goynaya. Kowdii iyo 30 daqiiqo ayaa la soo gaadhay magaalada, halkaas oo dadweyne aan ka yarayn kun qof oo rag, dumar iyo carruurba lehay Ugaaska ku sugayeen.Waddada waxa la soo safay ardaydii dugsiyada oo caleemo qoyan ruxaysa. Farxaddii iyo raynrayntii ka muuqatay dadka waxa laga daalacanayey sida ay ugu oommanaayeen mar uun inay arkaan Ugaas ay leeyihiin. Ugaaska iyo odayadii la socday waxay joogsadeen bannaan ka soo horjeeda maqaamka ama mawlaca sheekh Ciise ee ku yaal Hadhagaala, halkaa oo shacabkii la kala baxeen ciyaaro aan laga xiiso goynayn. Waxa kale oo halkaa laga tiriyey gabayo iyo buraanburro iskugu jirey duco iyo ammaanta Ugaaska. Goobtaa ciyaaruhu ka socdeen waxa laga dhisay laba aqal-soomaali oo aad iyo aad loogu farayaraystay.

Cabbaar dabadeed markii loo ciyaaray Ugaaska waxa la fadhiisiyey geed weyn oo ku yaal barxadda maqaamka isaga iyo odayadiiba. Boqollaal ka tirsan dadweynihii ayaa isa soo safay goobtii uu fadhiyey Ugaasku si ay gacanta uga soo dhunkadaan, inkaste oo qaar

badan nasiib u yeesheen inay Ugaaska gacan qaadaan haddana in kale ayaa nasiib u weyday.

Reer Hadhagaala maalintaa waxay martida u qaleen geel iyo adhi badan oo hadhimadii iyo xeraadkiiba si wanaagsan u gaadhay. Habeennimadii waxa Ugaaska lagu marti geliyey aqalka ugu bilic san magaalada.

Salaaddii subaax kadib markii la ducaystay waxa martidii lagu horay qureec iyo shaah ay aad uga dhex muuqatay moofada ay Hadhagaala caanka ku tahay. Moofada waxa ku lammaannaa loxoox amma biddeeno aan ka laalaadin. Markii la cunteeyey kadib ciyaarta wilwilaha ayaa la bilaabay iyadoo subaxaa ay isku heleen rag ruugcaddaa ku ah ciyaarta wilwilaha. Wilwilahaa oo dareenkii shacabka aad iyo aad u soo jiitay ayaa ahayd mid ay ku sagootinayaan Boqorka.

24[kii] Feb. 2010[kii], goorsheegtuna tahay 8dii iyo 15 daqiiqo ayaa laga ambabaxnay Hadhagaala illaa iyo Ayshaca. Hayeeshee ku talagalku waxa uu ahaa dixda caanka ah ee Geel-Case, buurta taariikhiga ah ee Siti iyo Laas-Xadhaadh in la sii maro. Laba waddo ayaa jirta oo loo sii maro Ayshaca, midi xadiidka dhiniciisa ayey martaa oo waa toobiye, Laas-xadhaadhna waxa loo socdaa 17km oo qudha. Waddada kale, buurta dadban ee u dhaxaysa Hadhagaala iyo Laas-xadhaadh ayaa laga soo wareegaa. Warar sugan oo la helay baa tilmaamay in waddada toobiyaha ahi go'an tahay oo aan la mari karin, sidaa daraaddeed waxa la isku raacay in la maro waddada dheer. Dhinaca cadceed-soo-baxa ayaa la abbaaray waxaana lagu dhacay waddada weyn ee xidhiidhisa Jabuuti iyo Diridhaba.

## Biyo-Qaboobe

Intii la sii socday laba magaalo oo waddada ku yaal oo kala ah Biyo-Qaboobe iyo Maro-Madoobays baa la sii maray. Biyo-Qaboobe markii la soo gaadhnay shacabkii oo is habeeyey oo waddada hareereheeda isa soo tubay baa mudh la isku soo yidhi. In badan oo ka mid ah dadweynihii Ugaaska soo dhaweeyey dharkii dhaqayka ayay ku labisnaayeen ardaydii dugsiyadana waddadaa la soo taagay iyaga oo caleemo qoyan ruxaya. Waxay indhuhu qabanayeen maalinaa odayo



da' ah oo wilwilaha goynaya isla markaana tirtirfanaya. Badhtanka markii soo gaadhay ayaa baabuurkii Ugaaska loo hakiyey si uu u gacan qaado dadweynihii faraxsanaa ee soo dhaweynayey isla markiiba dadkii oo dhan baa ku soo xoomay gaadhigii Boqorka si ay u gacan qaadaan ama u arkaan maruun wajigiisa. Reer Biyo-Qaboobe waxay ka mid noqdeen dadka nasiibka u yeeshay in magaaladooda Ugaasku soo maro.

## Moro-Madoobays

Biyo-Qaboobe markii laga baxay waxaa durba la gaadhay tuulada aan ka fogeyn ee Maro-Madoobays. Tuuladaa dadkii degganaa iyaguna siday u dhannaayeen dariiqa ayey isa soo taageen si ay u soo dhaweeyaan Ugaaska. Baabuurkii Boqorku markuu soo gaadhay halkii ay dadku ugu badnaayeen ayaa la joojiyey, Ugaaskuna intuu daaqadda gacanta kala baxay buu dadkii gacanqaadayey intii uu gaadhi karay. Maro-Madoobays iyo dadkeeduba iyaguna waxay ka mid noqdeen kuwii uu deegaankooda Ugaasku.

Halkii baa laga sii waday galbiskii Ugaaska, cabbaar markii la socday dixdii Geel-Case ayaa afka la saaray. Geel-Case waa mid ka mid ah dixihii la mariyey 18kii Ugaas ee kan ka horreeyey.

## Dixda Geel-Case

Dixda Geel-Case, buurta caanka ah ee Siti bay geesta bari ka martaa. Siti waa xaruntii Gandaha waana gootii lagu dhammays tiray xeerka Ciisaha. Waa buur sooyaalka Ciisaha meel weyn kaga jirta. Sidaan meel hore ku soo sheegay Ugaasyadii hore marka la soo mariyo dixdan Geel-Case oo kale Ciisaha hareeraha yaal oo dhan baa ku soo ururi jirey si ay u soo dhaweeyaan Ugaaskooga, haseyeeshee, markan waxa la go'aansaday in tuulooyinka lagu soo ururo si loo soo dhaweeyo Ugaaska.

Dixdii Geel-Case waa la dhex mariyey Ugaas Mustafe oo buurta Siti dusheeda sare iyo halkii odayada xeerka dhigay fadhiisan jireen ayaa la geeyey. Buurta kuradeeda waxa ku soo dhaweeyey odayo iyo

dhallin-yaro wiilal iyo gabdhaba leh oo ka yimid Laas-Xadhaadh iyo Ayshaca. Waxa kale oo halkaa diyaar ku ahaa koox dharkii dhaqanka ku labisan oo goobtaa ku soo bandhigay ciyaarihii dhaqanka iyo heeso. Qaar ka mida odayadii la socday Ugaaska ayaa ka war bixiyey taariikhda dheer ee ay Siti leedahay iyo inay goobtani tahay meeshii xarunta u ahayd ee laga maamuli jirey arrimaha Ciisaha gumaysigii ka hor. 12^kii^ duhurnimo ayey buurtii Siti ka soo degeen Ugaaska iyo odayadii la socday, dabadeed Laas-Xadhaadh oo 6km oo qudha u jirta Siti baa la tagay.

## ✎ Laas-Xadhaadh

Ugaaska iyo odayadii dhammaantood dusigii hoose ee magaalada Laas-Xadhaadh ayaa la dejiyey. Kadib salaaddii duhur waa la qadeeyey. Hadhimadii reer Laas-Xadhaadh hilib geel bay u badnayd. Maalintaa magaalada waxa ka socotay dabayl aan kala go'lahayn oo awaaro badan wadata kana soo dhacaysay dhinaca bari.

Saddexdii iyo 45 daqiiqo baa laga soo baxay iyada oo lagu sii jeedo Ayshaca oo u jirta 25km.

## ✎ Ayshca

Ayshaca waa magaalo sooyaal xasuus badan leh oo ku taal meel malko ah oo xidhiidhisa saddex gees. 1960^kii^ ka hor waxay ahayd meel uu ka socday ganacsi xoog lahaa oo dad badan oo tijaar ah baa ku noolaa, hasayeeshee 60^kii^ markay Soomaaliya xorowday ayaa ciidammadii dawladdii boqortooyadii Hayle Silaase cagta mariyeen oo ay xasuuqeen dadkii magaalada ku noolaa iyagoo u kala aabbayeelin yar iyo weyn. Xasuuqaa kadib magaaladii way baaba'day.

Dhinac kale waxay magaaladu xarun u ahaan jirtay Sheekh Muuse-Rijaal oo ka mid ahaa culimadii waaweynayd ee Ciisaha. Sheekh Muuse isla magaalada Ayshaca ayuu ku aasan yahay, waxana magaalada ka dhisan maqaam ama mawlac ku magacaaban Sheekh Muuse.



Markii Ugaaska iyo odayadii la socday afaafka magaalada soo gaadheen waxa si weyn u soo dhaweeyey dadweyne boqollaal ah oo faraxsan. In badan oo ka mid ah shacabku dharkii dhaqanka oo kala duduwan bay ku labisnaayeen. Tan iyo markii la soo gaadhay goobta uu ku yaal maqaamka Sheekh Muuse hortiisa waxa hareeraha tubnaa dadweyne soo dhaweynayey Ugaaska. Maqaamka hortiisa ayaa la istaagay, cabbaar ayaa goobtaa lagu ciyaaray ciyaaro kala duwan, u dambayntiina wilwile ayaa lagu soo afjaray soo dhaweyntii loogu tala galay Boqorka iyo guurtidii galbinaysay.

Habeenkii waxa Ugaaska lagu soo dhaweeyey aqal uu lahaa guddoomiyaha Ayshaca.Waagu markuu dillaacay ayaa dadweynuhu mar labaad bilaabeen ciyaarihii iyo dalbaadeggii loogu tala galay Ugaaska. Dhinaca kale, habeenkii iyo isla subaxaaba magaalada waxa ku soo qulqulayey dad badan oo ka soo kicitimay magaalada Diridhaba si ay ugu biiraan guurtida la socota Ugaaska.

Dadka maalintaa Ayshaca Ugaaska ka raacay waxa ka mid ahaa,160 oday, guddidii qabanqaabada ee Diridhaba oo dhan, madax ka socota Ismaamulka Soomaalida Itoobiya iyo guddoomiyihii hore ee gabolka Soomaalida Cabdi Jibriil Boobakir iyo rag kale oo qayb weyn ka qaatay qabanqaabadii qabashada Ugaaska 19aad.

Maalintaa oo 25^kii^ Feb. 2010, 10^kii^ iyo 40 daqiiqo ayaa laga baxay magaalada Ayshaca iyadoo la gelbinayo Ugaaska. Si ammaanka loo sugo waxa hor galay gadaal iyo dhexdana socday iyagoo foojigan ciidammada booliska gobolka Soomaalida Itoobiya oo sidaan halka hore ku soo sheegay naga soo raacay Mille.

Intii aan la gaadhin Galiila oo ku taal xadka kala qaybiya Jabuuti iyo Itoobiya, waxa la sii maray Cadayle iyo Dawanle oo labaduba ku yaalla waddada. Dadkii ku noolaa labadaa goobood iyaga oo aan u kala hadhin bay dariiqa labadiisa dhinac isa soo taageen iyagoo caleemo qoyan lulaya, isla markaana tirtirfanaya, Ugaaskuna gacanta ayuu dadka u haadinayey.

## Galiila

11[kii] iyo 50 daqiiqo ayaa la soo gaadhay Galiila, halkaa waxa loogu yimid dad buux dhaafiyey goobtii xadka oo u harraadnaa inay arkaan Ugaaska iyo gawaadhi aan la qiyaasi karin oo ka kala yimid Jabuuti iyo Cali Sabiix. Waxa kale oo halkaa joogay ciidammo ka tirsan booliska Jabuuti oo loogu talo galay inay la wareegaan amaanka Ugaaska, qaar ka tirsan madaxda dawladda Jabuuti oo uu u horreeyay Guddoomiyaha Baarlamanka M. Idiris Arnaa`uud ayaa iyagu na goobtaa ku sugnaa. Xafiis ay leeyihiin ciidammada nabadgelyada Itoobiya ayaa Ugaaska iyo odayadii markaa garab fadhiyey lagu nasiyay. Xafiiska waxa fadhiyey madax labada dhinac ka kala socday, halkaa oo si rasmi ah Ugaaska iyo madaxdii la socotay loogu wareejiyey ciidammada booliska Jabuuti iyo madax kale.

Dabadeed Ugaaskii gaadhi cad oo landrover ah baa lagu qaaday, odayadii guurtidii iyo martidii kale iyaga gawaadhi basas ah baa loo kireeyey. Waxa na hor galay baabuurtii booliska. Marka xadkii Jabuuti loo tallaabay boqollaal baabuur ah oo Ugaaska sugayey oo dadweynuhu leeyihiin baa kuu soo biiray si ay Ugaaska u sii gelbiyaan.

## Dixda Dhanaan

Markan waxa loo jeestqy Dixda la yidhaa Dhanaan oo ka tirsan gobolka Cali Sabiix oo tuulada Cali Cadde bari kaga toosan. Dhanaan markan bay ka mid noqotay dixaha la mariyo Ugaasyada. Waxaa la sii maray Magaalada Cali Sabiix oo dadkii ku noolaa markii ay maqleen in Ugaasku soo marayo isa soo taagey waddada si ay u soo dhaweeyaan ama maruun indhaha u saaraan. Markii ay badhtamaha magaalada soo gaadheen baabuurkii Ugaaska siday iyo kuwii galbinayey ba ayaa sawaxan iyo mashxarad farxadeed la isku daray, hasa yeeshee reer Cali Sabiix soo dhaweyntii ay Ugaaska ugu tala galeen, dixda Dhanaan oo ah goobta lagu sii jeedo ayay ku diyaariyeen. Intii aan la gaadhin Dhanaan, Cali Cadde oo ka sokaysa ayaa la sii maray. Reer Cali Cadde iyaguna dariiqa labadiisa dhinac bay ku diyaargaroobeen si ay Ugaaska u salaamaan, in yar dabadeedna Dhanaan baa la galay. Halkaa dad boqollaal gaadhaya oo ay ka mi yihiin wasiirro, xildhibaanno ka tirsan golaha baarlamaanka iyo madaxda gobolka Cali Sabiix ayaa Ugaaska ku soo dhoweeyay.



Ugu horreyn dhallinyaro ku labbisan dharkii dhaqanka ayaa Ugaaska ku soo dhaweysay ciyaarta wilwilaha oo goor walba u taagan guusha.

Dhanaan waa meel miyi ah oo aan waxba ka dhisnayn, sidaa daraaddeed waxa martidii loo dhisay teendhooyin. Ugaaska aqal si gaar ah loo habeeyey oo shiraac laga sameeyey baa loo dhisay gaadh adagna waa la hor dhigay. Habeennimadii halkaa bay u hoydeen Ugaaska, odayadii iyo dhammaan martidii la socotay. Galabnimadii iyo subasnimadii dad badan oo dadkii deegaanka ah iyo qaar kale oo ka kala yimid Cali Sabiix iyo Jabuuti baa isa soo safay halkii uu Ugaasku degganaa si iyaguna markooda u salaamaan Ugaaska. Dhulkii Ugaasku soo maray oo dhan odayadii joogay Ugaaska ayey u ducaynayeen.

## Dixda Beeya-Caddey

26[kii] Feb.2010[kii] salaaddi subax ka dib markii la ducaystay ayaa socod loo tabaabushaystay sidii ballantu ahayd. Goor barqo dheer ah baa laga dhaqaaqnay dixdii Dhanaan iyadoo loo sii jeedo dixda kale ee la yidhaa Beeya-Caddey oo magaalada Holhol dhawr iyo toban km u jirta. Beeya-Caddey waa goob deegaan ah oo uu ku yaal dugsi hoose, dadkii degaanka iyo reer Holhol ayaa soo dhaweeyey kuna martigeliyey Beeya-caddey Ugaaska iyo odayadii uu hoggaaminayey. Dadweynuhu goobtaa laba aqal-Soomaali oo aad iyo aad u bilicsan ayay ugu talo galeen Ugaaska. Martidii iyo odayadii kale shiraacyo waaweyn oo habaysan baa loo dhisay.

Markii la soo gaadhay Beeya-Caddey Ugaaska waxa soo dhaweeyey dad boqollaal ah oo u badan reer Holhol, odayadii deegaanka iyo ardaydii dugsiyada Beeya-Caddey iyo Holhol. Ciyaaro aad iyo aad loo jeclaystay, waji furnaan, badhbadhaadh iyo duco ayaa halkaa lagu soo bandhigay. Habeennimadii roob wanaagsan oo lagu farxay baa dhulka ka da'ay. Waagu markuu baryey weli daruurtii baa sii dul joogtay hawaduna waxay isku rogtay jawi qabow oo wata neecaw aad loogu raaxaystay, maalintii oo dhan qorraxdu way qarsoonayd oo daruuro ayaa samada lagu hagoogay.

Ugaaska iyo odayo galbinaya ayaa dhex mushaaxay dixdii iyagoo ku raaxaysanaya neecawda qabow ee socota. Socodkii markuu ka soo laabtay Ugaasku ee uu soo joogsaday aqal-Soomaaligii uu degganaa ayaa farxad daraaddeed lagu soo dhaweeyey ciyaaro kala geddisan.

Intii Ugaasku joogay Beeya-Caddey dad badan baa galaa-baxayey. Dadkaas oo ka imanayey Jabuuti iyo Holhol waxay ahaayeen qaar u harraadnaa inay arkaan oo ay salaamaan Ugaaska. Galabnimadii iyo habeenkii labaadna weli roobkii baa da'ayey hawaduna way sii macaanaatay. Habeenkaa warar baa la helay sheegayay in roobab ka da'een Saylac iyo agagaarkeeda, waxana laga tashaday sidii laga yeeli lahaa socodka berri lagu tegayo Ugaas-Lagu-Boqor iyo Seylac.

## Ugaas-Lagu-Boqor

Subaxnimadii 28[kii] Feb. 2010[kii] salaaddii subax, duco dabadeed ayaa loo xamaan xidhay sidii loo guuri lahaa. Goor sheegtu markay ahayd 8dii ayaa laga soo baxay Beeya-Caddey iyada oo la sii maray Holhol. Dadkii reer Holhol ayaa dhammaantood waddada joogay si ay u sii salaamadiyaan Ugaaska. Markii la soo gaadhay magaalomadaxda, lama soo dhex marin Ugaaska e, waxaa laga leexiyey waddo ka baydha duleedka magaalada oo dugsiga booliska ee loo yaaqaan Idiris Faarax Cabbane dhabarkiisa marta. Waddadaas oo toos ugu baxda Lawyacaddo ee dhinaca Somaliya waxa Ugaaska iyo baabuurtii galbinaysay ku sugayey wasiirro dawladda Jabuuti ka tirsan iyo wasiirro iyo saraakiil sare oo ka socday Somaliland.

Maalintaa xukuumadda Somaliland waxay amar ku bixisay in dadka ka qayb qaadanaya caleemosaarka Ugaaska loo fudaydiyo socodka sidaa daraaddeed gawaadhidii u tallaabaysay dhinaca Soomaaliya wax ruqsad ah lama weydiin iyada oo weliba si foojigan nabadgelyada loo ilaalinayo. Ugaaska, odayadii la socday iyo baabuurtii galbinaysayba markay u tallaabeen xadka Soomaaliya ammaankooda waxa si buuxda ula wareegey ciidammadii martida loo ahaa. Gawaadhidii oo dhan markay isa soo gaadheen ayaa mar keli ah waxa hor kacay ugu yaraan saddex baabuurta ciidammada ah oo ay la socdaan askar aad u ubaysan. Markan goobtii Ugaaska loogu xiirayey ee Ugaas-Lagu-Boqor baa lagu sii jeedaa. Intii aan goobtii la gaadhin baa la istaagay,



Xuseen-Mataan oo ah adeegaha gaarka ee Ugaaska iyo rag kale ayaa gaadhigii ay la socdeen ka soo degay, meel godan oo biyo xareed ahi jiifeen ayey ka soo buuxiyeen weel ay sideen, biyahaa oo ah kuwa loogu xiirayo Ugaaaska ah.

"Waa xeer in biyo xareed ah mooyee aan biyo kale loogu xiirin Ugaaska."

Waxa xusid mudan bishii Seb. 2009[kii] markii la qabtay Ugaaska in la sheegay, in maalintaa laga bilaabo aan tin laga goyn karin timihiisa tan iyo maalinta lagaga xiiri doono goobta la yidhaa Ugaas-Lagu-Boqor. Intaa waxay raaciyeen weliba odayadu in "*Biyo xareed ah mooyee aan kuwa kale loo dhaweyn doonin*".
Markaasaa su'aal lagu celiyey odayadii oo lagu yidhi :
- "*Haddii roob di'i waayana?*"

Waxay ku war celiyeen :
- "*mar kasta oo Ugaas loo xiirayaba roob baa darroora oo uu noo di'i doonaa haddii Alla yidhaa*".

Sidii bay noqotay oo roobkii baa da'ay! Waa cilmi Ilaah!

12kii duhurnimo ayaa la tagey Ugaas-lagu-boqor oo ay joogeen dadkii deegaanka oo halkaa ku soo shiray si ay Ugaask au soo dhoweeyaan. Dhallinyaro iyo odayo wiwile ciyaaraya ayaa na soo dhaweeyey, gabayo iyo buraanburro Ugaaska lagu ammaanayo ayaa halkaa laga tiriyey. Sidii goobihii kale ee la soo maray laba aqal-Soomaali oo lagu muujinayey dhaqanka ayaa la sii dhisay. Soo dhaweyn dabadeed baa loo tabaabushaystay sidii Ugaaska looga xiiri lahaa timaha.
**"Waxa xeer ah in Ugaaska laga xiiro markay qorraxdu duhur wixii ka dambeeya noqoto."**

Markii la hubsaday in qorraxdu haddeed galbeed u badatay ayaa la bilaabay u xiiriddii Ugaaska. Ugaas-Lagu-Boqor geedo badan oo qudhaca bay leedahay, meel geedaha badhtankooda ah, geed ku yaal oo aan weli gudin ku dhicin hoostiisa ayaa Ugaaska la fadhiisiyey si looga xiiro timaha. Lix oday iyo ninkii u xiirayey oo keli ah uuni la joogo ayaa cidlo ula baxay. Cid kale haba yaraatee lama oggola, sawir qaadayaashana hadalkoodaba daa.

Ninka u xiirayey Ugaasku waa nin Shariif ah oo reer Shinniile ah magaciisana la yidhaa Shariif Cali. Lixda oday waxay wakiil ka yihiin lixda aqal ee Ciisuhu ka kooban yahay. Lixda oday afar ka mid ahi maro cad oo weyn bay afarta gees kala hayaan si timaha Ugaaska laga xiiro loo xafido oo aanay dhulka ugu dhicin, labana gaadh bay hayeen si aanay cidina ugu soo dhawaan inta Ugaaska timaha laga wada xiirayo. Markii laga wada xiiray ee biyihii xareedda ahaana madaxa loogu maydhay, timihii siday u dhannaayeen maradii baa si tartiib ah loogu duubay. Timihii meesha loo wado ee la geynayo wey diideen inay odayadu sheegaan.

Dabadeed dharkii hore ee uu xidhnaa Ugaasku wuu iska beddelay oo khamiis cad buu xidhay. Oday ka tirsanaa raggii la joogay intii loo xiirayey oo magaciisa la yidhaa Axmad Cabdalla Gadiid oo Wardiiq, Yeesif oo Geeddi-Cali ah baa sidii xeerku ahaa u xidhay oo u duubay Ugaaska cimaamad cad.

Dabadeed waxa soo baxay Ugaaskii oo dhar wada cad ku labisan. Geed kale oo weyn hoostiisa ayaa gogol uu ku fadhiisto loo dhigay, markaasay dadkii oo dhan ku soo qamaameen iyadoo saxaafadduno sawirka la boobeen. Odayadii la socday baa Ugaaska agtiisa soo fadhiistay duco iyo Alla bari baa la bilaabay. Ducadii markii la dhammaystay ee soortii lagu tala galay la cunay ayaa socod loo diyaargaroobay kooxihii soo dhaweynta ayaa bilaabay ciyaartii wilwilaha ee ay Ugaaska ku sagootinayeen.

## Saylac

Markan waa Saylac goobta loo sii jeedaa, markii baabuurtii si nidaamsan loo joojiyey ayaa sidii markii horeba waxa na horgalay ciidamadii Somaliland ee Ugaaska ammaankiisa sugayey. Waddada la sii maray inkaste oo roobab da'een haddana way fiicnayd. Wax la sii socdaba markii la soo gaadhay duleedka tuulada Tokhoshi ayaa halkaa loogu yimid Suldaanno badan oo Soomaali ah oo goobtaa u yimid si ay u soo dhaweeyaan Ugaaska. Baabuurkii Ugaasku saarnaa iyo intii galbinaysayba waa la wada joojiyey si la isku salaamo, cabbaar markii la is gacan qaaday ee la is bartay baan socodkii la sii waday. Wax yar ka hor salaaddii maqrib baa la soo galay magaalada



qadiimka ah ee Saylac. Saylac oo ah magaalo sooyaal dheer leh isla markaana ahaan jirtay xaruntii dawladdii Islaamka ee Adal. Saylac waa magaalo lagu soo bokhray 18kii Ugaas ee kan ka horreeyey maantana lagu caleemosaarayo Ugaaska 19aad ee Ciisaha; Ugaas Mustafa Maxamad Ibraahim Ugaas Wacays.

Ugaaska iyo odayadii uu hoggaaminayey markay soo galeen afaafka hore ee magaalada waxa soo dhaweeyey dad kumanyaal ah oo wejiyadooda ay ka muuqatay farxad iyo raynrayn aan la qiyaasi karin. Dadkaas oo iskugu jirey reer Saylac iyo reer Jabuuti oo magaalada hore u soo buux dhaafiyey. Ugaaska waxa la dejiyey xarunta iskaashatada kalluunka ee Saylac. Odayadiina dugsiga weyn ee magaalada ayaa la dejiyey. Saylac hadda dad badan kuma noola oo waa meel laga guuray sidaa daraaddeed habeenkaa magaaladu dad bay la ciircii-raysay oo martidii iyo dadkii kale ee iskood u yimid meelo ay seexdaan bay kala waayeen. Ugaaska toddoba maalmood baa loogu talogalay inuu joogo halkaa sidii Ugaasyadii hore.

Aroornimadii bishii Mars 2010 salaaddii subax kadib sidii xeerku ahaa, Ugaaska waxa la geeyey xeebta Seylac halkaas oo uu badda ku soo dabbaashay muddo kooban.Ugaasku intii uu badda ku jiray waxa ku weheliyey Daahir Cige oo xeer-yaqaan ah iyo Xuseen Khayre *(Mataan)*.

Intaa kadib, aqalkii uu degganaa buu ku soo laabtay, wakhti yar dabadeedna Ugaaskii oo ku labisan khamiis cad madaxana ay ugu duubantahay cimaamaddii Ugaasnimadu oo odayo iyo culimona ay galbinayaan ayaa bilaabay inuu soo siyaarto meelo taariikhi ah oo ay ka mid yihiin :

* Xabaasha uu ku aasan yahay Eeba Cabdalle oo ah odayga ay ku abtirsadaan Ugaasyada Ciisaha oo dhan.
* Maqaamka Sheekh Ibraahim Seylaci ayuu dabadeed soo siyaartay. Maqaamkaa oo Ugaas kasta oo Ciisuhu bokhrayaan soo booqdo. Ugaaska waxa soo dhaweeyey culimo iyo odayo Qaadiriya ah oo maqaamka joogay. Kadib markii shallaadka la qaaday ayaa la ducaystay Ugaaskana si gaar ah baa loogu duceeyey. Intaa markuu soo booqday ayuu ku noqday aqalkii uu degganaa.

Qabanqaabada caleemasarku muddo badan bay soo socotay, dugsiga Saylac bannaanka hortiisa ah waxa laga dhisay shiraac weyn oo loogu talo galay xafladda caleemosaarka Ugaaska 19aad ee Ciisaha. Shiraaca hortiisa iyo aqalka Ugaasku deggan yahay hortiisa habeennimadii iyo sabaxnimadiiba waxa ka socday ciyaarihii dhaqanka oo aan kala go' lahayn.

Dhinaca kale, boqollaal ka mida dadweynihii ayaa saf u galay aqalkii uu degganaa Ugaasku si ay u soo gacanqaadaan amma u soo dhunkadaan Boqorka. Intii safafka lagu jirey ayaa waxa dhacay isjiidhjiidh iyo buuq ka dhashay badidii shacabka, sidaa daraaddeed.

Xafladda caleemasaarka waxa ka soo qayb galay dhinaca Jabuuti wafdi ballaadhan oo uu hor kacayo ra'iisal wasaaraha Mudane Dilleyta Maxamad Dilleyta. Dhinaca Somaliland waxa hoggaaminayey wasiirka arrimaha gudaha. Itoobiyana waxa ka yimid wasiirka dhaqanka iyo dalxiiska. 10kii ayaa xafladdii caleemasaarku si rasmi ah u bilaabantay iyada oo uu Ugaasku na 10kii iyo daqiiqado soo fadhiistay kursigii loogu talagalay. Ugaasku markuu soo galay fagaarihii, sacab, farxad iyo ciyaaro ayaa lagu soo dhaweeyey qof kasta oo halkaa joogayna inuu indhaha saaro ayuu rabay.

Ugaasku markuu fadhiistay halkii loogu talagalay ayaa xafladdii si rasmi ah loo bilaabay aayado Qur'aana baa lagu furay. Ugu horreynAadan Xasan Aadan *(Beleloo)* ayaa isagoo ku hadlaya magaca guddidii qabanqaabada xafladdana hoggaaminayay hadal kooban goobtaa ka jeediyey. Wax yar dabadeedna waxa uu Aadan madasha ku soo dhaweeyey Maxamuud Axamad Buux Aare si uu cimaamadda u saaroo Ugaaska. Cimaamad-Saarkii dabadeed odayo dhawr ahoo Gendaha ka tirsan baa duco badan halkaa ka soo jeediyey. Haddaba goobtii xafladdu ka socotay oo runtii aad u weynayd ayaa haddana dadkii qaadi weyday. Badidii dadkii goobta soo galay daraaddeed ayey suurto geli weyday in jadwalkii lagu talagalay sidiisi u socodo. Dadka qaar badan oo dibadda joogay baa iyaguna rabay inay gudaha soo galaan. Dhammaadkii xafladda wax yar ka hor ayaa Ugaaska laga soo bixiyey madashii caleemasaarka oo la geeyey aqalkii uu degganaa.



Haddaba sidaan kor ku soo sheegnay Saylac waa magaalo laga guuray oo ay adag tahay in dad badan ku noolaadaan. Ugaaska odayada la socda oo keli ah tiradoodu waa 250 oday. Roobabkii da'ayna gaadiid badan bay xayireen. Ciidammadii ammaanka ilaalinayey iyaguna si ay u kala kaxeeyaan dadkii buuqayey rasaas fara badan bay hawada u ridayeen. Haddaba odayadii ganduhu markay si wanaagsan uga baaraandegeen duruufaha adag ee ka jira Saylac, waxay isla garteen inay adag tahay in la sii joogo magaalada, sidaa daraaddeed waxay go'aamiyeen in Ugaaska iyo odayadaba la geeyo Jabuuti.

## Jabuuti

1[dii] mars 2010[kii] goorsheegtuna tahay 2dii duhurnimo ayaa Magaalada Saylac laga soo ambabaxay iyadoo lagu sii jeedo Jabuuti. Waxa qorshaha ku jirtay sidii caadada ahayd in Ugaaska la geeyo laba dixood oo ka tirsan gobolka Selel, haseyeeshee taa dib baa loo dhigtay waana laga ballamay.

Ugaaska aqalka martida ee Madaxtooyada agteeda ah baa la dejiyey. Odayadii la socday intoodii badnaydna huteello ayaa la dejiyey. 7[dii] mars Madaxweynaha Jabuuti M. Ismaaciil Cumar Geelle ayaa qada sharaf ugu qabtay aqalka madaxtooyada Ugaaska, odayadii la socday iyo guddiyadii qabanqaabada ee Diridhaba iyo Jabuuti. Intii la qadaynayey waxa halkaa ka socday gabayo heeso iyo ciyaaro lagu soo dhaweynayey Ugaaska.

8[dii] mars waxa Ugaaska iyo odayadii la socday aqalka ummadda qada sharaf ku soo dhaweeyey beesha Isaaq ee Jabuuti deggan.

Qada sharaftaa oo ay ka soo qayb qaateen Suldaanno guud iyo cuqaal reer Somaliland ah iyo weliba abwaanno magac dheer ku leh Soomaalida dhexdeeda kuwaas oo ay ka mid ahaayeen Maxamad Ibaraahim Warsame *(Hadraawi)* iyo Maxamad Xaashi Dhamac *(Gaarriye)*.

# Noqoshadii Ugaaska ee Diridhaba

Ugaasku intii uu joogay Jabuuti waxa soo booqday dad kumanyaal ah oo waayeel, dhallinyaro iyo carruur intaba leh. Dadkaas oo u jeel qabay aragtida Ugaaska.15[kii] mars ayaa Ugaaska iyo odayadii dhammaantood ka socdeen Jabuuti iyagoo ku sii jeeda hakaa iyo Diridhaba, qorshaha waxa ugu jirta sidii caadada ahayd in la sii maro Biyo-Qaboobe iyo Dixda Biyo-Baxay.

Siddeeddii aroornimo ayaa Ugaaska iyo odayadii la socday ka dhaqaaqeen aqalkii martida iyagoo ay sii galbiyeen baabuur tira dhaafay iyo madax badan oo ka mida dawladda Jabuuti ammaankana cidammada booliska ayaa aad iyo aad u ulaalinayey.

Intii ay jidka ku sii jireen tan iyo tuulada xadka ku taal ee Galiila waxa waddada hareereheeda joogay dad badan oo Ugaaska caleemo qoyan u ruxayey isla markaana gacmaha u haadinayey. haddii an si gaar ah u tilmaanno, shacabku waxay aad u joogeen Weeca, Cali Sabiix iyo Galiila. Soodhaweyn iyo salaan kadib, Ugaaska, madaxdii reer Jabuuti iyo dadweynihii kale ee sii galbiyey ayaa halkaa si heer sare ah u sii nabad galyeeyay.

Dabadeed Ugaaska iyo odayadii waxa la wareegay madaxdii dawladda federalka iyo madaxdii gobolka Soomaalida Itoobiya oo ay weheliyaan ciidammo boolis ah oo ka tirsan gobolka. 9kii iyo soddon daqiiqo ayaa laga ambabaxay Galiile, intii jidka lagu sii jiray meel walba dad Ugaaska soo dhaweynaya ayaa taagnaa, ugu horrayn



## Dawanle

Dawanle oo sanka ku haysa Galiile waxa Ugaaska ku soo dhaweeyey boqollaal ka tirsan dadkii degganaa Dawanle. Dadkaas oo ciyaarayey isla markaana wajiyadooda ay farxadi muquurtay.

## Ayshaca

Reer Ayshaca ayaa ku xigay reer Dawanle oo iyaguna aad iyo aad u soo dhaweeyey Ugaaska iyagoo waddada hareereheeda isa soo tubay. Cidi kuma hadhin baad is odhanaysaa magaaladii Ayshaca oo waddaday isa soo wada taageen badida shacabka isku soo baxay ee ciyaarayey markaad eegto. Meel kasta iyo tuulo walba oo Ugaasku sii maraba soo dhaweyn diirran baa lagala hor imanayey.

## Biyo-Qaboobe

Duhurnimadii Ugaaskii iyo ummaddii uu hor socdayba waxay gaadheen Biyo-Qaboobe. Biyo-qaboobe oo markan si fiican gugii ugu curtay. Biyo-Qaboobe waxay ku taal meel malka ah oo dawladihii shisheeyaha ahaa ciidammadoodii dhulka yimid dhammaantood Biyo-Qaboobe ayey soo dageen, dawladahaa waxa ka mid ahaa Masaaridii, Turkigii, Ingiriiskii, Talyaanigii iyo kuwii Minilig intuba.

Halkaas oo si aad u weyn loogu soo dhaweeyey. Ciyaaro, tirtirfe iyo suugaan farxadeed baa lagala hor yimid. Maadaama uu Ugaaskii la joogo reer Biyo-qaboobe maalintaa waxay u ahayd maalin farxadeed. Ugaaska maalintaa waxa lagu marti geliyey…

Reer Biyo-Qaboobe maalintaa boqollaal neef ayey u qaleen martidii sharafta lahayd ee Boqorku hor kacayey. Markii la tukaday salaaddii duhur ayaa hadhimadii loo fadhiistay. Dabadeed duco badan baa la ducaystay, ugu horrayn Ugaaska ayaa loo duceeyey, colaad iyo abaarna waa laga ducaystay. Habeenkii halkaa baa loo hoyday sidii ku talagalku ahaa.Waagu markii uu dillaacay ee salaaddii dabadeed baa mar kale la ducaystay.

Socod baa haddana loo tabaabushaystay, siddeeddii iyo soddon daqiiqadood taariikhduna tahay 16[kii] Maars 2010 ayaa laga ambabaxay Biyo-Qaboobe iyadoo markan loo sii jeedo goobta la yidhaa Biyo-Baxay.

## Biyo-Baxay

Wax la sii socdaba, tuulada la yidhaa Dhuurre markii wax yar loo jiro ayaa dhinaca cadceed-soo-baxa loo leexday, 20 km markii la socday ayaa la gaadhay Biyo-Baxay, halkaas oo boqollaal dad ahi Ugaaska ka hor yimaaddeen iyagoo tirtirfanaya oo wilwilaha goynaya.

Halkii loogu tala galay Ugaaska iyo odayadii la socday markii la geeyey ayaa halkaa laga sii waday ciyaarihii soo dhaweynta. Ciyaarihii maalintaa laga ciyaaray Biyo-Baxay waxay ahaayeen kuwii ugu qurux badnaa ee ugu macaanaa dhammaan ciyaarihii loo soo ciyaaray Ugaaska. Markaad u kuur gashid baad ogaanaysaa in goobtani tahay meesha ay joogaan ragga ugu sita gallinnada Ciisaha oo dhan ciyaaraha dhaqanka. Biyo-Baxay waa meel barwaaqo ah oo biyo badan isla-markaana waa meel geedo badan oo hawd ah, ku darso oo waliba roobkii guga ayaa si fiican ugu bilawday markan.

Reer Biyo-Baxay toddobaad bay u sii diyaargaroobeen sidii ay u soo dhaweyn lahaayeen Ugaaska, ku tala galkooduna waxa uu ahaa in Ugaaska iyo Gandaha la socdaa saddex cisho la joogaan.Waliba reer Biyo-baxay xil gaara baa saarnaa oo waa deegaankii Ugaaska looga dhisi lahaa. Goobtii soo dhaweynta lix aqal-Soomaali oo ay ugu talo galeen lixda aqal ee Ciise ayey ka dhiseen, Ugaaskana mid gaara bay u dhiseen.

Boqollaal neef oo geel iyo adhi u badan bay golaha soo tubeen Xoolahaa oo ay u diyaariyeen maalmaha martidu la joogto in loo qalo. Salaaddii duhur markii laga baxay ee la qadeeyey ee la ducaystay. Habeennimadii xeraadkii ka dib baa la isku warramay. Duco daba-deed, ayaa la wada hadlay. Hasayeeshee, oday ka mida odayadii ayaa yidhi : - *"Waa habeen, habeenna hadal lama furo ee waagu ha innoo beryo, sidii ayuu hadal ku ibo beelay"*.



Salaaddii subax markii la tukaday duco dabadeed ayaa sidii ballanku ahaa la sheekastay. Odayadii reer Biyo-Baxay ayaa hadalka qaatay. Murtidii waxay hadalkii ku soo koobeen saddex maalmood noo jooga. Reer Ashkirna wuxuu yidhi :

- *"Boqolkii sameenood ee cimaamadda iyo gabadhii aan caadada u lahaa iga guddooma Ciisow."*

Gandihii oday ka tirsan oo la yidhaa Dubbad Muuse ayaa hadlay oo yidhi :

- *"Boqolkii sameenood ee cimaamadda iyo gabadhii aad caadada u lahayd waa kaa guddoon tolkayow taasi waa sidaa.* (guurka mar kale ayaa loo ballamay).
  *Ta labaad eed tidhi saddex cisho ii jooga, walalahayow waad ku mahadsantihiin mid baase jirta oo noo saamaxayn inaan joogno, hawl kale sheegan maayo ee annaga iyo Ugaskuba waan daallannahay oo waad oghtihiin inta dhul iyo hawl aan soo marnay, sidaa daraaddeed waa inaad noo hawl yaraysiin oo aad na fasaxdiin."*

Inkastoo reer Biyo-Baxay ku adkaysteen in lala joogo haddana way u garaabeen codsigii odayada. Sidaa markii la isku wada afgartay ayaa duco badan la wada ducaystay oo aamiin lagu soo xidhay.

Siddeeddii barqanimo taariikhduna tahay 17[kii] Mars 2010 ayaa Ugaaska iyo odayadii la socday ka ambabaxeen Biyo-Baxay iyadoo markan ugu dambayn lagu sii jeedo magaaladii Xarunta Ciisaha ee Diridhaba.

Intii ay Diridhaba ku sii socdeen tuulooyinka jidka ku yaalla oo ay ka mid yihiin Dhuurre iyo Harmuukaale dadweynihii ku noolaa ayaa Ugaaska si diirran u soo dhaweeyey iyagoo aad u faraxsan.

## Diridhaba

Duleedka magaalada Diridhaba markay soo gaadheen Ugaaska iyo Gendihii la socday waxa halkaa si diirran u soo dhaweeyey oo kaga hor yimid dad boqollaal ah oo uu hor socdo guddoomiyihii maamulka magaalada Diridhaba Mudane Aadan Faarax iyo guddoomiyihii hore ee gobolka ismaamulka Soomaalida Itoobiya Mudane Cabdi Jibriil Boobakar.

Koox ku labisan dharkii dhaqanka ayaa halkaa ciyaar loo bogay oo Wilwile ah Ugaaska ku soo dhaweysay.

Cabbaar yar kadib guddoomiyihii maamulka Diridhaba Mudane Aadan Faarax iyo dadweynihii oo gawaadhi badan wata ayaa soo galbiyey Ugaaska.

Intii Ugaasku magaalada soo dhex marayey waxa hareeraha wad-dooyinka tubnaa kumaanyaal dadkii magaalada Diridhaba ah oo sacab iyo caleemo qoyan ku soo dhaweeyey. Dadkaas oo iskugu jirey haween,carruur iyo cirroole ay wajiyadoo ka bidhaamaysay farxad iyo rayn-rayn aan la soo koobi karin. Dadku waxay tubnaayeen ilaa aqalkii Ugaaska loogu talo galay oo ku yaal agagaarka Qunsuliyadda Jabuuti oo ah badhtamaha magaalada. Maalintaasi reer Diridhaba, maalin farxadeed oo dadka kale dheer yihiin bay u ahayd, waayo Ugaas Mustafe Maxamad ayaa magaalada ku dhashay isla markaana waa Ugaaskii koowaad ama ugu horreeyey ee Ciise yeesho oo magaalo laga qabto.

# Cutubka Siddeedaad

# Garihii la Qaaday

# Tusaale ku Saabsan Garihii la Qaaday

Tusaale ahaan haddaan u soo qaadanno kuwa laaluushaka la siin karo. Waxa ka mid ah kuwa fadhiya meelaha maxkamadaha dadka loogu garnaqo. Haddaba dadkeennii innaga horreeyey ee innoo soo talin jirey ama garta u kala niqi jirey dadka ay wax dhex maraan, wax laaluush la yidhaa ma kala qaadan jireen ?

Jawaabta su'aashan waxaan ka helaynaa dhacdadan.

Miley hore oo aanan sheegi karayn, waxa dhacday in nin ku dhagaroobey nin kale oo uu diley. Markuu dilku dhacayey cid arkaysey oo markhaati ku furtaana ma jirin.

Dabadeed waxa dhacday in ninka la diley qoladiisii dacwootey. Waxay dalbadeen in la siiyo boqolkii *(waa boqolkii halaad ee magta ninka Soomaalida dhexdeeda xeerka ahayd)* ninkii laga diley. Waxaana arrintii loo saaray guddi sida xeerku dhigayo.

Ninkii wax diley qoladiisii ayaa waxay damceen inay iska duwaan boqolkaa kusoo fakaday (hoydey). Si ay ugu guulaystaanna waxay adeegsadeen dariiqa xun ee Gubbo bixinta. Dabadeed waxay habeen madaw soo mareen rag ka tirsan guddidii arrinta loo saaray. Waxay gubbo ahaan u bixiyeen adhi aan tiradiisa la garanayn.

Maalintii ballantu ahayd ayaa guddidii iyo dadkii ay arrintu ka dhaxaysay, geedkii lagu ballamay isugu yimaaddeen. Arrintii markii la guda galay ayaa ninkii dembiilaha ahaa la weyddiiyey, oo lagu yidhi :

- *Ninkii Hebel Hebel ma aadaa diley ?*

Wuxu si badheedh ah u yidhi :

- *Tol kayoow, anigu ninkaa ma qabo dilkiisa.*

Guddidaas oo ay ku jireen raggii hore wax uga cantuugey *(Gubbaba ka qaatay)* waxay hadalkoodii meermeerisaba, waxay ugu dambayntii xukuntay in dembiga dilka ah ee ninkaa loo haysto aanay waxba ka jirin.

Qoladii ninka laga diley markay fahmeen in ay daacad darro ka jirto geedka ama madasha la fadhiyo, si aammusanaan ah bay geedkii uga dareeereen, xataa iyagoon dalbannin arrintoodii in la geeyo geed kale.

Gu'gii xilligaa la joogey xigey ayaa waxay roobab wanaagsani ka da'een, degmada la yidhaa HolHol ( J. Jabuuti). Waxaa halka isugu yimid labadii qolo ee dilka isu sheeganayey iyo reero kale oo badan.

Dadka kale ee degmadaa soo degey waxa ka mid ahaa laba oday oo garyaqaanno ahaa, daacadnimo lagu bartay oo la odhan jirey : Gaboobe-Sange iyo Giirre-Cadaawe. Markii la ogaadey inay degmada joogaan labadaa oday ayaa qoladii ninka laga diley waxay mar labaad dalbadeen in loo soo dhaadhiciyo qoladii uu ka dhashay ninkii wax diley.

"Xeer waa saan qollojiya, oo waa la qoystaa", ayuu Ciisuhu yidhaa. Sidaa bay gartii ku soo cusboonaysiiyeen.

Markaa dabadeed waxa shiray dadkii degmada, waxayna isla garteen in guddi loo saaro arrintaa. Guddidaas labaad ee arrinta loo saaray waxa lagu daray oo ka mid noqday Gaboobe-Sange iyo Giirre-Cadaawe. Waxa lagu ballamay maalin la isla ogyahay iyo geedkii Hol-Hol ee caanka ahaa.

Maalintii ballantu ahayd habeenkii ka horreeyey Gaboobe iyo Giirre waxay u soo hoydeen, meel aan ka dheerayn geedkii ballantu ahayd. Waxaa habeenkaa halkaa ugu yimid rag ka socda qoladii magta laga doonayey. Waxaay u keeneen naadh hilib shilisi ka buuxo iyo kildhi weyn oo ay ka buuxdo lacag qaraashi (quruush) ah oo gadhweynta la odhan jirey, lacagtaas waxa laga isticmaali jirey magaalada Saylac, Adari *(Harar)* iyo meelo kaleba. Raggii alaabta sidey markay socdeen ayey labadii oday is eegeen. Markaasuu Gaboobe-Sange yidhi :

- "*Ragga xoolahaa innoo keenay saw gartu kuma go'in?*"
- "*Haayoo way ku go'day!*", ayuu Giirrena ku yidhi.

Naadhkii uu hilibku ka buuxay iyo lacagtii oo halkaa ku daboolan ayey subaxnimadii ka tageen, iyagoo u sii jeeda halkii ballantu ahayd.



Galabnimadii ayaa geedkii la isugu yimid oo labadii qolo iyo guddidiiba ku soo dhammaadeen. Markii garqaadkii furmay ee la ducaystey, ayaa waxa hadalkii qaatay Gaboobe-Sange. Wuxuuna ku bilaabay :

- *Raggii reer hebel ee magta laga doonayey aaway?*
- *Waa kuwan oo way dhan yihiin.* Baa loogu jawaabay.

Markaasuu yidhi :

- *Ninkii hebel hebel ee aad disheen magtiisii way idinku go'day ee iska bixiya walaalahayow. Sidaana waxa gartay tolkiin macaane.*

Waxa kale oo uu intaa raaciyey isagoo markhaati uga dhigaya :

- *Laba nin oo aad xalay nagu darsateenna aniga iyo Giirreba waan af garan weyney oo halkii bay idinku sugayaane bal u taga.*

Halkan wuxuu uga jeedaa hilibkii iyo lacagtii.

Qoladii magta laga doonayey iyagoo aan dood ka celin xukunkaa uu Gaboobe-Sange ku ridey ayey yidhaahdeen :

- *Tolkayoow waan qaadannay.*

Waxay ka baqeen inay kashifanto lacagtii iyo hilibkii ay odayada gubbo ahaanta ay ugu geeyeen.

Sidaas baana lagu kala baxay oo magtii lagu bixiyey.

# Tusaale Kale

Guddiyuhu inta badan si cadaalad ah bay wax u xukumaan, hase yeeshee waxa dhacda mar mar ay si cadaalad-darro ah wax u xukunto, amma ha u kasaan amma mooddo ha ka noqoto'e.

Haddaba hadday mooddo wax ku xukunto waxa la yidhaa : "Guddidii way dhama'day" ama "Way Kama'day".

Waxaase jirta marka ay is helaan ragga garyaqaannada ahi inay si sahlan oo is faham ku jiro arrimaha qaarkood ay ku dhammeeyaan, iyadoo nin kastaba arrimihiisa daafacayo. Waxaan soo qaadanaynaa, dhacdo beri hore dhacday oo ku saabsan guddi "Dhama'day iyo Garyaqaanno is helay". Waana tan sheekadii dhex martay.

Wiil geel jire ah oo geel la jooga, ayaa geeluu uu ilaalinayey waxa ku qooqay awr qooqan oo goonna lahaa oo uu reer kale lahaa, awrkii goonnada lahaa markuu dhawr goor geelii didiyey ayuu cadhooday wiilkii geela la joogey. Markaasuu wiilkii intuu ul qaaday awrkii la dhacay, nasiib darrose waxay ushii kaga dhacday awrkii, ishii keli ahayd ee u fayoobeyd, sidaa daraaddeed buu awrkii u indho belay.

Dabadeed qoladii awrka lahayd ayaa ku dacwootey reerihii kale ee degmada yaalley. Waxaanay dalbadeen in loo soo dhaadhiciyo reerkii uu ka dhashay wiilkii Awrka isha ka ridey. Arrintii guddi baa loo saaray waxaana la ballamay maalin la isla ogyahay. Markii ay guddidii fadhiisatay ee garqaadkii furmay, ayaa sidii ay caadadu ahayd waxa hadalkii qaatay qoladii awrka lahayd, waxayna ku baaneen sidan soo socota.

*"Awrkaygu inkasta oo uu goonna lahaa (il la'aa), haddana wuxuu noo ahaa gaadiidka keli ah ee ay reeruhu ku guuraan. Haddii aan magaalo u safraynana wuxuu ahaa gaadiidka keliya ee aan ku safarno, hawlo kale oo badanna wuu noo qabanayey. Sidaa daraaddeed waxaannu doonaynaa in nala siiyo awrka magtiisii oo dhan."*



Awrta magtooda xeerka uu yaalla waa qiime dhan **12 sabeenood.** *(Sabeenuhu waa idaha dheddig).*

Qolada kale ee la dacweynayo ee magta awrka laga doonayo, waxa aabbo u ahaa oo ka difaacaya magta laga doonayo oday xeeryaqaan ahaa oo magaciisa la odhan jiray Hiil-Goonnaale oo ka mid ahaa odayadii Saylac ka talin jiray. Hiil isagoo iska difaacaya arrintaa wuxuu ku baanay :

- *" Wiilkayagu awrka il keliya buu ka ridey, awrkiina wuu nool yahay. Sidaas daraaddeed waxaan oggolahay magtii isha oo keliya, isha awrka magteeduna waa saddex sabeenood."*

Guddidii garta qaadeysey markay arrintii qaadaa dhigtay waxay xukuntay oo keliya magtii isha oo ah saddex sabeenood. "Gari laba nin kama wada qosliso!" ayaa hore loo yidhiye, go'aankaasi wuxuu u cuntami waayey qoladii awrka lahayd, waxayna yidhaadeen :

- *Tolkayow geed kalaan ka leenahay.*

Intaan geed kale la isla gaadhinba, qoladii awrka lahayd, waxay u tageen odayga la odhan jiray Gahayr Ashkir oo reerkooda u aabbo ahaa, xilligaa joogay buurta la yidhaa Maarmaar oo cadceed-dhaca ka xigta magaalada Cabdulqaadir. Gahayr wuxuu ka mid ahaa odayada xeer yaqaanka ah ee dadka oo dhammi xurmeeyaan. Markii looga warramay siday wax u dhaceen iyo xukunkii ay guddidu xukuntay ayuu madaxa lulay, markaasuu yidhi :

- *Ragga awrka isha ka ridey ayaa aabbo u ahaa?*
- *Waxaa aabbo u ahaa oo u baanayey odayga la yidhaa Hiil-Goonnaale.*

Baa loogu jawaabay.

Gahayr markuu woxoogaa arrintii ka fikiray ayuu saddex nin u yeedhay, wuxuuna ku yidhi :

- *Guddida sidaas wax u xukuntay way dhama'day ee waxaad yeeshiin. Hiil-Goonnaale waa ka Saylac jooga ee u taga oo waxad ku tidhaahdiin. "Gahayr wuxuu ku yidhi Hiil-Goonnaalow, waadigaa il la' ee saddexdaa nin een kuu soo diray hadday ku dilaan, ma waxaa la iga qaadi magtaadii oo dhan oo boqol halaad ah, mise waxa la odhan wuu il la'aa ee 15 halaad ka dhima oo 85 halaad ka qaada ?".*

Isha magteeda xeerka u yaal waa **15 halaad.**

Saddexdii nin markay Hiil-Goonnaale u tageen ee ay farriintii gaadhsiiyeen, Hiil-Goonnaale wuxuu yidhi :
- *Ma Gabayr baa farrintaa ii soo diray ?*
- *Haa,* bay yidhaahdeen.

Markaasuu Hiil-Goonnaale yidhi :

"Gahayrow,
Raggu miduu kugu hodiyo
Mid uu kugu hinjinaayiyo
Midu kugu hayuu leeyahaye
Habraha waan hinjinayee
Haddaadse u garatay
Awrka hilibkiisa ii keen
Magtiisana iga soo doono."

Haddaba awrka intaas oo gar iyo hadal ah loo galay muxuu faa'iido leyahay ? Waa su'aal ay is weyddiin karaan dadkan dambe ee xilligan nool. Waayo waxay iyagu ku koreen nolol magaalo oo awarku wax macna ah u samaynayn, sidaa daraaddeed waxay nala noqotay inaan wax ka iftiiminno wax tarka uu awrku u leeyahay nolosha reer miyiga.

Awrku guud ahaan nolosha miyiga wuxuu u yahay laf dhabar, reer aan awr lahayni iskii meel gooni ah ma dego, waayo hadduu doono inuu magaalada u safro ma awoodi karo, haddii uu reerku doono inuu guurana ma guuri karo, guud ahaan awrku reer miyiga wuxuu u yahay gawaadhida xammuulka qaadda oo kale.

Faa'iidoooyinka uu awrku leeyahay waxaa tilmaan fiican naga siin kara gabayadii iyo geeraarradii ay ka tiriyeen raggii hore iyo kuwa haatan noolba, an soo qaadanno gabaygan uu tiriyey mid ka mid ah raggii hore oo magaciisu na soo gaadhin, wuxuu yidhi :

Awr sagaal ka waynoo micidu, noqotay sooraanka
Ninkuu Eebbe siiyaa garan, sama falkiisiiye
Soo qabo carruurtaad tidhaa, seeda weynaha e
Surkaa loogu tuuraa hoggaan, dumar sameeyeene
Markaasuu sarbeebidaa bannaan, sal u fadhiistaaye
Siriq joogsi loogama baqiyo, sar iyo buubaale
Xadhig soohan suun iyo marraag, lagu sakaareeye



Saab iyo wixii saanle iyo, weliba saabaanka
Sadka reerka yaalloo dhanbaa, loo surradiyaaye
Saddex ubad ahi kuradiisa way, seexan karayaane
Kolkaad adigu amar siiso buu, saray is taagaaye
Suryo dhuuban buu kula maraa, kaana socod dheere

*Gabaygan waxaan ka qoray caajalad uu duubay,*
*Allaha u naxariistee, Axmad Aaden Cadcadle.*

Tuducyadaas gabaygu waxay inna bareen baahida reer guuraagu u qabo Awrka iyo kaalinta uu kaga jiro nolosha miyiga.

Waxa kale oon tusaale u soo qaadanaynaa dhacdadan si aan u sii fahamno awrku meesha uu ka joogo nolosha adag ee reer miyigeenna.

Sheekh Muuse, Allaha u naxariistee, oo xaruuntiisu ahaan jirtay Ayshaca, isla markaasna ku aasan, waxa laga soo weriyey xilligii uu noolaa in maalinta Siyaarada uu isa soo taagi jirey geed weyn oo ku yaalla magaaladaas. Wuxuu halkaa ku soo ururin jiray dhammaan xoolihii ay dadku sadaqadda u keeneen oo u badnaa ido. Waxa kale oo geedka Ayshaca maalintaa iman jirey dad baahan oo Sheekha sadaqad ka sugaya iyo kuwa xoola iibinaya iyo qaar kale oo xolo iibsanaya. Intaas oo dhan ayuu sheekhu isa soo dhex taagi jirey, markaasuu odhan jirey : "Agoon Awr la' yaa og ?". Isagoo dhawaaqaya, wuxuu Sheekhu waraysanayaa dadkan reer miyiga ah ee meeshan isugu yimid hadday ogyihiin agoon miyigii ay ka yimaaddeen ku awr la'ayd.

Jaamac Muuse Miicaad oo dhacdadan wariyey wuxuu yidhi :
- *"Wwaxaan u joogay maalin sheekha oo nin awr iibinaya (12) laba iyo toban sabeenood ka siiyey, dabadeedna awrkii reer agoon ah u diray."*

Intaa wixii ka dambeeya ayuu dadka kale ee baahan wax siin jirey.

Ficilkaa wanaagsan ee uu Sheekh Muuse ku shaqayn jirayna wuxuu inna tusayaa baahida reer miyigu u qabaan awrta.

Waxtarka awrtu intaa kuma koobna, intii anay tareenka iyo gawaadhida xammuulku dhulkeenna iman gaadiidka keli ah ee wax qaadi jiray waxay ahayd awrta, sidaa daraaddeed Awrku marna waa lagu shaqa tagaa oo lacag baa laga heelaa oo waakii ninkii geeraaray yidhi :

Marna dhuub lacageedow
Marna dhaydiyo xoorkow
Afartaada dhudhunee
Dhulka hoose u jeeddiyo
Dhabarkaad wax ku qaadi
Midkeen kaa dhunkadaa.

*Geeraarkan caajalad uu Axmad Aaden Cadcadle ku duubay ayaan ka qoray.*

Waxa kale oo jirta magaalooyinka markii xitaa la dhisayey waxa qayb weyn ka qaatay awrta. Dhinaca ganacsiga waxa keliya oo xoog loo raranayey awrta, magaalooyinkuna waxay cammirnaan jireen marka ay safarro awr ahi soo galaan oo waa kii gabayaagii Ismaaciil Xayd Xirsi *(Aflow)*, Isaaq, Habar-Awal, lahaa :

Magaalada Hargeysiyo Jigjiga, moodka waxa geeyey
Ee Adari Maarseey ka dhigay, muranku waa beene
Waa Muruq addoonlow ratiga, madaxa waaweyne

Intaas oo tusaale, geeraar iyo gabay ah baan u malaynaya inay innagaga filan yihiin faa'iidooyinka uu awrku u leeyahay reer miyiga.



# Samirre Geelle

Dhacdadani maaha gar la qaaday ee waxay ka mid tahay siyaasadihii ay ula yimaaddeen Ciisaha gumaystayaashi dhulka qaybsaday mid ka mid ah, waxayna wax u dheceen sidan.

Xilligii uu dalka Itoobiya ka jiray xukunkii milateriga ee uu madaxda ka ahaa Kornayl Mengistu, waxay dawladdu soo saartay sannadihii siddeetameeyadii bilawgoodii, barnaamij ballaadhan oo loogu talo galay sidii dadka beeralayda ah loogu samayn lahaa, tuulooyin waaweyn oo lagu soo ururiyo, si ay u sahlanaato sidii wax loogu qaban lahaa looguna dhiso iskuullo iyo dhakhtarro. Hase yeeshee dadka barnaamijkaa ay dawladdu waddo dhalliilaa waxay sheegayeen inay arrintu sidaa ka duwan tahay oo ay dawladdu doonayso oo keli ah sidii ay dadka xukunkeeda u hoos keeni lahayd.

Waxa kale oo barnaamijka dawladdu waddo ka mid ahaa, in dadka beerlayda iyo dadka reer guuraaga ah ee kala quruumaha ah ee reer Itoobiya, deegaannadooda la isku laaqo oo la isku dhafo.

Tusaale haddaan soo qaadanno. Abaarihii xumaa ee ka dhacay gobollada Wallo iyo Tigre sannadihii 1980yadii, waxay dawladii Milaterigu soo rartay kumanyaal beeraley Amxaaro ah oo ay dejisay deegaannadda Soomaalidu leedahay gaar ahaan Webi Shabeelle hareerihiisa.

Waxa kale oo ay dawladdu shirar badan u qabatay dadka Soomaaliyeed ee reer guuraaga ah, sidii ay iyagana ugu rari lahayd deegaanno kale. Haddaba aan soo qaadanno shir ay dawladdii kacaanku ku qabatay magaalada Erer oo ku dhow magaalada Diridhabe iyo wixii la is yidhi.

Shirkaas waxa dawladda ka wakiil ahaa isla markaana shirkan guddoominayey, Korneyl Salleqe oo xilligaa ahaa guddoomiyaha gobolka

Hararge. Dhinaca kale waxaa shirkaas joogey Ugaas Xasan Xirsi oo ahaa boqorka Ciisaha, Allaha u naxariisto, iyo odayo kale oo reer magaal iyo reer guuraaba ahaa.

Waxa shirkii furay wakiilkii dawladda Korneyl Salleqe, wuxuu halkaa ka jeediyey khudbad dheer oo uu kaga warramay barnaamijka ay dawladdu waddo, waxaana hadalladiisii ka mid ahaa :

- *"Ciisow dhulkiinnu waa abaar oo roobabkii baa ku yaraaday, dhirtiina way ka dhammaatay, dawladduna waxay ka cabsi qabtaa inay xoolohu idinka dhammaadaan.*
  *Sidaa daraadeed waxay dawladdu doonaysaa inay idiin rarto deegaanno kale oo barwaaqo ah si ay idiin badbaadiso, haddii aad doontanna aad beero ka qodataan".*

Kornayl Salleqe markuu hadalkii dhammeeyey, farriintii dawladda kacaankana uu gudbiyey waxaa hadalkii qaatay Ugaas Xasan Xirsi.

Ugu horrayn Ugaasku wuxuu dawladda uga soo jeediyey, mahadnaq ku saabsan barnaamijka ay ku doonayso inay ku barwaaqayso dadkeeda. Intaa ka dib wuxuu hadalkii ku wareejiyey Samirre Geelle oo uu ka codsaday inuu isagoo ku hadlaya afkii Ciisaha, uu jawaab ka bixiyo barnaamijka ay dawladdu u soo bandhigtay Ciisaha.

Intu Samirre hadalka qaadan waxaa soo dhex galay guddoomiyihii shirka Korneyl Salleqe. Guddoomiyuhu wuxuu amar ku siiyey turjumaankiisii inuu hadalka Samirre kelmed kelmed ugu tarjumo oo aanu waxba dhaafin, waayo Kornaylka iyo Samirre maanta isuguma horrayso oo horey ayey shirar u wada galeen lagaga hadlaayey arrimaha dalka.

Odayadii goob joogga ahaa ee dhacdadan weriyey waxay sheegeen, inuu guddoomiyuhu filayey inuu Samirre diidmo ka keeni doono barnaamijkan dawladdu soo bandhigtay.

Hadal iyo dhammaan Samirre ayey dooddii u wareegtey wuxuuna ku bilaabay mahadnaq uu dawladda u soo jeediyey.

Samirre wuxuu ka soo sheekeeyey dawladihii kacaanka ka horreeyey sidii ay u dayaceen Ciisaha, waxa kale oo uu tilmaamo ka bixiyey boqortooyadii Xayle Salaase, waxay tarto daaye inay duullaamo Ciisaha ku



soo qaadi jirtey, maantana waxaan haysannaa dawlad dadkeeda la jecel horumar dhinac walba ah, barnaamijkan maanta na hor yaalna waa mid lagu farxo oo qiimo badan, mar labaad ayaan dawladayadana uga mahadnaqaynaa ee Korneyl Salleqow i maqal :

- *"Beribaa waxaa jiri jirey nin Boqor ah oo dadkiisa la jecel barwaaqo iyo horumar. Boqorkaasu markuu muddo joogaba wuu socdaali jirey si uu ummaddiisa xaalkeeda u ogaado.*
  *Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Boqorkii socdaal dheer u baxay, waxaa sii raacay askar badan. Boqorkii iyo askartii oo maraya meel saxaara ah oo kulayl badan, waxay la kulmeen shimbir geed qallalan saaran oo haddana aad u faraxsan oo qosol ku jirta.*
  *Boqorkii wuxuu la yaabay shimbirtan meesha kulul ee saxaara ah joogta ee haddana faraxsan. Wuxuu amar ku bixiyey in shimbirta la soo qabto oo la geeyo qasrigii boqortooyada ee dhirta, tigaadda iyo biyaha badnaa.*
  *Boqorku wuxuu filayey marka shimbirta la keeno qasriga inay qosolka iyo farxadda sii biiriso. Hase yeeshe dhaqaaqba waa laga waayey oo madluun bay noqotay shimbirtii, biyo iyo baadna way ka degi waayeen.*
  *Boqorkii markuu ka yaabay inay shimbirtu dhimato ayuu amar ku bixiyey in la qaado oo meesheedii lagu celiyo.*
  *Mar allaale markii la geeyey meesheedii saxaaraha ahaa waxay bilowday farxaddii iyo qosolkii.*
  *Haddaba Kornayl Sallaqow dawladdayada Itoobiya waa sida Boqorkaa oo waxay nala doonaysaa barwaaqadaa iyo wanaaggaa aad soo sheegtay, Ciisuhuna waa sida shimbirtaa oo kulaylkaa iyo dhulkaa aan tigaadda lahayn ayuu ku faraxsanyahay. Waanan ka baxay hadalkii."*

Korneyl Salleqe intuu aad u qoslay ayuu yidhi :

- *"Samirre waan ka filayey inuu saas u hadlee.*
  *Ciisow intiinna kale maxaad leedihiin ?"*
- *"Halkuu Samirre ka qaaday baan ka qaadnay*
  *oo halkuu dhigay baan dhignay !"* Baa mar keliya loogu jawaabay.

Halkaasuu shirkii ku dhammaaday, barnaamijkii dawladdu wadatayna ku fashilmay.

*Sheekadaan waxaa soo weriyey rag goob joog ka ahaa shirkaas.*

Cutubka Sagalaad

# Geesi waa Kee ?

# Geesi waa Kee ?

## Hordhac

Magaca "Geesi" ma aha mid uu qof walba la baxo amma lagu magacaabo. Waxaa magacaa loo bixiyaa ninka hanta ee shuruudihiisa buuxiya, weyna adagtahay sida magacaa lagu helaa.

Duddeeyena waa la yidhaa oo waxay ka dhigan tahay u dhexeeye waa nin ummadda u dhexeeya, waa nin ay dirir islaam amma tu sokeeyaba xaaraan ka tahay, oonan oggolaan ku xadgudub shisheeye.

Geesiga waxaa kaloo lagu yaqaan inuu yahay nin deeqsi ah u dabacsan maatida iyo makasta, ruux walba oo dhibaato u sheegtana waligii maya odhan, waana gargaaraha ugu horreeya hadday dhibaato timaaddo.

Wuxuu dantiisa ka horreysiiya ta dadka kale waana gargaaraha ummadda isugu yeedha wax kasta oo dhibaato ah oo jiraba.

Waa nin duulkiisa iyo duul kale hadday islaayaan aanan u safan duulkiisa, waa ka had iyo jeer ah nin dhexaadka, dadkuna ay u yaqaaniin aabbaha ummadda meel walba. Taasina waa wanaag uu isagu beeray oo xaggiisa ka yimid. Kolkaa ninka sidaa ah waa geesi oo ummaddaa u bixisa magacaa. Waana nin ay ummaddu dhawrto.

Magacaa "Geesi" hadduu qof la baxo amma qof loogu yeedhayo la maqlo, bulshadaa qabsata ninkaa oo tidhaahda :

- Muxuu "Geesi" ku yahay oo uu ku muteystay baa la odhan ?

Haddaba, waxaan soo qaadanaynaa qaar ka mid ah raggii muteystay magaca "Geesi", bulshaduna u aqoonsatay xeerkuna siiyey.

# Cabdalla Caaggane

Cabdalle Caaggane, wuxuu ahaa nin geesiya oo ku sifoobey nabad jacayl. Wuxuu ahaa deeqsi dadka baahan wax tara. Waxa intaa u dheeraa oo lagu yaqaan runta oo aanu la gabban.

Cabdalle Caaggane dadka uu dhuun daloola taariikhdiisa waxay sheegeen inuu ahaa nin dul qaad badan oo gar darro kasta oo loola yimaaddo aan waxba ka soo qaadin.

Cabdalle Caaggane wuxuu halhays u lahaa oo uu ku maahmaahi jirey murtidan soo socota :

- Dirir haku gegdegin, tu sokeeyana haba ku darin.
- Waakashana, wax siin baan ka aamminay.
- Been, run baan ka aamminay.
- Baqa gaalaadna, dirir baan ka aamminay.

Cabdalle Caaggane ragga taariikhdiisa yaqaan waxa kale oo ay soo wariyeen dhacdooyin dhawr ah oo soo maray intii uu noolaa, kuwaasoo ka dhigay Cabdalle in loo aqoonsado geesinimadiisa.

◆ Dhacdadii u horreysay ee soo martay waxay ahayd baa la yidhi.

Maalin maalmaha ka mid ah iyadoo meel dix ah la joogo ayaa aabbihii waxa iskugu tegay rag Ciise ah oo si xun u uleeyey. Cabdalle Caaggane far muu dhaqaajin maalintaa. Waxaa aabbihii u gurmaday dadkii kale oo ka qabtay raggii. Dabadeed Cabdalle intuu aabbihii qaaday ayuu aqalkiisii geeyey.

Maalintii xigtay bay rag ku yidhaahdeen :

- *"Cabdallow iska warran ?"*



Wuxuu ku jawaabay hadal murti noqday :

- *"Xalay uur ku taallo ma Seexan,*
  *Aabbahayna taah ma seexan."*

◆ Dhacdada kale ee soo martay waxay ahayd.

Cabdalle oo socota ah baa u soo hoyday reer. Habeenkii markuu seexday ee uu aroortii kallahayey ayey reerkii habeenkaa marti galiyey waxay soo xidhxidheen dibi.

Waxay Cabdalle ku yidhaahdeen :

- *"Nala joog maanta, ducaan leenahay oo dibigan baan qalanaynaaye."*

Wuxuu yidhi :

- *"Socod horaan leehay."*

Waxay ku yidhaahdeen :

- *"Waayahee reerkaa hore ee aad sii maraysid u sheeg inaan dibi qalanayno."*

Cabdalle wuu socoteeyey.

Reerkii hore markuu gaadhay bay is wareysteen. Nabad baan sheegnay baa la is yidhi. Intaa dabadeed raggii reerka joogay baa Cabdalle waxay weyddiiyeen :

- *"Reerkaa aad xalay u hoyatay waxay shalay nagu yidhaahdeen, berri dibi baan qalanaynaa oo ducaan leenahaye, dibigii ma la qalay ?"*
- *Dantii haddayna furayn, dibi la xidhxidhay baan arkayey.*

Buu Cabdalle ku jawaabay isagoo been iska dhawraya.

◆ Arrinta kale ee Cabdalle Caaggane soo martay waxay ahayd.

Iyadoo la deggen yahay meesha la yidhaado Godgod ayaa waxaa reerihii ku soo dhawaaday col duullaan ah oo buto ah dhinaca Galbeedna ka soo duulay. Habeenkii ayaa reerihii la qaxiyey. Isla habeenkaa islaantii Cabdalle ayaa gabadh ummushay, waxana loo waayey awr lagu qaado. Halkii baana lagagag guuray ummushii, ilmihii iyo aqalkeedii, waayo colkaa loogama baqayn inay dumarka wax yeelaan.

Habeenkii dambe ayuu Cabdalle wuxuu kaxaystay laba awr si uu u soo raro aqalkii iyo ummushii. Markuu cabbaar sii maqan yahay ayaa rag badan laga daba diray si ay u garab galaan hadday cadaw iska hor yimaaddiin.

Cabdalle markuu istaagay halkii reerku ahaa, waxa xagga dambe kaga yimid raggii ka soo daba gurmaday. Cabdalle wuxu nimankii weyddiiyey:
- *"Xaggeed ka timaaddeen ?"*

Waxay ku jawaabeen :
- *"Adigaan kaa soo daba gurmannay si haddii cadaw ku helo kaaga dhicinno, ummusha iyo ilmahana kuula soo badbaadinno."*

Waxa kale oo ay raggii gurmadka ahaa intaa ku dareen :
- *"Si qarbaqarba ah oo habqan ah baannu ku soo gurmannay wax sabay ahna ma sidanno."*

Cabdalle oo weligiiba halhays u lahaa murtidii ahayd : "Waakasho wax siin baan ka aamminey!" wuxuu raggii u soo gurmaday ku marti geliyey labadii awr ee uu islahaa ummusha iyo aqalkeeda aad ku rartid. Markii ay raggii ay casheeyeen dabadeedna ummushii, ilmaheedii, iyo aqalkeediiba waxa degta ku soo qaaday raggii gurmadka ahaa. Markii la soo guryanoqday kadibna waxay reerihii go'aan ku gaadheen in Cabdalle loo soo mago labadii awr ee uu ragga ku marti geliyey.

◆ Dhacdada saddexaad ee soo martay waxay ahayd.

Raggii u dhuun daloolay taariikhda Cabdalle waxa kale oo ay soo wariyeen, dagaal ka dhacay dixda Harawa, dagaalkaa waxa Ciisaha ku soo qaaday niman Gaallaawi *(Oromo)* ah. Dagaalkaa oo mid aad u kulul ahaa, wuxuu bilawday waa dhawaadkii wuxuuna socday ilaa gabbal dhicii.

Cabdalle dagaalkaa qayb muuqata ayuu ka qaatay. Dagaalkaas waxaa ku dhintay rag badan oo ka soo jeeday safka Cabdalle. Qaar kalena waxa la sheegay inay carareen markii dagaalku sii kululaaday. Cabdalle oo maalintaas qolxadkiisii iyo warankiisii kolba dhinac ula boodaya ayaa Gaallaawidii u jilib dhigay ugu dambayntiina cadawgii waa la jabiyey.

Beri dambe ayaa Gaallaawidii laga soo weriyey inay yidhaahdeen, colka nala dagaallamayey ee na jebiyey maalintaas waxaa ku jiray nin jin ah. Cabdalle maalintaasna wuxuu muujiyey halhayskii uu lahaa :

"Baqa gaalaadna, dirir baan ka aamminay"

Tilmaamahaa aan soo sheegnay ayaa Cabdalle Caaggane loogu aqoonsaday oo uu ku mutaystay geesinnimada.



# Aadan Cigaal

Aadan Cigaal wuxuu ahaa nin geesi ah, dhabar ah oo ummadiisa hoggaaminayey. Odayadii xilligiisii xeerka dhigayeyna mudduu u talinayey. Ugaaska ka sokow wuxuu ahaa ninka keli ah ee 12ka aqalba ay aabbo ka odhanayeen kuna kalsoonaayeen, wuxuu ahaa nin la xushmayn jiray oo boqol nin oo meel fadhida hadduu ku soo baxo saray ayey u kici jireen, isagoo fadhiista yidhaa maahee may fadhiisan jirin.

Xilliyadii Aadan uu Ciisaha u talinayey xilli ka mid ah ayaa waxaa shir la isugu yimid, qolo Gaalla ah ugaaskuna goob joog buu ahaa. Qoladii waxay maalintaa ka yaabeen oo la fajaceen sida weyn ee Aadan aabbanimadiisa loo xushmaynayo. Qoladii waxay damceen inay Ugaaska iyo Aadan kala dilaan. Markaasay Ugaaskii ku yidhaahdeen :
- *"War ma adigaa taliya mise Aadan Cigaal baa Ciisaha u taliya."*

Ugaaskiina jawaab kooban buu siiyey :
- *"Ninka 12ka aqal aabaha ka ah ee geed walba joogaa waa Aadan, anigu duceeyaan ahay."*

Waxa kale oo ay soo wariyeen, raggii taariikhda Aadan yaqaannay, beri isagoo shir guddoominaya oo Ciisaha shirinaya si looga wada hadlo berri oo kale ballan u xidhnay Cafarta iyo Ciisaha oo nabad lagu xidhayey wixii lala shir tegi lahaa, ayaa waxaa shirkii ku soo dhex dhacay nin qaylinaya oo ku dhawaaqaya :
- *"Geel baa la qaaday, geel baa la qaaday."*

Aadan baa qayladii ka yaabay oo mooday in ay Cafari soo duushay oo la siray, Aadan baa ninkii qaylinayey weyddiiyey oo yidhi:
- *"Geela yaa qaaday ?"*

Markaasuu ninkii yidhi :
- *"Ciisaa qaaday."*

- *"War waxa geel baa la qaaday na yidhi ee naga yaabiyey muxuu ahaa ? Waar geela Ciise qaaday, waa geel dhallaan qaadaye shirka innoo wada".*

Buu Aadan yidhi. Shirkii baana la iska dhammaystay.

Maalinkii xigtay waxa la tegey shirkii nabadda lagu xidhayey ee Cafarta iyo Ciisaha, waxana guddoominayey Aadan Cigaal. Shirkii maalintaas waxa lagu heshiiyey la iskuna afgartay nabad la xidhay, nabaddaas oo aad loogu aayey Ciise iyo Cafarba, magaceedana waxaa loo bixiyey "Maaxa".

Maalintii xigtay Aadan laba nin intuu kaxaystay buu geelii ka daba tegey, raggii geela qaaday. Markay Aadan oo aabbihii ummadda ah arkeen ayuu hadal ku gudhay.

Aaden baa raggii la hadlay oo yidhi :

- *"Waar geela meel tigaad badanleh baad keenteene daajiya. Ciisubu geela ma kala xigo oo kolba kii haya um baa dhaqaaleeyee, carruurtii loo lisayey baan dooniye sii haya."*

Raggii baa isla xishooday oo yidhi :

- *"Aabbow geela ha nagaga tegine naga kaxee oo u gee dadkii lahaa."*

Aadan baa weyddiiyey oo ku yidhi :

- *"Waayabee waxaad ii sheegtiin waxaad ku leedihiin ee aad geela u soo qaaddeen."*

Dabadeed wixii ay tabanayeen bay sheegteen.

Aadan baana u soo dhammeeyey. Odaygii geeraaray ee wiilkiisa uga digayey inuu xeerka jabiyana waa kii lahaa :

Reer bariisanaya oo,
Bariiso uu ku lahaa,
Buto ruux geliyey,
Mabadbaadiyo Xeerkuye,
Baarcad way ka hoyaadiye,
Wiilkaygii baxsanaayow,
Barkhadlow inankaygow,
Bulsho Xeerka u yaalla,
Weligaa ha ka baydhin.



Aadan waxa kale oo loo yaqaannay "Bogsiiye".

Tilmaamahaa aan soo sheegnay buu Aadan Cigaal ku mutaystay in loo aqoonsado "Geesi".

Ninkii sidaa ahaa waxaa sabab u noqday oo dilay nin Ciise ah. Magtii Aadan Cigaal waxaa qoladii dishay u soo doontay laba iyo tobanka aqal ee Ciise oo aqal waliba yidhi Aabbuu noo ahaa Aadan Cigaal.

# Abraar Giirre

Abraar Giirre wuxuu ahaa oday geesi ah oo xilligii uu talin jiray wax dhibaato ah agtiisa ka dhicin. Wuxuu ahaa xeeryaqaan baanaa ah. Abraar Giirre wuxuu ahaa oday nabadeed oo tolalka hadday dhibaato ka dhex dhacdo, si daacadnimo ah u dhexdhexaadiya. Geedaha garta lagu qaado inta uu ka maqnaa way yarayd. Danihiisa oo dhanna ta ummadda ayuu ka horreysiin jirey.

Abraar Giirre wuxuu ka mid ahaa raggii nabadda, is dhex galka iyo gacalnimada ay ku wada nool yihiin Samaroonka iyo Ciisaha salka u dhigay. Isla markaana ummadda ku waaniya nabadda, waxa kale oo raggii taariikhdiisa weriyey sheegeen inaan weligii qof Islaama agtiisa lagu miidhin.

Abraar Giirre xilliyadii uu talin jirey wakhti kamid ah, ayaa gumaysigii Ingiriiska ee waqooyiga Soomaaliya xukumi jirey soo saaray, wax uu uga jeeday mooyaane, amar ah : "Ragga Ciisaha ah ee inan la yaalka ah ee Samaroonka ku dhex jira, in si degdeg ah looga raro."

Ingiriisku amarka wuxuu farta ka saaray caaqilladii uu shaqaynayey, gaar ahaan kuwii Samaroonka si ay u hirgaliyaan.

Caaqilladii iyagoo amarkii fulinaya ayey soo rareen sagaal (9) nin oo inan la yaal ah oo gabdho Samaroon ah qaba. Waxa la soo dul mariyey, reerahaa la soo raray, reer ay qaraabo yihiin Abraar Giirre oo Reer Dudub, Samaroon ah. Wuxuu warkii gaadhay Abraar Giirre.

Nimankii caaqillada ahaa hadduu wareystayna waxay u sheegeen, inuu amarka bixiyey D. C. gii Ingiriiska u fadhiyey Borama "Captain Walash". Abraar Giirre wuxuu caaqilladii ka codsaday inay faraha kala baxaan, reerihii ay soo rareenna wuxuu la furay amma la dejiyey reer xigtadiisa ah.



Nimankii u shaqaynayey Ingiriiska ku noqdeey Boorama oo ka wargeliyeey gaalkii inuu Abraar Giirre amarkii dawladda diiday.

Dabadeed badhasaabku askar buu diray, amarna wuxuu ku siiyey inay Abraar Giirre xafiiska Boorama keenaan. Askartii baa socotay oo Abraar Giirre ugu tagtay halkii reerku deggenaa, magaceedana la yidhaa "*Dhadhiima-case*" oo u dhaxaysa Boon iyo Quljeed. Markuu farriintii maqlay buu u yeedhay wadaad la odhan jiray Aw-Cali Akaal oo isna bulshada dhexdeeda magac ku lahaa, wuxuu ku yidhi :

- *Aw-Caliyow, DCgii Ingiriiska Boorama u fadhiyey baa ii yeedhay. Askartan buu ii soo diray. Maxaa male ah?*

Kadib markay tashadeen, waxay isla garteen inay wadajir ugu tagaan gaalka. Markay reerka ka sii baxayeen ayuu Abraar Aw-Cali ka codsaday inuu xoogaa cantoobo digada adhiga ah maro ku soo duubo. Aw-Calina sidii buu yeelay.

Subixii dambeba xafiiskii DCga ayey isa soo taageen. Wax yar kadib gaalkii baa yimid, gudihiibaa la wada galay, kuraastii baa lagu fadhiistay. (*DCgu inuu horey u yaqaan Abraar Giirre iyo in kale cid noo sheegta ma annaan arag.*).

Raggiise taariikhdan u dhuun dalooley waxay wariyeen, subaxdaas intaan gaalku hadalka bilaabin waxa hadalka qaatay Abraar Giirre oo yidhi :

- *Kabtan Walashow hal ma ku weydiin karaa?*
- *Haa !* Buu yidhi Dcgii.
- *Waxaan ku waydiisanayaa intaanad hadalka bilaabin inaad dharka oo dhan iska bixisid, dabadeed adoo qaawan oo mudh ah aad xafiiska ka baxdid, ood weliba suuqa magaalada sii dhex martid ood soo dhex martid.*

Gaalkii yaab baa Alla u keenay. Cabbaar markuu aamusnaa buu hadlay :

- *Miyaan waashay kolkaan sidaa yeelayo !* Buu yidhi.

Abraar Giirre oo jawaabtu diyaar u ahayd baa yidhi :

- *Haddaba hablaha aad leedahay reeraha ka rar, sidaasoo kale ayey dhar ii yihiin oo aan u bixinayn.*

Abraar Giirre intaa kuma joogine, Aw-Cali Akaal buu ku yidhi :

- *Digadii adhiga miiska ku shub.*

Aw-Calina sidii buu yeelay oo miiskii gaalka ayuu digadii ku hubsaday.

Gaalkii oo yaabban ayuu Abrar mar labaad hadalkii qaatay :

- *Kabtan Walashow, digadaa adhiga ee miiska taal noo kala saar, oo waxaad u kala soocdaa riyo iyo ido.*

D.C.gii baa yidhi :

- *Abraarow maxaad u jeeddaa ?*
- *Dadka aad tidhi kala rara ee walaalaha ah baa sidaa ah.* Buu ku yidhi.

Intaa dabadeed gaalkii wuxuu ogaaday inaan hadal dambe u furnayn, oo wixii laga wada hadli lahaaba Abraar go'aankeedii miiska soo saaray.

Shirkii maalintaas halkaa buu ku xidhmay, hase yeeshee ballan kale ayaa la dhigtay.

Gumaysigii Ingiriiska ee dalka xukumi jirey wuxuu ku shaqaynayey xeelado badan, wuxuu ku dadaali jirey inuu soo jiito dadka uu caqliga ku tuhmo ee mujtamucu ku xidhan yahay, sida Abraar Giirre oo kale.

Maalintii ballantu ahayd, markii la isku yimid D.Cgii wuxuu caddeeyey inuu la noqday amarkii ahaa in ragga inan la yalka ee Ciisaha laga dhex raro reeraha Samaroonka. Intaa wuxuu raaciyey :

- *Wararkii aan helno ayaa war-u-xumo tashiil noo keeni jirey. Dawladduna waxay u baahan tahay odayo sidaadaa oo kale runta kula dhaqma. Maanta wixii ka dambeeyana, waxaan ku qorayaa Caaqil Guud, oo dawladda la shaqeeya. Mushaharna waa lagu qori.*

Abraar Giirre taladaa dambe ee gaalku u soo jeediyey gaashaanka ayuu u daruuray, wuuna ka cudur daartay inuu caaqil noqdo. Sidaa buu isagoo guulaystay degmadiisii ugu noqday.

Abraar Giirre rag ay jaal ahaayeen baa, si kaftan ah, u weydiiyey oo ku yidhi :

- *Maad iska qaadatid lacagta gaalku kuu ballan qaaday ?*

Hadal layaable buu ku jawaabay :

- *Haddii aan oggolaado gunnada uu gaalku iigu yeedhayo, waxaan noqon nin gaalku leeyahay ee noqon maayo nin ummaddu leedahay.*



Waxaan soo qaadanaynaa dhacdo kale oo innoo bayaaminaysa geesinnimadiisii iyo nabad jacaylkiisi.

"Nin yari intuu ood ka booduu arrin ka boodaaye."

Dhallinyaro Ciisa ah duullaan ay soo qaadeen baay ku boojiyeen geel ay lahaayeen niman xigto dhow ay yihiin Abraar Giirre. Nimankii geela lahaa oo is urursanaya, doonayana inay xaqoodii soo dhacsadaan ayuu u yimid Abraar Giirre. Wuxuu yidhi :

- *Geelaa nin u dhaqaaqaa yuuna jirin.*
  *Waxaan hubaa in isagoo la wado la keeni doono.*

Sidii uu sheegay bay noqotay.

Markii la maqlay geelu inuu yahay reerkii Abraar Giirre, siddeed oday oo Ciisa ah, oo raggii la yaqaan ee magaca lahaa ah, baa gurmaday, waxay gacanta ku dhigeen geelii oo dhan. Dabadeedna reerkii Abraar Giirre ayey ku celiyeen, waxayna ku soo dareen hal nirigteediina wadata oo xaal ah iyo hadyad kale.

Ma soo koobi karno wanaaggi uu ummadda u soo qabtay. Qof kasta oo yaqaanay iyo cid walba taariikhdiisii daristayba waxay u qireen geesinnimo.

Innagana waxa waajib ah inaan ku dayanno raggaa geesiyaasha ah ee aynnu ka soo sheekaynnay.

# Bullaale Faarax

Waxaa kaloo geesiyaashii hore ka mid ahaa Bullaale Faarax oo loo yaqaanay "*Bullaale Wanjal*", aadna looga yiqiinay qaar ka mid ah degaannada Soomaalidu degto, ma ahayn nin qabiil ah. Wuxuu ahaa nin deeqsi ah oo aan dadka waxba ka lahayn.

Waa baa waxaa dhacday in Bullaale laga xaday laba awr. Doondoonkii uu labadaa awr ku raadcaynayay buu ku helay ninkii xaday. Bulaale wuxuu ku yidhi ninkii awrtiisa soo xaday :

- *"War maxaad iiga soo xadday awrtan anigaa lehe ?"*

Kolkaa buu ninkii yidhi :

- *"Awr la'aan baa ii geysay oo waxaan is idhi haddaad weydiisato dadkii lahaa billoo lagu diid."*

Markaa buu Bullaale yidhi :

- *"Waar wax awr ah miyaadan lahayn ?"*

Kolkaa buu yidhi ninkii :

- *"Ma lihi oo kuwaagaba awr la'aan baa ii geysay."*

Kolkaa buu Bullaale yidhi :

- *"Intaad kuwo doqon leeyahay oo lagugu dilo xadi lahayd kuwaygaba hayso kaa qaadimaayee anigu awr kale baan haystaaye."*

Beri dambe bay abaari dhacday, degaanno badan oo ay Soomaali degganayd bay saameysay. Kolkaa buu Bullaale u tegay dawladdii Xabashida ee dhulka xukumaysay, wuxuu ku yidhi :

- *"Waxaan u baahannahay inaad na amaahisaan waxaan kaga baxno abaartan, kolka uu gu'gu da'o oo ay barwaaqo timaaddo baan iska bixin doonnaaye. Anigaygan Bullaale ah oo caaqilkii amma baallabbaadkii gobolka ah baa idiin keeni doona, ee siiya waxay u baahan yihiin dadka reer guuraaga ah."*

Sidii bay ku qaateen wixii beeraley iyo xoolalayba ahaa.



Muddo sannad dabadeed buu dhulkii barwaaqo noqday, dawladdii baa Bullaale u soo dirtay rag :

- *"Waar Bullaalow amaahdii baa lagaa doonayaa ee keen ?"*

Kolkaa buu Bullaale yidhi :

- *"Waar dadkaa warmo waaweyn ma ku aragteen ?"*

Kolkaa baa la yidhi :

- *"Haa waan aragnay."*
- *"Ragga warmahaa waaweyn sita ee toban laxaad oo ay abaari reebtay la daba jooga maxaan ka doonaa, sow idili maayaan."*

Kolkaa bay dowladii ku xidhay xabsi ku yaallay Adari. Ummaddaa darteed buuna u xidhmay. Ummadii uu xoolaha siiyay baa maqashay in Bullaale la xidhay oo sababtooda loo xidhay. Ummaddii baa isku tagtay waxay ururiyeen lacag aad u fara badan. Jawaan buuxa oo lacag* ah bay qaadeen. Lacagtiina waxaa qaaday Ugaaskii iyo odaysaashii, waxay tageen Adari si ay ugu soo furtaan Bullaale.

Kolkii ay tegeen xabsigii bay yidhaahdeen :

- *"Waakan xoolihii lagu lahaa Bullaale ee noo soo daaya."*

Dawladdii baa tidhi :

- *"Waxan aad siddaan wax Bullaale furaya ma'aha, oo badhkeedna ma'aha." ee iskala noqda."*

Markaasay Bullaale ku yidhaahdeen :

- *"Waan soo biirinaynaa oo lacagtu wey yaraataye na sug."*

Wuxuu ku yidhi Bullaale :

- *"La celin maayo ee daaya."*

Bullaale intuu xabsigii dhex joogsaday buu yidhi :

- *"Kumaa lacag u xidhan, amma madax furasho lacageed muslim iyo gaalba?"*

Wixii ummad xabsiga ku jirtay buu lacagtii oo dhan ku furtay qolo iyo diin midna uma eegin. Boqortooyadii Itoobiya baa maqashay hadalkii oo tidhi :

- *"Dadka intaa le'eg yaa furtay ?"*

Waxaa la yidhi:

- *"Bullaalaa furay waxaas oo ummad ah."*

---

* Lacagtaa cadadkeedii cid noo sheegta ma arag.

Boqorkii Itoobiya Hayle Sillaase oo isagu guddoomin jiray maxkamadda sare ee Itoobiya baa Adari yimid. Kolkaa buu boqorkii yidhi :
- *"Bullaalow maxaad sidan u yeeshay ?"*

Wuxuu yidhi Bullaale :
- *"Lacagtani anigay i furi weyday oo waxay furaysay baan ku furtay."*

Boqorkii baa la yaabay deeqsinnimadii Bullaale wuxuuna yidhi :
- *"Adigana anigaa ku fasaxay."*

Sidaa baa Bullaale lagu sii daayay.

Waa dambe bey isdiideen maamulkii boqortooyada oo ay dagaallo dhexmareen wuxuuna galay oo uu u baxsaday Seylac. Dabadeed gumaysigii Ingiriiska ayaa qabtay, waxaa lagu xidhay xabsi ku yaallay dalka Ingiriiska. Maadaama uu bilaabay inuu la dagaallamo gumaysiga, ugu dambeyntiina wuxuu ku dhintay dhaktar ku yiil dalka Ingiriiska geesinnimadiisii aad baa loogu qiray.



# Cali Rooble Taame

Cali Rooble wuxuu ka mid ahaa raggii talin jirey ee xeerka iyo Gar-qaadka hibada u lahaa. Wuxuu ahaa xilligii uu noolaa nin danihiisa gaarka ah dhulka dhiga oo danta ummadda u heellan. Haddii isagoo jooga Kaaha oo ku taallaa galbeedka dhulka Ciisaha, la yidhaa waxa la gaaga baahday garta toddobaadkan lagu qabanayo geedka Geerisa oo ku taallaa bariga dhulka Ciisaha, kama baaqan jirin. Waxaaba iska yaraa inta uu dhex joogo xaaskiisa, carruurtiisa iyo xoolihiisa taas wuxuu kala mid ahaa odayadii kale ee garta qaadi jirey qaarkood. Cali Rooble wuxuu ahaa nin nabadeed oo dadka ku waaniya nabadda. Waxa kale oo odayadu sheegaan inuu ahaa nin gacan furan oo deeqsi ah.

Raggii taariikhda Cali Rooble Taame u dhuun daloolay waxay sheegeen :

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa geel ay xigtadiisu lahayd qaaday qolo kale oo Ciisa ah. Markii uu warkii gaadhay Cali Rooble wuxuu yidhi isagoo la hadlaya rag ilma adeerradiis ah oo arrinta ka cadhooday :
- *"Geel uu sokeeye qaaday meel ma tagayo, iyagaa keeni doona ee aan sugno."*

Qoladii geela qaadday markay maqleen Cali Rooble inuu sidaa yidhi, way isla xishoodeen geeliina way soo celiyeen. Wixii ay tabanayeenna waxa u dhammeeyey Cali Rooble oo isagu rumaysan :

"Waxaad geed ku helaysid, guluf haku doonan."

Beri kale iyadoo dhulku barwaaqo yahay Cali Rooble wuxuu arkay nin carruur badan leh xoolana aan lahayn. Carruurtaydii oo caano dhamaysa subaggii la lulayna hareeraha la iska dhigay. *"Carruurtaadu gaajoon mayso"*, intuu yidhi ayuu ninkii caydha ahaa geel irmaan iyo lo' iskugu daray oo uu siiyey.

Waa adduun iyo xaalkiiye Cali Rooble waa la dilay isagoo waajib saaran gudanaya. Sababta loo dilay waxay ahayd:

Laba jilib oo Ciisa ah oo kala ah Sacad Muuse, Reer Guulane (waa Cali Rooble jilibkiisa) iyo Walaaldoon, Cali-Hayiil oo xurguf aad u weyni dhex martay. Si loogu garqaado labada qolo, waxa maalintii ballantu ahayd meesha la yidhaa Dhijaan-dhiig u fadhistay odayo u ka mid ahaa Cali Rooble.

Intaan gartiiba la guda gelin ayuu nin Walaaldoon ah isdareensiiyey kol haddii Cali Rooble geedkan yimid inay ka gar heli doonin oo arrintoodu cirka ku laalmi doonto. Xabbad rasaas ah buu ku dhuftay odaygii. Intaa dabadeed, niman jilibka Cali Rooble ah ayaa iyaguna rasaas furay. Waxay halkaa ku dileen 17 nin oo Walaaldoon, Cali-Hayiil ah.

Gar la qaado daaye, nabaddii baa gebidheer laga tuuray. Ciisihii kale ee meesha joogay iyo qaar kale oo soo gurmadayba waxay u hawl galeen sidii ay u damin lahayaaeen colaaddaa. Maryo cadcad iyo go'yaal bay galabtaa oo dhan la dhex boodayeen, ilaa ay colaaddii daminayeen.

Cali Rooble Taame isagoo dhaawac ah buu haddana wax yaab leh ku dhaqaaqay galabtaa, oo waa maxay ?

Ninkii rasaasta ku dhiftay ee fitnaddaasoo dhan dhigay oo gacanta lagu dhigay ayuu madaxa intuu qabsaday hoosta soo gashaday buu yidhi :

"Nin aan bariiyo xalay baa iigu dambaysay,
Nin aan bixiyana maantaa iigu dambaysa
Ee tolkayow igu bixiya."

Sidii baana lagu bixiyey ninkii dhagar qabihii. Cali Rooblena in yar dabadeed buu dhintay, waxana loo aqoonsaday inuu ahaa "Geesi", ummaddoo dhan "Aabbo" u ahaa.

Waxaase xusid mudan colaaddii aan la filayn ee goobtaas ka dhacday, ragga qaarkii waxay sheegaan inay ahayd khasaarihii ugu cuslaa ee Ciisaha dhexdiisa ka dhaca. Iswayddiintuse waxay tahay ?

- Colaad dambe ma ka dhex dhacday labadii jilib ?
- Maxayse ku dhammaatay gartii ?



Horta waa Ilaah mahaddii oo colaad kale kama dhex dhicin labadii jilib. Waa marka labaade arrintii waxa ka taliyey 12 kii aqal ee Ciisuhu ka kooban yahay oo Ugaas Xasan guddoominayo.

Gartii markii loo fadhiistay ee dhan walba laga rogay waxay guddidii garatay oo Reer Guulane lagu xukumay :

- Inay **17 hablood** u dhisaan Cali-Hayiil imikadaa la joogo. "*Godob Reeb*"

Waxa kale oo guddidii xukuntay :

- In la bixiyo toddobiyo tobankii nin ee la dilay magtoodii.

Oo yaa bixinaya ?

- Toban (10) nin magtoodii waxaa bixiyey Ciise oo dhan.
- Dhawrkii soo hadhayna Reer Guulane ayaa bixiyey.

Hablihii islamarkiiba waa la dhisay, magihii raggana waxa lagu ballamay in la bixiyo karanta soo socota. Sidaa bayna ku dhammaatay arrintii.

Waxaase xusid mudan in sannadkaa sannadkiisii toddobiyo tobankii hablood wiilal miidhan wada dhaleen.

Ragga taariikhdan weriyey qaarkood waxay sheegeen inuu fikirka hablaha lagu dhisay lahaa Ugaas Xasan.

Xilliga ay dhacdadani ku beegnayd waa 1900 iyo afartameeyadii bilawgoodii, waa markii talyaaniga laga adkaaday ee Ingiriisku dhulka Soomaalida oo dhan gacanta ku dhigay.

# Gunaanad

# Gunaanad

Qaybtan ugu dambaysa een ku soo gunaanadayno buuggan waxaan uga maarmi wayney inaan ku soo qaadanno, abtirsiimada qabiilka Ciisaha ee xeerkani ka dhexeeyo. Ciisuhu wuxuu ka mid yahay qabaa'ilka Soomaaliyeed ee ku abtirsada Dir.

Sheeko kale yaa jirta oo odhnaysa Ciise waa ina Bin Axmad Bin Haashim, wuxuuna la walaal yahay Sheekh Isxaaq ayna ku wada aasan yihiin, baa la yidhi, laba meelood oo isku dhow kuna yaal Xiis iyo Maydh oo ka tirsan gobolka Sanaag ee dalka Soomaaliya. Hasa yeeshee odayo da'ah oo Ciise ahi aad bay u diideen inuu Ciise Carab ka soo jeedo.

Xagga dadwenaha markaad fiiriso boqolkiiba boqol waxay rumaysanyiihiin inay ka soo jeedaan Dir.

Ugaas Xasan Xirsi, Allaha u naxariistee, oo Ciisaha muddo (60) lixdan sanno ka badan Boqor u soo ahaa, geeryoodayna 1996[kii], mar wax laga weydiiyey halka Ciisuhu ku abtirsado wuxu yidhi :

- *"Waa marka horee Ilaahii inna abuurtay uun baa garan.*
  *Halka asal ahaan aan ka soo jeedno, waa marka labaade.*
  *Wixii aan odayo ka soo gaadhay baan idiin sheegi."*

Wuxuuna yidhi :

- *"Abtirsiimada aan odayo ka soo gaadhay waxay ahayd :*
  ***Ciise Madoobe Murdadle Dir Irir Samaale."***

Odayada kale ee warkan laga soo weriyey waxaa ka mid ah, Cusmaan Hande iyo Cali Cubeesh oo labaduba ahaayeen Abwaanno, Allaha u naxariisto labadaba. Waxana dhammaantood ka soo weriyey,

Abwaan Cumar Macallin oo wax badan baadhis iyo dabagal ku sameeyey Xeerka Ciisaha.

- *"Abtirsiimada kalee Carabta ka soo jeeddaa, waa tu dhawaan aan maqallay."*

Sidaa waxaa yidhi, Allaha u naxariistee, Ugaas Xasan Xirsi.

Taa markaan halkaa ku dhaafno, aan hoos ugu sii degno, Ciise inta uu dhalay iyo siday u sii kala farcameen.

Ciise wuxuu dhalay (6) lix wiil oo kala ah :

1. Ceeleeye
2. Holle
3. Hawlaqaade
4. Wardiiq
5. Hoorroone
6. Uurweyne

Lixdaa jilib waxay noqdaan amma ay isku raacaan (3) saddex qaybood oo kala ah :

1. Abgaal : Ceeleeye iyo Uurweyne.
2. Dalool :Holle, Hawlaqaade iyo Hoorroone.
3. Wardiiqna waa iskii.

Intaa markaan ka imanno, lixdaa wiil ee Ciise dhalay ayaa haddana midkiiba sii dhalay laba (2) wiil. Sidaa bayna ku noqdaan labiyo toban (12) Aqal, waxayna u kala baxaan sidan.

1. Ceeleeye, oo curadkii Ciise ahaa, wuxuu dhalay :
   Muuse iyo Mamaasan.
2. Holle wuxuu dhalay Furre (Fuurlabe). Furrena wuxuu dhalay :
   Mahadle iyo Saaciib.
3. Hawlaqaade (Walaaldoon) wuxuu dhalay :
   Iidle iyo Yuusuf.
4. Hoorroone wuxuu dhalay :
   Geelwalaal iyo Habarwalaal.
5. Wardiiq wuxuu dhalay :
   Rumawaaq iyo Wakhtishiile.
6. Uurweynena wuxuu dhalay :
   Fiqi iyo Cabdalle.



Labiyo tobankaa waxa laga soo xulaa 44ka oday ee Gendaha. Xilliyada aanu Gande xidhnayn, marka ay arrin dhabar ahi Ciisaha soo foodsaarto waxa 12 aqal laga soo xulaa, oo khasab ah, 44 oday si ay uga taliyaan arrimaha xaasaasiga ah ee milaygaa jooga.

Dhinaca guurka waxay odayada Xeer ka dhigeen in Ciisuhu isku guursadaan labada daamood ee kala ah : Abgaal iyo Dalool, iyagoo uga jeeda inay adkeeyaan midnimada iyo wada jirka Ciisaha, inkastoo qodobkaa la jebiyey markii dadku batay ee la magaaloobay. Haddana waxa weli qodobkaa lagaga dhaqmaa labada Gallin ama Gobol ee Ciisaha galbeed ugu xiga, Dayn iyo Dhuuyar.

Waxay odayadu iyagoo tilmaamaya in 12ka Aqal ee Ciisuhu sina u kala maarmayn ay halhays ka dhigteen :

Ciise waa ul iyo diirkeed !
Ciise waa sac iyo saantii !
Ciise waa dhasho iyo dhasheed !

Ugu dambayntii markay odayadu ducaynayaan waxay ducada ku daraan oo ay Ilaahay ka baryaan, in 12kaa Aqal uu walaalo isjecel ka dhigo, waxayna yidhaahdiin :

Labo way isa siddaa oo waa labada gacmood.
Labona way isa sugtaa oo waa labada lugood.
Labona way isku oydaa oo labada indhood.
Ilaahow labadii isa sidda ee isa sugta ee isku oyda naga yeel.
Aamiin !

# Buugaagta la Daalacday

1) Futuux Al Xabash.

2) Le Verdict de l'arbre, Dr. Cali Muuse Ciye.

3) First Food Steps in Africa, Richard Berton, 1856.

4) Halkaraan, Xaaji M Axamad Ibraahim Warsame.

5) Hilimada Maansada, Aw Jaamac Cumar Ciise.

6) Caajalad uu Duubay Abshir Nuur Faarax (Bacadle).

7) Caajalad uu Duubay Axmad Ismaaciil Diiriye (Qaasim).

8) HALABUUR ~ Xirmo 3, Tr.1&2, 2008 -
Ducooyinka Ciisaha, Aadan Xassan Aadan.

# Tusmo

**Hordhac** 1
**Jaamac waa kuma ?** 2
**Gogoldhig** 4
**Afeef** 9
**Mahadnaq** 10

**Cutubka Koowaad : Salka Ereyga "Xeer"** 13
Salka ereyga "Xeer" 15
Cali Kalageeye iyo Aale Buuri 17
Gogoldhigga Xeerka 25
Dhegaleyda Bilawgii Xeerka 27
Maahmaahaha Xeerka. 28
Dhegaleyda Maahmaahaha 31
Dhegaleyda Asluubta Xeerka 33
Dhegaleyda Rukummadda Xeerka 34
Dhegalayda Dhaqan 36
Dhegaleyda Tilmaamaha 8da ah 37
ama Xeerka Guud 37
Dhegalayda Guddida u Taal 38
Dhegalayda Umadda u Dhaxaysa 41
Dhagalayda Dhulka iyo Dadka 43
Dhegaleyda Gallimada 43
Dhegalayda Badbaadada Deegaanka 45
Gar 46
Dhegalayda Sargooyada 48

**Cutubka Labaad : Xeerka Dhiigga** 53
Dhegalayda Mag iyo Maydhaan 55
Dhegeleyda Magta 100ka 57
Axan iyo Ood 57
Iimaan 60

Dhegaleyda Addimada 63
Dhagarta Sokeeyaha 73

**Cutubka Saddexaad : Xeerka Dheerta 75**
Dheer 77
Yaradka amma Dhabanka 81
Dhaxalka, Dumarka Wax ma Laga Siiyaa ? 86
Xigsiinta 88
Dumaasha 90
Badbaadada Hooyada 92
Makasta iyo Maatida 94

**Cutubka Afaraad : Xeerka Dhaqaaqilka 97**
Dhegalayda Dhaqaaqal 99

**Cutubka Shanaad : Xeerka Qubanaha Ah 107**
Dhagaleyda Midiidinka 109
Dhegaleyda Dadka Waalan. 110
Dhegalayda Magangalyada 111
Dhegaleyda Ood-Wadaagta 112
Dhegaleyda Uur Wadaagta 113
Dhegaleyda Quudhsiga 114
Dhegaleyda Gocosta amma Kubbadda 115
Dhegaleyda Jiifaaga 116
Dhegaleyda Xeer-ka-boodka 117
Dhegaleyda Laba-Kitaablaha 118
Ciqaab Kulul 119
Sahan 120
Dhegalayda Nabad Xidhka 125
Af Baa Billaawe Baxsha 131
Dhegelayda Laba-Dublaha iyo Qalnaynta 133

**Cutubka Lixaad : Xeerka Dhaqanka *(Ugaaska)* 139**
Hordhac 141
Xeerka Qabashada Ugaaska 143
Awoodda Ugaaska 145
Qabashada Ugaaskii Kowaad 147
Taariikh-nololeedkii Ugaas Xasan 150
Guyaashii Ugaas La'aanta 153



**Cutubka Toddobaad : Qabashada Ugaaska 19[aad] 157**
Hordhac 159
Qabanqaabadii Qabashada Ugaaska 19[aad] 160
Qabashada Ugaaska 19[aad] 174
Bareentu, Soo Dhaweyntii iyo Ducada Yeesifka 180
Hawshii Caano iyo Caddiin 182
Geeddi Socodkii Caleema Saarka Ugaaska 19[aad] 189
Socdaalkii Ugaaska ee Diridhaba 204

**Cutubka Siddeedaad : Garihii la Qaaday 209**
Tusaale ku Saabsan Garihii la Qaaday 211
Tusaale Kale 214
Samirre Geelle 219

**Cutubka Sagalaad : Geesi waa Kee ? 223**
Hordhac 225
Cabdalla Caaggane 226
Aadan Cigaal 229
Abraar Giirre 232
Bullaale Faarax 236
Cali Rooble Taame 239

**Gunaanad 243**

**Buugaagta la Daalacday 249**

